TAARIIKHDA SOOMAALIYA

(Dalkii Filka Weynaa ee Punt)

Muxamed Ibraahim Muxamed

"Liiq-Liiqato"

Muqdisho



Mohamed Ibrahim "Liiq-Liiqato", Wuxuu ku dhashay magaalada Kismayo, sannadkii 1921. Markuu yaraa wuxuu dhigtay dugsiga Quraanka. Markuu barbaaray wuxuu qortay askarta gendarme gii Ingriska 1939. 1945 wuxuu isteeshimada xamar mid ka mid ah ka noqday (O.P.) sarkaal qora wixii habeenkas dhaca ama dacwa ah. Boliisnimada gendarme wuxuu ku gaaray Darajada Isbetore. 1950 kii wuxuu ka mid noqday boliiska Somaliyeed ee talyaaniga dalka maamulkiisa qabtay (Amministrazione Fiduciaria Italo somala, A.F.I.S.), wuxuna noqday Isbetore Laba Alifle. 1952 asaga iyo saraakiil xigeeno kale oo Somali ah ayaa loo qaaday Italiya in ay saraakiil noqdaan. 1954 tii ayey ku soo noqdeen dalka iyagoo ah xidigle yaal. Wuxuu ka soo shaqeeyey magaalooyin kala duwan dalka gudihiisa. 1960 wuxuu noqday Gaashaanle Sare iyo taliye xigeenka ciidanka boliiska Somaliyeed. 1964 wuxuu ku wareegay ciidanka xoogga dalka Somaliyeed, wuxuuna noqday Janan iyo taliye xigeenka xoogga dalka Somaliyeed . 1969 markii xukunka dalka ay la wareegen ciidamada qalabka sida, wuxuu noqday Safiirka Somaliyeed ee dalka midowga Sofiyetka. 1971 wuxuu noqday Safiirka Somaliyeed ee dalka Jarmalka Galbeed. 1974 wuxuu noqday Wasiirka Beeraha ee Somaliya, kadibna wuxuu noqday Wasiirka Ganacsiga ee Somaliya. Waxaa loo bedelay xaruunta dhexe ee xisbiga , wuxunna noqday Guddoomiyaha Hogaanka Dhaqaalaha. 1983 waxaa loo doortay Guddoomiyaha Golaha Shacbiga (President of the National Assembly). 1990 jagadaas waa uu ka fariistay. Tan iyo intii burburka Somaliya uu dhacay, Mohamed Ibrahim Liiq-Liiqato wuxuu ka shaqeyey kuna dadaalay sidii muwaafiqo loo heli lahaa. Wuxuu dhintay May 30 1998, assago dadaalkaas nabadeed ku jira.

ALLAHA U NAXARIISTO

Muxamed Ibraahim Muxamed
"Liiq - Liiqato"

TAARIIKHDA SOOMAALIYA

(Dalkii Filka Weynaa ee Punt)

Muqdisho

XUQUUQDA GAARKA AH

Buugani lama daabici karo,
Lamana koobiyayn karo,
Tan iyo inta ogolaansho laga helo qoyska qoraha

Mogadishu
Feb-2000

JASIIRAD U YAASHA SOOMAALYA



M U G G A B U U G G A

QAYBTA KOOWAAD
DALKA IYO DADKA

BOGGA

I. DALKA 1

A - ASTAAMAHA GUUD 1
1. DHULKA 1
2. ROOBABKA 3
3. XEEBTA 3
4. JASIIRADAHA 4
5. DEKEDAHA IYO MARSOOYINKA 4
6. WEBIYADA 5
7. DAAWYADA & DAYAX FADHIYADA 5
8. AYAANTA 6
9. SANNADKA CADCEEDDA 7
10. SANNADKA MIILAADIGA 8
11. SANNADKA DAYAXA 9

II. DADKA 10

B - DADKA XAMIITIGGA BARI EE WAAYIHII HORE 10
C - DADKA XAMIITIGGA BARI EE MAANTA 15
1. SOOMAALIDA 15
a) DHISMAHA BULSHADA SOOMAALIYEED 20
2. OROOMADA AMA GAALLADA 23
3. SIDAAMADA 24
4. CAFARTA AMA DANAAKILADA 24
5. SAAXADA 24
6. AAGAWDA AMA XABASHIDA 25
7. BEJADA 26
8. MASAAYDA (KUSHITO NILOOTIG) 26
9. ILBAXNIMADA CARABTA & SOOMAALIDA 27

QAYBTA LABAAD
FIDIDDA SOOMAALIDA

D - DALKA BALLAARAN AY MAANTA DEGGAN TAHAY 36

1. DEGAANNADA BARTAMAHA & DEEXDA BADWEYNTA HINDIYA . . . 37
2. DAGAALLADII GOBOLLADA GALBEED 38
3. DEGAANNADA BAY & HARQAAN 43
4. DEGAANNADA JIINKA WEBIGA GANAANE 45
5. DEGAANNADA DHANKA MIDIG WEBIGA GANAANE 47
(KAFAR, WAAMO, GEDO & WAASOW)
6. MAGAALADA KISMAAYO 48
7. DARIIQOOYINKA 49
a) QAADIRIIYA 49
b) AXMEDIYA 50
c) SAALAXIYA 50
d) RUFAACIYA 51

QAYBTA SADDEXAAD
GUMEYSIGA IYO AFRIKADA BARI

E - GUMEYSIGII BOORTAQIISKA & SALDANADDA CUMAAN 52
F - AFRIKA IYO GUMEYSIGA YURUBTA GALBEED 57
1 - SAHANNADII GUMEYSIGA YURUBTA GALBEED 57
2 - QARAN GUMEYSI KALA QAYBSADAY 60
2.1. ISBALLAARINTII GUMEYSIGA XABASHIDA 63
2.2. GUMEYSIGII INGIRIISKA 67
a) QABSASHADII GOBOLLADA SOOMAALIDA WAQOOYI . 67
b) KACAANKII DARAAWIISHTA 68
c) QABSASHADII GOBOLLADA DHANKA MIDIGTA WEBIGA GANAANE 79

2.3. GUMEYSIGII TALYAANIGA 84
a) QABSASHADII GOBOLKA BANAADIR 84
b) ISBALLAARINTII GUMEYSIGA TALYAANIGA 90
c) QABSASHADII TALYAANIGA DALKA XABASHIDA . . 97

QAYBTA AFARAAD
DAGAALKII LABAAD EE DUNIDA & DALALKUU TALYAANIGA GUMEYSAN JIRAY

G - MAAMULKII CIIDAMADA INGIRIISKA & MURANKII HORDHACA AHAA 99
H - KASMADII IYO ARAGTIDII SOOMAALI WEYN 105
I - DOODII IYO GO'AANNADII QARAMADA MIDOOBAY 113

QAYBTA SHANAAD
TOBANKII SANOO WASAAYADDA TALYAANIGA IYO MIDEYNTA LABADII GOBOL EE SOOMAALIYEED

J - TOBANKII SANOO WASAAYADDA TALYAANIGA 126
K - MAXMIYADII INGIRIISKA EE SOOMAALIDA WAQOOYI 133
L - MADAXBANNAANIDA IYO MIDEYNTII LABADA GOBOL EE SOOMAALIYEED 136
M - BUUGAAGTA RAADREEBKA AH 142
N - LIFAAQYADA 145

HORDHAC

Sida la ogyahay Adduunka ma jirto meel dad deggan yahay ama aan la soo deggin oo aan taariikh lahayn, sidaa daraadeed Jasiirad-uyaasha ee Soomaaliya maanta loo yaqaan, degaan ahaan waxaa isaga dambeeyay Wanyiika ama Sanji, Berberi iyo Soomaali oo maanta deggan. Inkastoo aan raadreebyo badan laga hayn dadkii degaankeeda ku kala dambeeyay ama qoraallo laga raadraaco taariikhdiisii hore, haddana wax unbaa ka haray oo raadinta taariikhda looga ambaqaadi karaa. Goorta degaan taariikhdiisa la baarayo, si loo helo wax sugan, waxaa loo baahan yahay in la helo raadreebyo caddeynaya dhacdooyin ay taariikhidu raadraacdo, sida qoraallo, dhaqan haraa ah iyo waxii la mid ah. Ujeeddada buuggani loo qoray ma aha inuu soo koobo taariikhda degaanka Soomaalida ama kuwii ka horreeyay iyo dalkaba, Balse waxaan filayaa inuu u noqon karo saldhig looga ambaqaado baarista taariikhda dadka iyo degaanka filka weyn ee maanta loo yaqaan Soomaaliya.

In muddo ahba waxaa jiray arrimo muran dhaliyay ee ku saabsan Soomaalida isirkeeda, goortay soo degtay dalka maanta Soomaaliya loo yaqaan iyo siday ugu fiday dalka ballaaran oo ay maanta deggan tahay. Waxaa kaloo in la caddeyo u baahan xiriirka Soomaalida iyo Carabta ka dhexeeyay oo soo jiray waayo aad u fog saameeyayna dhaqankeeda bulsho heerka uu gaarsiisan yahay iyo xiriirka labada ilbaxnimo ka dhaxeeya. Dhanka kale oo caddeyn u baahan waxa weeye xiriirka dhalasho ee ka dhexeeya qolooyinkii waayahii hore Berberiga loo aqoon jiray ee maanta magacyo kale la baxay halkuu sal ku leeyahay. Sikastaba ha ahaatee, waxaa loo baahan yahay baarista arrimahaasoo idil in la siiwado si loo helo taariikh runta ku saleysan loogana baxo laballabowga iyo walaaca muranka ku dhaliyay taariikhdayada.

Buuggan aan in badan ku hawshooday waxaan u qoray inaan ka qaybgalo tartanka lagu raadinayo runta taariikhda dalkayaga hooyo iyo dadkayagaba oo aan filayo inuu nin kastoo Soomaali ah xil ka saaran yahay inuu aqoontiisa, kartidiisa iyo dadaalkiisaba qayb ka siiyo dadweynaha u baahan aqoonta tagtada ah, iyadoo laga fogaanaayo aragtida gaaban iyo qaabka beenta lagu saleeyay aan raadraaca lahayn runtana la raadinaayo. Howshaan waxaa loogu talagalay in lagu kor doodo laguna murmo, si loogu dhiirrado siiwadida baaritaanka lagu dhammeestirayo taariikhdayada qabyada ah oo inta badan dhalisay in arrimaha qaarkood lagu kala sooci waayo runta iyo beenta. Soomaalida waxay ku maahmaahdaa: **GEEDKA LOOMA ABUURO ADIGAA HARSAN DOONO** oo macnaheedu yahay waxaa loo abuuraa inuu jiilka kaa danbeeyo harsado.

Haddii, waayihii hore aqoondarrada naga haysatay taariikhdayada ay ugu wacnayd qoris la'aanta afkayaga, maanta uu qoran yahay, waxuu dadweynaha Soomaaliyeed yar iyo weynba, tabayaa taariikhdiisa oo ku qoran afkiisa inuu helo. Qolo kasta ee Aduunka deggan taariikhdeedu way qortaa wayna keydsataa si jiilka ka dambeeya uu timaaddada u tixraaco ugana kordhisto aqoontiisa, maxaayeelay, taariikhdu waa macallin waxayna ku bartaa inaad ka weecato tubta qalloocan ee la soo maray kuguna hagaajisaa tubta habboon aad timaaddada mari lahayd.

Dhammaadkii Qarnigii 19aad, taariikhda iyo hab nololeedkii Qaranka Soomaaliyeed waxaa dhalanrogay tartankii gumeysteyaashii Faransiiska, Ingiriiska, Talyaaniga iyo Xabashida, iyadoo waxyaalahii u daahsoonaa la soo ifbixiyay hodannimadiisana lagu daba xiray duni uusan aqoon.

Waxaa soo galootiga gumeysteyaashii aad u sii fududeeyay Soomaalidoo aan lahayn maamul dawli midaysan oo qanuun la aqoonsan yahay ku dhisan iyo iyadoo ku habeysnayd guurto xoolo raacata ee ku salaysan hab jilibeed. Taasi waxay keentay inay wadajir uga hortagi waayday soo galootigii gumeysteyaasha oo ka abdaystay qaybsanaanteeda. Waaguu gumeysigu qorsheysanaayay inuu kala qaybsado Qaranka Soomaaliyeed waxaa Soomaalida maamulaayay Maqaawiirteeda waxayna lahayd xeerar iyo dhaqan filweyn oo ay isku maamuli jirtay. Qaybinta gumeysigạ waxay keentay in Soomaalidii Qaranka ahayd la dhaqan habaabiyo laguna maamulo shuruuc iyo xeerar shisheeye ee ka fog habkeedii dhaqandhaqaale waxaana qaybintaas door weyn ka qaatay Ingiriiska ee dhagartii ugu horreeysay ka galay taariikhda mugdiga ah ee Soomaalida. Xoogaggii gumeysiga Yurubta Galbeed, goortay maleegayeen mardabadii lagu qaybsanayay Qaaradda Afrika, waxay shir ku qabteen magaalada Barliin, bishii Febraayo 1884kii, shirkaasoo ujeeddadiisu ahayd in go'aan laga gaaro siday qolo waliba Qaaradda Afrika, sedkeeda gumeysi uga heli lahayd. Dood dheer kadib, bishii Nofeembar 1885kii, waxaa go'aan lagu gaaray in qolo waliba dalkey ku hormarto gumeysan karto loona aqoonsanayo rasmi ahaan, haseyeeshee, waxaa ayaandarri ahayd Xabashida oo ahayd waagaas dowladda kali ah ee Afrika ka madaxbannaaneed, Inay ka qaybgashay shirqoolkaas Qaaradda lagu qeybsanaayay sedkeedana ka qaadatay.

Faransiiska ayaa gumeysteyaasha ugu horreeyay inuu Geeska Afrika ku soo galo heshiisyo uu la dhigtay jammaamuurta Obokh, 1862dii Miilaadiga, waxaa ku xigay 1884kii iyo 1886kii Miilaadiga, heshiis kale oo dhexmaray Faransiiska, Saladiintii Cafarta iyo Soomaalida ee Tajura iyo Gobad oo ay dulucdoodu ahayd inuu ilaaliyo dalkooda nabadgelyadiisa iyo inay yeeshaan xiriir Iskaashi, haseyeeshee, danahuu u soo galay xeebta Soomaaliyeed waxay ahaayeen inuu Badda Cas maraakiibtiisa dagaalka marso uga helo uuna siyaasadiisa gumeysi saldhig isgaarsiin uga dhigto dabadeedna Xabashida dalballaarsigeeda ku taageero ugana abdaysto ganacsigiisa dalkooda ballaaran ee badxiranka ah. Waxaa xigay Ingiriiska oo danahuu ka lahaa ahaayeen qabsashada xeebaha Soomaaliyeed goortay Masaarida ka kacday, siduu isagaba sheegay, inuu cunto ugu helo ciidamadiisa Cadan fadhiya, gaar ahaan hilibka, haseyeeshee, danaha dhabta ah waxay ahaayeen, iyadoo Cadan u ahayd saldhigga difaaca iyo xiriirinta isgaarsiinta dalalkuu gumeysto, inuu xeebaha Soomaalina ku darsado dabadeedna labada dhinac ee Khooriga Cadmeed ka ilaaliyo irridda koofureed ee Badda Cas.

Labada gumeyste, Ingiriiska iyo Faransiiska, waxay ku heshiiyeen, 1888kii Miilaadiga, inay rasmi ahaan kala soohdimeystaan, intii mid waliba qayb u helay dalka Soomaaliyeed, iyadoo aan laga tixgelin dadkii dalka lahaa. Waxay ku heshiiyeen in Ingiriisku qaato Seylac iyo waxii Bari ka xiga Faransiiskuna waxii Seylac Galbeed ka ah. Heshiiiskaas waxay ku dhigteen in soohdinta dhanka xeebta Soomaalida la mariyo Habaas-Weyne, Biyo Qaboobe iyo Jildeysa uuna ku sinnaado magaalada Harar ka shiishe. Waxaase dhacday, 20 Maarso 1897kii, inay Faransiiska iyo Xabshida heshiis qarsoodi ah ku dhigteen magaalada Addis Ababa (Franco Abyssinia Treaty) ayna ku heshiiyeen inay soohdinta u dhexeeysa xeebta Soomaaliyeed iyo Xabashida marto Galiilyo halkay ka mari lahayd Harar ka shishe oo ahaa sidey Faransiisku iyo Ingiriisku horay ugu heshiiyeen 1888kii. Sidoo kale Ingiriisku, isagoo ku deyanaayo dhagarta

Faransiiska Soomaalida ku sameeyay, ayuu isna Xabashida la galay heshiis 14, Maajo 1879kii, uu ugu oggolaaday inay Xabashida la wareegto dalka Soomaaliyeed qayb ka mid ah. Waxaa halkaa durbadiiba kaaga muuqaneysa mardabada iyo dhagarta gumeysiga dalka Soomaaliyeed ugu heshiiyay inuu ku kala qaybsado, iyadoo aan la qadarin dadkii dalka lahaa.

Heshiisyadaa jammaamuurta Soomaaliyeed la galeen gumeysteyaasha waxaad moodaa inay isku qorshe ahaayeen oo ay isku meel ka soo baxeen wadajirna ay u soo abaabuleen Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Xabashida heshiisna ku ahaayeen mardabada iyo dhagarta dalka Soomaaliyeed lagu qaybsaday. Iimaha waaweyn ay lahaayeen heshiisyadaas ay wadda galeen Jammaamuurta Soomaaliyeed iyo gumeysteyaasha, waxaa ka mid ahaa inaan lagu xusin soohdimaha iyo masaafada dalalka saldhigyada u ahaa heshiisyada, taasoo u bannaynaysay gumeysteyaasha inay hadba siday doonaan u maamushaan una qaybsadaan.

Muxamed Ibraahim Muxamed
(LIIQ LIIQATO)

MAHADNAQ

Ugu dambeeyntii waxaan mahad ballaaran oo seere lahayn u celinayaa intii buugan hirgelintiisa wax igala qabatay dhan kastaba ah ahaatee gaar ahaan:

1. G/le Muxamed Sheekh Xasan oo habeen iyo maalin howl aan hagar lahayn igala qabtay buuggaan si uu u hirgalo, gaar ahaan, dhanka raadreebyada Carabiga ah oo wax weyn ku kordhiyay qoraalkan taariikhiga ah.

2. Dhamme Faaduma Xasan Muxamed oo aan la'aanteed guul laga gaareen habsami u hirgelinta qoraalkeyga ha ahaato dhanka garaacida, baarista iyo habayntaba.

3. Abuukar Xaaji Cali Nuur & C/qaadir Muxamed Axmad oo aan mahad u celinaayo inay qayb weyn igala qaateen tifaftirka, hannaanka iyo dib u habeynta buugan aan la'aantood dhib kala kulmi lahaa.

4. Ugu danbeyntii waxaan mahad gaar ah u celinayaa marwadeyda Aamina Xuseen Muxamed oo igu dhiiri gelisay soo saarida qoraalkaan taariikhiga ah.

M. I. Muxamed.

QEYBTA KOOWAAD

DALKA IYO DADKA

I. DALKA

A - ASTAAMAHA GUUD

Dalka Soomaaliyeed waa Jasiirad-uyaasha ku taal dhanka Waqooyi Bari ee Qaaradda Afrika oo dhankeeda Bari geeska ugu dhuuban yahay Raas-Caseyr ee waayihii hore loo aqoon jiray geeska carfoon, dhankeeda dhulka ah waxaa lagu aqoonsadaa soohdinta mala'awaalka ah ee ka billaabata Baab-Al-Mandab ee marta, dhankeeda Galbeed, Harada Hawaash kuna dhammaata, dhankeeda Koofureed, iskudarka webiga Taana ama Ganaane Mara iyo Badweynta Hindiya (eeg khariidadda Lr.1). Carabta waxay dalkaan ku magacaabi jirtay "Barri-Al-Cajam", taasoo macnaheedu yahay dhulka ay deggan yahiin dadka aan Carabta ahayn. Ereyga "Cajam", dhab ahaan macnihiisu waxuu yahay dhammaan dadka aan afka Carbeed ku hadlin ee degganaa Masar iyo Bartamaha Aasiya, kolkolna lagu soo koobi jiray reer Iiraan. La jeedka Khooriga Cadmeed waxaa barbar socda silsilad qarar buuraleey xaaluf ah oo buurta ugu dheer fiinteedu gaareeyso 6,000 cagood waxaana ka mid ah buuraha la yiraahdo Hadaaftimo iyo Naasa-Hablood. Silsiladdaas buuraleeyda ah ee garab socota Khooriga Cadmeed waxay dhankeeda Bari ku hoobataa agaggaarka taagga Raas-Caseyr ee Badweynta Hindiya; dhanka kalena,iyadoo si qunyar sare ugu kacdo, waxay martaa oogada Galbeed waxayna ku dhammaataa dooxada sare ee webiyada Shabeelle iyo Maana.

1) DHULKA

Dhulka Soomaalida deggan tahay waxaa loo qaybiyaa, muuqaal ahaan, siddeed gobol oo ay afar ku yaallaan dhanka Waqooyi iyo Galbeed afarna dhanka Koonfur iyo Bari. Afarta gobol ee dhanka Waqooyi iyo Galbeed waxay kala yahiin:

a. GUBAN — Waa gobolka deexda Khooriga Cadmeed ee bacaadka carro gubadka leh ay cimiladiisu aad u kulushahay waxaana ka baxa geed gaabka, daranta iyo xadhuunka dhawr biloodna waxuu ku habboon yahay daaqa nugulka iyo ariga, geelana waa ku darmaa daaqa xadhuunka iyo daranta.

b. OOGO — Waa gobolka sare ee buuralayda ah ee dabayshiisa iyo cimiladiisuba meel dhaxaadka yahiin, waxuuna ku habboon yahay beerashada dalagga qaarkii, sida sareenka, misiggada, tufaaxa, canabka iyo dalagyada aan ka bixin dhulka hoos.

c. DOOXO Waa gobolka dooxada ah ee u dhaxeeya buuraha iyo oogada oo ay ku rogmaan biyaha buuraha dushooda ka yimaada daawyada roobka ayna ka abuurmeen togagga, sida Togdheer iyo togga Nugaaleed. gobolkaani waa midka ugu wanaagsan dhanka Waqooyi waxuuna ku habboon yahay dhaqashada xoolaha, gaar ahaan, nugulka (lo'da iyo gammaanka).

d. HAWD Waa gobolka ciidda cas ee kaynta badan oo quracda iyo cawska ka baxaan waxuuna, guud ahaan ku habboon yahay daaqa iyo xoola dhaqashada, hadii waraab xoolaha lagu doojiyo loo helo.

Gobollada Koofureed iyo Bari ee la xiriira xeebaha Badweynta Hindiya, muuqaalkoodu wuu ka duwan yahay dhulka gobollada Waqooyi iyo Galbeed. Dhulka taagga ah si qunyar ayuu gudaha ugu hoobtaa taniyo masaafo dhan saddex boqol kiiloomitir. Dhulka gobolladaani waxaa mara webiyo ka soo askuma buuralayda Galbeed iyo Koofur Galbeed, kuwaasoo aanan gurin, haddii aan roob yari helin. Dhulka gobolladaan waxuu, muuqaal ahaan, u qeybsamaa:

a. XEEB: Waa gobolka xaalufka ah ee badda xigga ay cammuudiisa ka abuuranto bacaadka guurguura oo ay biyaha badda gawgeeda ku hakadaan oo aan ka fogeyn badda.

b. DEEX: Waa gobolka carra cadda ah ee la jeedka xeebta, oo cimila aad u kululna leh. Gobolkaan waxaa ka baxa dareemada, daranta, xadhuunka iyo geed gaabka waxuuna ku habboon yahay dhaqashada ariga iyo nugulka geelana waa ku darmaa daaqa dareemada iyo daranta. Waxaa kaloo xagaaga lagu beeri karaa Digir, Qare, Waambo, meseggo iwm.

c. DHOOBEY: Waa gobolka carra madowga dhooqada ah ee webiyada hareerahooda waxaana ku butaaca biyaha webiyada, goortay buuxdhaafaan, waxuu leeyahay dhir jiq ah oo uu ka dhasho qaniinka, sida dhuugga,gendiga iyo kaneecada ay dadka iyo xoolahuba ku goleystaan. Gobolkaan waxuu aad ugu habboon yahay beerashada waraabka iyo daaqa nugulka, haddii laga baabi'yo qaniinka xoolaha iyo dadkaba waxyeelada u geysta.

d. DOOY: Waa gobolka ciid guduudda shawda ah oo kaynta badan kana baxaan quracda iyo gumarta. Gobolkaan waxuu u dhaxeeyaa webiga Ganaane iyo yaacdada webiga Shabeelle waxuuna ku habboon yahay daaqa geela iyo ariga. Dhankiisa waqooyi Bari waxaa ku yaalla silsilad buuraleey ah ee ka sameeysan dhagax sulub ah, ka billaabata soohdinta webiga Shabeelle kuna dhammaato Buur Meged ee dooxada webiga Ganaane. Dusha gudaha dooy waxaa ku yaalla dhul adable ah ee ka kooban degmooyinka Qansaxdheere, Baydhowa iyo Buur Hakaba (1100 cagood) dabadeedna qunyar ayuu sare ugu kacaa taniyo inta laga gaaro ceelasha Bakool. Dhulkan adablaha ah waxuu ku habboon yahay daaqa nugulka iyo beerashada ku siman

daawyada roobka. Waxaa kaloo adablaha ka mid ah: Degmada Afmadow ee Jubbada Hoose oo loo yaqaanno Waamo.

2) **ROOBABKA**: Roobabka dalka ka da'a aad ayay u kala duwan yahiin, haddii loo eego gobol iyo gobol kale. Roobku sannad walba waxaa lagu qiyaasaa, ugu yaraan, 500mm, iyadoo uu gaaro, goortuu ugu badan yahay, 600-700mm. Roobabku inta badan waxay da'aan laba daaw sannadkiiba: Bilaha Abriile-Maajo iyo Oktoobar-Noofembar, goortaasoo ku beegan isbeddelada dabaysha. Waxaa xeebaha ka da'a shuux yar oo xagaa ah bilaha,Juunyo, Luulyo iyo Agoosto. Heerka rutuubada ama dhededa aad ayay u sarreeysaa aroortii waxayna gaartaa (90c taniyo 100c); daawyada roobabka darajada ugu hooseeysa waxay gaartaa galabtii 52c taniyo 76c; bilaha ugu qallalanna waa 52c taniyo 72c.

3) **XEEBTA**: Dalka Soomaaliyeed oo leh xeeb dheer oo gaaraysa in ka badan 3500 Km. oo la jeedda Khooriga cadmeed iyo Badweynta Hindiya, noolaha badeedda waxuu dhaqaalaha ka geli karaa kaalin wax ku ool ah, haddii la barbar dhigo tacabka beeraha iyo xoolaha, waxayna leedahay awood weyn ee horumarinta dhaqaale. Shisheeyaha booqashada dalka ku yimaada waxay la yaabaan noolaha faraha badan ee badda Soomaaliyeed, gaar ahaan, badda Waqooyi Bari. Sideedaba Soomaalidu, inta badan, waa guurto xoolo raacato ah, ma jillaabato noolaha badda mana cunto, waxaana ugu wacan aqoondarrida oo ay baddu u leedahay.

Xeebaha Somaliyeed, iyadoo maanka lagu hayo muuqaalka u gaarka ah, waxaa lagu tilmaami karaa afar qeybood oo ah:

a. Laga billaabo Baab-Al-Mandab taniyo taagga Raas Caseyr, xeebta waxay u janjeertaa dhanka Bari, waa buuraleey sarreeysa oo meelaha qaarkood leh qarar xeebta ku dul gudban iyo meela qalqalloocan.

b. Taagga Raas Caseyr taniyo Eyl, xeebta waxay u janjeertaa dhanka Koofur Galbeed, waa qarar sare sida aan horay u soo sheegnay.

c. Laga billaabo Eyl taniyo iskudarka wabiga Ganaane iyo Badweynta Hindiya, dhawr kiloomitir waxii Eyl ka rogan, ayaa kaliya leh buuro sare lehna meela qalqalloocan; dhanka Koofureed, guud ahaan, xeebta way hooseeysaa waxayna leedahay carro cadduun ah oo ka sameeysan buuro aan dhaqdhaqaaqin oo deexdeeda ka baxa geed gaabka, dareemada iyo daranta. Dhawr boqol oo mitir biyaha hoostooda waxaa jira bacaad mara oo aad ugu dhow biyaha dushooda, inta badanna hakiya doonyaha yaryar marinkooda, inkastoo guud ahaan, maraakiibta ay soo gaari karaan meelaha agaggaarkiisa ah.

d. Laga billaabo isku darka webiga Ganaane iyo Badweynta Hindiya taniyo iskudarka webiga Taana ama Ganaane mara iyo Badweynta Hindiya, xeebta qaarkeed waa cammuud bacaad ah qaarna waa qarar buuraleey ah. Qaarka buuraleeyda ah way sarreeyaan xoogaana wey qalqalloocan yahiin.

4) **JASIIRADAHA:** Badda dhanka Koofureed waxaa ku yaal Jasiiraddo oo ay kuwa ugu waaweyn yahiin:

- Kooyaama
- Inguumi (Vuma)
- Jawaay,
- Kufuumbi iyo
- Juula

Waxaa badda Jasiiradda Jawaay dhanka deexda uga weecdo tog weyn oo gudaha ka gaara meel fog oo noqon kara, timaaddada deked aad u habboon, hadduu degaanka shiimoobo. Waxaa kaloo deexda aaggaas ku yaal harooyin oo ay ka mid yahiin:

- Harada Guran Luga,
- Harada Caanoole iyo
- Harada Birkaan.

Waxay iyaguna timaaddada noqon karaan deegaan dalxiis, hadduu aaggaas shiimoobo.

5) **DEKEDAHA IYO MARSOOYINKA:** Dekedaha iyo marsooyinka dalka Soomaliyeed waxaa ka mid ah:

- Obokh
- Jabuuti
- Seylac
- Berbera
- Bareeda
- Bosaaso
- Beyla (Xaafuun iyo Hurdiya)
- Eyl
- Hobyo
- Mareeg
- Cadale
- Warsheekh
- Muqdisho
- Marka
- Baraawe
- Kismaayo

6) **WEBIYADA** Dhanka buuraha Koofur Galbeed, waxaa ka soo askuma afar webi oo u shubaan xagga Koofur Bari kuwaasoo kala ah:

- Weeb;
- Maana;
- Daawa iyo
- Shabeelle.

Saddexda ugu sarreeysa waxay ku kulmaan Doolow, halkaasoo ka dhasha webi Ganaane ama Jubba oo badda kaga daro tuulada Jumbo, iyadoo webiga Shabeellena yaacdo noqdo uuna ku baaba'o dooxada ka rogan tuulada Haawaay ama Xaawaay, inta usan gaarin badda.

Burqashada labada webi oo waaweyn iyo mugga ay la eg yahiin biyahoodaba waxay ku xiran yahiin roobabka ka da'a oogada buuraha Galbeed iyo Koofur Galbeed, mid aan sidaas u sii weyneynna waxaa saameeya roobabka ka da'a dalka gudihiisa. Burqashada webiyada si weyn waxay u dhacaan laba jeer sannadkiiba, kuwaasoo ku xiran yaraanta ama badnaanta roobabka ka da'a buuraleeyda Galbeed iyo Koofur Galbeed. Roobabka xoogga badan waxay da'aan laga billaabo, 15ka Abriil taniyo 15ka Seteembar, daawyadaasoo ku habboon tacbashada beeraha.

Dhulka beerashada ku habboon ee labada webi waaweyn jiinkooda, male ahaan, waxay la'eg yahiin Milyan Hektar waxaana laga tacbadaa 600,000 Hektar waxaana lagu beeraa dalagyo kala duwan ay ka mid yahiin: moos, geedsokor, liin, mafafaay, canbe, qunbe, khudrad, meseggo, galley iyo sisin waxaana lagu waraabiyaa matoorro iyo daadwaraab. Ciidda labada webi way kala duwan yahiin; ciidda Webi Shabeelle waa isku jaad waxaana ku badan cusbodhuleed ama Cusbo-eyl (Alkaline) oo ay ugu wacan tahay fataha webiga iyo waraabka aan biyo shuurka lahayn oo dhulka ka dhigta nabaadguur aan mira ka bixin waxayna u janjeertaa inay ku sii badato biyoqaadka muggiisana ma badna. Webi Jubba ciidiisa waa kala jaad cusbo dhuleedkana waa ku yar tahay muggiisa biyoqaadkana waa ka badan yahahay kan Shabeelle waxuuna timaaddada leeyahay horomar wacan.

7). **DAAWYADA SANNADKA IYO DAYAX FADHIYADA.**

Sannadka cadceedda waxuu u qaybsan yahay afar daaw, kuwaasoo ah:- Gu' Xagaa, Dayr iyo Jilaal ama Diraac. Afartaas daaw waxaa lagu tiriyaa afar qaybood dayax fadhi oo midkiiba yahay toddoba dayax fadhi iskudarkooduna yahay siddeed iyo labaatan dayax fadhi oo adduunkoo idil laga yaqaan waxaana weeye:-

a. Toddobada dayax fadhi ee daawga Gu'ga waxaa la yirahdaa CIRIR kuwaasoo kala ah:-

i.	Cirir Faruurane	(laba xiddigood)
ii.	Jid Gabarre	(saddex xidigood)
iii.	Jid Gacanla	(lix xiddigood)
iv.	Meecaad Guran	(shan xiddigood)
v.	Meecaad Buuxe	(laba xiddigood)
vi.	Meecaad Hore	(laba xiddigood)
vii.	Meecaad Dambe	(laba iyo toban xiddigood)

b. Toddobada dayax fadhi ee daawga xagaaga waxaa la yiraahadaa NAAFO kuwaasoo ah:

viii.	Naaf Cadde	(sagaal xiddigood)
ix.	Naaf Madoobe	(laba xiddigood)
x.	Afgooye	(saddex xiddigood)
xi.	Kuxdin Hore	(laba xiddiood)
xii.	Kuxdin Dambe	(shan xiddigood)
xiii.	Kuxdin Majin	(afar xiddigood)
xiv.	Dirir	(hal xiddig)

c. Toddobada dayax fadhi ee daawga Dayrta waxa la yiraahdaa DALAALA kuwaasoo ah:

xv.	Dirir Garbood	(laba xiddigood)
xvi.	Dirir Bayaxaw	(laba xiddigood)
xvii.	Dirir Gudbane	(shan xiddigood)
xviii.	Dalaala Cas	(toddoba xiddigood)
xix.	Dalaala Hore	(toddoba xiddigood)
xx.	Dalaala Dareegdheer	(toban xiddigood)
xxi.	Dalaala Dameeraley	(afar xiddigood)

d. Toddobada dayax dadhi ee daawga Jiilaalka ama Diraacada waxaa la yiraahdaa FARAC kuwaasoo ah:-

xxii.	Gudun	(saddex xiddigood)
xxiii.	Listan	(saddex xiddigood)
xxiv.	Lixa	(lix xiddigood)
xxv.	Laxmar	(siddeed xiddigood)
xxvi.	Sacaha	(Saddex Xiddigood)
xxvii.	Cigaal Case	(lix xiddigood)
xxviii.	Afgaal	(afar xiddigood)

8). AYAANTA

Ayaantu waxay u qaybsantaa 24 saac oo ka kooban 12 saacad maalin iyo 12 saacad habeen waana sida soo socoto:

a.

Maalin:	Habeen
Waabari	Qorraxdhac
Galin Hore	Saq Hore
Aroor	Fiid
Barqo	Caweysin
Hargal	Habeenbar
Galindambe	Saqdambe
Galab	

b.

Maalinta	Saacadaha	
Waabari	0530-0600	
Galin Hore		
Aroor	0600-0900	
Barqa	0900-1130	
Hargal	1130-1400	"
Galindambe		
Galab	1400-1730	"

c.

Habeenka	Saacaadaha	
Qorraxdhac	1800-1830	"
Saq Hore		
Fiid	1830-1900	"
Cawaysin	1930-2400	"
Habeen Bar	2400	"
Saqdambe	2400-0530	"

Ayaanta sannadka Cadceedda waxay billaabataa Aroortii saacadu goortay tahay 0600 Saac. midda Miilaadiga ahna waxay billaabataa habeenbarka 0000 iyo midda dayaxa oo iyana billaabata qorraxdhaca 1800saac.

9) **SANNADKA CADCEEDDA.**

Sannooyinka cadceedda Soomalida waxay ku tirsataa magacayada maalmaha toddobaadka, sidaa daraadeed, maalin kasta oo ah maalintuu billawday waxaa lagu magacaabaa sannad uu kan ugu horreeyo yahay sannadka Sabtida kan ugu dambeeyana yahay sannadka Jimcaha. Sannad kastaa, si loo aqoonsado waxaa lagu lammaanshaa magaciisa dhacdo qaayo leh ee sannadka gudihiisa lala kulmo, sida abaar, roob badan, cudur bas ah iwm. Dhacdooyinkaas gobollada dalka wey ku kala duwan yahiin, iyagoo ayan isku dhacdo ahayn awgii. Sannadka billawgiisa waxaa lagu xusaa dabshid oo qof kasta habeenka ka horreeya sannadka billawgiisa dab shito uu ku xusaayo sannadkiisa. Dhallinyarada, iyagoo sannadkooda tirsanaaya ayay dabka ka boodaan inta da'adoodu tahay. Waa Dhaqan Soomaalidoo idil ka dhexeeysay aadna moodid, waayahaan dambe, inay soo gurayso. Waxaa habeenkaa dabshidka sannadka loogu dabaaldegaa ciyaaro iyo rayrrayn uu qoys kastoo Soomaaliayeed ku soo dhoweeynayo sannadka cusub billawgiisa kuna sagootinayo kan tegay. Soomaalida waxay ayaanta ku tirsataa sannadka Hijrada oo ay ayaantiisa billaabata qorraxdhac waxayna ka horreeysaa 6 saac ayaanta sannadka Miilaadiga oo billaabata habeenbarka, tan Cadceeddana ay ka horreeyso 12 saac oo iyana billaabata aroortii. Sidaa daraadeed ayaamaha loo tirsho saddexda sano isku goor ma billawdaan. Taasi waxay keentay in

Soomaalidu dabka ay shidato, xusidda sannadka Cadceedda billawgiisa, oo dhaco habeenka ka horreeya aroorta billaawga ayaanta Cadceedda. Sannadka cadceedda waa 365 Ayaamood waxuuna ka kooban yahay 12 bilood, kuwaasoo ah:

			Miilaadiga
a)	**BILAHA SAMAHELE (SHAN HORE)**		
i.	Laxadhaqe	30 ayaamood [1](dabshid)	23.07-21.08
ii.	Diraacgood	30 "	22.08-20.09
iii.	Samalaho	30 "	21.09-18.11
iv.	Kalahaan	30 "	19.11-20.10
v.	Dambarsame	30 "	21.10-19.11
b)	**BILAHA DIRIR (TODDOBA DAMBE)**		
vi.	Baldaaq	30 ayaamood	29.11-19.12
vii.	Lixkor	31 "	20.12-18.01
viii.	Toddob	31 "	19.01-18.02
ix.	Fuushane	31 "	19.02-20.03
x.	Gu'soore	30 "	21.03-20.04
xi.	Samuulaad	31 "	21.04-20.05
xii.	Dirir Sagaaro	31 "	21.06-21.07

Iyadoo sannadka Cadceedda ka badan yahay kan Dayaxa 11 ayaamood, Soomaalida waxay ku kordhisaa kan Dayaxa 10 ayaamood halkii lagaga kordhin lahaa 11 oo ka dhiman si loo gaarsiiyo 365 ayaamood oo uu ka kooban yahay Sannadka Cadceedda. Tusaale ahaan sannadkaan waa Talaado oo loogu magac daray ayaantii dabka la shiday.

10) SANNADKA MIILAADIGA.

Sannadka miilaadiga waa 365 ayaamood waxuuna ka koobmaa 12 bilood, kuwaasoo ah:_

i.	Janaayo	31 ayaamood
ii.	Febraayo	28 "
iii.	Maarso	31 "
iv.	Abriile	30 "
v.	Maajo	31 "
vi.	Juunyo	30 "
vii.	Luulyo	31 "
viii.	Agoosto	31 "
ix.	Seteember	30 "
x.	Oktoobar	31 "
xi.	Nofeember	30 "
xii.	Diseember	31 "

[1] Waxaa dabka la shitaa habeenka ka horreeya aroorta ay billaabanaysa ayaanta sannadka Cadceedda.

11) SANNADKA DAYAXA.

Sannadka dayaxa waa 354 Ayaamood waxuuna ka koobmaa 12 bilood kuwaasoo ah:-

	BILAHA DAYAXA SOOMAALIYEED.		BILLAHA DAYAXA CARBEED
i.	Seko	30 Ayaamood	Muxarram
ii.	Safar	29 "	Safar
iii.	Mawliid	30 "	Rabiicul-Awal
iv.	Maal ma doone	29 "	Rabiicul-Aakhir
v.	Ban hore	30 "	Jamaadul-Awal
vi.	Ban dambe	29 "	Jamaadul-Aakhir
vii.	Sabuux	30 "	Rajab
viii.	Waabaris	29 "	Shacbaan
ix.	Soon	30 "	Ramadaan
x.	Soonfur	29 "	Shawaal
xi.	Sidataal	30 "	Dul Qacda
xii.	Arrafo	29 "	Dul Xaj

II. DADKA

B - DADKA XAMIITIGA EE WAAYAHII HORE

Toban kun oo sano waa laga joogo, dad badan oo Xamiitig ah ee waagaa ku noolaa buuraleeyda Kawkaasiya oo loo maleeyo dhanka waqooyi ee loo yaqiin Peershiya, ayaa Galbeed u soo hayaamay. Dadkaa soo hayaamay waxaay ka koobanaayeen saddex qolo oo kala ah: Misr, Kush iyo Puth ama Quut hadba sida lo yaqaan. Tariikhda ma sheegeyso sababtii keentay hayaanka dadka sidaa u badan, waxaase suuragal ah inay dad kale oo ka yimid Bariga Fog u soo riixeen dadkaas xagga Galbeedka. Sikastaba ha ahatee, saddexdii qolo ee kawkaasiya degganayd waxay u soo hayaameen dhanka Qorrax u dhac waxayna soo gaareen Afrikada Waqooyi ee dalka maanta Masar loo yaqaan. Waagaa Afrikada Waqooyi iyo Bariga Dhexe bad uma dhexayn sidaaseyna ku suuragashay inay si fudud ugu soo gudbaan Afrika, iyaga iyo duunyadooduba waxayna ku hakaddeen yaacdada webiga Niilka, halkaasoo ay degganayeen intay ka gaareen dhawr fac ama boqolaal sano. Muddadaas dheer kadib, way kala guureen. Qoladii Masaarida waxay ku hartay yaacdada Niilka kadibna qaarkood u hayaameeyn dhanka Waqooyi waxaana loo maleeyaa, qaarkaan dambe, inay ka farcantay qolada maanta loo yaqan Berberi oo ah dadka aan Carabta ahayn ee deggan Waqooyiga Afrika.

Taariikh yaqaannada Talyaaniga, Profesor Ducati iyo Giuseppe Sergi, waxay tilmaameen qolooyinka kale oo u soo hayaamay Waqooyiga Afrikada Bari oo ay u baxsheen Xamiitigga Bari, waxay sheegeen in qolooyinkaas, muddo goortay ku meeraysanayeen dalkay tageen ee Afrika oo loo maleeyo dhawr fac kadib, ayay kor u siiraaceen webiga Niilka dabadeedna dhabbe ka heleen oogada buuraleeyda Nuuba iyo Nabatiya waxayna degeen deexda Badda Cas iyo oogada la jeedka ah ee loo baxshay dalkii Kush (Land of Kush) oo ay waa danbe ka dhalatay Boqortooyadii Kush oo waagaa la yaqiin aadna loo qaddarin jiray. Qoladii Puth oo waagii dambe loo yaqiin Punt, kuma ay nagaan oogada waxayna siiwaday hayaankeedii taniyo intay ka gaartay xeebta Khooriga Tajura iyo Waqooyi Bari Badweynta Hindiya. Waxay halkaa ka barakicisay dadkii horay u dagganaa Geeska Afrika oo loo yaqiin Wanyiika ama Sanji oo ay u riixday dhanka dooxooyinka Koofureed.

Waxaa hubaal ah in arrintani dhacday muddo fog, waagii Geeska Afrika loo [2]yaqiin dhulkii udgoonka ee jaawaha, beeyada, xabkaha iwm. Muddo aan la garanayn goortay degganayd Geeska Afrika ayay, qaar qoladii Puth ahayd, dib ugu hayaantay dhanka Wooqooyi, iyagoo maray xeebta Badda Cas. Waxaa suuragal ah inay dhabbe ka heleen dooxada Xammaamat waxayna dabadeed ku biireen qoladii Masar. Goortay gaareen dalka Masar waxay xiriir dib ula yeesheen qoladay ka soo hayaameen ee degganayd Geeska Afrika, iyagoo u bixiyay dalkii Puth (Land of Puth). Magaca Punt oo waa dambe dhaqan galay waxaa loo maleeyaa inuu yahay Puth oo doorsoomay ahna magacii Kush walaalkiis oo ay ku abtirsanaysay qoladii Geeska Afrika degtay.

---

[2] Dhulkii udgoonaa waxaa loo aqoon jiray deexda u dhaxeysa Khooriga Tajura taniyo Raas Caseer. Waxaa hubaal ah "jaawaha" inuusan ka bixin dalka Soomaalida, waxaase laga keeni jiray Koofurta Hindiya iyo Gobolka Jaawa dabadeedna dib loo sii iibin jiryay.

Waxaa xusid mudan inay qoladii dib uga hayaantay dalkii Punt ee ku laabatay dalka Masar, sida ku cad qoraallada taariikhda Masar, ka dhalatay Boqortooyadii Hak. Waxaa loo maleeyaa Boqortooyadii Hak inay ahayd tii Afrika, taariikh ahaan, ugu horreeysay waxayna ka horreeysay boqortooyadii Mena. Boqortooyadii Hak waxay Saldanada haysay muddo ah 1255 sano, kadib waagii Masartii sare iyo tan hoose la mideeyay, magaca Hak waxuu ahaa mid lagu faanno lagana hormariyo darajo iyo magac kasta oo ay Masaaridu lahayd. Magaala madaxda Boqortooyadaas waxaa la oran jiray Nekehen ama magaaladii Hak, Boqor kastana waxaa lagu magacaabi jiray Xuur.

Labada qoloo Xamiitigga Bari waxaa ugu horreeynba lagu garanaayaa muuqaalka dhismaha jirkooda dadnimo (anthropological features); Waxay kaloo leeyihiin af isku hayb ah oo xiriir la leh afka Samiitigga, gaar ahaan, Carabta iyo afafka kale ee Aasiyada hoose oo ah afafka oo ay af-yaqaannada yiraahdaan "HAMITO-SEMITIC GROUP". Inkastoo isu ekaansho af muuqato haddana lama oran karo afka Xamiitigga Bari waxuu dhismo ahaan la hayb yahay ama xiriir dhismo la leeyahay kan Carabta, hubaalse waxaa ah inay ilbaxnimada Carabtu muddo fog dheeheysay dadka afkaas ku hadla ereyo badanna ku kordhisay hodannimadiisa. Dadka Xamiitigga Bari waxuu inta badan dhaqankiisu yahay guurto xoolo raacato ah, waxaa laga ogaaday Herotodus ee Giriig ahaa loona yaqiin aabbiihii taariikhda, inuu waayahii hore dadkaas gibilkiisu caddaa, dheerdheeraa, dhuubdhuubnaa dhaqanna u lahaa inuu dibida da'da yar dhiigga ka cabbo, dhaqankaasoo maanta weli ku dambeeya Oroomada iyo Masayda. Herotodus waxuu kaloo sheegay inaan taariikhda lagu xusin waagii uu Xamiitigga Bari u hayaamay Afrikada Waqooyi Bari, haseyeeshee, waxaa muuqata inay muddo fog ka soo warreegtay hayaankiisa, intuu siihayaamayayna ay isguursadeen dadkuu dhexmarayay ee gibilka madoowaa waaguu Waqooyiga Afrikada Bari gaarayna, muddo dheer dabadeed, gibilkiisi caddaa uu u doorsoomay maarriin.

Muddo laga joogo 4000 sano Milaadiga ka hor, Masaaridu waxay xiriir la lahayd Boqortooyadii Kush ee maanta u kala qaybsan Eritreeya iyo Suudaanta Waqooyi lana oran jiray Tune Heshow ama dalkii Kush iyo Boqortooyadii geeska Afrika ee loo yaqiin dalkii Punt ama To Netar (Dalkii Eebbe). Masaaridu waxay dalalkaas la lahayd xiriir ganacsi waxayna ka iibsan jirtay hargaha shabeelka, beeyada, xabkaha, baalasha goroyada, geedaha uunsiga oo waagaa siinad aad u sarreeysa lahaa iyo daawooyinka lagu dhayi jiray maydka fircoonnada.
Waayihii dambe waxaa ku soo kordhay badeecooyinkaas faanta maroodiga iyo addoomada. Xiriirkaa waxuu xoogeystay joogtana noqday qarnigii 15aad miladiga ka hor, waagii saldanadii 18aad oo ay Boqoraddii Hat-Shep-Sut u talinaysay dadka Masaarida.

Muddadii Masar ay u talineysay Boqoraddii Hat-Shep-Sut oo ay Wanbarka Boqortooyada kala wareegtay walaalkeed That Mes oo ninkeediina ahaa, sida dhaqanka fircoonnada ahayd, waxay booqasho ku tagtay dalkii Punt. Qoraallo raadreeb ah oo ay waagaa ka tagtay waxay ku qoran yahiin derbiga taallada fircoonkii Amone ee Dair-El-Baxri waxayna u qoran yahiin sida soo socoto: "Wax kastoo wanaagsan oo laga helo Masar waxaa lagu keenay talada Boqoradda Hat-Shep-Sut. Waxaa loo maleeyaa in xaryannadii u dhoofay dalka Punt oo ay hoggaaminaysay Boqoraddii Hat-Shep-Sut uu saarnaa sawirka Boqoradda (Status) ee laga sameeyay marmar, kaasoo ay ugu diiqaysay dadkii Punt, iyadoo qabtay inuu isirkeedu yahay Punt waxaana loo maleeyaa in meel dalka Punt ka mid ah lagu dhisay.

Boqorkii weynaa ee dalkii Punt deeqduu Boqoradda siiyay waxaa ka mid ahaa: Dahab, macdanno kala duwan oo qiimo badan, malmal, xabag hedi, beeyo, faan maroodi, geed uunsi iyo geedaha beeyada oo loo qaaday in lagu tallaalo dalka Masar. Goortay Boqoraddii u dhammaatay booqashadeedii, Boqorkii Punt Beru iyo ooridiisi Aari waxay raaceen xaryankii Boqoradda Hat-Shep-Sut, iyadoo lagu raray waxyaabihii deeqda loo siiyay oo dhan. Maalintuu wafdigaasi Masar ku laabtay waxaa laga dhigay maalin ciid weyn ah waxaana la gowracay ido madax madow iyo dibiyo si loogu duceeysto waxayna ahayd maalin aad loogu bogay waxaana Boqoraddu ka muuqatay rabitaan inay maalin weyn noqoto oo ay xusuustaan dadka labada dal, Masar iyo Punt. Si taas u suuragasho waxaa sawirro badan lagu aslay derbiga taallo cusub ee laga helay dhanka Galbeed ee Thapaid oo uu helay, qarnigii dhowaa, Profesor Naville oo ah dhulbaare Faransiis ah. Sawirradaas la aslay midkood waxaa ka muuqda kooxdii xaryannada ahayd oo marso dalka Masar ka anbabbaxaysa una dhoofeeysa dalkii Punt iyo Boqoraddii Hat-Shep-Sut oo saaran. Waxaa kaloo ka muuqda doonyo lagu raraayo deeqdii loo waday dalka Punt, iyadoo isla goortaana ay sawirrada ka muuqdaan xoolo la gowracaayo looguna baryaayo inay xaryannada dabayl ay ku dhoofaan helaan. Xiriirkii taxanaha ahaa ee ka dhexeeyay Masar iyo Punt waa la siiwaday si loo horumariyana Boqoradda iyo madaxda Masar waxay isfareen inay xoojiyaan ganacsigii iyo dhaqankii ka dhexeeyay labada dal. Sidoo kale ayay Boqorka iyo madaxda Punt isfareen, si ballankaas loo fuliyona wafuud badan ayaa dabadeed labada dal isweydaarsadeen xiriirkooduna uu gaaray, sida ku cad qoraallada iyo raadreebyada laga helay Masar, heer la kala garan waayay labada dal. Masar goortay ka hadli jirtay dalkii Punt uma ay arki jirin dal shisheeye sidaasuuna ku socday xiriirkii u dhexeeyay taariikhdii hore ee Masar iyo Punt". Gebriel Ferrand, dhulbaaraha Faransiiska, waxuu yiri: "Boqortooyadii ugu horreeysay ee Thapaid waxay u dirtay Dalkii Punt badmareennadii ugu horreeyay ee xaryanno ah oo lagu doonayo Marmar lagu sameeynaayay xabaallaha Fircoonnada. Xaryannadaas waxaa marin u ahayd Bada Cas, iyagoo u socda gobolka udgoon ee ahaa dhanka Waqooyi Bari ee dalka maanta loo yaqaan Soomaaliya".

Dhulbaaraha Ameerikaanka, James Hanery Breasted oo Professor ka ahaa Jaamacadda Chicago, waxuu ka qoray raadreebyo uu ka helay Dair-El-Baxri inay ahaayeen kuwa ugu qaaya badan oo taniyo haatan la helay ifafaale cusubna ku kordhinaaya tariikhdii hore ee dalka Punt. Qoraalladiisa oo ku magacaaban "Egypt Through the Strescope" waxuu ku leeyahay xaryannadii Marmarka loo diray: "Inkastoo ay goorta iyo waasacu inoo oggolaanayn inaan la socono tillaabo kastoo socdaalkaas la xiriiray", haddana, shantii xaryan ee la diray waxay gaareen meesheey u socdeen, iyagoo ka dhoofay marso aan la garanayn oo ku taal xeebta dhanka Waqooyi ee Badda Cas kuna xirtay marso ku taal xeebta Soomaaliya. Masaaridu waxay dalkaas u taqiin dalkii Punt waxayna muddo fog ee ka billaabata 3,600 ama 3,700 sano M.H kula xiriiri jirtay badmariddii ugu horreeysay waagaas, isla marinkaas, waa dambe, waxaa ku ganacsan jiray Nebi Suleymaan". Breasted waxuu kaloo leeyahay: "waxaannu raadreeb ka helnay, muddadii saldanadii shanaad ee fircoonkii Sahore, 3567 M.H, in loo diray dalkii Punt socdaalkii dhulmareen ugu horeeyay taariikh ahaan. Dalka Punt waagaas waxaa dhulka looga socdaali jiray, lamadegaanka Okotos ee maanta loo yaqaanno Kuft, iyadoo looga gudbi jiray dooxada Xammamat oo waagaas loo yaqiin Ante Rehenu. Sarkaalkii wafdigii dhulmareenka ugu dambeeyay ee loo diray dalka Punt hoggaaminaayay waxaa la oran jiray Henu waxaana la diray intii ay jirtay Boqortooyadii Remsis, fircoonkii 3aad ee Saldanadii 19aad, 1400 sano M.H. Oonleeyda lamadegaanka ah waxuu uga gudbay sibraarro biyo ah iyo muufo uu sahay u qaatay, dadka socdaalkaas ka qaybgalayna waxuu

ahaa 3,000. Waxaa hubaal ah in faraaciinta muddo fog xiriir ganacsi la lahayd dadkii Afrikada Waqooyi Bari ee degganaa iskudarka Badda Cas iyo Badweynta Hindiya.

Boqortooyadii Kush oo waayahii hore aad looga yaqiin caalamka kana talin jirtay dalka maanta loo yaqaan Eritreeya taniyo Waqooyiga Suudaan xarunteeduna ahayd Nabatiya, ayaa Qarnigii 10aad Miilaadiga ka hor, ka goosatay xiriirkii siyaasadeed, dhaqameed iyo dhaqaalaba oo ay mudda aad u fog la lahayd Masar. Sanadkii 540kii Miilaadiga ka hor, waxay sidoo kale xaruteedii u rartay Meroe kuna xirtay ilbaxnimadeedii, dhaqankeedii iyo dhaqaalaheediba dalalkay deriska la ahayd. Intii ka dambeeysay muddadii fircoonkii Nektane, Masaaridii hore ma ayan yeelan madax iyada ka dhalatay. Sannadkii 525kii M.H waxaa Masar qabsaday Pershiya waxaana Boqor u noqday Kambise oo ahaa wiilki Boqorkii Jurus. Boqoradii Pershiyaankii waagaa qabasaday Masar waxay caabudi jireen diintii Masaarida waxaana loo aqoonsaday inay yahiin faraaciin. Dariuskii 1aad (522-485) waxuu dhammeystiray hawlahii uu waday fircoonkii Masaarida ee ka horreeyay oo uu ka mid ahaa biyamareen ama keli iskuxirayay Niilka iyo Badda Cas. Sannadkii 322kii M.H waxaa xukunka Masaarida qabsaday Alesandarkii weynaa Pershiyaankiina way isdhiibeen, iyagoo u aqoonsaday Alesandar fircoon waxuuna dhisay magaalada loogu magacdaray ee Alesandariya. Kadib goortuu Alesander geeriyooday waxaa xukunkii qabsaday nin u ahaa abbaaduulle oo la oran jiray Ptolemy. Saddex boqoloo sano waxaa Masar xukumaayay faracii Ptolemy waxayna dhalashadoodu ahayd Giriig ee gobolka Mashedoniya, haseyeeshee, waxuu dhaqankoodii iyo hiddahoodiiba u doorsoomay kan Masaarida. Waxay isku magacaabi jireen faraaciin waxaana lagu Boqri jiray magaalada Memfis oo waagaa ahayd maagaaladii diinta. Waxaa faracii Ptolemy xukunka ugu dambeeyay Boqoraddi kleopatra oo noqotay Boqoraddii Masar goortay, dood awoodda ka dhalatay awgii, walaalkeed Ptolemy 12aad, kala wareegtay xukunka, iyadoo uu gacan ku siiyay "Juuliyo Cesare" oo madax u ahaa waagaa Saldanada Roma. Goortay awoodda Romaanka xoogaysatay, Masar waxay noqotay gobal hoos yimaado Roma. kleopatra, 30kii M.H, si ay u muujiso dhibaatada iyo niyad xumida ka haysatay cadaadiska siyaasadeed ee xukunka Romaanka, way isdishay. Kadib geeridii Kleopatra, Masar waxay noqotay gobol hoos yimaada xukunkii Romaanka taniyo sannadkii 640kii Miilaadiga uu Islaamka Masar qabsaday waagaa kadibna ka dhalatay Bariga Dhexe Boqortooyadii Bisantiin oo iyaduna baabba'day sideed boqol sano kadib. Waxaa loo maleeyaa in taniyo intuu Masar ka billawday xukunkii shisheeyaha uu go'ay xiriirkii oo ay la lahayd dalkii Punt". Billawgii qarnigii kowaad taniyo qarnigii 10aad ee miilaadiga, dalkii Punt waxaa loo aqoon jiray dalkii Berberiga ama Barri-Al-Cajam. Magaca Soomaaliya waxuu soo ifbaxay intii ka dambeeysay Qarnigii 10aad ee Miilaadiga, waagaasoo ugu horreesay inuu qoraallada Adduunka ku soo baxo.

Qarnigii 4aad Miilaadiga, Boqortooyo Xabashi ah oo ka dhalatay Akhsum ayaa ku duushay qabsatayna Boqortooyadii Kush oo dabadeed qaadatay Diinta Masiixiga Qibtiga ah oo ay u keeneen baadariyaal Suuri ah Kitaabka Injiilkana lagu tarjumay afka Qays ama Gees.

ISIRKA DADKA SIDAY DIIMUHU KITAABIGA QABAAN:



C - DADKA XAMIITIGGA BARI EE MAANTA

Labadii qoloo xamiitigga ahaa ee waayahii hore kasoo hayaamay yaacdada webiga Niilka ee ahaa Puth iyo Kush una soo hayaamay Geeska Afrika waxaa maanta faracoodu loo yaqaanaa sida soo socota:-

1) Qoladii Puth ama Punt:

i. Soomaali;
ii. Oroomo ama Gaalla;
iii. Sidaamu;
iv. Cafar ama Danaakilo;
v. Saaxo.

2) Qoladii Kush

i. Aagaw ama Xabasha;
ii. Beja;
iii. Masaay (Kushito-Nilotig) iyo qolooyin kaloo yaryar.

1. SOOMAALIDA

Waayahii hore dadka maanta loo yaqaan Soomaalida waxuu degaankiisa ku ekaa deexda u dhaxeeysa Khooriga Tajura iyo Raas Caseyr ee Woqooyi Bari Badweynta Hindaya waxaana waayahii hore loo aqoon jiray dalkii Punt. Muddo aad u dheer ee Miilaadiga ka hor taniyo horraantii Qarnigii Kowaad Miilaadiga, xeebta Soomaaliyeed waxay Adduunka ka ahayd go'doon muddadaasna taariikhdu wax raadreeb ah kama ay helin. Waxaa loo maleeyaa inuu go'doonkaasi ugu wacnaa loollankii iyo isbeddeladii xukuumadeed ee waayahaas ka dhacayay Afrikada Waqooyi iyo Bariga Dhexe, arrintaasoo go'doomisay xiriirkii ka dhexeeyay dalalkaas iyo geeska Afrika. Waxaa ugu horreeysay in arrimaha xeebta geeska Afrika la ogaado, sannadkii 47aad Miilaadiga ee la qoray buuggii la magac baxay "The Peripolus of the Eritrean Sea". Magaca "Eritrean Sea" waxaa waayihii hore loo aqoon jiray Badweynta Hindiya waxaana buuggaasi qoray nin la oran jiray Hipolus oo dhalashadiisu ahayd Giriig. Waxuu ahaa badmareen ganacsata ah oo u adeegayay Boqortooyadii Romaanka oo waagaa Bariga Dhexe ka talinaysay waxaana loo diray inuu soo sahmiyo heerka ganacsiga ee magaalooyinka xeebaha Afrikada Bari iyo Hindiya kana soo warramo heerkooda ganacsi. Waxuu u qaybiyay xeebta Geeska Afrika: Xeebta Berberiga oo ah Khooriga Cadmeed iyo Waqooyi Bari Badweynta Hindiya iyo Xeebta Azaaniya oo ah waxii ka sii Koofureeya.

Waxuu faalladiisa ku tilmaamay magaalooyinka xeebaha, marsooyinka, webiyada iyo dhulka astaamihiisa, waxuu kaloo tilmaamay heerka sayladaha ganacsiga, dadka dhaqankiisa iyo siday isumaamulaan. Xeebta Berberiga faallo uu ka bixiyay, waxuu ku yiri: "waxaa

magaalooyinka fog looga soo dhoofi karaa Masar xaryannadii timaadana waxay istaagaan badweynta waxaana looga degaa doonyo; waxay xaryannadu uga yimaadaan Barygala (Shiinaha) iyo Ariyaga (Hindiya) waxayna keenaan badeecooyin kala duwan. Waxuu caddeeyay inaan magaalooyinka Boqor u talin ayna maamulaan jammaamuurtooda oo ay sayladaha ganacsiguna wanaagsan yahiin.

Arrinta isirka iyo taariikhda Soomaalidu dal iyo dad ahaanba, weli lama caddayn waxaana dood ka taagan tahay laba aragti oo ay kala qabaan Isiryaqaannada (ethnologists); dhulbaareyaasha (archaeologists); afyaqaannada (philologists) iyo taariikhyaqaannada (historians). Aragtida isiryaqaannada, dhulbaareyaasha, afyaqaannada iyo qaar taariikhyaqaannada ah waxay tahay in dadka maanta loo yaqaanno Soomaalidu isirkiisu yahay "Xamiitig" uu waayo ka horreeysay 3,600 sano Miilaadiga ku noolaa Waqooyi iyo Waqooyi Bari dalka maanta uu deggan yahay. Aragtidaan waxay sal ka dhiganaysaa raadreebyo laga helay dhul baarid la sameeyay Qarnigii 12^{aad} Miilaadiga ka hor iyo xiriirkii taariikhiga ahaa ee ka dhexeeyay Masar iyo dalkii Punt uu ka mid ahaa booqashadii Boqoraddii Hat-Shep-Sut ku timid dalkii Punt, Qarnigii 15^{aad} Miilaadiga ka hor, laguna aslay waagaa taallada Fircoonkii Amone ee Dair-El-Baxri. Waxaa kaloo sal u ah xiriirka cilmi ahaan ka dhexeeya muuqaalka dhismaha dadnimada, dhaqanka haraaga, hiddaha iyo xiriirka afka ee dadkii waagaa iyo dadka maanta deggan Soomaaliya. Waxaa kaloo sal u ah raadreebyo laga helay Meydh, Berbera iyo meelo badan oo dalka ka mid ah waxayna qabtaa inuusan dadka dhalanrogmin oo waxaa doorsoomay yahay magacyada. Dalkaan iyo dadkiisaba waxaa ka doorsoomay magacyo badan ee waayihii hore loo aqoon jiray waxayna yahiin kuwa hoos ku tilmaaman:

1. Masaarida waxay u aqoon jirtay: To Netar (dalkii Eebbe) iyo kol damboo dalkii Punt loo yaqiin;
2. Giriigga iyo Romaanka waxay u aqoon jireen: Cinnamamifera oo macnaheedu yahay dalkii udgoonaa, (jaawaha, beeyada, xabkaha iyo geeduunsiga);
3. Carabta waxay u aqoon jirtay: Berri Al-Cajam oo macnaheedu yahay degaanka dadka aan carabta ahayn.
4. Dalkii Berberiga oo loo yaqiin qarnigii 1^{aad} taniyo qarnigii 12^{aad}.
5. Magaca Soomaaliya oo qarnigii 12^{aad} intii ka dambeeysay loo yaqaan.

Aragtida kale oo ay qaar taariikh-yaqaannada qabaan waxay tahay in magaca Soomaalidu oo maanta dalka iyo dadkuba loo yaqaanno soo ifbaxay qarnigii 10^{aad} Miilaadiga iyo waxii ka dambeeyay uuna dadka ka farcamay guur dhexmaray dadkii dalka degganaa iyo Carab Bariga Dhexe ka soo hayaantay. Aragtidaan waxay sal ka dhiganaysaa laba qodob oo ah:-

1) Raadreebyo laga helay dhul baarid lagu sameeyay magaalooyinka Seylac iyo Banaadir oo ah magaalooyin ay aasaaseen ama degaan u ahaa dad Carab ah oo soo hayaamay.

2) Sheekooyin kala duwan oo aan raadraac lahayn ee Soomaalida qaarkeed laga weriyay isirkeeduna ku salaysay Carab.

Waxaa jirta sheeko laga wariyay nin Carab ah oo la oran jiray [3]Xasan Muxamed Cabuud iyo Mr. Cox P. Z. oo qoray abtirsiimada Soomaaliyeed 1896kii waxayna oranaysaa in magaca Soomaalidu uu ka yimid erega "Soo-maal" Maadaama ay Soomaalidu guurto xoolo raacato tahay martigelintana ay ku wanaagsan tahay, cidkastoo u soo martigashaba waxay oran jirtay "u soo maal" dabadeed eraga u doorsoomay Soomaali. Sheekadaan Soomaalidu ma aqoonsana.

Waxaa jirta sheeka kale oo ku dooda: Intayan dalka soo gelin kooxyadii ganacsatada Carbeed ka hor, waxaa jiray nin Hindi ahaa oo ku noolaa xeebaha Soomaalida Waqooyi oo lagu magacaabi jiray Ragnag lagana yaabbo inuu dalka u yimid sababo ganacsi. Ragnag waxay dantiisu ahayd inuu dalka ku ballaariyo ganacsigiisa, sidaa awgeed, waxuu ka guursaday dadkii dalka degganaa waxaana u dhashay wiil. Wiilkii waxuu keligii dhaxlay hantidii badnayd ee aabbihi ka dhintay. Waaguu wiilkii qaangaaray ganacsatadii Carabeed ee ka ganacsan jirtay dalka ayaa u bixisay naaneysta ah "Duu-maal" oo erey Carabi ah micnihiisuna yahay maalqabeen. Naaneystaas waxay goor dambe u doorsoontay Soomaali.

Soomaalidu, inta badan, taariikhdeeda oraahda ah waxay ku sheegtaa inay ka soo farcantay nin la oran jiray Hiil Abroone degaankeeduna uu ku ekaan jiray deexda Waqooyi iyo Waqooyi Bari dalka ay maanta deggan tahay. Hiil Abroone waxuu ahaa nin aqoon badan waagaana ku tababari jiray dadka tabaha dagaalka iyo fardo fuulka. Xurmadii iyo jacaylkii loo qabay awgii waxaa loo guuriyay gabadh, waxaase dhacday, maadaama da'diisu ay weynayd, inay gabadhii diiday, iyadoo oranaysa: "Waa waayeeloo wax ima taro". Muddo kadib waxaa la arkay gabadhii oo uur leh waxayna reerkii gabadha ka dhalatay, Hiil weeydiiyeen: " siday u suuragashay" Hiil waxuu ku warceliyay: "Waan sabsabay" Gabadhii waxay ku curatay wiil waxaana loo baxshay magaciisa Sab. Waxaa muddo kadib la arkay naagti oo uur leh reerkeeduna dhaqanaysa, waxaana kol labaad Hiil la weeydiiyay siday arrintu u dhacday waxuuna yiri: "Waa ii samaatay". Naagtii waxay dhashay wiil waxaana magacisa loo baxshay Samaali. Sab goortuu hanaqaaday waxuu u guuray dhanka Galbeed waxuuna ka guursaday dadkii aaggaa degganaa waxuuna dhalay Amarre asna waxuu dhalay Deysame asna waxuu dhalay Digil waxaana ka farcamay toddobada Digil oo ah: Duubo, Duubdheere, Geedle, Digane, [4]Cumar, Cusman iyo Muxamed. Guurkaas dhexmaray faraciisa iyo dadkii uu la degganaa ayuu ku dhalanrogmay. Samaali waxuu ku haray degaankii aabbihii iyo hooyadii waxuuna ka guursaday dadkiisa kamana uu tegin dhaqankii iyo hiddahii dadkuu ka dhashay mana uu dhalanrogmin faraciisa. Waxaa Samaali ka farcamay sagaal oo ah: Irir, Maqarre, Gardheerre, Mayle, [5]Kuruurre, Gariirre, Xamarre, Xariirre iyo Yaabuur. Soomaalidu, inta badan, waxay qabtaa inuu magaca maanta dadka iyo dalkaba loo yaqaan ka yimid Samaali oo ahaa magacii wiilkii Hiil ee samaanta ku dhashay. Dadkii magaca Samaali sheeganaayay waxay degi jireen deexda iyo dhabbeyaasha

---

[3] H.M.Abuud and COX P.Z. = Genealogical Trees of the Somal including the Aysa and the Gadabursi, London 1896.

[4] Cumar Digil iyo Cusmaan Digil wax lagama hayo meel ay ku dambeeyeen faracoodu. Duub-Dheere digil waxaa laga hayaa: Warasiile iyo Takame oo ay labaduba sheegad ku yihiin Xariin iyo Dabarre.

[5]Karuurre; Xamarre iyo Xariirre lama oga meel ay ku dambeeyeen faracoodu.

waagaa lagu ganacsan jiray dabadeedna xiriirka oo ay la lahaayeen dadkii shisheeyaha ahaa ee dalka imaan jiray awgii uu Samaali magaciisu ugu hanaqaaday dalkoo idil. Magaca Samaali waxuu dabadeed u doorsoomay Soomaali oo aad u hirgalay qarnigii 12aad iyo intii ka dambeeysay, waagaasoo ugu horreeyntii ku soo baxay khariidooyinka iyo qoraallada Adduunka.

Sheekôoyin kala duwan oo Soomaalidu qaarkeed laga wariyay isirkooduna ku salaysay Carab oo ay taariikh-yaqaannada qaarkood cuskanayaan waxaa ka mid ah: sheeko aan radraac lahayn oo laga wariyay, sannadkii 1866dii, nin la oran jiray sheekh Cabdi Aw Nuur ee waagaa Waqooyi ku noolaa waxayna oranaysaa: Sannadkii 5aad, kadib waagi Nebi Muxamed, NNKH, soo ifbaxay (sannadkii 615kii Miilaadiga), waxaa billawday qaxootigii ugu horreeyay ee u qaxay Afrikada Waqooyi Bari waxuuna ka koobnaa kooxo yaryar. Koox Qureyshtii waagaa soo qaxday ka mid ahayd uu hoggaaminaayay Caqiil abu Daalib, Nebiga ina adeerkii, ayaa ka soo gudubtay Baab-Al-Mandab waxayna degtay deexda Waqooyiga dalka maanta Soomaaliya loo yaqaan. Durbadiiba waxay xiriir ganacsi la yeelatay Xabashida iyo Xadaramowt waxayna is dheeheen dadkii Xamiitigga ahaa ee dalka degganaa, sidaa daraadeed waxaa ka farcamay dadka maanta loo yaqaan Soomaalida. Sheeko kaloo oraah ah oo ay Soomalidu qaarkeed qabto oo iyaduna raadraac lahayn, waxay oranaysaa: Dhammaadkii Qarnigii 8aad Miilaadiga, waagii uu Boqortooyada Ummawiyiinta u talinaayay Cabdulmaalik bin Marwaan, in wasiirkiisi Xijaaj bin Yusuf Al-Saqafi, cadaadis siyaasadeed awgeed, Xijaas uga soo eryay nin la oran jiray Cabduraxmaan bin Ismaaciil bin Caqiil, waxuu xaryan uga degay marsada Faylakh ee u dhexeeysa Caluula iyo Baargaal; waxaa soo dhoweeyay Dir, Aji Irir oo waagaa odey u ahaa reerihii aaggaa degganaa waxuuna u guuriyay gabadhiisa Doobira Dir guurkaasna waxaa ka farcamay: Tanade, Kablalax, Sede, Awrtable iyo Ciise. Cabduraxmaan eriskii daraadii waxaa lagu naaneysay "Tarraad" oo goortii dambe u doorsamay Daarood oo macnehiisu yahay kii la soo eryay, waxuuna ku aasan yahay Karin Duushe ee buuraha Hadaaftimo.

Sheeko sidoo kale oraah ah oo ay Soomaalidu qaarkeed ku doodo waxay iyaduna oranaysaa: nin la oran jiray Shariif Isaaq bin Axmed iyo afartan iyo afar xertiisa ah inuu ka yimid Xadaramowt kana soo degay Maydh. Waxuu ka guursaday dadkii aaggaa degganaa guurkaasna waxaa ka farcamay: Toljacle, Ayuub, Arab, Garxajis, Sanbuur, Cimraan, Awal iyo Muuse waxuuna ku aasan yahay [6]Maydh. Sida laga soo xigtay qoraallo gaboobay waxay rumeynayaan Dir iyo Daarood Wada dhasheen kana farcameen Aji Irir Samaali, haseyeeshee oo ay Isaaq iyo Daarood sheegteen Carab magaca Ajina oo ay wada sheegtaana yahay naaneys uuna ahayn qabiil jira.

Sheeko kaloo aad u hanaqaaday waxay iyaduna oranaysaa: "Goor aan la garaneyn in Jambeelle Hawiye helay nin carab ah oo la oran jiray Baalcad oo geed saaran. Waxuu Carabku is moodsiiyay goortuu arkay ninka ku soo socdo inuu dili doono waxuuna isku adkeeyay geedkuu saarnaa. Jambeelle waxuu u dhigay gambar si uu u soo dego cabsidana uga saaro; wuu diiday inuu soo dego; kol labaad ayuu u bandhigay inuu siin doono faras hadii uu soo dego; taasna wuu diiday; kol saddexaadkii Jambeelle wuu dugay waxuuna Carabkii ku yiri "dusheyda ku soo deg". Baalcad waxuu ku soo degay dusha Jambeelle waana la magangaliyay dabadeedna Jambelle waxuu u guuriyay gabadhiisii Faadumo. Guurkaas dhexmaray Faadumo Jambeelle iyo Baalcad

[6] Nello Pucioni le popolazioni indicine della Somalia Italiana, Decembre 1937 B.5 - 26=

waxaa ka dhashay shan wiil oo la yiraahdo "Shanta Baalcad" oo ah: Ulajir, Waranle, Garuurre, Uruurre iyo Hintire (Ajuraan waxa dhalay Ulajir oo lagu naanayso "Caalim"), sidaasay Ajuuraanku qaarkood ugu kalsoon yahiin inuu isirkoodu Carab yahay, runtuse waxay u dhowdahay inuu Baalcad dhalay Jambeelle Hawiye, madaama ereyga Baalcad uu yahay eray Soomaaliyeed, guurkaas dhexmaray Baalcad iyo Faadumana uusan jirin. Waxaa kaloo la leeyahay inuu Ajuuraanku ahaa ciidamo Carbeed oo loo soo kiraystay in lagu gumaysto dalka magaciisuna uu yahay eray Carbeed oo ah "Ujura", haseyeeshee sheekada ma xusin cidii soo kireesatay.

Sheeko kale oo iyaduna oraneysa: Nin Carbeed oo la oran jiray Cumarudiin oo ka dhashay qabiil la yiraahdo Subeyr binu Awxam oo Qureysh ah, isaga iyo saddex walaalihiisoo ahaa Shamsudiin, Fakhrudiin iyo Axmedudiin inay Xamar yimaadeen oo waagaa u talinaayay Suldaan la oran jiray Musafar. Suldaanku, kolkuu ogaaday inay afarta walaalaha yahiin rag tabo badan oo falfalloowyo ah, waxuu ku soo dhoweeyay xaruntiisa, haseyeeshee, waxuu u diray naag soo xuuraamisa sheekadooda. Sheekadu waxay leedahay:- Waxaa martidii lagu sooray cunto oo ay ka mid yahiin hilib ari iyo malab naagtiina waxay u kuurgashay sheekadooda. Midkood waxuu yiri: "Malabkan naloo keenay waxaa laga soo miiray kabar xabaal rag korkiis ku tiilay". Kii kale waxuu yiri: "naagta cuntada noo kentay dhibaad bay qabtay ". kii saddexaad waxuu yiri: "neefkaan ariga oo hilibkiisa nalagu sooray waxuu nuugay eey". kii afaraadna waxuu yiri: "Suldaanka dalkaan u taliya waa wecel". Naagtii waxay maqashay oo idil ayay Suldaanka u tebisay waxuuna ugu horreeyntiiba naagtii weydiiyay inay dhibaad qabto. Waxay tiri: "haa dhibaad ayaan qabaa". Waxuu dabadeed weydiiyay adeegeyaashii arrimahii kale waxayna yiraahdeen: "Waa run malabka waxaa laga soo miiray kabar xabaal rag korkii ku tiil sidoo kalena neefka ariga ee martida lagu sooray waxuu nuugay eey".

Dabadeed Suldaanki waxuu u yeeray hooyadii waxuuna ku yiri: "Saddex walxaad oo ay sheegeen sheekhyadii dalka Carbeed ka yimi waan hubsaday inay run yahiin, haseyeeshee, mid afraad oo aanan ogeyn ayay ii sheegeen. "hooyooy ma run baa inaan wecel ahay" ? Hooyadii waxay tiri: "Haa, waxaad tahay wecel; ninkaygu maal qabeen buu ahaa awood ragannimona ma uu laheeyn, wuu i guursaday, haseyeeshee, adigu wiilkiisa ma tihid". Suldaanku waxuu u yeeray afartii sheekh waxuuna ku yiri "sidaad doontaan dalka u jooga una doorta degmadaad rabtaan". Ninkii afarta u weynaa oo ahaa Cumarudiin, waxuu sadaaliyay inuu dad madax u noqon doono waxuuna dhexgalay qola Digil ah oo waagaa Shabeellada Sare degganayd waxuuna ka guursaday Caasha Caleemo. Guurkaas waxaa ka dhashay : Kasanle, Jambaluul, Jilible (Geledi), Baalguri, Begedi, Gasaar-Gudde, Waaqbiyo, Waaqdhoor iyo Gaalwegar.

Sheekadan waxay ka soo horjeeddaa qoraallo farguri ah ee magaalada Muqdisho laga helay oo ku xusan in ay Qarnigii 13^{aad} magaalada Muqdisho yimaadeen saddex walaalo ah, oo ka dhashay Reer binu Qasaan lana kala oran jiray : Fakhrudin, Shamsudiin, Calaa'udiin. Labada hore waxay degeen xaafada Xamar Weyne kan dambena xaafada Shangaani. Fakhrudiin waxuu dhisay, sannadkii 1271^{dii} miilaadiga, Masaajidka taniyo maanta lagu magacaabo ee Xamar Weyne ku yaal dabadeedna wiilkiisii Abuubakar Fakhrudiin loo caleemo saaray Suldaankii Muqdisho ugu horreeyay; Shamsudiin waxaa ka farcamay reer Shamsudiin oo Xamar deggan, Calaa'udiin isaguna waa abkii Sheekh Cabdisamad oo ku aasan Shangaani laguna xuso. Waxaa xusid mudan Cumarudiin iyo Axmedudiin oo ay sheekadu xusayso inayna ka muuqan taariikhda Muqdisho. Waxaa kaloo xusid mudan in Saldanada reer Fakhrudiin ay dhalatay, Qarnigii 13$^{aad.}$ tan reer

Musafarna ay ahayd, Qarnigii 16[aad], una dhexeeysa saddex qarni sidaasayna, tariikh ahaan, isugu imaan karin sheekada oraahda ah iyo qoraallada laga helay Muqdisho.

Sidaan horayba u soo sheegnay, Soomaalidu qaarkeed waxay sheekadeeda oraahda ah ku tiraahdaa in isirkeedu Carab yahay, haseyeeshe, waxaad moodaa inaysan sheekadaas raadraac lahayn qiraalna ka helin dhanka cilmiga isiraqoonta, dhulbaarista, afaqoonta iyo taariikhduba. Si kastaba ha ahaatee, goortii la raadinayo taariikhda dadka waxaa saldhig u ah qoraallada, dhaqanka, hiddaha, afka iyo raadreebyada, haddiise intaba la eego waxay ka dhan yahiin inay Somaalidu, isir ahaan, Carab ka soo farcantay, waxaase hubaal ah inay muddo fog Soomaalidu xiriir la• lahayd dadka Carabta ah, xiriirkaasoo aad u weynaaday Qarnigii 10aad saameeyayna dhaqanka, ganacsiga iyo siyaasadda bulshada Soomaaliyeed. Waxaa xusid mudan in carabnimadu tahay af iyo dhaqan laysku bahaystay oo ayan ahayn nasabad ama isir leh aabbe lagu abtirsado. Ilbaxnimada Carabta Nebi Ibraahim, NKH, way ka horreeysay waxuuna ugu tegay Maka qabiil Carbeed ee la oran jiray binu Jurham, halkaasoo wiilkiisa Cismaaciil ka guursaday dadkii degganaa dabadeedna faraciisu ku caraboobay maantana loo yaqaan Cadnaaniyin.

Inkastoo Kasmada Soomaalidu qaarkeed ka qabto isirkeedu uu yahay sidaan kor ku sheegnay haddana cilmi baarista, isiryaqaannada iyo taariikhyaqaannadaba may oggolaan doodaas iskumana diiddana culumada ku tabdheer kasmada cilmiga isirka, abuurista dadka, dhaqanka, hiddaha iyo afkaba inuu Soomaalidu Isirkeedu, cilmi iyo muuqaal ahaanba yahay Xamiitig. Waxaa jirta oraah qoto dheer ee Soomaaliyeed oo oranaysa: "Inankii laba qolo ka dhasha waxuu raacaa dhanka hooyadii, hadduu aabbahii inan layaal yahay" Waxaa kaloo jirta oraah kale ee Soomaaliyeed oo orannaysa: "dad kaa badan iyo biyo kaa badanba waa ku hafiyaan". Sidaaseyna cilmi ahaan suuragal u ahayn dad yar oo koyto ah inuu doorsho ama dhalanrogo dad ka badan ee hortii degganaa.

Soomaalida, Oroomada, Cafarta, Sidaama iyo Saaxada waxaa waayahii hore giddigood loo aqoon jiray Berberi waxayna wadaagi jireen degaanka maanta loo yaqaan Soomaaliya iyo muuqaal dadnimo, af iyo dhaqanba, sidaa daraadeed way adag tahay si taariikhdoodu ka dambeeysay Qarnigii 10[aad] ee miilaadiga oo shisheeyuhu murjiyay, loo kala saaro. Taas waxay keentay in lagu murmo isirkooda iyo dhaqankooda Geeska Afrika, waxaase aad u sii murjisay diinta Islaamka oo la timid caqiido wadata dhismo bulsho cusub iyo hab abtirsiino oo ka duwan kay ku dhaqmi jireen ama ay u dhasheenba laguna kala leexday diinta, siyaasadda iyo dhaqanka. Waxa hubaal ah shantaas qolo inuu isirkoodu yahay Xamiitigga Bari ee waayahii hore ka soo hayaamay buuraleyda Aasiya ee Kawkaasiya. Waxaa kaloo aan muran ku jirin in degaankii hore uu magaca Soomaali ku dhashay kuna hanaqaaday uu ku ekaa lajeedka deexda Khooriga Tajura iyo Waqooyi Bari Badweynta Hindiya, aaggaasoo odeyaashii ay ka soo farcameenoo idil ku aasan yahiin.

a. DHISMAHA BULSHADA SOOMAALIYEED

Dhismaha bulshada Soomaaliyeed waxay u qaybsan tahay qoys, Jilib, reer, qolo iyo tol oo inta badan ku salaysan abtirsiino ama iskaashi daneed. Qoysku waxuu ka koobmaa nin iyo xaaskiisa oo ah naagtiisa iyo caruurtiisa; jilibku waa qoys farcamay oo qeybsamay; reerku waa dhawr jilib oo isku tagoog ku abtirsada; qolo waa intii isku isir ah oo isku abuulan ka soo faracantay waxayna ka koobantaa dhawr reer; tolku kama aasaasmo dhalasho kali ah waxuu ka koobmaa intii isku dan, xeer, qaaraan iyo degaan wadaagta. Qabiil waxuu beddelay qolo waana

erey Carbeed oo Soomaalidu ka soo galay xagga diinta Islaamka iyo xiriirka dhaqameed oo ay Carabtu la lahayd kumana habeysna dhismaha bulshada Soomaaliyeed. Ereygaan Carbeed waxaa aad u dhaqangeliyay gumeeysigii dalka qabsaday oo ay dantiisu ahayd kala qaybinta Soomaalida si uu ugu fushado xukunkiisa gumeysi.

Bulshada Soomaaliyeed, inta badan, waa guurto xoola raacato ah, waxaase waayaahaan dambe abuurmay beeraley deggan, gaar ahaan, agaggaarka webiyada iyo dhulalka tacabka beeraha ku habboon. Soomaalidoo dhaqankeedu asaleed yahay guurto xoolo raacato ah waxay ka faantaa tacbashada beeraha, jillaabashada noolaha badda iyo hawlaha farsamada qarkood oo ay dadka ku salayay noloshooda ku takoorta inay yahiin nasabdhiman; kasmadaas haraaga ah waxay dadka u keentay dibjirnimo dhaqaale iyo horukac la'aanta nolosha. Qola walboo Soomaali ah waxay lahayd madax hoggaamiso oo doorasho ama dhaxal ku timid magacayadooduna kala duwan yahay. Madaxda kor ku xusan oo ah: Suldaan, Boqor, Ugaas, Wabar, Garaad, Malaaq, Imaam, Islaan iyo Isloow, kalama awood sarreeyaan, iyadoo ay ugu wacantahay madaxda Soomaaliyeed oo qaar magacyadooda iyo haybadooda laga soo ergaday shisheeye macnahooduna ka duwan yahay heerka dhismaha bulshada Soomaaliyeed, waxaadna moodaa inuu shisheeyahu si gef ah u gartay heerka awoodooda iyo haybadooduba oo ku kooban qoladiisa.

Soomaalidu arrimaheeda qaayaha leh waxay ku dhammeysataa shir. Shirku waa hab dhaqameed oo muddo fog soo jiray. Waxaa looga baaraandegaa arrimo qaaya leh ee qolo u gaar ah ama qolooyin dhexmartay; sida heshiis, colaad, xeerdejin, doorasho ama arrin qoys iwm. Qaayaha iyo qiimaha uu shirku leeyahay waxaa muujinaaya in horey loogu digo ka qaybgaleyaasha shirka arrinta laga hadlaayo, goorta iyo meesha lagu qabanaayo shirka oo nin kastoo daw u lehna ku dadaalo inuu shirka ka soo qaybgalo. Runtu waxay tahay, shirku waa madasha qolo kasta ku fuliso arrimaheeda loogana taliyo.

Inta badan waxaa shirku lagu qabtaa geed hoostii waxuuna leeyahay awood xeerdejin, fulin iyo garsoor. Shirka waxaa guddoomiya madaxa qolada shiraysa waxuuna hubiyaa habsami u socodka hawsha shirka; qaybiyaa hadalka; dhexdhexaadiyaa doodaha bandhigaana weydiimaha. Soomaalidu, gaar ahaan, kuwa guurtada xoolo raacatada ah, dhaqan ahaan, aad bay u dhegaystaan doodaha iyo hadallada dheerdheer oo ay rag codkar ah soo jeedinayaan waxaana laga dhawraa shanqar, haba yaraatee, dhibi karto habsami u socodkiisa. Haddii uu guddomiyuhu maqnaado waxaa shirka guddomiya ninka ugu waayeelsan jammaamuurta shirka ka soo qaybgashay. Intuuna shirka billaabmin waxaa la magacaabaa kowshe ee hawshiishu tahay inuu cod dheer ku maqashiiyo ka qaybgaleyaasha shirka ninkasta hadalkiisa oo ay dhici karto inuu cod hooseeyo ama koreeyo ku jeediyaa. Dhanka xeerdejinta, shirku waxuu oggolaadaa arrimah qolo dhexmara ama qolooyin kana dejiyaa xeerkii timaaddada lagu dhaqmi lahaa, dhanka garsoorkana markuu dhegeysto qolooyin arrin dhexmartay ayuu go'aan ka gaaraa, asagoo cuskanaaya xeerkii u dhexeeyay qolloyinka loo garnaqaayo. Shirku waxuu leeyahay awood fulineed oo ku saabsan go'aannadiisa.

Soomaalidu badideed, waa guurto xoolo raacato, xoolaheedana waa Geel, Lo' iyo Ari. Soomaalida deexda degta, gaar ahaan dhanka Koofureed, dhaqankeedu waxuu isugu dhafan yahay guurto xoolo raacato oo daawyada roobka tacbato beera yaryar iyo beeraley dhab ah. Guga deexday u guurtaa, iyadoo xooloheedu kala fogaanaaysa qaniinka cayayaanka ka dhasha webiyada agaggaarkooda Xagaagana way geeda gashaa. Labada daaw roobeedka waxay tacbataa beera

yaryar oo ay ka soo saarataa in noolasheeda ku filan. Dhulka ay tacbato waa milki ama doonfuul kamana badna, qoys kasta, siddeed darab ama laba Hektaar.

Qoyska Soomaalidu, waxuu ku abtirsadaa tagoogta ama odayga, naagta aad ayay uga qayb qaadataa noolasha qoyska si madaxbannaani ayay u dhaqdhaqaaqdaa xuquudeeduna waxuu ku salaysan yahay shareecadda Islaamka. Waxaa jira caadooyin diinta Islaamka ka horreeyay ee weli nool sida: Dumaalka, gudniinka Fircooniga iwm. Guurku Soomaalida, dhanka nikaaxa, waxuu ku salaysan yahay Shareecadda Islaamka; doonista, yaradda iyo arooskana caadooyinkii hore ee Soomaaliyeed. Soomaalidu waa Qaran isku isir, af, dhaqan iyo hiddaba ah, boqolkiiba boqol waa Muslim sunni ah mad'habteeduna tahay Shaafici.

2. OROOMADA AMA GAALLADA

Oroomo ama Gaallada, sida guud ahaan loo yaqaan, waxay deggan tahay Gobollada ugu barwaaqaysan ee Xabashidu gumeeysato iyo Kenya soohdinta degaankeeduna waxuu yahay dhanka koofureed ee Xabashidu gumeysata taniyo Woqooyiga Kenya.

Magaca Gaalla waa naanays loo yaqaan dadkaas oo u ah tilmaan diin la'aan. Gaallada qaarkeed ma jecla naanaystaan, maxaayeelay, waxay u ekaatay loona fasiray in magac Gaalla uu ka soo jeedo Gaalnimo, Kaasoo Soomaalidu ku magacawday intoodii badanayd ee ku hartay cawaannimada.

Xabashidu magaca Gaalla waxay u taqaan koyto Carabtuna waxay ku tilmaantaa inuu yahay erey Carbeed oo ka yimid "Gaal-la" oo ay ugu baxday diidmo diinta Islaamka. Waxaa la leeyahay waagii diinta Islaamka soo ifbaxday ayaa Maka laga soo diray ergo dadka Gaallada u gudbisa diinta cusub waxaana diiday duqii u talinaayay.

Magaca Oroomo waa kan dhabta ah ee ka yimid ilma Orma oo ah abuulankey ka soo farcantay waxayna Oroomada qaarkeed magacaasi ku diidaa arrin siyaasadeed. Qarnigii 16aad, waagii dagaalkii weynaa uu dhexmaray Boqortooyadii Soomaaliyeed ee Awdal iyo Boqortooyadii Xabashidu ee ku saabsanaa loollan diineed, Gaalladu waxay u kala qaybsantay: qaar taageeray Boqortooyadii Awdal iyo diinta Islaamka iyo qaar taageeray Boqortooyadii Xabashidu iyo diinta Masiixiga; taas waxay keentay inay ku kala leexdaan dhaqanka, magacyada, diinta iyo guurkaba. Qolooyinkii Masiixiga noqday waxay la hareen Magacii Oroomo, qoladii kalena way diideen. Oroomada waxay u kala baxdaa laba qolo oo waaweyn:

MAJA:	oo ka kooban: Limmu, Gumma, Jimma, Geera, Leeqa, Laqamtii iyo Jam-jam.
BERENTUMA (**KOOFIRA**)	oo ka kooban: Warra-Deya, Boorana, Nono, Carsi, Karranyu, Umbana, Iitu, Noole, Asabo iyo Raaya.

Baahsanaanta ay ku faafsan tahay dal aad u ballaaran awgii iyo ayadoo guursi dhexmaray dadkii horey u degganaa oo Oojiga ama Jareerta ahaa, Oroomada astamaheedii iyo muuqaalkeedi isireed si weyn ayuu u dhalanrogmay; reeraha qaarkood weli waxaa ka muuqda astaantii Xamiitigga oo dhab ah, iyadoo kuwana ay xoog ugu dhalanrogmeen Jareerta, haseyeeshee, inteeda badan waxay u dhexeeysaa cirifyada aan kor ku soo sheegnay.

Qoyska Oroomada waxuu ku abtirsadaa tagoogta ama aabbaha, waxuuna daw u leeyahay noolasha iyo geerida caruurtiisa. Wiilka curudka ah waxuu qoyska ka joogaa heerka ugu sarreeya waxuuna qaadanayaa saddex meelood laba dhaxasha qoyska kan xiggana saddex meelood laba inta soo harta. Waxaa jira inay Oroomada dhaqan u tahay korinta caruurta ayna dhalin xiriirkuna yahay wiilkii la korsaday xuquuqdiisa inay la mid tahay tan curadka, iyadoo aan da' ku xirnayn; Oroomadu waxay u badan tahay inaysan ka guursan sokeeyaha yaraddana waxaa lagu baxshaa lo' ismana furi karaan kadib goortuu aroosku dhaco oo ay u yaqaannaan Raka-rako. Naagtu xuquuq yar ayay ku leedahay qoyska Oroomadu waxaana laga yaabaa inaysan waxba dhaxlin, haseyeeshee, bulshada waxay kaga jirtaa heerka ugu wanaagsan, si madaxbannaani ah ayay u dhaqdhaqaaqdaa si weynna way u saameeysaa noolasha qoyska. Guud ahaan, ninka naag keliya

ayuu guursadaa, haseyeeshee, way bannaan tahay in ninkii hodan ah uu guursado naaga badan. Qolooyinka cawaanta ah way dumaalaan naagtii walaalkood ka dhintay, iyadoo lagu daryeelaayo hantida iyo caruurtuu walaalkii ka geeriyooday. Inkastoo dalka Oroomadu degto aad u baaxad weynyahay, dad af kale ku hadlaana isguursadeen, haddana weli afka Oroomada ma uu dhalanrogmin waxayna isku hayb yihiin afka Soomaalida, Sidaamada, Saaxada iyo kan Cafarta.

3. SIDAAMADA

Sidaamadu waxay ka kooban tahay: Kambata, Daraasa, Calaawa, Haadiya iyo Guraage. Inta aanay Oroomada iyo Xabishidu dalka ku fidin, Sidaamahu waxuu degaankeedu ahaa dal ballaaran oo ay soohdintiisu tahay: dhanka Waqooyi Shawa; dhanka koofureed Guji; dhanka Bari Baalli iyo dhanka Galbeed Harada Aabay ama Dereesa. Magaca Sidaamu waa mid guud oo ay Oroomada u taqaan cid kasta oo aan Oroomo ahayn. Billawgii isballaarintii Xabashida waxay Sidaamada ka qabsatay dhanka waqooyi taniyo magaalada Shawa waxayna dhalanrogtay dadkii Sidaamada ee degaankaa.

4. CAFARTA AMA DANAAKILADA

Cafarta waa guurto xoolo raacato ah waxayna ka kooban tahay laba qolo waaweyn: Casa-Mara iyo Caddow-Mara waxayna degtaa dhul ballaaran ee ka billawda: Khooriga Tajura; Koofur Galbeed, la jeedka marinka Raylka isku xira Dire-dawa iyo Jabuuti; Waqooyi taniyo jasiirad-uyaasha Buri. Dhulka ay Cafartu deggan tahay waa guban oo inta badan xaaluf ah ee u badan dabayllo duufaan leh iyo meelo lamadegaan ah waxayna af, isir iyo hiddaba isku hayb yihiin Soomaalida, Oroomada, Sidaamada iyo Saaxada. Cafartu waxay door weyn ka qaadatay dagalladii dhexmaray Xabashida iyo Boqortooyadii Awdal, qarnigii 16^{aad}, waxayna ahayd qayb weyn oo ka tirsan ciidamadii Imaam Axmed Garaad Ibraahim "Gurey". Goortuu Axmed Gurey dhintay way kala firdhatay waxayna u kala qaybsantay, qolo hoos timid saldanaddii Cawsa ee waagaa dhalatay iyo qolooyin ay kala qeybsadeen gumeeysteyaasha Xabashida, Faranisiiska iyo Talyaaniga.

5. SAAXADA

Saaxada si wadajir ah ayaa laysugu duubaa waxaana lagu tiriyaa Cafarta.Saaxada waxay ka kooban tahay lix qolo oo waaweyn iyo afar yaryar waana: Asoarta, Mini, Feree, Taruuwa, Hase, Debri-mele iyo Irobo. Afarta qolo ee yaryar waa: Adde-feer, Baradota, Idda iyo Asabaat-Carre. Inta badan saaxadu waxay ku nooshahay Bariga babacyada buuraleeyda Akele-Gusay, Shamasana iyo Agame. Waa guurto xoola raacata ah Dayrta waxay u hayaantaa xeebaha diraacdana Akele-Gusay iyo cadduunka Hasma taniyo Sarreya. Hayaanka noocaasi ah, waayahii hore, waxaa ka dhashay inay reeraha qarkood degaan oogada dabadeedna afkoodu u doorsoomo kan Tigrayga.

6. AAGAWDA AMA XABASHIDA

[7]Aagawda ama Xabashida degaanka asalka u ah waxaa weeye dusha weyn Takase iyo dooxoyinka ku hareera yaal uu kala qeybiyo webiga Niilka Buluugga waxayna ka kooban tahay: Tigray, Bengender, Dambaya, Amxaara, Aagaw-Medda, Damoot iyo Gojaam oo giddigood loo yaqaan Xabasha waxayna tahay Xamiitig-Kushitig ah oo uu aad u dheehay Samitig dalka soo galay, waxaase la moodaa dheehidaa Samitiiggu inayna wax weyn ka doorin astaamihii dhalashadeedii iyo muqaalkeedii Xamiitigga ahaa.

[8]Howsha ugu horreeysa waxay tahay, kolka wax laga qoraayo Aagawda ama Xabashida, in la go'aansado magacii loogu yeeri lahaa, maxaayeelay, waa arrin murugsanoo aan weli meel laysla dhigin. Aagawdu waxay isku magacawday "Ethiopia", iyadoo ka fogaanaysa magaca Xabasha oo ahaa magac oo ay lahayd qolo Carab Xabashaad ah ee waayihii hore ku timid dalka hayaan awooda dalkana la wareegtay oo ay dabadeed Carabtuna aad u hirgalisay."Ethiopia" waa magac soo jireen ah oo leh macnooyin waayo badan soo jiray oo mid ka badan oo ay taariikh-yaqaanada Yurubta qaarkood qallociyeen mid ka mid ah macnooyinkii hore uu iska lahaa.

Ereyga Ethiopia waxuu ka kooban yahay labo erey oo af Giriig ah oo macnehoodu yahay "Fool-Madoowe" waxay af ahaan isku asal iyo taariikh yahiin ereyga "Negro" oo Latin ah iyo ereyga "Aswad" oo Carabi ah oo giddigood lagu tilmaamo dadka gibilka madoow. Taariikh-yaqaannadii hore: Homer, Herotodus, Diodurus, Strabo iyo Pliny waxay u isticmaali jireen ereyga Ethiopia goortay tilmaamayeen gobolka u dhaxeeya Niilka iyo Hinduska oo idil kaasoo ay u yaqiineen gobolkay deggan yahiin dadka uu gibilkoodu madoow yahay oo ay u qaybsheen: Ethiopiada Bari oo ahayd Carabta, Shaamiyiinta, Mesopotaniya iyo Hinuuda; Ethiopiada Galbeed oo ahayd dadka Xamiitigga ee ku nool Badda Cas degteeda Afrika. Qoreyaashii hore kuma ayan darin Xabashida qaybta Ehtiopiada Galbeed, waayo, waagaa ma aysan aqoon dadka Xabashida iyo dalka ay ku noolaydba. Waxa kaloo muuqata in Qoreyaashii afka Qayska ku tarjumay Injiilka ay magacii Kush ku beddeleen Ethiopia, iyagoo ujeeddadoodu ahayd inay tilmaan ka bixiyaan gobolka Nuubada ee Koofurta Sudaan oo ayan u jeedin Xabashida. Haddaba waxaa isweydiin leh maxay Xabashidu ugu daalaysaa ama u sheeganaysaa magaca loo aqoon jiray, guud ahaan, dadkii gibilka madoobaa oo idil ama ku koobnaa dadkii ku noolaa waqooyigeeda ee waagaa la yaqiin. Waxay u egtahay in kuwii ku turjumay Injiilka afka Xabashida kuna beddelay afka Qayska ama Geez, hadba sida loo yaqaan, inay magaca Xabashida ku beddeleen ereyga Ethiopia oo soo jireenka ah si ay ugu muujiyaan, adduunka Dawladda Masiixiga ah, inay tahay mid filweyn oo soo jireen ah. Waxaa jira sheeko oraah ah oo Xabashida ka dhaqan gashay oo oraneysa in Nabi Nuux dhalay Xaam; Xaamna dhalay Kush isaguna dhalay Ethiopia oo ah magaceeda halkuu ka yimid, kasoo ku aasan magaalada Akhsum oo loogu magac daray wiilkiisii Akhsum oo aasaasay magaalada. Runtu waxay tahay in magaca Xabashidu ka yimid qolo carab ah ee la oran jiray [9]Xabashaad ee Qarnigii 7^{aad} M.H ka soo hayaantay Yaman. Xabashidii waagaa

---

[7] C. Conti Rossini = "Ethiopia e genti Ethiopia" (1937)

[8]Lytton = The Stolen Desert B. 19

[9] J.S. Trimingham - Islam in Ethiopia B. 32

dalka degtay kuna taageysatay inay la wareegtay awoodii siyaasadeed iyo dhaqaale dabadeedna magaceedu ku faafay [10]dalkoo idil. Kadib waxaa iyana dalka soo galay qolo la oran jiray Qays oo degtay Shamsana, Akele-Gusay iyo Agame. Qolodaan dambe waxaa afkeeda lagu tarjumay Injiilka Masiixiga waxuuna aad u dhalanrogay afkii Kushiitigga aḥaa. Abbaarihii Qarnigii 4aad Milaadiga Saldanadii Xabashidu waxay ku fiday Waqooyi iyo oogada dalka maanta loo yaqaan Eriteerya, uuna Boqorkii Xabashidu la baxay Boqorkii Boqorada waxaana magaalo madax u ahayd Akhsum. Waxa kaloo ku soo [11]biiray sannadku goortuu ahaa 640kii Miilaadiga, qolooyin [12]Yahuud ah oo laga soo eryay dalalka Carbeed caqidadooda diinta awgeed. Qolada Amxaarada waxay ku abtirsataa Menelikii koowaad oo ay sheekadooda oraahda ku doodo inuu ahaa wiil oo ay iska dhaleen Nabi Suleymaan iyo Boqoraddii Belqis ee Xabashaad ama Saaba, sheekadaan oo ayan taariikhyaqaannadu rumeyn.

7. BEJADA.

Bejada waa qolada ugu badan dhanka Waqooyi Eritreeya iyo Sudaanta Waqooyi degaankooduna waxuu u dhexeeya webiga Niilka iyo Bada Cas. Qarnigii 1aad ee miilaadiga, Bejada waxay ku fiday Galbeedka dalkii Boqortooyadii Kush ee Meroe waxayna degaankeedu u dhexeeyay Koofurta Masar iyo Waqooyiga Boqortooyadii Xabashida ee Akhsum waxayna ku sii fiday dalka Boqortooyadii Akhsum, kolkii ay hoos u dhacday awoodeeda. Sidaa daraadeed waxaa maanta jira qolooyin badan ee Xabashi ah kuna hadla afka Tigrayga ee haddana sheeganaayaa isirkoodu inuu yahay Saraaye. Bejadu waxay ka kooban tahay afar qolo oo waaweyn oo ah: Bashcariin, Amarcaar, Hadandiiwa Iyo Ballow. Qolodaan dambe waxay la baxday banu-Caamir. Bejada inteeda badan ee ku hartay degaankeedii hore waxaa aad u saameeyey ilbaxnimada Carabta ee la timid caqiidada Islaamka iyo ganacsi. Carabtii sidaa dalka ku soo gashay waxay is guursadeen Bejada wayna ku dhalanrogmeen. Dheehidaas Carabtii caqiidada Islaamka iyo ganacsiga la timid ayaa keentay inay Bejada qaarkeed abtirsigeedii runta ahaa u rogtay mid Carbeed, inkastoo isroggaas uuna aad u saamayn dhaqankeedii iyo muuqaalkeedii xamiitigga ahaa waxayna weli qaarkeed ku hadashaa afkeeda.

8. MASAYDA (KUSHITO NILOTIG).

Masaaydu waa Kushiitig dhalanrogan, inta badan waa guurto xoolo raacato waxayna ka dhalatay isguursi dhexmaray Xamiitig iyo Niilootig. Waxay kaga duwan tahay dadka kale ee dhalanrogan astaamaha Kushiitigga oo weli aad uga muuqda dhismaha jirkooda, afka iyo dhaqanka waxayna deggan tahay dhul aad u ballaaran, laga billaabo Harada Rudolfo kuna gudban tahay taniyo Kenya iyo Tansaaniya.

---

[10] J.S. Trimingham - Islam in Ethiopia B. 32

[11] Sidoo kale B. 33

[12] Sidoo kale B. 19

X) ILBAXNIMADA CARABTA IYO SOOMAALIDA.

Muddo aad u fog ayay Xamiitigga Geeska Afrika iyo Xeebaha Afrikada Bari xiriir ganacsi la lahaayeen Khooriga Peershiya, Koofurta dalka Carbeed, Hindiya, Indooneesiya iyo Shiinahaba oo raadreebyo badan laga helay. Xiriirka, gaar ahaan, ka dhexeeyn jiray Geeska Afrika iyo Jasiirad-Uyaasha Carabta waxuu soo taxnaa qarniyaal waxayna isaga doolaali jireen Badda Cas iyo Badweynta Hindiya. Xiriirkii u dhexeeyay Soomaaliya iyo Adduunka waxaa sal u ahaa dabaysha mansuunka iyo badeecooyinka oo ay ganacsiga isku weydaarsan jireen. Waxaa la odorosi jiray isbeddellada dabaylaha oo ay badmareennada ku dhoofi jireen afarta bilood oo ay dabaysha Mansuunka ka dhacda Waqooyi Bari iyo tan amminkaasoo kale ka dhacda Koofur Galbeed.

Xiriirka soo jireenka ah ee ka dhexeeyn jiray Carabta iyo Soomaalida waxuu ku kordhiyay taariikhda iyo dhaqanka Soomaaliyeed qoraallo badan, magaalooyinka xeebta Soomaaliyeed oo ay ilbaxnimada Carabtu saameeysayna waxaa ka mid ah: Seylac, Harar, Berbera, Maydh, Boosaaso iyo Xaafuun oo ay carabtu u aqoon jirtay Barri-Al-Cajam iyo Muqdisho, Gendershe, Marka iyo Baraawe oo ay u aqoon jirtay Banaadir. Magaalooyinkaan, intooda badan, waxay ka aasaasmeen xeebta Soomaaliyeed Milaadiga ka hor. Carabtu nolosheeda, inta badan, waxay waayihii hore ku tiirsanayd ganacsiga iyo marinnada badda waxayna badmaridda u lahayd aqoon iyo awood looga abdaysto isweydaarsiga badeecooyinka laga ganacsado. Iyadoo ka abdaysanayso aqoontaas iyo marinnadaas, ayay ku fidisay ganacsigeeda kuna faafisay ilbaxnimadeeda Bariga Hindiya iyo Xamiitigga guurtada ah ee xeebta Badda Cas iyo Bad weynta Hindiya. Beeyada, geedaha uunsiga iyo xabkaha waxay ahaayeen badeecooyinka ugu muunada lahaa oo waayahaas laga gancasan jiray, ka sameeynta catarka iyo daawada ka sokow, waxay lagamamaarmaan u ahaayeen cibbaadaysiga diinta. Waxaa iyaguna sidoo kale laga ganacsan jiray hargaha shabeelka, faanta maroodiga iyo badeecooyin kaloo badan. Si ganacsigu ugu fududaado kuna horumaro, Carabtu waxay xeebaha ka aasaastay magaalooyin iyo saylado ganacsi waxayna waday ka abdaysigaas ganacsiga xeebta Geeska Afrika iyo Afrikada Bari taniyo soo ifbixii diinta Islaamka oo dabadeedna isla marinnadaas ay ku faafisay dardar cusubna ku gelisay ganacsigeeda iyo diinta Islaamka. Waxaa loo maleeyaa Sannadkii 615aad Miilaadiga, waaguu Nabi Muxamed, NNKH, risaalada loo soo dhiibay kana soo ifbaxay Jasiirad-Uyaasha Carbeed oo ay Qureyshta cadaadisay dadkii ugu horreeyntii raacay, inay xoogaysatay soo gelidda Ilbaxnimada Carabtu geeska Afrika. Nabigu, NNKH, kolkuu arkay cadaadiska Qurayshta ku haysay asaxaabtiisa waxuu xusuustay dalkii magangelyada siiyay Carabtii Masiixiga ahayd ee cadaadis awgii uga qaxay dalka Yaman waxuuna asaxaabtiisa ku yiri: "Haddii aad u qaxdaan dalka Xabashida waxaad ka helaysaan Boqor aan hoostiisa cidna lagu cadaadinayn. Waa dalka dhawra dawga lahaanshaha oo Ilaah idinka qaadi doono cadaadiska iyo dhibatada idin haysata". Waxaa sannadkaas billawday qaxootigii ugu horreeyay ee u qaxa Geeska Afrika waxuuna ka koobnaa kooxo yaryar; qaxaasi waxay Carabtu u bixisay "Hijradii kowaad". Aad ayay Qurayshtu uga carootay qaxaas waxayna u dirtay, Boqorkii Xabashida, ergo soo celisa. Boqorku waxuu u yeeray qaxootigii Islaamka waxuuna weydiiyay: "Maxay tahay diintaan aad dadkiina iyo dalkiinaba u soo baylahayseen oo aan ahayn mid la yaqaan taydana aan soo gelin" ?. Jacfar abu Daalib oo hoggaaminayay qaxootiga ayaa Boqorka u warceliyay waxuuna ku yiri: "Boqoroow, waxaannu ahayn Qaran jaahil ah, caabuda sanamyada, cuna bakhtiga, ceebta fala, dila xigtadiisa, illoobay xilka dariskiisa

ee midka xoogga leh cuno kan liita, sidaas ayaannu ahayn intaan Ilaah inoo soo dirin Rasuul naga dhashay oo toosnaantiisa, dhaqankiisa iyo hufnaantiisa suuban aannu ku kalsoonaanay waxuuna inoogu yeeray Ilaah caabudkiisa iyo kalsoonidiisa inaannu ku midowno iyo inaannu iska deyno caabudidda dhagaxda iyo sanamyada ee innaga iyo aabbayaasheenna caabudno ee aannu Ilaah kali caabudno. Waxuu na faray inaannu runta ku hadalno, isku kalsoonaanno, xilka Aadamiga iyo kan dariskaba gudanno, ka joogsanno waxuu Ilaah reebay iyo dhiigga la daadiyo, cunida hantida agoonta iyo sameeynta macsida. Waxuu na faray Ilaah caabudkiisa iyo in Ilaah mooyee uuna mid kale jirin, inaannu salaadda tukano, soonno sadaqaduna bixinno. Sidaas ayaannu ku rumeysanay hadalkiisa kuna raacnay aqoontuu Ilaah nooga keenay. Taasi waxay keentay dadkaan isku dalka nahay inay na cadaadiyaan, iyagoo doonaya inaannu diinteena iyo Ilaah caabudkiisu ka fogaanno una noqonno caabudidda dhagaxda iyo sanaamyada". Intaa kadib, Boqorkii Xabashida waxuu qaxootigii Islaamka siiyay magangelyo.

Qarnigi 7[aad] Miilaadiga, kadib waagay taageersatay diinta Islaamka kuna fiday dalalka aan Carabta ahayn, waxay Carabtu billawday inay sahmiso xeebta dalka Soomaalida kana qortay warbixinno badan xeebta Afrika Bari oo idil. Warbixinnadaas oo ujeeddadoodu ahayd in dardar cusub la geliyo xiriirkii ganacsi ee waayo fog ka dhexeeyay xeebtaas iyo dalalka Carabta. Xiriirkaas dhawr jeer ayuu isbaddelay, isagoo had walba ka ambaqaadayay arrimo cusub ee ku soo kordhay waxaana la hubaa in ganacsatadii waagaa u tegi jirtay ganacsiga dalka Soomaalida ay ku soo biirtay, waa dambe, Carab soo hayaantay oo doonaysay dalka inay degto. Arrintaas waxay ahayd mid caadi ah, waayo, Islaamku waxuu ku dhiirrigelin jiray dadka ku kalsoon caaqiidada Islaamka inay dhoofaan ama hayaamaan, hadba goortay u suuragasho, si ay wax uga qabtaan noloshooda dhaqaale iyo aqooneed baraanna cawaanta diinta Islaamka kuna tageeraan muslimiinta u baahan bareyaal aqoonta Islaamka u gudbiya. Intaa waxaa dheeraa Muslimiintii ugu horreeysay ee loo diray inay dalalka dariska la ah baraan caqiidada Islaamka iyo ciidamadii ka danbeeyay oo soo raadraacay. Arrimahaasoo idil waxay kaalmayeen in laysku deydo laguna dhiirrado dhoofitaanka ama hayaanka. Carabtu waxay ugu hayaantay xeebta Geeska Afrika sababo kala duwan oo ah: Inay raadiyaan saylado oo ay ganacsi wanaagsan ka sameeyaan iyo inay dadka aan muslimka ahayn ku hanuuniyaan caqiidada Islaamka. Waxaa kaloo tegay, muddo kadib, Carab aad u fara badan ee uga qaxay dalkooda cadaadis siyaasadeed awgeed. 20[aad] sanoo ka danbeeyay geeridii Nabiga, NNKH, waxay muslimiinta u ahaayeen kuwo aad u dhibaato badan, kolka loo eego taariikhda Islaamka oo soo taxnayd. Sannadahaas gudahooda Carabtii degganeyd Jasiirad-Uyaasha oo ku midowday diinta Islaamka waxay dagaal adag ku qaaday dalalkii ka baxsanaa oo ahaa: Ciraaq, Iiraan, Suuriya, Masar iyo Falastiin oo ay ka talineysay Boqortooaydii Romaanka dabadeedna Islaamku waxaa ka dhexdhashay loollan awoodeed oo muddo socday xooggii Islaamkuna wiiqay. Jasiirada-Uyaasha Carbeed waxaa waagaa astaan u ahayd kulayl aad u sarreeya iyo saboolnimo dhanka kheyraadka nolosha Carabtuna waxay ku tiirsanayd ganacsiga iyo marinnada baddaha. Loollankii awoodda siyaasadeed waxuu keenay inay dad badan u qaxaan xeebta Afrikada Bari. Cumaan oo aan ka qayb qaadan loollankaas iyo dagaalladaba, iyadoo ka abdaysaneysa waaya'aragnimadeedii iyo aqoonteedii marinka badeed, ayay gashay xeebta Afrkida Bari awood weynna ku yeelatay.

Dalka Soomaalida waxuu ka mid yahay dalalka yar ee dadkiisu boqolkiiba boqol uu muslim yahay. Islaamku waxuu Geeska Afrika soo galay waagii ugu horreeysay ee asaxaabtii Nabiga, NNKH, u soo qaxday dalka Xabashida. Taariikh-yaqaannada qaarkood waxay qabaan in Islaamku Soomaaliya soo galay qarnigi 8[aad] Miilaadiga, waagii Saldanada Boqortooyada

Umawiyiinta uu hayay Cabdulmaalig binu Marwaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa loo maleeynayaa inuu dalka Soomaalida ka mid yahay dalalkii ugu horreeyay Afrika oo ay soo gaartay caqiidada Islaamka si dhakhsa lehna ugu fiday. Soomaalidu diinta Islaamka way rumaysantahay, waxayna si qoto dheer u dheehday dhaqanka, xeerka, hiddaha iyo dhaqaalaha bulshada. Dareen la'aan waa caqiido aan bulshada Soomaaliyeed laga loodin karin, inkastoo kaniisadooyinka Masiixiga, iyagoo tageersanayay gumeysigii Yurub, isku deyeen inay doorshaan. Islaamku Soomaalidu waxuu baray Illaah caabudkiisa iyo hannuunsanaan diineed ee ku salaysan dhaqankeeda; masaajidyada waxay noqdeen kulliyadahii lagu baranayay heerka sare ee aqoonta Islaamaka waxaana looga soo xeraysan jiray meel kasta oo Soomaalidu deggan tahay. Taariikh-yaqaankii maqribiga ibni Batuuta oo Muqdisho booqasho ku yimid, sannadkii 1331[aad] Miilaadiga, waxuu kitaabkiisa "Al Rixla" ku sheegay in lagu soo dhoweeyay guriga xerta oo muujinaysa inay jirtay jaamacad ballaaran ee diineed. Waxuu kaloo sheegay in magaalada lagu xukumo Shareecada Islaamka aadna loogu hannuunsan yahay.

Qarnigiyadii dhexe ee Miilaadiga, waxaa sahanno ganacsi iyo dhul aqoonsi ku maray xeebaha Geeska Afrika raadreebyo qoraallo ahna ka tegay Shiinaha, Maangooliyada, Carabta, Boortaqiiska iyo kuwo kaloo badan. Carabtu waxay xeebaha Afrkida Bari aqoon u laheeyd taniyo waayo fog waxayna aad wax uga qortay heerka ganacsiga magaalooyinka xeebaha iyo dadka deggan dhaqankiisa. Waxaa xusid mudan inay Carabtii qarniyadii dhexe miilaadiga wax ka qortay dalka Soomaalida waxayna u taqiin dalkii Berberiga ama Barri-Al-Cajam oo micihiisu yahay dalka aan Carabta ahayn welina waagaa sooma ifbixin magaca Soomaaliya.

Qoreyaashii Carbeed ee wax ka qortay dhulka Soomaaliyeed iyo guud ahaan Geeska Afrika waxaa ka mid ahaa: Al Yaquubi; ibnu Idirisi; Yaaquut; Cabdul Fida; ibnu Khalduun; Al Cumaari; ibnu Saciid; Al Muqadasi; Al Istakhaasi; Sidi Muxamed iyo ibni Batuuta.

Al Yaquubi waxuu ahaa Carabkii ugu horreeyay ee wax ka qoray xeebaha Geeska Afrika, Sannadkii 890-893kii Miilaadiga, waxuuna kitaabkiisa "Al Buldaaan" ku sheegay dhaqanka iyo diinta Berberigii degganaa Khooriga Cadmeed iyo Badweynta Hindiya, gaar ahaan, magaalooyinka Seylac iyo Muqdisho.

Ibnu Haykal oo isaguna wax ka qoray, Sannadkii 977[aad] miillaadiga, waxuu soo xigtay qoraalladii Al Yaaquubi ee Soomaalida iyo dalkeeda uu ka qoray.

Al Idirisi oo wax ka qoray, Sannadkii 1154[aad] Miilaadiga oo sahan ku maray xeebaha Badweynta Hindiya waxuu u kala qaybiyay saddex qaybood: Waqooyiga Muqdisho waxuu ku magaacabay xeebaha Berberiga; Koofurta Muqdisho taniyo Jasiiradda Pemba waxuu ku magacaabay xeebaha Sanjiga iyo Pemba waxii koofur ka ah oo ku magacaabay xeebaha Soofala. Waxuu kaloo yiri: "Qaybta hore ee xeebaha Berberiga waxaa ku yaal magaalooyinka Xaafuuni, Banduuna iyo Al Najah oo loo maleeyo inay tahay Muungiye dadkuna waxuu ku sheegay cawaan. Maagaalooyinka koofurta ee Sanjiga waxaa dhanka waqooyi ugu horreeya magaalada Marwa (Marka) oo dadka deggan uu u taliyo Boqor Berberi ah (Ajuuraan) dabadeedna waxaa xiga magaalooyinka Baraawe taniyo Mombaasa oo ah xarunta Boqorka Sanjiga".

Yaaquut (1212-1224dii M.) oo sahan ku maray xeebaha Badweynta Hindiya waxuu ku sheegay kitaabkiisa lagu magacaabo "Al Mujmac" in dhanka koofureed ee dalka Berberiga yahay soohdinta oo ay ku kulmaan Sanjiga, Berberiga Xamiitigga ah (Soomaali iyo Oroomo), Carabta iyo dad kaloo Aasiya ee dool ku yimid.

Ibnu Saciid (1274kii M.) waxuu isaguna qoray in magaalada Muqdisho iyo Marka dhankooda Koofureed ay deggan yahiin Sanji, dhanka Waqooyina Berberiga Xamiitigga ah (Soomaali iyo Oroomo) Magaalooyinkana Carab iyo Aasiya dool ku yimid. Waxuu kaloo sheegay in Berberiga yahay guurto xoolo raacata ah oo aan la mid ahayn kuwa deggan Waqooyiga Afrika uuna lahayn Suldaan ayna hoggaaminaayaan maqaawiirtooda. Berberiga degaankiisa dhanka koofureed ee Geeska Afrika inuu u dhexeeyay degannada Xabashida iyo Sanjiga.

Maagaalooyinka xeebta Khooriga Cadmeed kuwa ugu da'da weyn waxaa ka mid ah; Awdal (Seylac), Berbera, Maydh iyo Xiis. Sida la maleeynaayo magaalooyinkaan aasaasidoodu waxay ka horreeysay Miilaadiga waxaana la ogaaday jiritaankooda, ugu horreeyntii, sannadkii 47aad Miilaadiga, waaguu badmareenkii Giriiga ahaa Hipolus kaga sheekeeayay buuggiisii la magacbaxay "The Peripulus of the Eritrean Sea" kuna magaacabay Awdal "Adalite", Berbera "Malao" (Macallo) iyo Hufayn (Opene). Inkastoo magaca Seylac maanta, rasmi ahaan loo yaqaan, haddana Soomaalidu waxay weli haysataa magacii hore ee Awdal oo ay Hararíyiinta u taqaan Aftal Oroomaduna Aftali. Sidoo kale magaalooyinka Muqdisho iyo Harar waxaa weli loo yaqaan magacyadoodii hore ee ahaa Xamar iyo Adari. Qaar qoreyaashii shisheeyaha ahaa ayaa ku qaldamay magacii horee Awdal oo u beddelay Adal kana muuqatay inay aad u dhaagin in Boqortooyadii Awdal ee jirtay Qarnigii 15[aad] Miilaadiga magaca ka qaadatay magaalada lagu aasaasay.

Ibnu Batuuta oo Awdal (Seylac) sahan ku maray, sannadkii 1331[kii] Miilaadiga, waxuu kitaabkiisii "Al Rixla" ku sheegay: "Waa magaalo madaxda Berberiga oo dadka deggan Muslim yahay xoolahooduna yahay geel iyo ari waana magaalo saylad ballaaran oo qaayo leh. Berberiga dalkoodu waa xaaluf laga billaabo Seylac taniyo Muqdisho". Maagaalooyinka xeebta Badweynta Hindiya kuwa ugu da'da weyn waxaa ka mid ah: Xaafuun (Hufayn), Muqdisho, Gendershe, Marka iyo Baraawe. Inkastoo aan raadraac badan laga hayn, haddana waxaa loo maleeyaa magaalooyinkaan inay aad u da'weyn yahiin uuna jiritaankoodu ka horreeyay Milaadiga. Waxuu Khaliijka Carbeed muddo fog la lahaa magaalooyinka xeebta Banaadir xiriir ganacsi iyo mid diineedba, waa magaalooyinkay Diinta Islaamka ku horreeysay oo ay aadna u saameeysay ilbaxnimada Carabeed. Xaafadda maanta loo yaqaan Xamar Jabjab ee ka tirsan magaalada Muqdisho, waxaa loo maleeyaa, inay jirtay Miilaadiga ka hor ayna la da' tahay magaalooyinaka Xaafuun, Maydh, Xiis, Berbera iyo Seylac. Raadreebkii ugu horreeyay ee laga tilmaaan qaadan karo jiritaankeeda waxa weeye buugga la magacbaxay "The Peripulus of The Eritrean Sea" oo ku magaacabay Nikon. Sheekada oraahda ah waxay leedahay in magaalada cudur ku habsaday dabadeedna dadkii degganaa laayay, intii ka hartayna aasaasatay xaafada cusub ee Xamar Weyne. Magaalada Muqdisho waxay leedahay labo magac oo kala ah Xamar iyo Muqdisho waxaana filweyn magaca Xamar oo ay ugu baxday magaaladoo ay ku badneed dhirta xoomarta ah dabadeedna u doorsoomay Xamar. Magaca Muqdisho waxuu baxay waa dambe. Al-Yaaquubi kitaabkiisa "Al-Buldaan" waxuu ku magaacabay magaalada Muqadas oo waadanbe u doorsoomay Muqdisho. Taariikhda oraahda reer Xamarka waxay leedahay, dhammaadkii Qarnigii 6[aad] Miilaadiga, waagay guuldarrada ku dhacday taliskii Xabashida Yaman oo ay carabtii ugu horreeysay ka soo barakacday Yaman una soo hayaantay Afrikada Waqooyi Bari inay qaarkeed degtay magaalada Xamar. Waxaa kaloo la leeyahay in waagaasoo Islaamku ka horreeysay, magaalada Xamar uu u talinaayay Suldaan Ascad Al Ximyaar. Muqdisho waagii la aasaasay durbadiiba si dhakhsi leh ayay u fiday si wacana way u dhisantay; waxay noqotay bartamaha dhaqdhaqaaqa ganacsiga xeebta Afrikada Bari. Carabtii ku timid hayaanka xeebta Banaadir, inta

badan, waxay ahaayeen dad dalkoodii sababo kala duwan uga soo barakacay waxayna badidooda ka soo dalkaceen Yaman, Xijaas, Shaam, Ciraaq iyo Khaliijka Carbeed. Qarnigii 8[aad] Miilaadiga, waaguu saldanada Islaamka uu Boqortooyada Macaawiyiinta u talinayay Cabdulmaalik binu Marwaan ayay carab badan, cadaadis siyaasadeed awgii, dalkooda uga soo barakacday waxayna u soo hayaantay magaalooyinka xeebta Banaadir waxayna u kala degtay sida soo socota:

1. [13]Toddobo nin oo walaalo ah ee qabiilka Al Xaarati ee ka soo qaxay Al Acsa Khaliijka Carbeed, ayaa yimid Banaadir waxayna degeen magaalooyinka Muqdisho, Gendershe, Marka iyo Baraawe;
2. Qolo Qaxtaani ah Al Muqarri ee ka soo qaxday Xadaralmowt ayaa iyaguna yimid Banaadir degtayna Muqdisho, Marka iyo Braawe. Qoladaan waxay muddo dambe la baxday reer Fakhi;
3. [14]Jadcati ibnu Meymuun ayaa isaguna ka soo qaxay Yaman waxuuna degay Muqdisho faraciisana goor dambe la baxay Shaanshiya.

Waxuu kitaab Al Sanuuj sheegayaa, Qarnigii 8[aad], inuu magaalooyika xeebta Afrikada Bari soo booqday oo ay Muqdisho ka mid ahayd, Wasiir Yaxya ibnu Cumar Al Canis uu soo diray Boqorkii Cabaasiyiinta Abuu Jacfar Cabdalla Muxamed Al Mansuur (762-775 Miilaadiga), kaasoo isku deyay inuu magaalada Muqdisho hoos geeyo xukunka Cabaasiyiinta, haseyeeshee, dadkii degmada ayaa ka soo horjeestay waxayna ku adkeysteen inay difaacdaan madaxbannaanidooda. Waagaa waxa magaalada Muqdisho degganaa 24 reer oo Carab ah, waxayna ka koobnaayeen: 12 reer Al Muqarri (Qaxtaani), 12 reer Jadcati ibna Maymuun.

Qarnigii 9[aad] Miilaadiga, Waagay Shiicada Karmatiga awooda ku yeelatay Xijaas, cadaadis uga yimid Shiicada awgii, ayay qolooyinka hoos ku xusan ka soo barakaceen Xijaas hayaanna ku yimaadeen Muqdisho:

1. Ciise Al Kanili Bin Nuur Al Caqabi oo Xijaas ka soo hayaamay Muqdishana yimid faraciisuna, waa dambe, la baxay reer Sheekh.
2. Qolo Cafiifi ah oo ka soo hayaantay Al-Acsa ayaa iyana ku timid hayaan Muqdisho oo faraceedu, waa dambe, la baxay Gudmana;
3. Ismaaciil bin Cumar bin Muxamed oo ka soo hayaamay Xijaas ayaa isaguna yimid Muqdisho.

Qarnigii 9[aad] Miilaadiga, Carabtii waagaa dagganayd magaalada Muqdisho waxay ahayd 39 reer oo u qaybsan; 12 reer Al Muqari (Qaxtaani) 12 reer Jadcati, 6 reer Al Caqabi, 3 reer Al Cafiifi iyo 6 reer Al Ismaaciili. Waxaa kaloo magaalada degganaa dadkii loogu yimid oo goor dambe la baxay Bandhabow, Moorshe iyo Dhabarweyne.

---

[13] Cerrulli Enrico = "Somalia"(Scritti vari editi ed En)B.18

[14] Sidoo kale B.19

[15]Qarnigii 9[aad] Miilaadiga, weerar joogto ah ee halis geliyay madaxbannaanidii magaalada awgeed ayaa dadkii degganaa ku hawaanisay inay xukunka iyo maamulka magaalada mideeyaan waxayna sameeysteen xukunwadaag ka kooban afar jilib:

1. Al Jadcati (Reer Shaanshiya);
2. Al Muqarri (Reer Fakhi);
3. [16]Al Caqabi (Reer Sheekh);
4. Al Cafiifi (Reer Gudmane).

Waxaa xukunka afarta Jilib ee Muqdisho loo baxshay "Afarta kursi ee Xamar" waxaana sidaa magaalada lagu maamulayay 300 sano. Jilibka Al Muqarri (Reer Fakhi), waagaa xukunwadaagga jiray waxaa loo aqoonsaday maamulkii Culummo sidaa awgeedna waxuu daw u yeeshay in laga doorto Khadiibka iyo Qaadiga magaalada.

Aasaaskii xaafadda Shagaani wax badan ayay ka dambeesay Xamar Weyne waxaana loo maleeyaa inay aasaaseen dad jilaabata ee Wanyiika ah iyadoo magaceedu yahay eray Sawaaxili ah uu macnihiisu yahay bacaadka "Mshagaani". Waxaa xaafada, waa dambe, yimid ee shiimeeyay Ashraaf ka soo hayaantay Ciraaq iyo Camuudi ka soo hayaamay Yaman. Qoraallo degaanka laga helay waxaa ku xusan, inay bartamihii [17]qarnigii 13[aad] Miilaadiga, yimaadeen magaalada Muqdisho saddex walaalo ah ee u dhashay reer binu Qasaan oo la kala oran jiray Fakhrudiin, Shamsudiin iyo Calaa'udiin. Labada hore waxay degeen Xamar Weyne kan dambena Xaafadda Shangaani. Fakhrudiin waxuu dhisay, sannadkii 1271[ki], masaajidka taniyo maanta lagu magacaabo ee Xamar Weyne ku yaal dabadeedna wiilkiisa Abuubakar Fakhrudiin loo doortay Suldaankii ugu horreeyay Muqdisho. Shamsudiin waxaa ka farcamay reer Shamsudiinka Xamar deggan; Calaa'udiin isna waxaa weeye Abkii Sheekh Cabdisamad ee ku aasan Shangaani laguna xuso.

Waagii xukunwadaagga jiray magaalada waxay gaartay horumar heer sare ah waxaana waayihii ugu dambeeyay xukunkaas la dhisay masaajiddada Jamaacadda, Cabdulcasiis, Arbaca Rukun iyo Fakhrudiin. Waxaa kaloo magaaladu ku noolayd xasillooni iyo nabadgelyo ganacsiguna waxuu ku fiday dalalka deriskeeda oo idil.

Qarnigii 13[aad], Abuubakar Fakhrudiin oo ahaa wiilkii aasaasihii masaajidka Fakhrudiin, ayaa loo caleema saaray Suldaankii ugu horreeyay magaalada Muqdisho waxaana caleema saarkaa taageeray Jilibka Al Muqarri oo Suldaanku u aqoonsaday, kolkale, awoodii culummo ee magaalada ay horay u hayn jiray. Sheekadan soo socoto oo laga soo xigtay farguri uu qoray Macallim Makaram Ibnu Cumar, qarnigii 17[aad] oo asna ka soo xigtay kitaab uu qoray awoowgii saddexaad Fakhi Casharo Ibnu Fakhi asna sidoo kale ka soo guuriyay awoowgii Fakhi Axmed Ibnu Fakhi Abuubakar Al Qaxdaani, waxay tilmaamaysaa sida reer Muqdisho ay u caleemo sareen Suldaan Abuubakar Fakhrudiin oo ahaa Suldaankii magaalada Muqdisho ugu horreeyay waxuuna qoraalka leeyahay "Waxaad ogaataan dadka reer Muqdisho waxay ahaayeen afartan jilib

---

[15] Cerrulli Enrico ="Somalia"(Scritti vari editi ed EnditiB.169).

[16]Ciise Al Kanili Bin Nuur Caqabi

[17]Cerrulli Enrico ="Somalia"(Scritti vari Editied Enditi)B.4

oo mid dhimman waxayna kala ahaayeen: 12 Muqarri, 12 Jadcati, 6 Caqabi, 3 Cafiifi iyo 6 Ismaaciili. Qoladii ugu horreeysay ee soo degtay Muqdisho, waxay ahayd reer banu Qaxdaan oo ahaa 12 Muqarri. Dadka reer Muqdisho ogaada reer banu Qaxtaan ibnu Weyl waxuu ahaa reerkii ugu horreeyay ee Muqdisho degay ee geed qaaday qolooyinka kale ka hor, waagaas kadib ayay soo degeen qolooyinka kale, waxuuna reer bani Qaxtaan ahaa qolada ugu weyn qolooyinka Muqdisho soo degtay, taasi waxay keentay inay kulmaan qolooyinka kale uu ka mid yahay qolada Sheekh Fakhi Abuur oo ahaa qaadigii iyo khadiibkii magaalada ayna la tashadeen reer bani Qaxtaan waxayna isku afgarteen qaadiga iyo khadiibka magaalada inay daw u yeeshaan reer bani Qaxtaan ibnu Weyl, dhaqankasoo socday muddo 300 oo sano. Kolkaa kadib, waxaa yimid nin shisheeye oo reer bani Qasaan ah ee lagu magaacabi jiray Abuubakar Fakhrudiin oo ahaa cayr wax maal ahna aan qabin waxuuna qabay naag maalqabeen ah oo uu dhalay Sheekh Cabdijabaar. Maalin maalmaha ka mid ah masjidka Al Jaamaca waxaa yimid nin sabool ah oo dadka masaajidka ku tukanaayay yaboohsaday inay wax ugu deeqaan, haseyeeshee, waxba looguma deeqin taniyo ay ka istaageen Sheekhyadeena Xaaji Xuseen iyo Xaaji Muuse oo u yaboohsaday saboolka kolkale; iyagana looma deeqin, taasoo ay la murugoodeen. Kolkaa kadib, waxa istaaagay Abuubakar Fakhrudiin waxuuna ku deeqay 100 Dirham, isagoon waxba haysan waana loo riyaaqay looguna duceeyay dabadeedna nin waliba gurigiisii ayuu aaday. Goortuu Abuubakar tegay gurigiisii waxay naagtiisii aragtay inuu murugeysan yahay midabkiisuna gadoomay waxayna ku tiri: "Ninkeygoow waxaa iiga kaa muuqata murug iyo inaad midab gadoontay foolkaadana doorsoon yahay, maxaa kaa yaabiyay?". Waxuu ku yiri: "Naagteydaay waxaan joogay masjidka Al Jaamaca waxaa yimid nin sabool ah oo weydiistay in wax loogu yabooho, haseyeeshee, looma deeqin taniyo inta ay ka istaagayeen Sheekhyadeena Xaaji Xuseen iyo Xaaji Muuse oo saboolka u yaboohsaday, iyagana looma deeqin. Dhabbe kale ee ii furnaa ma jirin inaan yabooho mooyee, dhibaatadaas ayaan la murugaysanahay". Naagtii waxay tiri "Waxaad ii sheegtaa waxaad yaboohday?". Waxuu yiri: "Boqol Dirham". Waxay ku tiri: "Waa dhowdahay, ka sii maalkaan 100 Dirham". Waxuu saboolkii siiyay boqol Dirham waana loo duceeyay. Goortii la gaaray habeenkii waxuu addoonkiisa ku yiri "Soo meyr dharkeyga". Aroortii goortuu addoonkii baddii tegay dharkiina soo meyray waxuu ku soo laabtay gurigii waxuuna warray dharkii. Sayidkii waxuu addoonkiisii weydiiyay in wax cambar ah uu sido waxuuna addoonkii yiri: "Sayidii ma wado cambar, haseyeeshee, waxaan u maleeynayaa in dhagaxii aan dharka korkiisa ku soo dhaqay ahaa cambar". Waxay labadoodii aadeen meeshii dharka lagu soo meyray dhagaxiina waxuu noqday cambar wayna soo xambaarsadeen, iyagoo Eebbe gargaarsanaya. Sheekheena Xaaji Dabarre waxaa caado u ahayd inuu habeen walba Qur'aanka kol khatimo, goortuu khatimana uu waagu beryi jiray, haseyeeshee, habeenkaa waagii ma beryin taniyo uu laba jeer khatimay Qur'aanka, taasuu la yaabay goortuu waagii baryay. Abuubakar Fakhrudiin gurigiisii ayuu cambarkii ku kaydsaday warkiisiina waxuu ku faafay magaalada. Kolkaa kadib, Arbaca rukun (Afarta kursi) way kulmeen si ay uga wadahadlaan inay sameeystaan Suldaan waxaana la isku afgartay Abuubakar Fakhrudiin inuu noqdo Suldaan. Arrintaas qolooyinka way isku afgaranwaayeen, qolo kastaa waxay ku dooday: "inaga ayaa daw u leh Suldaannimada nin shisheeye ahina nooma noqon karo Suldaan. Inagu Suldaan ma yeelan taniyo muddo 300 oo sano ah, haddii aan doonayno waxaan Suldaan u dooran lahayn reer binu Qaxdaan, iyaga iyaa daw u leh. Iyaga waxay ahaayeen qaadiyaasheenii iyo khadiibyadeenii". Abuubakar Fakhrudiin waxuu yiri: "Waxaan doonayaa inaan reer binu Qaxtaan wax ku magacaabo" waxuu wakiil uga dhigtay

dhulka oo aan la'aantood lakala iibsan karin, iyagoon goobjoog ahaa mooyee. Kolkaa kadib sheekhyadeena way kulmeen waxay yiraahdeen ninkani waa shisheeye noomana faani karo ee hala daayo. Way isku afgarteen Suldaannimadiisa, goortiiba warkii magaalada ayuu ku faafay waxana maqlay Sheekheenna Fakhi Muxamed Xaaji Dabarre, kitaabkiisa ayuu xiray waxuuna kolkaa fasiray aayada orenaysa "Haddii ay Boqoradu tuulo soo galaan way fasahaadiyaan", goortuu gurigiisii ku laabtayna waxuu darbistay afartan markab waxayna u guureen magaalo kale".

[18]Sannadkii 1331[hs] Miilaadiga, waaguu Saldanada magaalada Muqdisho hayay Suldaan Sheekh Abuubakar Muxamed Cumar oo ahaa qoyskii Fakhrudiin, waxaa magaalada booqasho ku maray ibni Batuuta oo Kitaabkiisii, "Al Rilxa", ku sheegay magaaladu siday ugu muuqatay. Waxuu sheegay inay ahayd magaalada ugu qaayaha leh xeebta Geeska Afrika, laguna soo dhoweeyay guriga xerta oo muujinesyay inay jirtay, waagaas jaamacad ballaaran oo diinta Islaamka lagu barto. Waxaa jaamacadaas barashada diinta Islaamka looga soo xeraysan jiray magaalooyinka deriska ah. Waxuu kale oo sheegay in magaalada lagu xukumayay shareecada Islaamaka ayna ahayd magaalo diinta Islaamaka ku habeysan aadna loo qadariyo. Caadada magaalada waxay ahayd hadduu markab magaalada yimaado in dhallinyarada oo idil soo bannaanbaxdo dadka ka soo degana la soo dhoweeyo lana marti sooro. Haddii nin madax ahi la socdo markabka waxaa lagu martigelin jiray guriga qaadiga. Ibni Batuuta waxuu xeebta kula kulmay qaadiga magaalada iyo xertiisii waxuu maalmo degganaa hoyga ardayda, isagoo marti u ahaa Suldaanka. Waxuu kaloo sheegay in intuu joogay si fiican loo quudin jiray waxuuna yiri: "quudka caadiga ah waxuu ka koobnaa xeero weyn oo lagu keenay kalluun isla goortaa badda laga soo jillaabay, hillib digaag, bariis laguna bisleeyay saliid, oo qudaar la dul dhigay dhir lagu karshay caano oo ay la socdaan caano labeen leh, liin, saxan basbaas shiidan iyo cambe". Waxuu kaloo xusay in dharka Aliindiga ee Muqdisho lagu sameeyn jiray loo dhoofin jiray Masar.

[19]Qarnigii 16aad miilaadiga, Musafar ibnu Maalig ibnu Naasir ayaa kala wareegay taxanihii Saldanadii reer Fakhrudiin waxuuna aasaasay Saldanadii reer Musafar. Wax raadreeb ahna lagama helin sababihii dhaliyay la wareegida Saldanada iyo halkey reer Musafar ka yimaadeen. Si kastaba ha ahaatee, isla waagaa waxa ka dhalatay webi Shabeelle Saldanadii Gelledi waxaana u talinaayay Boqor Ajuuraan ah. Gobolka Shabeelada Hoose waagaas waxuu ahaa halka ganacsiga Muqdisho saldhiga u ahayd waxaana labada Saldanadood ka dhaxeeyay xiriir wacan iyo iskaashi.

Kitaab Al Sanuuj waxuu sheegayaa in waagii Saldanada Boqortooyada Islaamka uu hayay Cabdullmaalig binu Marwaan waxuu xeebta Afrikada Bari u soo diray ciidan uu hogaaminaayay Ammiir Muusa ibnu Cumar oo ka dhashay reer Qaxtaan, xeebtaasoo ka dhisnaayeen, Islaamka ka hor, magaalooyin Carbeed oo waaguu Islaamku soo ifbaxay durbadiiba qaatay caqiidada Islaamka. Ciidankaas dib uma laaban waxuuna degay xeebta Afrikada Bari. Isla qarnigaas, Xasan binu Cali iyo lix wiil uu dhalay ayaa ka soo qaxay Al-Acsa ee Khooriga Carbeed, dhibaato qoyskiisa ka dhexdhalatay awgeed, waxayna degeen xeebta Afrikada Bari.

---

[18] Cerrulli Enrico = "Somalia"(Scritti vari editied enediti) B.19

[19] Sidoo kale B. 19

Sheekada oraahda waxay leedahay inuu Xasan aabbihii ahaa Suldaan uuna ka dhalay naag nasab dhiman ah dabadeedna walaalihiis oo hooyadood ahayd nasab takooreen, sidaa awgeedna wiilashiisa Afrikada Bari ula soo qaxay. Waxaa kaloo la leeyahay inay toddobo xaryan ku soo kala dhoofeen uu wiil kastaaba magaalo ka aasaasay xeebta Afrkida Bari. Magaalooyinka ay dhiseen, sida la leeyahay, waxaa ka mid ah: Mombasa, Pempa iyo Johanna; Xasan qudhiisuna uu dhisay Kilwa. Degaannadaas xeebaha ka dhismay waxaa degay badmareenno Carab ah oo muddo badan ka ganacsan jiray iyo qolooyin Qureysh ah oo waa dambe soo qaxay. Qolooyinkaas dambe ee soo qaxay waxay ahaayeen Nowfali ee Lubeyd binu Saalim waxaana dabadeed ku soo biiray koox Xuseeniyiin ah iyo badmareenno Carab ah oo kordhiyay tiradoodii shiimeeyayna magaalooyinka xeebta oo ay ka mid yahiin Jumbo (Yumbo), Rasiini, Maliindi, Mombasa iyo Kilwa. Waxaa suurogal ah reer Baraawaha gibil cadka oo ah Bidaha iyo Haatimiga inay waagaa aad isu dheeheen Wanyiikada, kadibna u guureen degeena magaalada Baraawe, halkasoo ay la yimaadeen af cusub oo la yiraahdo "Shambalasi". Afka Shambalasi waxuu la hayb yahay afka Sawaaxiliga waxayna reer Baraawuhu ku abtirsadaan Bida iyo Haatimi oo labaduba yahiiin Carab Nowfali ah.

Baajuunta taniyo maanta deggan xeebta iyo Jasiiradaha Jubbada Hoose waxay ka farcantay guur dhexmaray Carab, Iiraaniyiin, Wanyiika iyo Oroomo (Warra Daya). [20]Taariikhdu waxay leedahay magaca Baajuunta inuu ka yimid qolooyin Qaxtaani ah oo ku abtirsada Juheyn binu Ximyaar iyo Kindah binu Caamilah oo labaduba ka yimaadeen Khooriga Carbeed iyo Tay binu Qaxtaan oo iyaguna ka yimid Afgaanistaan, magaalo la oran jirey Juweyna (Baajuweyn) oo waa dambe Baajuun u doorsoomay. Qoladaan dambe, taariikhdu waxay leedahy, in reer iyaga ah oo muddo fog u guuray Ciraaq gobolka Mowsal lagana yaabo in qaarkood waa dambe, u sii guureen Afgaanistaan. Baajuuntu waxay ku hadashaa af la yiraahdo "Ki-Bajuuni" oo la hayb ah afka Sawaaxilliga. Qarnigii 10[aad] Miilaadiga, waxaa iyagana ku soo biiray qolo Iiraan ah oo ka soo hayaantay gobolka Shiraas oo ay ka farcantay qolo yar oo deggan magaalooyinka Kilwa iyo Mombasa oo la baxay Afro-Shiraasi.

Waaguu yaraaday dhaqaalihii ka soo gali jiray jillaabashada noolaha badda iyo ganacsigii oo ay la lahayd dadkii gobolka degganaa iyo dagaalladii ka dhex aloosmay Oroomada (Warra-Daya) iyo Soomaalida awgood, waxay Bajuuntu billawday inay ka hayaanto Jasiiradaha ayna u guurto Rasiini, Laamu, Kilwa iyo Mombasa. Waxaa Jasiiradaha qaarkood ku haray dadkii taagta darnaa iyo maatadii aan guuri karin. Jasiiradda Kismaayo waxaa laga qaxay waagii Warra-Deyada dishay duqii Baajuunta oo la oran jiray Fununu. Waxaa kaloo laga qaxay tuulada Shunguwaya (Buur Gaabo) iyo tuulooyinka ku hareerayaal Caanoole waxaana qaxaas ugu wacnaa dagaallo ka dhex aloosmay Soomaalida iyo Oroomada (Warra-Dayada). Waxaa waagaa dhismay tuulada Ngumi oo qaadatay magacii Jasiiradda Kismaayo ee maanta loo yaqaan.

---

[20] Corrado Zoli = Oltre Giuba (A Cura del Ministero delle Colonie) B. 138-146

QAYBTA LABAAD
FIDIDDA SOOMAALIDA

D - DALKA BALLAARAN AY MAANTA DEGGAN TAHAY

Taariikhda oraahda Soomaaliyeed waxay leedahay Qarnigii 12aad Miilaadiga iyo waxii ka horreeyay, inuu Soomaalida degaankeedu ahaa deexda u dhexeeysa khooriga Tajura iyo Raas Casayr ee Waqooyi Bari Badweynta Hindiya oo ay gobollada dhexena degganayd Oroomo oo gidigood waagaa loo yaqiin Berberi. Goortay Diinta Islaamka dalka soo gaartay kuna hanaqaaday dadkii ku midaysnaa magaca Berberiga ee dalka degganaa waxuu u kala qaybsamay kuwa qaatay caqiidada Islaamka iyo kuwa ku haray cawaannimada. Waxaa durbadiiba soo ifbaxay magacyo cusub waxaana lagu kala leexday magacyada, diinta, dhaqanka, siyaasadda iyo dhaqaalaha. Waxaa kaloo dhalatay neceeb oo lagu takooray kuwii cawaannimada ku haray laguna colaadiyay inay yahiin nacab gaala madow ah.

Muddo arrintu hadday sidaas ahayd waxaa, Soomaalidii Islaamka ahayd iyo Oroomadii cawaanta ahayd, ka dhex aloosmay dagaallo muddo dheer socday oo ay ugu dambeeyntii Soomaalidu ku taagroonaatay kuna fiday dalkay maanta deggantahay. Soomaalidu duullaankay ku fidaysay waxuu ku habeysnaa Afar jaho oo kala ah: Bartamaha, dooxooyinka webiyada, Waqooyi Galbeed iyo Koofur Bari oo ah deexda Badweynta Hindiya. Dagaal dheer oo waayo socday kadib, waxay ugu dambeeyntii libtu raacday Soomaalidii Islaamka ahayd waxaana Oroomadii cawaanta ahayd loo riixay Galbeed iyo Koofur. Sida la sheegaayo waxaa Dagaalladaas lagu dilay Harti Koombe oo ay dad badanoo Soomaali ah ku abtirsadaan waxuuna ku aasan yahay Bixin meel u dhow oo la yiraahdo Dameerra-Buuq Dhuure. Dagaalladaas kadib, intii caqiidada Islaamka qaadatay, qolo kastaba ha ahaadeenee, waxay ku biireen ama sheegteen Soomaalida kuwii cawaannimada ku harayna waxay, iyaguna kolkooda, Koofur u siiriixeen Wanyiikadii agaggaarka webiga Shabeelle degganayd oo ay kuwii ka haray maanta Soomaalida ka mid yahiin.

Taariikhda oraahda Soomaalida waxaa weli laga xusuustaa raadreebna leh dagaalladii Oroomada waagaa lagaga kacshay oogada Gobollada Waqooyi, Waqooyi Bari iyo Bartamaha. Waxaa kaloo weli la xusuustaa meelihii oo ay waagaa Oroomadu degganayd inay ka mid yahiin: Hargeysa, Firdeysa (Sheekh), Baran, Yabaabil oo ceelasha Bar-Madoobeeye ah, Dhahan, Qowlo-Weyn, Qowlo-Yar, Qowlo-Ugub oo ay siday taariikhdu oraahdu sheegayso ku aasan yahiin saddexdii naagood ee Oroomada odaygii madaxda u ahaa iyo Gaala-Ood oo ku taallo Koofurta Xaafuun. Waxaa kaloo iyaduna xusid mudan taallooyinka raadreebyada ah ee Waqooyi iyo Waqooyi Bari laga helo oo ay ka mid yahiin kuwa ku yaal: Cal-Madow, Laasa-Weylood, Duud-Cadde iyo meelo badan oo Gobollada Waqooyi Galbeed ka mid ah. Soomaalida du ullaankeedii way siiwaday taniyo intay ka qabsatay Galbeedka oo ay maanta deggan tahay gaartayna Wabiga Shabeelle dabadeedna Oroomadii aaggaa degganayd u siiriixday Koofur Galbeed.

1. DEGAANNADA BARTAMAHA IYO DEEXDA BADWEYNTA HINDIYA

Qarnigii 13[aad] Miilaadiga, Sidaan horayba u soo sheegnay Soomaalidu waxay dhanka koofureed uga soo duushay deexda Waqooyi Bari ee Badweynta Hindiya waxayna gaartay Mareeg iyo ceelasha Cadale. Waxaa ugu horreeyntii wabiga shabeelle dhankaas ka gaaray Jiido oo halkaas ka gudubtay wabiga Shabeellada Dhexe; waxay weerar ku qaaday Oroomadii aaggaa degganayd una riixday Koofur waxayna degtay aagga u dhaxeeya wabiga iyo deexda ku aadan Warsheekh taniyo Marka. Sidoo kale Ajuuraan ayaa isagu ka soo duulay deexda qabsadayna miyiga deexda Banaadir oo u dhexeeysa degmada warshiikh taniyo Baraawe oo Oroomadii iyo Wanyiikadii degganaydna u riixay koofur. Waa danbe waxaa soo raadraacay Soomaali kaloo badan ee Waqooyi Bari ka soo hayaantay shiimaysayna degaannadii Oroomada laga kacshay oo durbadiiba xiriir la yeelatay Carabtii magaalooynka xeebta degganayd.

Dhacdooyinkaas waxay taariikhda oraahdu Soomaaliyeed ka xusaysaa inay Soomaalidu ku soo duushay saddex sagaalaad ayna u soo kala horreeysay, Sagaal Jiido, [21]sagaal Ajuuraan iyo sagaal Abgaal giddigoodna ka soo duuleen gobollada dhexe iyo deexda Waqooyi Bari soona wada mareen Warsheekh. Waa danbe waxay Soomaalidu ku duushay Oroomadii ku hartay gobollada dhexe oo muddo goortay ceelasha Mudug ku loollamayeen hanashadoodu ayna ismari waayeen, ayay Soomaalidu, ugu danbeystii, weerar kedis ah Oroomada ku qaaday, iyadoo fardaha dibkooda ku xiratay hargo qalallan. Oroomadu, goortay maqashay hugun soo yeeraayo aragtayna siigo aad u badanoo kacday oo cirka ku saloolantay, ayay argagaxday, iyadoo mooday inuu jinni soo weerarray waxayna u baqatay Galbeed. Goortay Soomaalidu qabsatay ceelasha Mudug waxay u bixisay Gaalkacyo, waxayna dabadeed ku fiday gobollada dhexe oo idil.

Waxaa xusid mudan hees ka mid ah heesihii waagaa fardaha loogu heesay oo ah:-

Haddii aad Baraxley buur cad uga fusho,
Baadi mooyee baahi laaboow.

Taariikhda oraahada Soomaaliyeed waxay xuseeysaa isbahaysi la oran jiray Aji iyo Ajuuraan. oo ka koobnaa Ajuuraan iyo laba beelood oo Aji ah [22](Maadinle iyo Magoosile). Sheekada oraahda ah waxay leedahay Ajuuraanku inuu lahaan jiray boqoro dhaxaltooyo ah oo lahaa awood aan la soo koobi karin waagaas oo ayan jirin diin ama sharci bulshada lagu kala hago oo ay hadba siday maagaan dadka u maamuli jireen. Waxay kaloo taariikhda oraahda ah xusaysaa in Maadinluhu awooda la wadaagi jiray Ajuuranka uuna qoday, inta badan, ceelasha dheerdheer ee ku yaallo dhulka adag ee dibirka ah iyo warraha taniyo maanta laga helo dhoobooyda. Waxaa kaloo raadreebyo isbahaysigaas u ah, qalcadaha uu difaaca u sameeystay oo ay ka mid yahiin kuwa Dhanaane, Baydhowa iyo meelo kaloo dalka ah laga helo, ceelasha laga qoday gobollada dhexe, xabaalaha iyo taallooyinka laga helo meelkastoo ay Soomaalidu waayihii

---

[20] Ajuuraan wuxuu dhalay toddobo wiil, labada dheeriga ah, Waranle iyo Hintire waa adeero.

[21]. Inkastoo Beelaha Maadinle iyo Mogoosile ay maanta ka dhex muuqan Soomaalida, haddana waxbaa ka haray oo Beela kale ku biiray.

hore degganayd, gaar-ahaan, gobollada Bay iyo Harqaan. Sida la ogyahay Ajuuraanku waxuu door ku leeyahay taariikhda Soomaalida koofureed uu inta badan maamuli jiray, laga billaabo Qarnigii 13[aad] taniyo Qarnigii 16aad. Mudadaas afarta boqol sano ah oo ay Boqoradiisu koofurta Soomaaliya ka talin jireen lagama helin wax raadreeb ah, mana lahayn maamul midaysan iyo calan lagu aqoonsado kumana midaysnayn degaannada iyo habka maamulka bulshada, hasayeeshee, dhaqankooda waxuu la mid ahaa kan bulshada Soomaaliyeed oo inta badan guurta xoola raacatada ah ee ku salaysan danwadaagnimo iyo af oo ay qoraal la'aantiisa ugu wacneyd inaan tagtadeeda laga dhaxlin qoraallo iyo raadreebyo afartii boqol sano oo ay Boqoradiisii dalka u talin jirtay.

2. DAGAALADII GOBOLLADA GALBEED

Qarnigii 12[aad] Milaadiga, [23]waxaa ka jiray degaannada Galbeed oo ay maanta Xabashidu gumeysato Saldanado Islaam ah waxayna ahaayeen: 1. Awfat (Ifat); 2. Haadiya; 3 Arababni; 4. Sharka; 5. Fatajar; 6. Dawaaro iyo 7. Baalli. [24]Saldanada Islaamka ee Awfat oo ay Xabashida u taqiin Ifat waxaa aasaasay qoys Maqsuumi ah ee Xijaas ka soo hayaamay, Sannadkii 283dii Hijrada (896/7kii Miilaadiga). Isla Qarnigii 12aad, waxaa magaalada Awdal (Seylac) ka dhalatay Boqortooyadii Islaamka ee Awdal oo shisheeyuhu u yaqiin [25]Adal oo ay hoos imaanayeen: 1. Harar; 2. Moora; 3. Hobat iyo 4. Jidaayo. Boqortooyadaas waxay ahayd mid aad u awood weyn difaaceeduna adag yahay, sidaa daradeed Xabashiduna ma ay soo haweysan jirin inay baado ama ka qaadato gabbaro degaannaday u talin jirtay. Sannadkii 1277[kii] Miilaadiga, nin la oran jiray Cali Waali Asmac iyo qoyskiisa ayaa dagaal ku qaaday Saldanada Awfat uu qoyska Maqsuumiga u talinaayay dabadeedna qabsaday, halkaasoo ay ku hanaqaaday Saldanada qoyskii Waali Asmac oo ay Xabashidu u taqiin "Walasma".

Qarnigii 13[aad] Miilaadiga, Saldanadaha Xabashida waxay ku ekaayeen dusha buuraleyda ah waxayna u talinayeen dadka Aagawda sheegta. Boqorada Xabashida ma ay laheen boqor isku magacaabi jiray Boqorkii Boqorada (Negus Negesti) taariikhda Xabashiduna weligeed ma noqon mid run ku salaysan, isku dubbarridan ee midaysan siyaasad iyo maamul ahaan. Waxay waayihii danbe, inta badan, ka koobnayd Boqortooyooyin yaryar ee diin isku bahaysatay kuna dhisan habkii fewdaaliga ahaa ee qarniyadii dhexe oo Boqorkii u taagroon lagu magacaabi jiray Boqorkii Boqorada.

[26]Horraantii Qarnigii 14[aad] Miilaadiga, waxaa Saldanadaha Xabashida oo ka koobnayeen Boqoro yaryar ka dhex dillaacay dagaallo awood sheegad ah waxaana loollan iyo dagaal dheer kadib, ku guuleeystay inuu mideeyo Saldanadaha Xabashida Boqorkii ku abtirsanayay qoyska Suleymaan iskuna magaacabay Boqorkii Boqorada. Kadib goortuu mideeyay xukunka Xabashidu,

---

[22] J.S. Trimingham - Islam In Ethiopia B. 66-67.

[23] Enrico Cerrulli = "Sultanato In Ethiopia dello Shoa" nel secolo XIII, R-SE (1941) B. 5-42.

[24] Adal waa magacuu buugga "The Peripulus Of Eritrean Sea" ku magacaabay magaalada Seylac, magaceedii horena yahay Awdal. Boqortooyada waxaa lagu aasaasay Awdal (Seylac).

[25] J.S. Trimingham - Islam in Ethiopia B. 66

isagoo kaashanaya dawladahii Masiixiga ee Yurub, waxuu billaabay inuu isku ballaariyo Saldanadihii Islaamka ahaa ay deriska ahaayeen. Waxuu ugu horreeyntii isku deyay inuu qabsado Saldanada Awfat oo waagaa ugu awood roonayd Saldanadaha Muslimka uguna ballaarnayd. Saldanada Awfat waxaa waagaa u talinayay Suldaan Xaq Al Diinkii koowaad ee qoyskii Waali Asmac. 1321[kii] Miilaadiga, waxaa muran ka dhexdhashay Suldaankii Awfat iyo Boqorkii Xabashida, murankasoo kol dambe isurogay dagaal lagu dilay Suldaan Xaq Al Diin dabadeedna Xabashidu Saldanada ku wareejisay walaalkii Sabra Al Diin.

Waaguu Sabra Al Diin dhintay qoyskii Waali Asmac waxaa ka dhex aloosmay loollan awoodeed, kaasoo 1376[kii] Miilaadiga, Saldanadii uu qabsaday Xaq Al Diinkii labaad. Suldaan Xaq Al Diin waxuu ka soo horjeestay isballaarintii Xabashida waxayna dagaal iskaga [27]soo horjeesteen, sannadkii 1386/7 Miilaadiga, dagaalkasoo Suldaan Xaq Al Diin lagu dilay Xabashiduna lagu caabiyay. Sacad Al Diin Muxamed Cali oo ahaa Suldaankii la dilay walaalkii, ayaa noqday hoggaamiyaha Saldanada waxuuna siiwaday dagaalkii lagala soo horjeeday dhul ballaarsigii Xabashida Masiixiga. Kolkii hore waxuu ka soo hooyay guulo dabadeedna weerar dambe ay Xabashidu ku soo qaaday ayaa lagu jabshay Xabashiduna ku qabsatay Awfat. Halkaas waxaa ku dhammaaday Saldanadii Islaamka. Sacad Al Diin waxuu u qaxay magaalada Awdal (Seylac) oo ahayd xarunta Boqortooyada Awdal. Sannadki 1415kii Miilaadiga, Boqortooyadii Xabashida oo siiwaday dhul ballaarsigeedii waxay weerar ku qaaday magaalada Awdal waxaaana dagaalkaa lagu dilay Ammiir Sacad Al Diin Muxamed Cali ee ku aasan geeska Koofur Bari ee jasiiradda maanta lagu magacaabo.

[28]Sannadkii 1487kii Miilaadiga, Boqor Johankii II[aad] ee Boortaqiiska, waxuu danjirihiisii Pedro Cavilhan u soo diray Boqorkii Xabashida si uu ula soo dhammeeyo heshiis saaxiibtinimo waxuuna Boqorki Xabashidu ku yiri: "Waa waajib saaran Boqortooyada Masiixiga ee Xabashida inay Saldanooyinka Muslimka ka go'doomiso caalamka Islaamka". Boortaqiisku Waxuu ballan qaaday inuu ilaaliyo xeebaha iyo xarumaha ganacsi si uu Xabashidu gacan u siiyo. Boqorka Xabashidu waxuu isna oggolaaday inuu qorshahaas fuliyo waxuuna Boortaqiiska ka codsaday inuu u soo diro ciidamo hubeysan; takhaatiir; nijaaro iyo fuundiyo dhiso kaniisado. Boortaqiisku wuu ka oggolaaday Xabashida codsigaas, mase fulin qaybta dambe taniyo inta ooridii Boqorka oo la oran jiray Helene ay u dirtay danjire dhalashadiisu ahayd Armeeniya lana oran jiray Metthew. Danjiruhu waxuu Boqortooyada Xabashidu ku soo laabtay, bishii Abriil 1520[kii] Miilaadiga, isagoo ay la socdaan koox Boortaqiis ah uuna hoggaaminayo Don Rodrigo De Lima waxayna ka soo degeen marsada Masawac.

Boortaqiiska, isagoo fulinaya qaybta hore ee heshiiskay wada galeen Xabashida oo ahaa in la go'doomiyo Saldanadaha Islaamka, waxay xaryannadiisii billaabeen inay duqeeyaan magaalooyinka xeebaha Soomaliyeed. [29]Daandaansigii Boortaqiiska waxaa ugu horreeyay weerarro u sameeyay Pero De Cavilhan, 1487[kii], waa uu ka soo laabtay socdaal uu ku tegay Hindiya. Waxaa xigay Vasco Da Gama oo ka soo laabtay sahankii dheeraa ee caanka noqday uu

---

[26] J.S. Trimingham - Islam in Ethiopia B.74

[27] Sidoo kale B. 83

[28] Corrado Zoli-Oltre Giuba = (A Cura Del Ministero Delle Colonie) B. 151

ku soo maray Hindiya, ayaa marsada Muqdisho yimid 2[dii] Janaayo 1499[kii], isagoo hoggaaminaya koox xaryanna ah. Waxuu isku deyay inuu magaalada gun uga dhigo xukunkii Boortaqiiska, haseyeeshee, kolkuu ka horyimid dadweynaha reer Muqdisho uuna mariwaayay waxuu duqeeyay magaalada.

Sannadkii 1506dii Miilaadiga, Boortaqiisku waxuu duqeeyay magaalooyinka xeebta Soomaaliyeed ee Baraawe iyo Muqdisho. Kolkuu [30]Boortaqiisku isku deyay inuu ciidankiisa magaalada Baraawe ku dejiyona waxaa ka horyimid ciidan hubaysan oo gaaraya 6000, dagaal kulul oo laysku hardiyay, waxaa Boortaqiisku goobtaas looga dilay 800 oo askari in badanna looga dhaawacay waxaana lagu sanduleeyay inuu magaalada Baraawe ka hilfo gurto. Boortaqiisku waxuu kolkale isku deyay inuu weerarro magaalada Muqdisho oo lagu tirinayay inay ahayd midda ugu hodansan uguna awood roonayd magaalooyinka xeebta Afrikada Bari. Goortay xaryannadiisii dagaalka yimaadeen marsada magaalada waxaa durbadiiba xeebta isku gadaamay ciidamadii Muqdisho oo badankooda ka koobnaa fardooley. Boortaqiisku waxuu isku deyay inuu ciidankiisa ku dejiyo magaalada, haseyeeshee, waxaa lagu dirqiyay inuu dib uga laabto aragtidiisii gumeysi. Kolkuu magaalooyinka Soomaaliyeed ka quustay guulna ka gaari waayay danahiisa gumaysi, ayuu u gudbay Jasiiradda Suqatara halkaasuu kala kulmay ka hortag xoog leh, haseyeeshee, goor dambe ayay u suuragashay inuu ciidankiisu ku dejiyo dabadeedna qabsado jasiirada. Boortaqiisku waxuu halkaas ka dhigtay saldhig weynoo ciidameed, iyadoo himiladiisu ahayd inuu ka sameeysto saldhig joogto ah uu ku fuliyo heshiiskii uu la galay Xabashida iyo danahiisa gumeysi, haseyeeshee, waxuu ka guuray labo sano kadib. Sannadki 1517[kii], Lope Suarez waxuu duqeeyay uuna gubay magaalada Awdal (Seylac), Sannadkii xigayna nin la oran jiray Saldanha, ayaa duqeeyay hooshayna magaalada Berbera. Waxaa, isla waagaa, Boortaqiisku ka horyimid Boqortooyadii Cotmaaniyinta oo badda ku lahayd xoog aad u awood badan horayna u mideysay Dunida Islaamka.

Sannadkii 1526[kis] Miilaadiga, Boqorkii Xabashida Labna, kolkuu gaboobay waxuu awoodii gaashaandhigga ku wareejiyay Degelhan inuu siiwado weerarkii Islaamka lagu haayay. Sannadkii xigay waxaa dhanka kale awooddii gaashaandhigga Islaamka hoggaamiye u noqday Axmed Garaad Ibraahim (Gurey) oo 35 jir ahaa. Imaam Axmed waxuu ku dhashay magaalada Hobat oo u dhow Jildeysa una dhexeeysa Harar iyo Seylac. Yaraantiisii waxuu ku barbaaray Harar diintana ku bartay waxuuna ahaa nin aad u firfircoon, aqoon wanaagsan u leh diinta islaamka ahaana geesi la jecel yahay. Inkastoo sheekooyin kala duwan laga fidiyay isirkiisa haddana waxaa hubaal ah inuu ahaa nin Soomaali u dhashay sababa badan awgood. Suuragal ma aha in nin aan Soomaali ahayn uu dagaal u hoggaamiyo kumayaal ciidan oo Soomaali ah; waxaa kaloo la ogyahay inay abaanduuleyaashiisii, Nuur Allamagan, Mataan iyo Xuseen Gaatiro ahaayeen Soomaali iyo sababa kaloo aan halkaan lagu soo koobi karin ayaa caddeeyneyso inuu Soomaali ahaa.

Isla Sannadkaas, col Xabashi ah uu hoggaaminaayay Degelhan ayaa soo weerarray saldanada Awdal waxaana laysaga horyimid tuulo la oran jiray Baqdi ee u dhexeeysa Togga Hawaash iyo Shawa waxaana Xabashidu si xun u jabshay ciidankii uu hoggaaminaayo Imaam Axmed Gurey. Rag meeluu jooga aalaaba libin isuma oggola, haseyeeshee, libintii uu Imaam Axmed ka soo hooyay Xabashida dadku waxay ugu muuqatay libin u soo hoyatay Islaamka oo kii lid ku ahaa ku tixgeliyo kii raacsanaana kalsooni uu ugu hoggaansamo madaxnimadiisa

[29] Somali Goverment - Somali Peninsular (A New Light On Imperial Motives) B. 3.

maalintaas kadib. In kastoo guushaasi ay u ahayd Imaam Axmed billawgii halgan dheer oo timaaddada u harsanayd, haddana waxaa durbadiiba ka hinaasay Suldaan Abuubakar oo waagaas u talinaayay magaalada Harar oo ay u muuqatay inuu Imaam Axmed halis ku yahay madaxnimadiisa waxuuna kolkaas ku billaabay dibindaabyayn iyo shirqool, si ay isaga horyimaadaan dabadeedna uu tillaabo uga qaado intuuna ku taageysan, haseyeeshee, Imaam Axmed durbadiiba waxuu dareemay mardabaduu suldaanku waday waxuuna billaabay tillaabooyin ka soo horjeeda. Ugu danbeyntii waxay gaartay inay xoog isaga horyimaadaan, **si kii roon reerka ugu haro**. Kolkii la ogaaday inay arrintooda meel xun mareyso ayaa lagu dhexdhexaadiyay in Suldaan Abuubakar ahaado Suldaanka magaalada Harar Imaam Axmedna ammiirkii Siim iyo agaggaarkeeda u madaxbannaanaado, mase waarin heshiiskaas oo halkii ayaa loollankii laga siiwaday taniyo ugu danbayntii dagaal laysaga horyimid oo Suldaan Abuubakar lagu dilay. Intuu loollankaas kula jiray Suldaan Abuubakar, Imaam Axmed waxuu guursaday Dalwaabara oo ahayd gabadhii uu dhalay Amiir Maxfuus oo intaan Imaam Axmed kicin u talinaayay saldanada Adal ama Awdal oo goortuu Imaam Axmed saldanada qabsaday fiday. Guurkaas isaga iyo Dalwaabara waxuu Imaamku ku helay taageero badan, iyadoo Dalwaabara huwanayd magacii iyo haybadii aabbeheed awgii. Sannadkii 1516kii, xarunta saldanada Awdal waxay ahayd magaalada Seylac, haseyeeshee, waayahii dambe waxay noqotay magaalada Harar.

Sannadkii 1531[dii] Miilaadiga, magaalooyinka Dawaaro iyo Shawa waxaa qabsaday ciidankii Imaam Axmed, labo sano kadibna waxuu qabsaday gobollada Axmaara; Lasta; Baali; Haadiya; Guraage iyo Sidaamu. Weerarradaas waxay ahaayeen kuwii ugu xoog badnaa uguna weynaa ayna ku guulaysteen ciidamadii Islaamka. Afar sano kadib, Imaam Axmed, waxuu ka talinayay koofurta iyo bartamaha dalkii Xabashidu isku ballaarisay waxuuna weerar ku qaaday Tigrey. Inkastoo dagaal xoog leh uu kala kulmay duullaankaas dambe haddana weerarkiisii ma hakan waxayna ciidamadaasi ku fideen dusha hoose taniyo laga gaaro magaalada Taka (Kasala) Koofur Galbeed ee Sudaan. Halkaas waxauu kala xiriiray Saldanadaha Muslimka ee Masargaa, dhanka hoose ee Walqayti iyo Gobolka Nuubada. Boqorkii Xabashida, goortuu arkay in la go'doomiyay lana ugaarsanayo, waxuu Dawladdii Boortoqiiska u dirsaday ergo uu kaalmo iyo gurmadba ku weydiisanaayo.

Sannadkii 1540[kii], Stephano Da Gama oo loo magacaabay xaakimkii gumeysiga Boortaqiiska ee Hindiya, ayaa loo xilsaaray inuu Masawac ka abaabulo taakuleynta ciidamadii Boortaqiiska ku taageeray Boqortooyada Masiixiga ee Xabashida waxuuna saldhig ka sameeystay marsada Masawac. Sannadkii 1541[dii], waxaa marsada Masawac ka soo degay ciidankii Boortaqiisku uu soo diray inay tageeraan Xabashida oo uu hoggaaminayay Christopher De Gama. Goortay ciidamadii Boortaqiisku dalka Xabashida soo gaareen waxay la kulmeen Boqorkoo geeriyooday xilkii Boqortooyadana uu la wareegay wiilkiisii Galawdewos.

Iskahorimaadkii ugu horreeyay ee Imaamka iyo ciidamadii Xabashida oo ay xoojinayeen ciidamadii Boortaqiisku waxuu ku dhacay, meesha la yiraahdo Ansa ee u dhexeeysa Ambalaji iyo Waadiga Ashangi sannadkii 1542[kii]. Dagaalkaas ciidamadii Imaamkaa waa lagu jabshay Imaamka laftisana lagu dhaawacay. Jabkaas waxuu naxdin ku noqday Imaamka ciidankiisa, waxayna ku ridday niyad jab dabadeedna waxuu dib ugu laabtay buuraha Sobul, si dib loogu dhiso looguna habeeyo.

Dawladda Cutmaaniyiinta goortay maqashay jabka Boortaqiisku uu u geystay Imaamka, waxay u soo dirtay ciidamo iyo madafiic taageera ah. Imaamku waxuu dib u adkeeyay ciidankiisa

waxuuna kolkale qaaday weerar layskaga horyimid dooxada Woofa halkaasoo hoggaamiyahii ciidanka Boortaqiiska, Christopher Da Gama oo ahaa wiilkii badmareenkii caanka ahaa Vasco Da Gama, lagu go'doomiyay kooxdiisa lana qabtay dabadeedna la dilay. Dagaalkaas Boortaqiisku waxuu ku waayay horjoogeyaal fara badan loogana dilay 200 oo ahayd saraakiil sare iyo dabley, hub iyo rasaasna looga qabsaday. Imaamka oo awoodiisii mahadiyay rumeysnaana inuu isku filan yahay waxuu iska diray ciidamadii Cutmaaniyinta ee xoojinaaysay waxuuna dib ugu laabtay xaruntiisii oo waagaa ahayd Harada Taana. Dhaawacii ka soo gaaray dagaalkii Ambalaji awgiis ayuu dabadeed, dhintay horraantii sannadkii 1543dii, . Geeridii Imaamka waxay hoggaanka ciidamada u keentay kala go' halis ah iyo niyad jab taasoo ay ku lumiyeen dhiirrinimadoodii iyo niyadii dagaalka waxay kaloo dharbaaxo ku noqotay isku xirkii ciidamada waxaana billaabatay astaamo hannaandarri ah oo ka timid maqnaanshaha hoggaankii iyo kormeerkii madaxdooda.

Bishii Oktoobar 1543[lxi], Boqorkii Xabashida Galawdewos waxaa u suuragashay, isagoo kaashanaya ciidamada Boortaqiska, inuu weerar ku qaado ciidamada Boqortooyada Awdal oo waayay hoggaamiyahoodii waxuuna kaga guuleystay meesha la yiraahdo Weyn-Daya ee u dhow Harada Taana. Xabashidu waxay dib u qabsatay una ceshatay dalalkii horay faraheedii uga baxay waxaana halkaa ku burburay ciidamadii awooda iyo haybada lahaa ee Imaam Axmed Guray iyo Boqortooyadii Awdal.

Geeridii Imaam Axmed Ibraahim kadib, Nuur Alamagan ayaa loo doortay Ammiirka Harar waxayna noqotay magaalo madaxda Immaarada. Ammiir Nuur oo loogu magacdaray Mujaahid, taasoo uu ku mutaystay geesinnimadisa iyo hoggaankiisa haboon waxay sheekada oraahda ahi leedahay inuu ku dhashay Balli Nuur oo ka tirsan Degmada Dhuusa-Mareeb waxuuna uga tegay qoyskiisa inuu ku biiro ciidmada Imaam Axmed Ibraahim Gurey. Waxuu gaaray inuu ka noqdo hoggaamiye weyn oo geesi ah aadna loo jecelaa. Ammiir Nuur, goortuu noqday hoggaamiyaha dalka kadib, waxuu si feejignaan leh u billaabay inuu ciidanka dib u abaabulo, iyadoo ujeedadiisu ahayd in uu weerar cusub ku qaado Xabashida. Sannadkii 1559[lxii], Ammiir Nur waxuu dib u billaabay inuu ku duulo Xabashida waxuuna weerar ku qaaday magaalada Fatajar. Boqorkii Galadewos ee Xabashidu waxuu ina adeerkiis Hamalmaal u diray inuu ka hortago ciidamada Ammiir Nuur, haseyeeshee, Ammiirku waxuu adeegsaday tabahii Imaam Axmed waxuuna ku guuleystay inuu ciidamadii Xabashida si geesinnimo leh u waabiyo. Jabkaa kadib, Boqorkii Xabashida, ayaa laftiisa soo hoggaamiyay dullaankii ciidamdiisa, dagaal kharaar kadibna, Boqorkii Xabashidu Galadewos, ayaa goobtaas lagu dilay ciidamadii Xabashidana lagu jabshay.

Waxaa ciidamada Islaamka ku soo kordhay weerarro isdabajoog ah oo ay guurtada Oroomada (Gaalla) ku soo qaadeen magaalada Harar waxayna magaalada gaarsiiyeen heer aad u hooseeya. Ammiir Nuur waxuu dhintay 975[lxiii] Hijrada (la mid ah 1568dii Miilaadiga).

Waagaa dhaqaalaha magaalada Harar waxuu gaaray heer baaba' ah ee aad u hooseeya waxaana ka abuurmay madaxda dhexdooda is qabsasho iyo iska horimaad, taasoo hoos u dhigtay midnimadii baabi'isayna haybadii uu u kasbay Imaam Axmed. Madaxdu waxay awood u waayday inay iska difaacaan weerarradii isdabajooga ahaa ee Oroomadu ku soo qaadaysay ee geliyay ciriiri xiriikii ganacsi oo ay magaaladu la lahayd Seylac burburiyayna dhaqaaleheeda. Goortuu Imaan Nuur geeriyooday waxaa xilkii la wareegay Ammiir Cusmaan oo durbadiiba la galay heshiis Oroomada una oggolaaday inay ka adeegtaan kana ganacsadaan sayladaha magaalada Harar, iyagoon dhibaato dadka u geysan. Tallaabadaa waxay ahayd tii ugu horreeysay ee laysku deyo

in la yareeyo dagaallada oo ay Oroomada waday lana hagaajiyo xiriirka nolosha magaalada. Ammiir Cusmaan waxuu heshiiskaa fulintiisa u xilsaaray Jibriil oo Ammiir Nuur sodog u ahaa.

Jibriil waxuu tegay Sajaraabar ee gobolka Cawsa ka tirsan halkaasoo dad diidan taliska Cusmaan ay u doorteen madax waxaana halkaa ka abuurmay dad ka soo horjeeda xukunka Ammiirka. Arrintaa waxay ka dhalatay diidmo ku saabsaneyd qodob ka mid ah heshiis Oroomada lala galay oo ahaa in Oroomada loo celiyo dadka ka soo baxsada waxaana jirtay gabadh uu dhalay nin ka mid ah Maqaawiirta Muslimka reer Harar oo ay Oroomadu horay u afduubtay inay ka soo baxsatay dabadeedna Cawsa tagtay. Ammiir Cusmaan waxuu faray Jibriil in gabadhaas la celiyo, farriintaasoo Jibriil diiday inuu fuliyo. Arrintaas awgeed ayaa layskaga horyimid dagaal lagu dilay Jibriil. Talxa oo ahaa wiilkii Ammiir Cabaas ayaa ka mid ahaa madaxdii dagaalka hurisay waxuuna qabsaday taliskii Harar kol uu Ammiir Cusmaan ku maqnaa Cawsa waxaana, loo magacaabay Suldaan sannadkii 1569[lxiv].

Sannakii 1571[lxv], Talxa waxaa laga qaaday xilkii Suldaannimada waxaana loogu marmarsooday inuusan duullaan hoggaamin intuu xilka Saldnadda hayay, siday dhaqanka Saldanada ahayd, waxaana xilkii Suldaannimada loo dhiibay Naasir, wiilkii Ammiir Cusmaan. Waagaas dadweynaha reer Harar waxaa saameeyay rabitaan duullaan lagu qaado Xabashida waxuna gaaray go'aan lagu joojinayo loollanka awoodeed iyo dagaalka gudaha waxuuna billaabay in laysku habeeyo dagaal lagu qaado Xabashida. Wiilkii Suldaan Naasir, Suldaan Muxamedkii 4[lxvi], ayaay, dagaal Xabashida iskaga horyimaadeen, sannadkii 1577[lxvii], agaggaarka wabiga Weeb, dagaalkaasoo Muxamed lagu dilay Hararna ku waayday ciidankeedii awooda lahaa. Intuu Suldaanku dagaalka ku maqnaa waxaa ka abdaystay Oroomada oo soo weerartay Imaaradda Harar waxayna gubtay boqol tuulo dad badana ku laysay.

Nin la yiraahdo Mansuur Muxamed, ayaa abaabulay ciidan cusub una suuro gashay inuu soo celiyo awoodii midnimo dibna u qabsaday gobolka Cawsa. Mansuur waxuu isaguna ku dhacay dabinkii loollanka reer Harar dhaqanka u ahaa waxaana xilkii kala wareegay Imaam Muxamed Jasa oo ka dhashay qoyskii Imaam Axmed Gurey. Imaam Muxamed waxuu xilkii maamulka magaalada Harar uga tagay walaalkii uu wasiir ku magaacabay waxuuna xarunta Saldanada u wareejiyay, sannadkii 1577[lxviii], gobolka Cawsa ee ahaa degaankii Cafarta waxayna ulajeeddadiisu ahayd inuu xarunta Saldanada ka fogeeyo Oroomada halkaaseyna ka billaabatay taariikhda Saldanada Cawsa. Sannadkii 1583[lxix], Oroomada Warra-Deya waxay dishay Imaam Muxamed Jasa, geeridaa kadibna waxaa billawday loollankii gudaha ahaa oo ay isku baddeleen taliska, shan sano gudahood, siddeed suldaan. Harar way ka madaxbannaaneed Saldanda Cawsa waxaana u talinaayay, sannadkii 1647[lxx], Ammiir Cali Daa'uud waxayna ahayd bartamaha barashada diinta Islaamka iyo Ganacsiga taniyo qabsashadii Ciidamada Masaarida. Waagay Boqortooyadii Awdal baaba'day Seylac waxay noqotay saylad qaaya leh ee badeecada dhulka buuraleyda ka timaada soona marta Harar laysku dhaafsado, inkastoo kolkol ay hakinaayeen weerarradii magaalada Oroomada ku haysay.

3. DEGAANNADA BAY IYO HARQAAN.

Qarnigii 14[lxxi] Miilaadiga, Gobollada loo yaqiin Bay iyo Harqaan oo ay degganayd Oroomo (Warra-Deya iyo Boorana) oo cawaan ahayd waxaa soo dhexgalay qolooyin Soomaali

ah oo isku bahaystay Aji iyo Ajuuraan (Magoosile, Madiinle iyo Ajuraan) oo dhanka deexda Bari ee Banadir ka yimid dagaal dheer kadibna ku fiday degaannada Bay iyo Harqaan.

Dabaadigii Qarniga 15[aad] Miilaadiga, kadib waagay guuldarrada ku dhammaadeen dagaalladii arrimaha diineed mudadda dheer Galbeed ku dhexmaray Xabashida iyo Soomaalida, ayay qolooyin Sab iyo Samaali ah Koofur Galbeed u soo hayaameen. Sabtu waxay ka soo hayaantay inta u dhexeeysa Adari iyo Dikhil Samaaliduna Waqooyi Galbeed iyo Waqooyi Bari. Qolooyinkaas soo hayaamay waxay dagaal ku qaadeen Oroomadii degganayd hareeraha webiga Shabeelle dhankiisa sare waxayna Oroomada u riixeen webiga dhankiisa midig. Muddo kadib waxaa iyana ku soo biiray qolooyin isku bahaysatay Aji iyo Ajuuraan oo deexda Bari ka yimid. Sabta iyo Samaalida way siiwadeen weerarkoodii taniyo ay ka gaareen webiga Weeb.

Horrantii Qarniga 17[aad], qollooyin Sab iyo Samaali ah oo isku bahaystay magaca Raxanweyn, iyagoo ka soo duulay hareeraha webiga Weeb ayay weerar ku qaadeen Oroomadii iyo Ajidii degganayd Bay iyo Harqaan dagaal muddo dheer socday kadibna, Oroomadii iyo Ajidii oo laga taag roonaaday loo riixay webiga Ganaane degtiisa midig (Gedo iyo Oddo). Sidoo kale Warra-Deyadii iyo Ajuuraantii degganayd Buur Hakaba ayaa iyagana loo riixay jiinka webiga Ganaane dhankiisa bidixeed (Baardheere iyo Saakow). Degmadaan dambe waxaa laga kacshay oo waagaa degganaa qolo la yiraahdo Saakuye oo maantaba deggan Kenya.

Magacyada siddeed iyo sagaal oo raxanweyntu isu kala qaybisay iskuna aqoonsato waxay sheekada oraahda leedahay in qarnigii 15[aad], waagay Sabtu Buur Habarre ee Shabeellada Sare Koonfur uga soo hayaantay waxay soo kala mareen laba waddoo kala duwan, waxana kala hoggaaminaayay Caleemo iyo Mirifle. Goortay soo gaareen kuna kulmeen dhanka Bay ee iskudarka Webiyada uu ka aasaasmo Webiga Ganaane, ayuu Mirifle yiri: "Waxaynu nahay siddeed". Caleemona ku warceliyay: "Innaguna waxaynu nahay sagaal". Qolo kastoo waayihii danbe ku soo biirtay degaannadaay labadaas hogaamiye qabsadeen waxay hayb ku racday labadaas qolo midkood. Siddeeda Mirifle waxay kala yahiin: Eelaay, Haryin, Barbaarow Haraw, Qoomaal, Yalaale, Garwaale iyo Disow. Sagaalka Caleemo waxay kala yahiin: Kasanle, Jambaluul, Gasaar Gude, Jilible (Geledi), Baalguri, Waaqbiyo, Begadi, Waaqdhoore iyo Gaalwegar. Waxaa kaloo jira Beela kaloo Raxan Weyn ah aan ku abtirsanayn Sab ama Digil ee ku midoobay magaca danwadaagta ah ee Raxan Weyn. Ereyga Raxan Weyn waxuu tilmaamayaa dad fara badan oo kala duwan ee iskaashi iyo dan ku toloobay. Waxaa kaloo xusid mudan badi dhisamaha bulshada Soomaaliyeed kuma ay imaan isir ama sida loo wada dhashay oo keli ah ee qaarkood waxay ku dhasheen iskaashi iyo danwadaag. Ereyga tol oo ay Soomaalidu isku aqoonsato waxuu ka yimid tolliimo waxaana la yiraahdaa: "tol waa tolane, waa inti talo iyo dan wadaagto ee ma aha intii tagoog isu keentay". Oraahdaan waxay caddeeynaysaa ereyga tol inuusan tilmaamayn wada dhalasho.

Bartamihii Qarnigii 18[aad], Eelaydii degganayd Buur Hakaba waxaa ku soo biiray qolooyin badan oo ka soo hayaamay degaannada Galbeed iyo Waqooyi Galbeed oo ah: [31]Daarood, Dir iyo Sheekhaal reer Aw Qudub. Daaroodkaasi waxuu ka koobanaa: Ogaadeen, Mareexaan, Warsangeli iyo Dhulbahante waxayna isku bahaysteen magaca Kablalax, Inkastoo Mareexaanku yahay Sede waxayna sheegad u noqodeen jilibka Geedafade oo waagaa Eelaydu u badanaa uguna taag roonaa. Xiriirka sheegatada iyo qolada la sheegtay waxuu ahaa mid aad u qeexan.

---

[30] Corrado Zoli = Oltre Giuba (A cura del Ministero della Colonie) B. 41-42

Qolada sheegatada ah waxay ka tirsanayd gunta waxaana ka reebanaa inay ka qaybgasho shirarka odayaasha beesha ee lagu go'aaminaayo talooyinka beesha hantidii duullaan lagu soo dhacana waxaa laga siin jiray saami maquuna ah, iyadoo qaataan ciidankii duullanka galana qaybta ugu badan ka qaataan. In muddo ah haddii sidaa lagu dhaqmaayay, Daroodku waxaa u muuqday dhaqankaasi inuusan caddaalad ahayn.

Horrantii Qarnigii 19aad, waxaa Daroodku ku soo kordhay dad badan oo ka yimid dhanka Banaadir waxuuna dareemay inuu cuduud iyo hantiba isku filnaan gaaray, duullaan badan oo Boorantii iyo Warra-Daydii lagu qaadayna uu ku muujiyey awooddiisa cududeed. Goor la qaybsanaayay hanti badan oo Booranta laga soo dhacay ayaa saamigii laga siiyey Daaroodku saluugay waxuuna codsaday in si sinnaan ah wax loo qaybsado haddii kalena loo oggolaado ka bixidda sheegadnimada. Eelaydu codsigaasi kama ay garaabin waxayna Daaroodku ku tiri: " waa inaad ka gurtaa degaanka kuna laabataa degaankii aad kol hore ka timid" taasoo ay Daaroodku ugu muuqatay in Eelaydu diidan tahay inuu dhanka wabiga ka xigsado dabadeedna oo ku noqdo deris u keena dhibaato marinnadooda Booranta iyo Warra-Dayda ugu duuli jirtay.

Sannadkii 1858[xii], Daaroodku, isagoo u kala qaybsanaa Madaxgoy iyo Buur Hakaba, ayuu isugu gurtay Madaxgooy dabadeedna waxuu billaabay inuu ku dhowaado dhanka webiga Ganaane, tillaabadaasoo, Eelaydii dareen ku dhashay awgii billawday abaabul dagaal. Daaroodku waxuu raadiyay inuu dareenkaa Eelayda qaboojiyo waxuna malaaqooda ee la oran jiray Kuusow Eden oo ay naagtiisu geeriyootay, ugu tagay baroordiiq una geeyey deeq ah saddex addoon, afar faan maroodi iyo dibi. Malaaqu waxuu oggolaaday dibigii oysiga loogu geeyey deeqdii kalena diiday, isagoo Daaroodku ugu goodiyay dagaal.

Muddo gaaban kadib, Eelaydii waxay qaaday weerar ballaaran aan naxariis lahayn, dagaal dheer oo khasaare fara badan kadibna Daaroodkii ayaa laga taag roonaaday, isagoo qax ahna waxuu ka gudbay helada Geylab iyo Baardheere waxuuna magangalay Boorantii Gedo degganayd. Waxaa sidoo kale waagaa la gudbay qolooyin Dir ah iyo Sheekhaal reer Aw Qudub. Boorantii qaxootigii Daarood way soo dhoweeysay waxayna u oggolaatay inuu sheegto si simanna wax ula qaybsadaan.

4. DEGAANNADA JIINKA WEBIGA GANAANE

Soomaalida ka hor, jiinka webiga Ganaane labadiisa dhinac oo loo yaqaan Gosha, waxaa degganaan jiray qolooyin loo yaqiin WABOONI oo ay Soomaalidu u taqiin Boon-Aleeleey iyo Saakuye oo ay magaca kala hartay Degmada Saakoow.

Taariikhda oraahda Soomaaliyeed waxay sheegaysaa, in waayo loo maleeynaayo sannadkii 1840[xiii] miilaadiga, laba nin ee Sawaaxili ah oo la kala oran jiray Muse Barrow, qoladiisuna ahayd Mejindo iyo Wareeshi-Jumac oo isna qoladiisu ahayd Manyaasa, ay ka soo baxsadeen Warra-Daydii addoonsan jirtay ee waagaas degganayd Waamo dabadeedna magangalay Boontii degganayd jiinka webiga Ganaaneha Hoose. Muddo yar kadib waxaa ku soo biiray nin la oran jiray Aw Bundo oo qoladiisu ahayd Mashuunguli oo asna sidoo kale ka soo baxsaday Soomaalidii addoonsan jirtay. Waxaa iyana goor dambe ku soo darmay dad badan oo asalkoodu Sawaaxili ahaa ee Soomaalidu addoonsanaysay, iyagoo u arkaayay Gosha meelay ku xorroobi karaan, nabadgeliyadoodu ku ilaashan karaan kuna tabcan karaan. Waxay billaabeen beero tacbasho iyo inay ka hortagaan damaca kuwii addoonsan jiray oo doonaayay inay ku celiyaan heerkii ay ka

soo baxsadeen. Degaannada agaggaarka webiga Ganaane Soomaalidu waxay u taqiin GOL iyadoo ay ugu wacnayd inuu ku badnaa cayayaanka, sida dhuugga iyo gendiga ee xoolaha ku golaystaan iyo kaneecada oo dadka u keenta cudurka duumada, sidaa daraadeed dadka deggan waxaa loo baxshay reer Goleed. Soomaalidoo guurto xoolo raacato ah way ka fogaataa degaankaasi qaniinka cayayaanka leh, taasaana u fududeysay dadka reer Goleedka ee addoonsiga ka soo baxsaday inay ku nagaadaan. Soomaalidu degaankeedu waxuu ahaa dhulka loo yaqaano Gabiibta ee deexda xiga. Goortii dalka Soomaaliyeed uu gumeeysigii Yurubta qabsaday waxaa la baa'biyay dhaqankii isaddoonsiga dabadeedna degaanka Gosha waxuu noqday meel oo ay dad badan oo la xorreeyay soo tiigsadaan oo ay tuulooyin badan ka dhasheen agaggaarka webiga, dadkii xorroobayna isudoonteen siday u wada dhasheen.

Sannadkii 1875[xii], waxaa iskudarka webiga Ganaane iyo Badweynta Hindiya barroosinka soo dhigtay saddex markab oo uu hoggaaminaayay nin Scotch ah ee la magac baxay Mac Qaalib, uu Masar ka soo diray Ismaaciil Baasha oo waagaa u talinaayay dalka Masar. Dadkii reer Goleedku waxay u arkeen maraakiibtaasi in dalka lagu qabsanaayo, sidaa daraadeed waxay ku tashadeen inay deeq u geeyaan ninka maraakiibta hoggaaminaayay, iyagoo doonaayay inay weeydistaan magangelyo. Reer Goleedku waxaa madax u ahaa nin la oran jiray Farxaan Makwa oo wagaa ugu awood roonaa odayaasha. Qola Tunni ah oo wagaa degganayd tuulada Jumbo ayaa halis u arkayay kororka tuulooyinka dadka addoonsiga ka soo baxsaday inuu ku yahay tuuladooda dabadeedna raadiyay, kol hadday xoog ku maquunin karin, inay shirqoolaan waxayna is yiraahdeen: haddii Nasib Bundo oo dhallinyaraa addoonkooduna ahaan jiray uu beddelo Farxaan Makwa inay ku gaari karaan danahooda. Sidaa daraadeed waxay abaabuleen war shirqool ah oo ay u sheegeen hoggaamiyahii maraakiibtaasi inay reer Goleedku soo weerarri doonaan. Goortay reer Goleedku oo deeq siday heesaayana u soo dhowaadeen xeradii Masaarida, iyagoo u qaatay inay soo weerarrayaan, ayay tacshiirad ku fureen waxaana ku geeriyooday Farxaan Makwa. Goortuu hoggaamiyahii maraakiibta ogaaday in arrintu ahayd shirqool oo ay Tunnidu maleegeen iyagoo Mac Qaalib raali geliyay reer Goleedkii, isagoo magdhaw bixiyay, sidaasuna Nasiib Bundo ku noqday madaxa dhawr tuulo.

Durbadiiba waxaa loollan awoodeed ka dhexdhashay Nasiib Bundo, Shangolo Mafuula iyo Makomo Mareegu oo ahaa madaxda tuulooyinka ugu awood badnaa. Loollankaasi awoodeed ee reer golleedku waxuu socday taniyo 1885[xiii], waagaasuu Nasiib Bundo ku guuleeystay loona caleema saaray inuu noqdo Suldaankii reer Goleedkoo idil. Waxuu durbadiiba billaabay inuu dejiyo xeerar, hab iyo hannaan laysaga dambeeyo laysagana caabiyo faragelin uga timaada kuwii addonsan jiray loona sahlay kuwii is xorreeyay soo gelitaankooda tuulooyinka. Waxuu tuulooyinkii ka abaabulay ciidamo uu hub casri ah ku hubeeyay adkeeyayna nabadgeliyadooda. Nasiib Bundo waxuu ahaa nin aad u firfircoon una aqli badan waxyaabihii oo u sameeyey reer Golleedku taniyo maanta wey xusaan.

Sannadii 1865[xiv], waxaa Banaadir dhanka kofureed uga hayaamay qolooyin isku bahaystay magaca Aji waxayna ku hakadeen degmada Jamaame, tuulada maanta loo yaqaano Buulo Aji. Sidoo kale waxaa hayaankaa daba joogay qolo Sheekhaal Aw Looboge ah oo iyana Banaadir ka hayaantay, loollan dheer kadibna ku fiday deexda Jilib taniyo tuullada Jumbo oo ay dhanka Baraawe u riixday Tunnidii aaggaa degganayd.

5. DEGAANNADA DHANKA MIDIGTA EE WEBIGA GANAANE (KAFAR, WAAMO, GEDO IYO WAASOW)

Qarnigii 19[aad] bartamihiisi, webiga Ganaane labadiisa dhinac waxaa loo kala degganaa sida soo socoto:- Soomaalidu soohdinta ay degganayd wagaa waxuu ku ekaa webiga Ganaane dhiniciisa bidixeed laga billaabo isku darka webiga Ganaane iyo Badweynta Hindiya taniyo helada Gobeys ee webiga Maana waxayna dhankaas deris kala ahayd Caruusa. Intay Soomaalidu u soo gudbin Webiga Ganaane dhankiisa midigeed ee waa danbe gumeysiga u baxshay Jubba Land, waxaa loo kala degganaa sida soo socota:-

1. Dhanka J/sare iyo Oddo Oroomada Boorana;
2. Dhanka Koofureed ee adablaha Waamo laga billaabo Togga Sooya taniyo Diif iyo Waqooyiga Kenya waxaa degganaa Oroomada Warra-Daya oo loo yaqaanno Werdey;
3. Dhanka kafarta iyo Jasiiradaha waxaa degganaa Baajuun jilaabata ah.
4. Jiida webiga Ganaane labaadiisa dhinaca waxaa degganaa Boon iyo Jareer la baxday Reer Goleed.

Soomaalida iyo Booranta waxay ku dirireen ceelasha Ceel Waaq, dagaalkaasoo lagu dilay nin Booran ah. Collaadaas ka dhex dillaacday Soomaalida iyo Booranta awgeed, ayay qolooyinkii dakanadaas galay u qaxeen Waamo waxayna magangaleen Warra Dayadii aaggaa degganayd dabadeedna sheegad u noqdeen. [32]Sannadkii 1867[xv], waxuu dagaal ballaaran oo saameeyay degaannadaasoo idil ka dhex-aloosmay Soomaalidii sheegadka ahayd iyo Oroomadii degganayd Waamo, J/sare iyo Odo. Durbadii Soomaalidii degganayd Webiga degtiisa bidxeed, ayaa soo wada gurmatay, iyagoo ka soo gudbay webiga Doolow, Baardheere iyo Goob-Weyn dagaalkana ka qaybgashay. Warra Dayadii waxaa lagu jabshay loogana taagroonaday goobo dagaallo laysaga horyimidoo ay ka mid yahiin: Afmadow, Tabda, Guullole, Elin iyo Looreyaan xoolahooduna laga dhacay waxayna dabadeed u guratay Saangur. Dagaalkaas waxuu socday taniyo 1869[xvi], waagaasoo laga taagroonaaday Oroomadii lagana qabsaday degaannadeedii Waamo; J/sare iyo Odo intii ka hartayna ay Soomaalida sheegatay. Isla waagaa, qolooyinkii isku bahaystay magaca Aji ee ka soo gudbay Goob-Weyn, ayaa iyana qabsatay kafarta oo ay Baajuunta jillaabatada ah degganayd. Soomaalidu dagaalkeedi ayay siiwaday taniyo intuu gumeysigii Ingriirsku ku hakiyay 1909[xvii], soohdinta Waqooyi Kenya oo ay maanta deggan tahay.

---

[31] Corrado Zoli = Oltre Giuba (A cura del Ministero delle Colonie) B. 44

6. MAGAALADA KISMAAYO

Magaca Kismaayo waxuu ka kooban yahay laba eray oo sawaaxili ah (Kisima Yaajuu) oo macnahoodu yahay ceelka kore; magaca waxaa lahaa markiisi hore ceel ku yaalay jasiirad ku taalla dhanka Waqooyi Bari ee magaalada (Jasiiradda maska u eg) oo ay degganayd koox jillabato Bajuun ah. Jasiiradda waxaa laga guuray goortii Warra-Dayadii degganayd Waamo dishay duqii Baajuunta oo la oran jiray Fununu. Magaalada Kismayo waxay ka aasaasantay tuulo yaroo xeebta ku tiil ee la oran jiray Ngumi oo ay degganayd koox jillaabata ah oo waagay Ajida qabsatay durbadiiba soo degeen oo shiimeeyeenna2 Carab iyo Soomaali ganacsata ah ee Banaandir ka timid iyo Hindi ka timid Kenya.

7. DARIIQOOYINKA

Dariiqooyinka Soomaalidu waa ururro wadaaddo iyo xertooda, si gaar ah isu maamulo oo digri iyo ducooyin gaar ah leh, kuna dhaqma hab urur wada jir ku nool. Waxay isugu yimaadaan madal lagu digrinayo ama lagu ducaysanayo. Waxaa loo maleeyaa in dariiqooyinka Soomaaliya ka billawdeen dalkana ku fideen qarnigii 19aad. Sida dariiqooyinka Soomaaliya ku billawdeen iyo kala horreeyntiiba waa sida soo socota:

a) QAADIRIYA

Qaadiriya waa dariiqadii Islaamka ugu horreeysay, meela yar mooye, inta badan dalalka Islaamka ah waa laga xusaa magaca Sheekheeda, Cabdulqaadir Al-Keylaani (1077-1166 Miilaadiga). Waxay tahay dariiqada ugu horreeysay ee soo gasha dalka Soomaalida, waana mida aad u fiday. Waxay ku soo gashay dalka Soomaalida xiriir ganacsi iyo marinka badda ee ka dhexeeyay magaalooyinka xeebaha dunida Islaamka. Waxay taariikhda oraahda leedahay in Harar iyo Seylac uu keenay Sharriif Abuubakar ibnu Cabdalla Al Caydaruusi oo loo yaqiin Al-Qudub, oo ku geeriyooday Cadan 909ki Hijrada (1503ki Miilaadiga). Waxaa lagu sheegay kitaabka la magac baxay "Fatuux Al Xabash" waxuuna goor dambe qoray kitaabka la yiraahdo "Al Jusul Latiif fii Kaafiyaat Al Dariiqat Al-Suufiya". Dariiqadu waxay aad u gashay gobollada Weeb, Shabeelle taniyo Caruusa. Cabdishakuur, Ammiirkii Harar (1785-1794 Miilaadiga), waxuu dhisay masaajid lagu magacaabay Cabdulqaadir Al Keylaani. Qaadiryada waxaa Bari-Galbeedka Caruusa geeyey Sheekhyo Soomaali ah waxaana qaatay dad badan.

Inkastoo muddo badan ay dariiqada xeebaha ka jirtay kuma ay fidin gudaha dalka taniyo 1819ki Miilaadiga, waagaasoo Sheekh Ibraahim Xasan Yebarow uu ka aasaasay jameecad magaalada Baardheere, waagaasoo ay magaaladoo idil jameecada ku biirtay. Waxay ugu horreesay aasaasida jameecooyinka oo ay kadib dariiqooyinka kale kaga daydeen. Sannadkii 1840ki Miilaadiga, Sheekh Ibraahim waxuu weerarray magaalada Baraawe, dadkii degganaana kala firdhay, sababtoo ahayd inay diideen aragtidiisii caqiido, dhacdadaas kadibna dariiqada aad ayay dalka ugu fiday.

Waxaa isna, isla waagaas, soo baxay Sheekh Cabdiraxmaan Axmed Al Saylici (1883ki Miilaadiga) oo aasaasay faraca Sayliciyada ee Qaadiriya. Sheekh Cabdiraxmaan waxuu ku dhashay degmada Waajid 1820ki waxuuna ku aasan yahay Qalanquul. Waxuu qoray qasiidooyinka oo ay kuwa ugu magac weyn yahiin: "Mutayid Al Afraax Cayniya" uu Nabiga, NNKH, ku ammaanay iyo "Siraaj Uquul Wal Sira Fii Al Tawasul bin Cabdulqaadir Keylaani".

Sheekh Uweys Muxamed Al-Baraawi ee ku dhashay Baraawe, waxuu dalka gudihiisa aad ugu faafiyey dariiqada, waxayna jameecadiisa saldhig ku lahayd tuulada Tayeeglow, waxuu aasaasay faraca Uwaysiya oo ka mid ah Qaadiriyada waxuuna si adag uga horjeeday Saalixiyada Sheekh Muxamed Cabdulle Xasan uu u tiriyay qasiidooyin lid ku ah. Qasiidooyinkaas waxay ku ursursan yihiin "Mujmac Al Qasaa'id" ee Sheekh Qaasim Muxaydiin Al Baraawi. Sheekh Uweys waxay Daraawiishta ku dishay, sannadkii 1909ki Biyoolay, halkaasuuna ku aasan yahay laguna xusaa. Sheekh Cabduraxmaan Cabdalla oo loo yaqiin Sheekh Suufi oo geeriyooday 1913ki Miilaadiga, waxuu Muqdisho ku aasaasay Saawiya, waxuuna soo saaray qasiidada "Shajarat Al

Yiqiin", waxayna qasiidooyinkaas ku ursursan yihiin diiwaanka wadaaddada qaadiriyada ee la magac baxay "Al Majmuuc Al Mubaarak". Waxuu culayskiisa saaray barashada dariiqada ee kama qayb galin dalka ku fidinteeda waxuuna ku aasan yahay Muqdisho.

Sheekh Cabdullahi Yusuf Al Qudubi oo geeriyooday sannadku gootuu ahaa (1947[ki] Miilaadiga), waxuu isna aad u faafiyay dariiqada, gaar ahaan, gobollada Galbeedkda iyo Waqooyi Bari. Waxuu qorey dhawr kitaab oo ku saabsan cilmiga Suufiyada, waxayna ka mid yahiin diiwaanka wadaadada Qaadiriyada ee la magac baxay "Al Majmuucat Al Mubaarak". Waxaa qoraalladiisa ka mid ahaa qasiidooyin lid ku ahaa dariiqada Saalixiyada waxuuna ku aasan yahay Qalanquul oo u dhow Sasabane.

Sheekh kaloo isna door wayn ka qaatay dariiqada waxa weeye Sheekh Madar oo xijaabtay sannadku goortuu ahaa (1917[ki]), oo Hargeysa ka asaasay Jameecada gobolka Waqooyi ugu muhiimsan iyo Sheekhyo kaloo badan oo ay ka mid yihiin: Sheekh Beerato; Sheekh Habi; Aw Barkhadle iyo Sheekh Cusmaan Nuur.

b) [33]AXMADIYA

Sayid Axmed ibnu Idiriis Al Faasi, (1760-1837[ki] Miilaadiga), aasaasihii dariiqada Axmadiya door weyn ka qaatay dalalka Carbeed, halkaasoo dariiqadiisa si dhab ah uga hirgaliyay. Dariiqada waxaa Soomaaliya soo galiyey sannadkii (1870[ki] Miilaadiga), Sheekh Cali Maye Duruqbe oo ka mid noqoday dariiqada intuu Xajka Maka u joogay. Waaguu dalka ku soo laabtay waxuu abaabulay jameecad waxuuna ku dadaalay faafinta dariiqada. Waxuu ahaa Sheekh aragtidiisa aad loo qadariyo. Waxuu ku geeriyooday Marka, sannadkii 1917[ki] Miilaadiga, halkaasoo ku aasan yahay oo lagu xusaa bisha Safar 5 teeda. Dariiqadu waxay gaartay taniyo dalka Caruusa oo uu geeyay Sheekh Xaaji Cabdullahi Ciisa.

c) [34]SAALIXIYA

Goortuu Sheekh Axmed Idiriis Sayba xijaabtay, ayaa Ibraahim Rashiid oo xertiisa ahaa ku dooday inuu Sheekha u magaacabay hoggaaminta dariiqada, waxaase dhashay in xertii kale, oo ay ka mid yihiin Muxamed ibnu Cali Al-Sanuusi iyo Muxamed Cusmaan Al-Mirqaani, iyana ku doodeen inay Sheekha ka heleen oggolaaasho oo ay ku aasaasaan dariiqooyin kale. Axmadiya iyo Saalixiya waxaa ugu horreeyntii Afrika soo galiyay Sheekh Saciid ibnu Ibraahim, wiilkii Al Rashid, sannadku goortuu ahaa 1850[ki] Miilaadiga. Sheekh Saciid Ibraahim waxaa beddelay wiilkuu adeerka u ahaa Muxamed binu Saalax oo geeriyooday sannadku goortuu ahaa (1918[ki] Miilaadiga) oo Sheekhyo xertiisa ahaa dalka si ballaaran ugu fidiyeen. Waxaa Sheekh Saalax Xertiisa ka mid ahaa

Sheekh Muxamed Guuleed oo xijaabtay sannadku goortuu ahaa (1918[ki] Miilaadiga) oo jameecadiisu saldhig ku lahayd gobolka Shabeellada Dhexe. Waxaa kaloo Sheekhyada waaweyn ee dariiqada ka mid ahaa Sheekh Ismaaciil Sheekh Isaaq, Sheekhii weynaa

---

[32] J.S. Trimingham - Islam in Ethiopia B. 242

[33] Sidoo kale B.243

Muxamed Cabdulle Xasan; Sheekh Muxamed Yuusuf ee aagga Weeb deggenaa iyo Sheekh Cali Nayroobi. Dariiqada Saalixiyada waxay ku magac yeelatay is-hortaagidii gumeysiga dalka qabsanayay iyo dhalashadii Kacaankii Daraawiishta uu hoggaaminaayay Sayid Muxamed Cabdulle Xasan.

d) RUFAACIYA

Dariiqadan waxaa aasaasaay Sheekh Saalin bin Axmed Marwaas oo dhisay Masaajidka ku magacaaban ee Muqdisho, dadka raacsan way yar yihiin. Goortuu Sheekh Saalim geeriyooday waxaa hoggaaankeeda qabtay Shariif Caydaruus oo aasaasay Jameecada Islaamka 1931[ki]. Waxuu geeriyooday sannadku goortuu ahaa 1958[ki], Muqdisho ayuuna ku aasan yahay.

Horumarinta dariiqooyinka qaaya wayn ayay u lahaayeen taariikhda Soomaalida, raad-reebyo badana waa lagala haray. Waxyaabo badan bay ka sameeyeen dhulka tacabkiisa waxayna dadka ku hanuuniyeen diinta, iyagoo tixgelinaya inay diimo kaloo badan la deris yahiin. Waxay ahaayeen kuwii ishortaagay gumeysigii dalka soo galay dagaal ba'anna ku qaadeen.

QAYBTA SADDEXAAD

GUMEYSIGA IYO AFRIKADA BARI

E - GUMAYSIGII BOORTAQIISKA IYO SALDANADA CUMAAN

Taniyo Qarnigii 9aad Miilaadiga iyo ka horba, Cumaan iyo Carabta kaleba xiriir ganacsi iyo mid diineed ayay la lahaayeen magaalooyinka xeebta Afrikada Bari muddo kadibna qaarkood weyba degeen. Carabtu waxay badweynta Hindiya ku doolaali jirtay goortay dhacaayaan dabaylaha loo yaqaan Mansuunka ee ka dhaca Waqooyi Bari iyo Koofur Galbeed, bilaha Nofeembar iyo Maarso oo ay badda furantahay. Dabaadigii Qarnigii 15aad, gumeysiga Boortaqiiska waxuu galay magaalooyinka xeebta Afrikada Bari itaalna ku yeeshay sayladahooda ganacsi. Isla waagaas waxaa taariikhda xeebta Afrikada Bari saameeyay loollan iyo dagaallo muddo dheer dhexmaraayay Boortaqiiska oo itaal ku lahaa Badweynta Hindiya iyo Saldanada Cumaan oo aqoon filweyn u lahayd baddaas kana ganacsan jirtay muddo aad u fog sayladaha magaalooyinka xeebteeda. Loollankaas iyo dagaalladaasoo ay ujeeddadoodu ahayd inay magaalooyinkaas xeebta awood ugu tartamaan dabadeedna midkoodii ku taagroonaado uu gumeysto magalooyinka iyo sayladahooda ganacsiba.

Horraantii 1499kii, waxaa magaalada Muqdisho yimid Pero Diaz waxuuna kula kulmay marsada laba xaryan oo ka yimid Hindiya oo ku rarnaa badeecooyin kala duwan. Goortuu marsada soo galay, sida dhaqanka ahayd, waxuu magaalada ku salaamay yeerta buunka xaryanka oo ay xaryannada kale iyo dadkuba si diirran u soo dhoweeyeen. Kolkii labadii xaryan ee marsada fadhiday badeecaday wadeen laga rogay, waxay maqaawiirtii magaalada dadkoodii fareen in Pero Diaz la soo qabto, goortuu biyo soo doonto, isagoo loo aanaynaayo godob uu Boortaqiisku horay magaalada uga galay. Pero Diaz waxuu soo diray ciidan yar oo biyo u soo dhaansho, haseyeeshee, si loo shirqoolo waxaa ciidankii lagu yiri: "[35]biyaha waxaa laga soo dhaamiyaa ceel meel fog ku yaal, sidaa awgeedna waxaa loo baahan yahay in ciidanka la soo kordhiyo". Arrintaas waxaa looga gol lahaa in ciidanka xaryanka saaran badidiisa xeebta lagu qabto dabadeedna Pero Diaz, si fudud loo soo qabto. Goortii ciidankii la soo kordhiyay uuna xeebta ka soo degay, ayaa isaga iyo doonyahiisaba, la qabtay waxaana durbadiiba la aaday xaryanka si Pero Diaz loo soo qabto. Pero Diaz, goortuu arkay in col ku soo socdo, isagoo og in xaryanka ay ku hareen toddoba badmaax kaliya, ayay talo ku wansiixday waxuuna dabadeed go'aansaday inaysan dhabbe kale u furnayn inuu dhoofo mooye. Durbadiiba xaryanka ayuu borroosinka u qaaday waxuuna u shiraacday jasiiradda "Capo Verde", isagoo aan wadan naaquude xaryanka u hoggaamiya.

[34] Cerruli Enrico " Somalia" (iscritti vari editi ed enediti) B 117.

[36]Sannadkii 1506dii Miilaadiga, Duarto Barbosa oo ahaa Sarkaal Boortaqiis ah ayaa ku yimid sahan magaalada Muqdisho waxuuna qoraalkiisa ku yiri: "Waa magaalo aad u weyn oo Carabta iyo iska dhalkuna ku magacaabaan "Mogodoxo", waxaana ka taliya Suldaan. Waa magaalo ganacsi oo ay xaryannada waaweyn keenaan badeeco fara badan sida dharka, bunka, shaaha, filfisha, kabsaraha, kaamuunta iyo badeeco kale. Magaaladu waxay dhoofisaa dahabka, faanta maroodiga, xabkaha iyo waxyaaabo kale waxayna magaalada ganacsiga ka heshaa abdo fara badan. Kolkaad magaalada dhexgasho waxaad ku arkeysaa sayladaheeda hilib, galley, qamadi, khudaar nooc kasta ah, fardo iyo waxyaabo kale oo dhammaan muujinaya in magaaladu hodan tahay. Dadka deggan waxay ku hadlaan afka Carabiga; midabka dadku badanaa waa maarriin iyo madow in yar ayaa cad. Hubka ma yaqaaniin, haseyeeshee, waxay isku daafacaan fallaarro mariideysan". Duarto Barbosa waxuu dalka Hindiya joogay taniyo Sannadkii 1516kii, arrimahii uu Soomaalida ka soo tabiyayna waxay lahaayeen xiiso sababtoo ah.

b - Waxuu ahaa ruuxa qur ah ee reer Yurub oo soo tabiyay inay magaalada Muqdisho uu suldaan xukumayay, taniyo Qarnigii 16aad, taasoo adkeynaysa una marag furaysa taariikhda oraahda ee reer muqdisho.

t - Waxuu kaloo caddeeyay inuu ganacsi ka dhexeeyay Saldanada Muqdisho iyo Hindiya sidoo kalena Cadan iyo Muqdisho. Badeecooyinka qaayaha leh ee laga soo dhoofin jiray dalka Hindiya waxay kala ahaayeen dharka cudbiga, xariirta iyo filfisha magaalada Muqdishona waxaa laga dhoofin jiray dahabka, faanta maroodiga, xabkaha iyo qamadiga. Waxaa la yaab leh, arrintu si kastaba ha ahaatee, warka la xiriira marsada Muqdisho in laga dhoofin jiray dahabka iyo inay jireen fardo badan.

Waxaa halkaa nooga muuqata inay jirtay Saldanada dhexdeeda saylad dahab oo asal ahaanna ka imaan jiray Afrikada Koofureed iyo guddaha dalka maanta loo yaqaano Ethiopia, iyadoo badda iyo dhulkaba lasoo marsiin jiray. Muqdisho waxay ahayd sayladda ganacsiga oo badeecooyinka Hindiya iyo Afikada Koofureed ka yimaado laysku dhaafsan jiray.

j - Waxaa kaloo Duarto Barbosa sheegay in Saldanada Muqdisho looga hadli jiray afka Carabiga, taasoo laga garan karo in afka ganacsigu ahaa Carabiga, haseyeeshee, magaalada looga hadli jiray afka Soomaalida oo dalmareenkii Ibna Batuuta waagaa 200 sano ka hor ku magcaabay "Mogadishiani", (Afkii Reer Muqdisho).

x - Duarto Barbosa waxuu kaloo ahaa qofkii ugu horreeyay ee dalalka Yurubta Galbeed u tabiyay inay Soomaalida fallaarrohooda mariideysato. Sida la ogyahay Soomaalidu waxay adeegsataa waabaayo xubnaha curyaamiso isla goortaana keenaysa geeri degdeg ah.

[35] Cerruli Enrico "Somali " (iscritti vari editi ed enediti) B. 118

[37]Sannadki 1505tii Miilaadiga, Dawladda Boortaqiisku waxay soo dirtay ciidan badeed uu hogaaminaayo Alfonso D'Albuquerque si uu u weerarro una qabsado marsooyinka Afrikada Bari iyo magaaloyinka xeebaha. Pedro De Anya waxuu 1506dii; qabsaday Sofala, Tristan Da Gunha waxuu isaguna 1507dii, qabsaday, Suqatara iyo Laamu; Duarto Del Mello oo isaguna qabsaday Musambik; Pero Diaz Isla sannadkaas waxuu sidoo kale qabsaday Kilwa iyo Maliindi.

[38]Sannadkii 1532kii, Stephano Da Gama ayaa soo gaaray Muqdisho waxuuna ahaa wiilkii labaad ee badmareenkii Vasco Da Gama kana mid ahaa saraakiishii xarunta Boqortooyada Boortaqiiska. Bishii Maarso isla sannadkaa waxuu ka soo ambabaxay magaalamadaxda Boortaqiiska Lisbon, isagoo la socday koox xaryan ah ee uu hoggaaminayay Admiral Pero Vas Amaral. Goortuu tagay xeebta Maliindi una sii socday Jasiiradda Suqatara, ayaa xaryankiisii oo la oran jiray "Esperito Santo" duufaan u rixeen xeebta Jasiiradda Carbeed. Stephano xaryankii ayuu ka degay si uu aqoonsado dhulka uu marayay, haseyeeshee, walaalkii Christopher oo ahaa sarkaalkii ku xigay, kadib goortay duufaantu sii xoogaysatay, ayuu xaryankii barroosinka u qaaday una shiraacday dhanka xeebta Afrika. Goortaa kadib, Stephano waxuu doon uga dhoofay Jasiirada Suqatara waxuuna ku hakaday Muqdisho, halkaasoo u ka iibsaday xaryan uu ku dhoofay si uu dalka Musambik ugu gaaro xaryankuu la socday.

[39]Sannadkii 1550kii Miilaadiga, Cumaan oo soo ceshatay awoodeedii hanatayna gobannimadeedii, iyadoo u hoggaaminayo Suldaan Seyf bin Suldaan Al Yaruubi, waxay magaalamadaxdeeda Masqad iyo marinnada Badda Carbeed ka kicisay Boortaqiiskii oo goortaa kadib u wareegay Afrikada Bari. Si uu uga hortago ku soo laabashada Boortaqiiska Bariga Dhexe, ayuu Suldaan Seyf darbiyay 28 xaryan oo ay ku rakiban yahiin 80 madfac, saddex sano kadibna, sida laga soo xigtay qoraallo laga helay magaalada Mombaasa iyo xusuusqorkii taariikhda Godonho, Suldaan Seyf xaryannadiisii waxuu u soo wareejiyay xeebta Afrikada Bari, iyagoo uu hoggaaminayo Shadaad ibna Shahdi Beluushi.

[40]Sannadkii 1556kii, waxaa isaguna Boortaqiiska ku baxay ciidan badeed Turki ah uu hoggaaminayo nin la oran jiray Cali Bey oo ku dirqiyay magaalooyinka Muqdisho, Baraawe, Laamu, Kilwa iyo Mombaasa inay gun u noqdaan Saldanada Istanbul, haseyeeshee, saddex sano kadib waxuu Boortaqiisku ku qabtay magaalada Mombasa waxuuna u qaaday Lisbon.

Sannadkii 1622kii, Shaahii Iiraan oo ay taageerayaan ciidamada badda ee Ingiriiska, ayaa ka boobay Boortaqiiska marinka Hormus oo xuduntooda ciidamada Boortaqiisku ahayd.

[41]Sannadkii 1665kii, waxaa qabsaday magaalooyinka Banadir oo ay Muqdisho ugu weyneyd, ciidan Cumaan ah oo uu hoggaaminayay Amiir Saalim Al Shariimi oo muddo gaaban kadibna Suldaankiisu faray inuu ciidankiisa dib ugu laabto Cumaan. Isla waagaa, gumeysigii Boortaqiiska waxaa ka saaray xeebta Afrikada Bari iyo Jasiiradaheedaba Cumaan oo ku soo

---

[36] Cerulli Enrico= "Somalia" (Scritti vari Editi ed Enediti) B.120

[37] Sidoo kale B.171

[38] Coupland R. East Africa And Its Invaders B. 315

[39] Corrado Soli Oltre Giuba = A cura del Ministero delle Colonie B.152

[40] Cerulli Enrico Somalia (Scritti vari Editi ed Enediti) B.98

qaaday weerarro isdabajoog ah oo aan naxariis lahayn waxuuna Boortaqiisku u gurtay dhanka xeebta Afrikada Koofureed. Sidaa awgeed waxaan oran karnaa, sannadkii 1689kii, Saldanada Cumaan waxay ku fidsanayd dhammaan xeebta Afrikada Bari taniyo Musaambiik oo laga reebo Mombaasa ee ku harsanayd gacanta Boortaqiiska taniyo 1729kii. Saldanada Cumaan waxay qabsatay sayladaha ganacsiga waxuuna Boortaqisku arrintaas rasmi ahaan ku caddeeyay [42]xeer sharci, 19kii Abriil 1752kii, dalalkuu xukunkiisa gumeysi ka taliyo inay yahiin Musaambiik, Sofala, Rio De Sena, (webiga Sambesi) iyo dalka u dhaxeeya "Raas Delgado iyo xeebta Lorenso Markos".

[43]Sannadkii 1799kii, Ingiriiska waxuu magaalada Bombay ka soo diray ciidan badeed uu hoggaaminaayay Admiral Pohern, iyadoo ujeeddadiisu ahayd inuu ilaaliyo marinnada Badda Cas waxuuna saldhig ciidameed ka sameeystay Jasiiradda Peril oo ka kooban shan Mayl oo afar geesood ah oo muddo bil ah kadibna u wareejiyay ciidamadiisa magaalada Cadan, iyadoo ugu wacnayd cimilada Jasiiradda oo xumayd una wanaagsanayn fayoobida ciidamada.- Ingiriisku waxuu Suldaankii Cadan la galay heshiis isbahaysi ah, iyadoo sabab looga dhigay heshiiskaas, inuu ka difaacayo weerar uu Faransiisku ku soo qaado oo ay waagaa Ingiriisku ku loollamaayeen Badda Cas. Waxaa ka dambeeyay, Sannadkii 1802dii, in Ingiriiku iyo suldaankii Cadan ay wada galeen heshiis wadeynimo iyo mid ganacsi oo Ingiriisku goor dambe ku qabsaday Cadan, isagoo kolkii hore ku soo galay wadeytinimo dabadeedna u rogtay gumeysi.

Sannadkii 1806dii, Sayid Saciid bin Suldaan Axmed oo labaatan jir ah, ayaa dilay ina adeerkiis Suldaan Beder awooddii Saldanadana la wareegay. Labaatankii sanoo xukunkiisa ugu horreeyay waxuu ku hawlanaa siyaasadda Cumaan iyo dalalkay deriska yahiin waxuuna, 1811kii, Sanjibaar usoo magacaabay Imaam uga wakiil noqdo dalalkuu Afrikada ka gumeysto.

Sannadkii 1823kii, Sayid Saciid waxuu booqasho ku tegay Sanjibaar waxuuna durbadiiba go'aan ku gaaray inuu Sanjibaar ka dhigto xaruntuu saldanadiisa ka maamulo waxuuna Cumaan ku laabtay, Abriile isla sannadkaas. Waxuu Sanjibaar ku soo laabtay, dhammaadkii 1831kii, waagaa kadibna taniyo geeridiisii, inta badan, waxuu ku noola Sanjibaar. Inkastoo Sayid Saciid ku dadaalay inuu hubaal ka dhigo awooddii magac-uyaal ahayd oo ay Cumaan ku gumaysanaysay Afrikada Bari, kolkuu xaruntiisa ka dhigtay Sanjibaar maamulkiisana hoos keenay Mumbaasa, Pemba, Banaadir, Sanjibaar iyo magaalooyinka xeebta taniyo Raas Dalgaado, haddana uma ay suuragelin inuu si buuxda u hanto.

Jennaayo 1828kii, Imaamka Sanjibaar waxuu isku deyay inuu xukunkiisa dul dhigo magaalooyinka Banaadir ee Muqdisho, Marka iyo Baraawe, taasoo uu dadkii degganaa magaalooyinkaas ka soo horjeestay. Isla sannadkaa koox xaryan dagaal oo uu soo diray Imaamkii Sanjibaar, ayaa yimid marsada Muqdisho waxuuna hoggaamiyahii xaryannadaas maqaawiirta magaalada ku martiqaaday xaryanka dushiisa waxayna u geeyeen deeq aan sidaa u muuno badnayn. Wax yar kadib, goortay maqaawiirtii xaryanka dushiisa fuuleen, ayuu badmaaxyadiisa faray in xaryannada loo shiraaco Sanjibaar, halkaasoo kolkay tageen lagu xiray taniyo laga baxsho lacag madaxfurasho oo dhan labo kun Doolar. Arrintaas tagrifalka ahayd

---

[41] Corrado Zoli Oltre Giuba (A cura del Ministero delle Colonie) B.152

[42] Coupland R. = East Africa And It's Invaders. B.464

kadib, Muqdisho waxay heshiis isbahaysi oo lid ku ah gumeysiga saldanada Sanjibaar la gashay magaalooyinka xeebta. Saddex sano heshiiskaas kadib, ciidankii badda ee Imaamka Sanjibaar, ayaa duqeeyay magaalada Muqdisho.

Sannakii 1843kii, Imaamka Sanjibaar, isagoo ka abdaysanayay dagaal ka dhex aloosmay labada xaafadood ee Muqdisho, Shangaani iyo Xamar Weyne, ayuu magaalooyinka Banadir u soo diray ciidan canshuur ka uruuriyo, haseyeeshee, saldanada Sanjibaar awoodday ku lahayd Banaadir waxay ahayd mid magac-uyaal ah oo aan dhab ahayn, sidaas awgeedna ma fulin ujeeddadaas. Xaryannada Sanjibaar waxay marsooyinka Banaadir u imaan jireen, ganacsi iyo canshuur qaad kaliya goortay badda furan tahay.

"Sayid Saciid waxuu geeriyooday 1856kii, waxuuna ka tegay dardaaran uu ku dhaxal siinaayay saldanada labadiisa wiil Majiid iyo Tawayni: Majiid waxuu dhaxal u helay Sanjibaar iyo xeebta Afrikada Bari, Tawaynina Cumaan. Labadii wiil kuma ay kalsoonaan dardaarankii aabbahood waxayna u geysteen doodooda kuxigeenkii Boqorka Ingiriiska ee Hindiya, "Lord Canning" oo wax ka ogaa dardaarankii aabbahood, kaasoo ansixiyay qaybtii aabbahood, haseyeeshee, caddeeyay in Sanjibaar ka madaxbannaan tahay Cumaan sidaaseyna ku dhalatay Saldanada Sanjibaar, sannadkii 1860kii. Sannadkii xigay Faransiiska iyo Ingiriiska ayaa rasmi ahaan u aqoonsaday labada saldanadood ee Sanjibaar iyo Masqad waxayna ku heshiiyeen inay dhawraan gobannimadooda iyo madaxbannanidooda, haseyeeshee, Sannadkii 1886kii, ayaa si caalami ah loo aqoonsaday. Sannadkii 1871kii, Suldaanka Sanjibaar, si uu u salayo hubaalna uga dhigo awooddiisa gumeysi oo magac-uyaalka ahayd, ayuu magaalooyinka Banaadir (Muqdisho, Marka, Baraawe) iyo magaalada Kismaayo u soo magacaabay waaliyaal maamulo. Si waaliyaasha Sanjibaar awooddooda u oggolaysiiyaan magaalooyinkaas ma ay ahayn mid fudud mana ay noqon mid hirgasho.

[43] Corrado Zoli - Oltre Giuba - (A Cura del Ministero delle Colonie) B.152

F - AFRIKA IYO GUMEYSIGA YURUBTA GALBEED

1 SAHANNADII GUMEYSIGA YURUBTA GALBEED

"Sannadkii 1789kii, guuto ciidanka badda Ingiriiska ee ka koobnayd saddex xaryan dagaal lana oran jiray Leopard, Deadulus iyo Orasta uu hoggaaminayay Taliye la oran jiray Blanket, ayaa Dawladda Ingiriisku u soo dirtay Badda Cas iyo xeebta Afrikada Bari inay sahmiso. Guutadaas xaryannada goortay dhaaftay Johanna, ayay duufaan ku kacday una riixday dhanka Waqooyi taniyo xeebta Soomaliyeed. Inkastoo ay si xoog leh isugu deyday inay duufaantaas ka gudubto haddana waxay dhaafi kari waayday inay barroosinka dhigato, 15kii Disembar, iskudarka webiga Ganaane iyo Badweynta Hindiya, halkaasoo ay ku hakatay dhawr toddobaad. Intay halkaa joogtay, ayuu taliyaha guutada sahan ugu diray xeebta koox badmaax ah oo wata afar doonyo inay biyana u soo dhaamiso. Kooxdaasi goortay xeebta caga dhigatay waxaa durbadiiba soo weerarray dadkii aaggaa degganaa oo dilay dhamme kooxda u madax ahaa iyo lix badmaax qabsadeenna labo ka mid ah oo goor dambe lagu siidaayay lacag badan oo madaxfurasho ah intii kaloo baxsatayna dirqi ayay ku gaareen xaryannada. Guutadaas goortay ku soo laabatay Jasiirada Sanjibaar, ayay dabadeed dib ugu soo ambabaxday Makha, iyadoo soo martay badda Banaadir iyo Waqooyi Bari ee Soomaaliya ugana muuqdeen, xaryannada dushooda, magaalooyinka Banaadir iyo Waqooyi Bari iskumana ay dhiirrin kolkale inay soo gasho marsooyinka Soomaaliyeed, taasoo ugu wacnayd cabsi ay ka qabeen Soomaalida awgeed, hasayeeshee, taasi ma hakin gumeysteyaasha sahannaday ka wadeen Soomaaliya.

Sannaddadii 1826 iyo 1842kii, waxaa magaalooyinka Muqdisho iyo Baraawe sahan ku tegay Dhamme W.F. Awen oo dhalashadiisu ahayd Ingiriis oo watay markab yar waxuuna isku deyay inuu halkaa ka sameeyo maxmiyad Ingiriis ah, haseyeeshee, way u suuragali waayday, sababtoo ah diidmo xoog leh oo Soomaalida kala hortimid, iyadoo dhaqan ahaan aan u oggolayn in dhulkeeda hooyo talis shisheeye oo gumeysi ah soo galo. Sarkaalkii Ingiriiska ahaa waxuu xusay inay Soomaalidu dareen ka qabtay shisheeyaha aadna isaga ilaalin jirtay waxuuna yiri: "Saraakiishayada, goortay dhulka caga dhigeen, meel ayaa lagu xiray, haseyeeshee, siday doonaan ayay ugu dhaqdhaqaaqayeen goobtay ku xirnaayeen. Aragtida iyo Muqaalka kaliya oo ay magaaladu ka arkaayeen waxay ahaad meeshay ku xirnaayeen oo dhulka ka sarreeysay dushana ka feydneed. Xabsigu waxuu ahaa mid adag, haseyeeshee, waxay Soomaalidu nagula dhaqantay asluub wanaagsan, si ay dhaqankooda wanaagsan noogu muujiyaanna goortaannu soo ambabaxaynay waxay, qaar ka mid ah, xeebta nagu soo sagootiyeen deeq ay noogu keeneen xoolahay dhaqdaan". Waxaa kaloo magaalada Baraawe sahan ku yimid sarkaal Ingiriis ah ee la oran jiray William Christopher madaxna ka ahaa shirkad saldhigeedu ahaa Hindiya xafiisna ku lahayd Sanjibaar, isagoo la socday koox sahmiyeyaal ah oo watay markab la oran jiray Tigris. Waxuu dhawr jeer sahmiyay, bilihii Abriil iyo Maajo 1843kii, hareeraha webiga Shabeelle. Wararkuu Christopher ka uruuriyay dalka Soomaaliyeed waxaa goor dambe lagu qoray, sannadkii 1884kii, wargeyska "Royal Geographical Society of London", warbixintaasi waxayna soo koobaysay xogogaalkii ugu horreeyay ee dalka Soomaaliyeed laga uruuriyay ee ujeedooyinka

[44] Coupland R. East Africa And Its Invaders B. 337

gumeysi lahaa. Waxaa xigay sahan kaloo uu hoggaaminaayay dhamme C.I. Gruttenden, sannadkii 1846kii oo labo jeer si qarsoodi ah u sahmiyay xeebta Soomaliyeed kadibna dowladdiisa u gudbiyay warbixin gumeysiga qaayo u lahayd. Sannaddadii 1845-1848kii, sahmiye Faransiis ah ee la oran jiray Charled Guilian oo ahaa dhamme ka tirsan guutada Duccouedie, ayaa sahmiyay meelo badan ee Koofurta Soomaaliya iyo Saldanada Geledi kadibna soo saaray warbixintii gumeysiga ugu qaayaha badnayd oo ka koobnayd saddex buug iyo lifaaqyo tilmaamayeen dhaqanka, taariikhda iyo astaamaha dhulka Soomaaliyeed.

Sannadkii 1854kii, sahmiye Irish ah R.F. Burton oo isku maldahay ganacsade Carbeed oo Muslim ah, ayaa isku deyay inuu sahmiyo Waqooyiga Somaaliya. Bishii Oktoobar, ayuu Seylac yimid kadibna u gudbay magaalada Harar oo uu kula kulmay Amiir Axmed Abuubakar oo ku hawaaniyay inuu Berbera dib ugu laabto. Burton socdaalkiisii Soomaaliya waxuu ka dambeeyay booqasho uu ku tegay, 1853kii, Maka iyo Madiina dabadeedna la baxay Xaaji Cabdalla oo Yurub uga caanbaxday. Waxuu kol labaad dib Soomaaliya ugu soo laabtay, isagoo iska dhigay nin Muslim ah, waxuuna u gudbay Harar oo intuusan gelin ka baqay in la aqoonsado dabadeedna kolkuu dareemay inuu halis galo cabsi daradeed isku sheegay inuu Ingiriis yahay. Sannadkii xigay, Burton waxuu soo maray Soomaaliya, isagoo sahan ugu socda Sanjibaar waxaana wehliyay saddex nin oo kala ahaa: Herue, Speke iyo Striyen oo ka tirsanaa Ciidamada Badda Ingiriiska. Marsada Berbera goortay ka soo degeen, ayaa Soomaalidu weerartay waxayna ka dileen Striyen dhaawaceena Burton dabadeedna dirqi ayay kaga baxsadeen uguna laabteen Cadan. Sannadkii 1857dii, Qunsulkii Austeria u fadhiyay magaalada Khartuum iyo Henru Lambert oo ahaa qunsulkii Faransiiska u fadhiyay magaalada Cadan, ayaa isku waa soo sahmiyay dhul kooban ee xeebta Soomaaliya. Waxaa kaloo jiray nin ka mid ah fidiyeyaasha caqiidada Masiixiga P. Leon Des Avouches ayaa, gaaray goortii ugu horreesay, meesha uu ka soo billawdo Webiga Ganaane. Sannadkii 1865kii, Baron C. Clausen Von Der Deken oo Jarmal ah kadib goortuu sahmiyay dhulka xeebta u dhaxeeya webiyada Tana Iyo Ganaane ayuu abaabulay sahan rasmi ah oo ay ujeedadiisu ahayd inuu markab ku sahmiyo marinbiyoodka webiga Ganaane. Sahanku waxuu gaaray Baardheere, 14kii Seteembar 1865kii, halkaasoo maalmo kadib Soomaalidu ku weerartay laguna laayay, isaga iyo badmaaxyadiisii oo ruuxa kaliya ee ka baxsaday ahaa macalin looxqore ah "Brumer" oo waayo dambe, codsi uga yimid qoyskii Von Der Deken awgii, dib ugu soo laabtay inuu sahanka la siiwado Cottlieb Kinzelboch. Waxuu sahanno kale ku soo maray gobollada Ganaane iyo Tana waxaana waa dambe lagu dilay Geledi.

Xogwarrannadii badnaa oo ay ka soo uruuriyeen Soomaaliya sahmiyeyaashii Von Der Deken, Guilian iyo Christopher ayaa sawir cad ka siiyay himiladii gumeysi ee Yurubta Galbeed, iyagoo daboolka ka qaaday aqoontii ka diimmooneed iyo waxyaabihii ka daahsoonaa una soo bandhigay tabahii lagu gumeysan lahaa Soomaaliya. Siday arrintu waagaa ahayd, soo gelida gumeysiga Soomaaliya waxaa ciidamada iyo dibloomasiyiinta ku weheliyay dad ganacsato ah iyo sahmiyeyaal oo xilkeedu ku maldahnaa cilmi baaris, haseyeeshee, u weheliyay tabo siyaasadeed iyo ciidameed. Dawladda Talyaanigu, iyadoon ku qanacsanayn siyaasaddeeda u janjeerta gumeysidoonka, waxay goorwalba raadinaysay inay danteeda ku fuliso marmarsiinyada sahminta Soomaaliya, hawshaasoo ay u fulin jirtay shirkad la oran jiray "Societa Geografica Italiana" (SGI). Aqoonta Webi Shabeelle goortii hore iyo Jubba goor dambe waxaa si cilmiyaysan gumeysiga Talyaanigu ugu soo bandhigay sahanno oo ay shirkaddaasi abaabushay ayna maal gelisay Dawladda Talyaanigu. Talyaanigu waxay la ahayd caadi in shirkaddu hawshaas u fidiso Dawladda ayna horseed u noqoto siyaasaddii gumeysiga ee ku dhisnayd dhaca iyo hooshka.

Shirkaddu, iyadoo meel kaga dhacday hawshii loo dhisay, ayay ka qayb qaadatay baahinta kasmadaas gumeysi, ee ku salaysnayd aragtida beenta oo ahayd inuu Afrikaanku dadka ka maangaaban yahay iyo weliba in siyaasad ahaan loo qabsado dalka Xabashida iyo Soomaalida. Intaas waxaa sii dheeraa inay shirkaddu waxba ka qaban waayday arrinta Joqraafiga ee dalka Talyaaniga oo aan waagaa la ogeyn intay baaxadiisu la'eg tahay oo ka mid ahayd sababtii loo aasaasay. Sahmiyeyaashii waagaas waxay ahaayeen caan siday maanta cirbixiyeenada yahiin waxaana Afrika laga sameeyay sheekooyin iyo waayowaayo laga been abuuray dhaqanka iyo abuurista dadka, kolkolna si kale u muujiyay ujeeddada laga lahaa sahannadooda. Siday u dhammaayeenba waxaa taarikhda loogu qoray inay ahaayeen dad naftood hureyaal aan dan gaar ah laheyn ee nabadda jeclaa, haseyeeshee, howshoodu taariikhdu dib uma ay turxaan-bixin. Sahmiyaha Talyaaniga Pietro Sacconi oo bishii Agoosto 1883kii, Soomaaliya ka soo galay dhanka Harar, ma ayan wadin dan cilmi baaris ah ee waxaa waday mid ganacsi. Ka hor intaan lagu dilin Galbeed, meelo badan ayuu naftiisu ku biimeeyay, kolay ku tahay Japan uu u tagay inuu ka ganacsado. Qoraalladii uu ka tegay ee ku saabsanaa socdaalkiisii Afrika qaayahoodu way yaraayeen. Waxuu yimid Harar 1888kii waxuuna ka soo laabtay, isagoo rumeysan, goortuu tixgeliyay sahmiyeyaashii ku dhintay iyo howshay qabteen, inuu Talyaanigu daw u leeyahay qabsashada dalkaas, haseyeeshee, waxuu la kulmay dalkiisa oo aan arrintaas dan ka lahayn. Shir uu qabtay waxuu ku yiri: "Waxaa jira dadka qaarkood oo ku eedaynaya sahmiyeyaasha inay dadka ku abuurayaan hanweyni iyo himilo aan jirin, iyagoo illoobayo danaha guud oo ay horseedka u ahaayeen, mase ogtihiin in ay bulshada Ingiriiska adduunka ku qabsatay raadka sahmiyeyaasha.

Bishii Maajo 1890kii, sahmiye Robecchi Bricchetti goortay ku adkaatay gelida waddada Harar, iyadoo sahmiyeyaal badan lagu dilay awgeed, ayuu ka soo degay dekedda Hobyo waxuuna sahan ku maray xeebta taniyo Caluula sahmiyeyna togga Nugaal iyo gobolka Waqooyi Bari. Bilo yar kadib, waxuu billaabay sahan adag ee uu isaga gudbay Koofurta Soomaaliya iyo Waqooyi, waxuuna maray waddo dhererkeedu yahay laba kun oo km. Waxuu sameeyay qoraallo faro badan ee ku saabsan khariidadda, taariikhda, astaamaha dhulka, isirka dadka, dhaqanka, afka, dhirta, xoolaha, cimiladda iyo diinta waxuuna ka qoray buug la yiraahdo "Soomaaliya iyo Banaadir" oo ah 726 bog. Haseyeeshee qoraalladiisu waxay jaha wareeriyeen aragtida caalamkii gumeysiga halkuu wax u iftiimin lahaa, iyagoo aan aragti ka qabin halkay khariidadda Adduunka Soomaaliya kaga taal. Waaguu Robecchi Bricchetii ku hawlanaa sahankiisa xeebta Hobyo iyo Caluula, Enrico Baudi di Vesme waxuu soo gaaray Berbera, Burco taniyo Buur Dhaab ee ku yaal dhanka Koofureed ee Soomaaliya. Sannad kadib, 1891kii, isagoo uu la socdo Inj. Giuseppe Candeo, waxuu soo dhexgalay Galbeed waxuuna ku sifeeyay jannadii Soomaaliya waxuuna sahankiisa soo gaaray Iimey, dhank sare ee Wabiga Shabeelle. Inkastoo uu huwanaa magaca Shirkadda Joqraafiga haddana, danta Baudi di Vesme, waxay ahayd mid siyaasi keli ah. Waxuu ahaa sarkaal ciidamada ka tirsan waxaana la socday Injineer khariidadaha sameeya iyo 30 ilaaloo Soomaali hubaysan ah. Waxuu xilkiisu ahaa inuu sahmiyo waddooyinka isku xira dalka Xabashidu gumeysato iyo Soomaaliya ee Filonardi oggoleysiiyay inay hoos yimaadaan gumeysiga Boqortooyada Talyaaniga. Baudi di Vesme waxuu Soomaalida Galbeed u ballan qaaday in Talyaanigu ka difaaci doono weerarka kaga yimaada dhanka reer Shawa, waxaana u suurogashay inuu oggoleysiiyo odoyaashii Soomaaliyeed ee aaggaa degganaa inay magangelyo Talyaaniga weydiistaan.

2 QARAN GUMEYSI KALA QAYBSADAY

Qarnigii 19aad, waxuu ahaa waayahii gumeysigii hantigoosadka Yurubta Galbeed barroosinka u dhigtay kala qaybsashadii Qaaradda Afrika waxaana waagaa Qaaradda Yurubta Galbeed ka hanaqaaday dhaqdhaqaaqyo doonaayay inay horumarinta warshadahooda uga abdaystaan hodannimada alaabta ceeriin iyo cududda dadka Qaaradda Afrika. Sida la ogyahay qarniyadii hore, intaan Yurubta hantigoosadka warshadaha ka dhalan, dhaqaalaheeda waxuu ku salaysnaa beeraha waxaana Qaaradda Afrika looga abdaysan jiray cududda addoomada oo waagaa ahaa muruqa tacabsoosaarka, gaar ahaan, beeraha oo ilaha dhaqaalaha Yurubta Galbeed iyo Ameerika ku salaysnaa. Goortii la reebay ganacsigii addoomada waxaa durbadiiba soo ifbaxay inuu dhaqaalahii dalalkii hantigoosadka hoos u dhacay dabadeedna awooddoodii ay u duween warshadaha oo u baahday alaabta ceeriin. Waxaa u muuqatay inay baahidaas alaabta ceeriin iyo ganacsiga tacabkay warshadahooda soo saaraan ku dabooli karaan Qaaradda Afrika oo la gumeysto. Si qorshahaas loo fuliyo waxaa la abaabulay sahanno Afrika ka soo tebiyo xogwarranno ku saabsan tabta ugu habboon ee qorshahaas gumeysiga loo fulin lahaa. Goortii sahannadii laga helay xogwarrannadii loo baahnaa ayaa la abaabulay shirkado ganacsi oo lagu maldahaayay gumeysi dadban oo dabadeed u horseed noqday gumeysiga runta ah. Waxaa dhabbahaas sii wanqaray oo misana fududeeyay 1869kii furitaankii marinka Suweys, oo isku soo dhoweeyay masaafadii u dhexeeysay labada qaaradood, gaar ahaan, Afrikada Bari iyo Yurubta Galbeed.

[46]Sannadkii 1859kii, Qunsulkii Faransiiska u fadhiyay Cadan ayaa jammaamuurtii cafarta la galay heshiis uu Faransiisku uga kireysanaayay marsada Obokh, haseyeeshe, rasmi ahaan, uma uu soo degin taniyo 1881kii. Waxaa xigay inuu Faransiisku, 1884kii iyo 1885kii uu la galay heshiisyo kale salaadiintii Soomaalida iyo Cafarta ee Tajura iyo Goobad. Heshiisyadaas waxay dulucdoodu ahaayeen inuu Faransiisku dalkooda difaaco ayna yeeshaan iskaashi dhaqaale iyo bulsho, haseyeeshee, Faransiisku waxaa u qarsanayd inuu xeebta Badda Cas uga helo marso oo ay maraakiibtiisa dagaalka uga gurmakaraan dalalkuu Afrika ka gumeysto iyo saldhig isgaarsiineed, waxuu kaloo danaynaayay dalka Xabashida ee badxiranka ah inuu ku fidiyo ganacsigiisa. [47]Sidoo kale, 15kii Nofeembar 1869kii, shirkad Talyaani ah ee la oran jiray Rubattino, ayaa ka iibsatay marsada Casab, Suldaan Ibraahim Axmed iyo walaalkiisa Xasan Axmed oo ahaayeen madaxda Cafarta aaggaa degganayd.

Isla waagaa Dawladda Masar uu madax ka ahaa [48]Kadawi Cismaaciil Baasha, ayaa ku dooday inay 1866kii, Turkiga kala wareegtay, marsooyinka Sawaakin iyo magaalooyinka xeebta Soomaaliyeed, laga billaabo Tajura taniyo Raas Casayr, muddo gaaban kadibna waxaa dhoollatus marsada Berbera ku yimid markab la oran jiray Khartuum, sannadkii xigayna waxaa yimid Muxammed Jamaal Bey oo saaray calankii Masaarida magaalooyinka Tajura, Bulloxaar iyo Berbera, sheegayna inay Dawladda Masar leedahay dalka Soomaalida taniyo Xaafuun. Sannadkii

---

[45] Somali Government = Somali peninsular 196 B.19

[46] Sidoo kale B.20

[47] G. Bouin = Histare Regen Du Kedive Ismail, Cairo 1941, vol III.

1866kii, goortuu geeriyooday Ammiirkii Harar Axmed Abuubakar, waxaa saldanada magaalada boobay Muxamed Cali oo taageersaday Oromada. Muxamed Cali waxuu cadaadiyay dadkii reer Harar, isagoo u eexanaayay taageereyaashiisa Oromada, taasoo keentay inay Maqaawiirtii Hararayiinta dhambaal codsi taageero u qortaan Kadawi Cismaaciil Baasha ee Masar. Sannadkii 1874kii, ciidamadii Masaarida ee gumeysiga maldahan ku haysatay magaalooyinka Soomaalida Waqooyi, ayaa ku soo duulay qabsadayna magaalada Harar.

Bishii Febraayo 1884kii, xoogaggii gumeysidoonka Yurubta Galbeed, si ay u maleegaan mardabadii lagu kala qaybsan lahaa Qaaradda Afrika, waxay shir ku qabteen, magaalada Baarliin. Shirkaas ujeeddadiisu waxay ahayd in go'aan laga gaaro habkay Qaaradda Afrika, qolo kasta sedkeeda oo ay gumeeysato uga heli lahayd. Dood dheer kadib, bishii Nofeembar 1885kii, ayaa la go'aamiyay in qolo kastaa dalkay ku hormarto ay gumeysan karto dhab ahaanna loo aqoonsanaayo, hasayeeshee, waxaa ayaandarro ahayd in Xabashida oo waagaa ahayd Dawladda qur ah ee Afrika gobannimadeedu u madaxbannaanayd ay ka qaybgashay shirqoolkaas Qaaradda lagu qaybsanaayay sedkeedana ka qaadatay.

Sannadkii 1884kii, shirkii Baarliin kadib, Talyaaniga siyaasadiisa gumeysi doonka ahayd waxaa ku soo korortay aragti cusub oo ah rabitaan uu ku doonaayay inuu isku ballaariyo marsooyinka Badda Cas iyo Badweynta Hindiya, halkaasoo uu waayihii hore u galay sababo ganacsi awgood dabadeedna isu rogay gumeysi dhab ah. Baarlamaanka Talyaaniga, isagoo ka ambaqaadayo rabitaanka gumeysi doonka ee ku baahay dadweynaha, ayuu go'aamiyay in xukuumadda lagu cadaadiyo siyaasadeeda inay ka dhigto mid firfircoon si wacanna uga qaybqaadato dardar cusubna la geliyo tartanka gumeysi doonka ee dawladaha Yurubta Galbeed ku qaybsanaayaan Qaaradda Afrika. Jarmalku waxuu isaguna si buuxda oo la yaab leh faraha ula galay Afrika, gaar ahaan, Togo, Namiibiya iyo Tanganyika. Faransiiska oo ka haystay Badda Cas marsada Obokh, taniyo Sannadkii 1867kii, waxuu isaguna billaabay inuu dedejiyo hawlihii isballaarinta uu ka waday Afrika, taasoo ku abuurtay Talyaaniga baqdin in looga taagroonaado danihii dhaqaale oo ay shirkadiisa Casab aagga Badda Cas uga fulineysay. Waxaa kaloo jirtay, kacaankii Daraawiishta Suudaan ka dhashay awgii, inay Masaaridu ka kacday Gobollada Soomaalida Waqooyi iyo Masawac ciidamadeeduna ka guratay. Talyaaniga oo doonayay inuu garabsado Ingiriiska lana sameeysto xiriir wanaagsan, ayaa la kulmay Ingiriiskoo ku howlanaa dhexdhexaadin muran ka dhexdhashay Faransiiska iyo Jarmalka arrimahooda gumeysi doonka. Sidoo kale gumeysigii daahsonaa ee saldanada Sanjibaar ku haysatay Afrikada Bari waxaa iyaduna soo foodsaartay halis uga timid gumeysi doonkii Yurubta Galbeed. [49]Bishii Agoosto 1885kii, shan markab dagaal ee Jarmalku leeyahay, ayaa ku gooddiyay inay Sanjibaar duqeynayaan, haddii uu Suldaanka Sanjibaar durbadiiba u aqoonsan maxmiyad Jarmal shan magaalo oo dalka uu gumeysto ka tirsan. Sayid Barqash, goortuu taageero ka waayay Ingiriiska, waxuu oggolaaday siduu Jarmalku rabay, muddo gaaban kadibna waxay Ingiriisku, Faransiisku iyo Jarmalku abaabuleen guddi soo hubiyo intay masaafadiisu dhan tahay dhulka gudaha uu Suldaanka Sanjibaar sheeganayay. Guddigaas saddexda Dawladood ee Yurubta waxuu gaaray go'aan runta ka fog, isagoo ka weecday inuu caddeeyo masaafada dalkay saldanada Sanjibaar sheeganayso. Bishii Oktoobar, Ingiriisku iyo Jarmalku waxay ku heshiiyeen inay Suldaanka

---

[48] Coupland R. East Africa And Its Invaders B. 342.

Sanjibaar Saldanadiisa u aqoonsadaan Pemba, Ufia iyo Laamu kali ah dhanka xeebtana laga billaabo webiga Munjini taniyo Kipini iyo masaafo dhan 10 Mayl gudaha. Waxaa kaloo loo aqoonsaday xeebta Soomaaliyeed magaalooyinka Banaadir 10 Mayl gudaha ah (Muqdisho, Marka, Baraawe iyo magaalada Warsheekh oo masaafo 5 Mayl gudaha ah) iyo Kismaayo oo masaafo 10 Mayl gudaha ah. Dhulka kale ee Suldaanku sheegan jiray waxaa qaybsaday Jarmalka iyo Ingiriiska taniyo webiga Umba soohdintaasoo, 4tii Diseemabar 1886dii, Suldaanku oggolaaday.

[50]Si loo adkeeyo heshiiskaas, waxuu Ingiriisku ballanqaaday inuu dhexdhexaadiyo Suldaanka iyo Jarmalka habkii loogu wareejin lahaa marsooyinka Darasalaam iyo Pangani shirkad la oran jiray Shirkadda Jarmalka ee Bariga Afrika. Arrintaas kadib, labada awoodood ee gumeysiga Yurub waxay ku heshiiyeen inay kala seereestaan dalalkay ka qabsadeen Bariga Afrika waxayna qaybsadeen dhulka gudaha, laga billaabo afka webiga Wanga taniyo dhanka Bari ee Harada Nyansa. Ingriisku waxuu qaatay dhanka Waqooyi ee haradaas Jarmalkuna dhanka Koofureed taniyo laga gaaro dalka uu gumeysto Boortaqiiska ee Musaanbiik. Dhanka Galbeedna soohdinta Ingiriiska waxay gaartay Waqooyiga dalka Witu oo Suldaanka Sanjibaar horay u siiyay, 1885kii, walaalo Jarmal ah ee la oran jiray Deubarts dabadeedna loo wareejiyay shirkadda Deusche Colonial Verain oo kadibna maxmiyad ahaan la hoos geeyay, Abriil isla sannadkaas, Dawladda Jarmalka. Qaybta gumeysiga Ingiriiska waxaa dabadeed sii ballaarisay siina adkeeysay shirkaddii Afrikada Bari ee [51]Boqortooyada Biritaaniya (Imperial British East African Company) oo si dadban u maamuleysay dalalkaas uu Ingiriisku qaybta u helay.

Qarnigii 19aad, taariikhda Qaranka Soomaaliyeed waxaa dhalinrogay gumeysteyaashii Xabashida, Faransiiska, Ingeriiska iyo Talyaaniga waagaasna Soomaalidu ma ahayn Qaran isku duuban oo leh maamul ku saleysan qaanuun iyo siyaasad la aqoonsan yahay. Waxuu ahaa Qaran ku dhisan hab jilibeed guurto xoolo raacato ah oo ay maamulaan maqaawiirtiisa waxuuna lahaa xeerar, hiddo iyo dhaqan fil weyn uu isku maamuli jiray. Kadib shirkii Baarliin gumeysteyaashii Yurubta Galbeed iyo Xabashida, iyagoo ka abdaysanaayo awooddarrida, firirsanaanta iyo tala xumida Soomaalida, ayay kala qaybsadeen. Qaybsanaanta waxay dabadeed dhaxalsiisay in lagu dhaqanguuriyo laguna maamulo shuruuc iyo xeerar shisheeye ee ka duwan kana fog kiisii dhaqandhaqaale waxaana loo kala sameeyay soohdimo dhalanteed ah oo ay isaga gudbi karin.

[49] Moye Bartleit the History of The Kings African Rifles 1956 B.10.

[50] Somali Government = Somali Peninsular (A New Light On Imperial Motives) B.1.

2.1. ISBALLAARINTII GUMESYIGA XABASHIDA

Qarnigii 19aad, taariikhda Xabashida waxaa lagu yiqiin loollan ku saabsan dhul ballaarsi iyo saldana raadis ka dhex aloosnayd madaxda yaryar (raasas). Loollan dheer kadib waxay awood u yeelatay inay mideyso maamulkeeda dawli, taasoo dheelitir u noqotay maamulka iyo siyaasadda dabadeedna kolkale gashay dabayl isballaarin ah. [52]Sannadkii 1840kii, waxuu loollankaa Saldanada Xabashida ku soo koobmay afar awoodood oo kala ah:-

1) Shawa oo u talinaayay Raas Xayle Malakoot,
2) Tigray/Simiyen oo u talinaayay Dijaashmaash Wuubiye,
3) Lasta iyo Gojaam oo u talinaayay Dijaashmaash Gooshu Birru,
4) Gondor iyo Dabra Tabor oo u talinaaya Raas Cali.

Afartaa talis oo kala madaxbannaanayd waxay kaliya ku mideysnaayeen kaniisadda Masiixiga Qibdiga ah waxuuna [53]isbaddel siyaasadeed ka billawday, Sannadkii 1843kii, waagii nin burcad ah ee la oran jiray Kasa Xaylu Walda Gorgis, ku dhaliyay walaac talisyadaas. Kasa waxuu ka dhashay qoys sabool ah hooyadiina waxay iibin jirtay daawo laga sameeyo geedo la yiraahdo Kusa oo lagu dhaawo gooryaan Minni la yiraahdo ee ku dhasha caloosha dadka hilibka ceyriin cuno. Kasa waxaa lagu yaqiin burcadnimo iyo inuu ku dhaco marinnadii Muslimiinta uga ganacsan jirtay degaannada hareeraha Niilka oo ay goor dambe ku soo biireen kooxo waagaa noloshooda ku salaysnayd boobka iyo dhaca. Waxay duullaan ku qaadeen Gojaam, halkaasoo ay ku jabiyeen ciidamadii Dijaashmaash Gooshu Birru qabsadeenna gobolka sidoo kalena saldanadii Gondor uu ka talinayay Raas Cali. Kasa, goortuu is mahadiyay, waxuu isku magacaabay Raas waxuuna billaabay inuu labadii awoodood ee u dhinnayd ku duulo. Labo sano kadib Dijaashmaash Wubiye ayaa isaguna isku magacaabay Raas, goortuu geeriyooday Dijaashmaash Gooshu Birru ee u talinayay Lasta iyo Goojaam, haseyeeshee, madaxda diinta Qibdiga ayaa la safatay Kasa oo u caleema saartay madaxnimadii gobolkaas, iyagoo ku taliyay in Kasa ka saaro Masiixiyiinta Katooliga dalka Xabashida. Arrintu si kastaba ha ahaatee, dagaal ayaa ka dhex aloosmay Kasa iyo Wubiye, halkaasoo libtii ku raacday Kasa oo xilkii gobolladaas la wareegay, sannadkii 1855kii, loona caleema saaray Boqorkii Boqorada. Waxuu la baxay Theodorogii labaad Boqorkii Boqorada, magacasoo u doortay inay jirtay sheeko saadaalinaysay, Boqor magacaas la baxi doono ayaa Xabashida mideyn doono Islaamkana ka saari doono dalka Xabashida. Laba bilood kadib, goortii loo caleema saaray Boqortooyada Xabashida, Theodoro waxuu ku duulay Shawa waxayna halkaa isku haleeleen ciidamadii isbaheystay ee Negus Xayle Malakoot iyo Gaalla Wallo halkaasoo libintii ku raacday Theodoro dabadeedna u gudbay magaalamadaxda Shawa iyo Ankober uu dhib la'aan u qabasaday. Nugus Xayle Malakoot, isagoo daacuun silciyay dadkiisina ka gadooday kana wada baxsaday, ayuu isku deyay inuu Theodoro hakiyo,

[51] Angelo del Boca = gli Italiani in Africa Orientale Vol.I B.5

[52] Sidoo kale Vol.I B.8

haseyeeshee, uma ay suuragalin wuuna geeriyooday. Goortuu Xayle Malakoot dhintay, Theodoro waxuu boojistay wiilkiisii Sahal Maryam oo toban jir ahaa waxuuna ku noqday xaruntiisii ee magaalada Maqdala, halkaaseyna, Diseembar 1855kii, ku dhammaatay taariikhdii Saldanooyinkii yaryaraa ee Xabashida kuna billaabatay Boqortooyada mideysan. Boqor Theodoro intuu u talinayay dalka Xabashida waxuu, kolkii hore, isku deyay inuu mideeyo dalka Xabashida maamulkiisana horumariyo, haseyeeshee, waxaa ka horyimid madaxdii Xabashida ee u baratay dhaqankii horreeyay ee hooshka iyo tafaraaruqa ku dhisnaa. Theodoro, goortuu u caalwaayay madaxdaas ka hortimid arkayna inay himiladiisu si fudud ugu hirgalayn, ayuu billaabay cadaadis siyaasadeed iyo amarkutaaklayn ku salaysan dil iyo dhac oo [54]dhalisay inaan loo hoggaansamin awoodiisa. Waxuu xiray qunsulkii Ingiriiska ee la oran jiray Kamaron oo uu ku tuhmay inuu xiriir la yeeshay Muslimiinta, booqasho uu ku tegay Suudaan. Waxuu kaloo xiray toddobaatan reer Yurub ah ee dalka Xabashida degganaa, tillaabadaasoo ka careysiisay Boqoraddii Ingiriiska Victoria. Muddadii u dhexeeysay 1863-1867kii, isaga iyo Ingiriiska waxaa u socotay, waanwaan laysku deyaayay in lagu samatabixiyo dadkii reer Yurub ee uu xirtay. Isla waagaa waxaa dhanka kale dalka Xabashida ka dillaacay tafaraaruq lagu diidan yahay awoodda Boqor [55]Theodoro ciidankiisuna badi uu ka gadooday kana baxsaday. Nabarkii ugu darnaa waxuu ka soo gaaray wiilkii Xayle Malakoot oo goortuu labaatan jirsaday, 30 Juunyo 1865tii, ka baxsaday magaalada Maqdala tagayna Shawa, isagoo wata ciidanay siisay Boqoraddii Wallo oo la oran jiray Warqitu, halkaasoo Sahal Maryaam loo caleemo saaray Neguskii Shawa lana baxay Menelik.

Ingiriisku si uu uga samatabixiyo qunsulkiisii iyo dadkii reer Yurub ee Theodoro xirtay waxuu Hindiya ka soo diray ciidan uu hoggaaminayo S/Guuto Robert Napiyar, ciidankaasoo ka soo degay marsada Sula ee Badda Cas magaalada Maqdalana weerarray, 13kii Abriil 1868dii. Theodoro, goortuu arkay in laga awood roon yahay magaaladana la qabsanaayo, ayuu isdilay. Kadib geeridii Theodoro waxaa kolkale dalka Xabashida ka dillaacay tafaraaruq iyo loollan saldanadeed oo ay madaxda Xabashidu ugu tartamaysay jagadii Boqorkii Boqorada oo ay goor dambe isku soo hareen saddex xukuumadood oo ah:

1. Raas Gobase ee gobolka Lasta xukumayay,
2. Dijaasmaash Besbes Kasa oo gobolka Tambien xukumayay,
3. Negus Menelik ee gobolka Shawa xukumayay.

Dhaqdhaqaaqii ugu horreeyay waxuu ka yimid Raas Gobase oo boobay Gondor dabadeedna isku magacaabay Boqorkii Boqorada Takhle Gorgiskii IIaad waxuuna durbadiiba burriyay wax allaale waxii cusbaa ee Theodoro sameeyay. Gobase goortuu tillaabadaas qaadayay waxuunan tixgelin seedigii Dijaasmaash Besbes Kasa oo isaguna isu darbinayay jagadaas Boqorkii Boqorrada. Besbes Kasa, isagoo qayb weyn ka qaatay jabintii Theodoro, ayuu kala haray Napiyar hub cusub iyo S/alifle Ingiriis ah ee u tababaro ciidankiisa. 9kii Luulyo 1871dii, ciidamadii Besbes Kasa iyo Gobase waxay isku haleeleen Cadwa, halkaasoo libtii ku raacday Besbes Kasa oo Gobasena lagu xiray. 21dii Jannaayo 1872dii, Besbes Kasa waxaa loo caleemo saaray Boqorkii Boqorada Johaniskii IV waxuuna xaruntiisii Boqortooyada ka dhigtay Cadwa.

---

[53] Angelo del Boca = Gli Italiani in Africa Orientale Vol. I B 25-26

[54] Sidoo kale. Vol.I B.25-26

Saldanadaha Xabashida waxay goortaan dambe isugu soo hartay Johaniskii IV Boqorkii Boqorada iyo Menelikgii IIaad ee Neguskii Shawa. Negus Menelik waxuu dhexgalay gumeysigii reer Yurub ee u loollamayay inay Geeska Afrika gumeystaan waxuuna ka helay taageero hub cusub uu ku yeeshay iyo awood uu ku gumeysto dalalkay dariska yahiin. [56] Waagaa Talyaaniga waxuu billaabay inuu ka hinqado saldhigiisii magaalada Masawac uuna galo gudaha gobollada Eritreeya, isagoo ka sameeystay goobo ilaalo. Tillaabadaas Talyaanigu qaaday dadka reer Tigrey way ka dhiidhiyeen waxayna qabsadeen koox sahan ah ee u socotay dhulka buuraleyda ah. Talyaanigu, si uu u samatabixiyo kooxdaas la qabsaday, waxuu diray ciidanay tiradiisu dhan tahay 500, haseyeeshee, waxaa u babacdhigay ciidankii Boqor Johanis, halkaasoo lagu laayay ciidankii Talyaaniga intiisii badnayd. Talyaanigu intaa kuma uu hakan ee waxuu durbadiiba la xiriiray Negus Menelik waxuuna u ballanqaaday inuu gacan ku siinaayo siduu u jabin lahaa Boqor Johanis. Boqorkii Johanis, goortuu ogaaday awoodda iyo taageeraduu Menelik ka helay gumeysiga, ayuu durbadiiba Menelik la galay heshiis nabadgelyo ku wada noolaasho oo oranayay in la wada qaybsado dalalkii cusub ee boob lagu helo, gaar ahaanna, Menelik la siiyo Harar, Gaalla Wallo, Kafa iyo Walega. Waxaa intaa dheeraad ku ahayd in loo guuriyo wiilkii Johanis oo laba iyo toban jirsaday gabadhii Menelik oo iyaduna toddobo jir ahayd dabadeena uu Menelik dhaxlo jagada Boqorkii Boqorada Xabashida, gortuu Johanis geeriyoodo. [57]Bishii Maarso 1886kii, in sahamiye Talyaani ah ee la oran jiray Pietro Porro oo ka wakiil ahaa shirkad Talyaani ah abaabulay sahan uu ku soo marayay dalka Soomaaliyeed. Waxuu sahankiisa ka billaabay magaalada Seylac, isagoo ku siisocday magaalada Harar, ayay Soomaalidii aaggaa degganayd weerartay oo halkaasi ku ciribtirtay sahankaas gumeysiga. Arrintaas waxaa marmarsiinyo uu Harar ugu duulo ka dhigtay Negus Menelik oo weligiiba aano taariikhi ah Soomaalida u qabay doonaayayna inuu uga aarsado dadka reer Harar waxuuna u garabsaday Faransiiska oo isaguna loollan gumesyi kula jiray Talyaaniga iyo Ingiriiska, oo giddigood ku wada heshiis ahaayeen in la burburiyo dhaqdhaqaaqyada Soomaaliyeed ee ka soo horjeeda gumeysigooda gacanna ku siiyay Menelik inuu magaalada Harar qabsado. Saldanada Harar waxay Xabashida weligeedba ku eegi jirtay il nacab taniyo waagii Imaam Axmed Ibraahim (Guray), haseyeeshee, Menelik ayaa noqday kii qabsaday. Waxuu kolkii hore Harar u soo diray ciidan uu hoggaaminaayay Raas Walde Gabriyeel, isagoo Amiirka Harar u aanaynayay weerarkii lagu laayay sahankii Talyaaniga, haseyeeshee, ciidankii Xabashida waa la jabshay dib ayaana loo celiyay. Menelik goortuu arkay inay arrintu fududayn, ayuu Dodhusa soo hoggaamiyay ciidan soddon kun ah waxayna halkaa libtii ku raacday ciidankii Xabashida oo qabsaday magaalada Harar 1887kii. Tillaabadaas waxay Menelik ugu muuqatay inuu Soomaalida uga aarsaday dagaalkii Axmed Guray ee Qarnigii 16aad ku qabsaday badi dalka Xabashida. Menelik, goortuu qabsaday Harar, waxuu warqaad u qoray wakiilkii gumeysiga Ingiriiska u fadhiyay Cadan waxuuna ku yiri:

Ka: Negus Menelik, Boqorka Shawa iyo Gaallada oo idil
mid xun iyo mid sanba:

---

[55] Angelo del Boca = Gli Italiani in Africa Orientale Vol.I B. 221

[56] Sidoo kale Vol.I B.224-225

"Sidee baa tahay, xamdiga Eebbe waan ladanahay. Amiir Cabdullaahi uma oggoleen dalkiisa Masiixiga".

"Waxuu ahaa Guray kale, haseyeeshee, Ilaah mahadii waan la dagaallamay, waan baabi'iyay waxuuna ku cararay faras dushiisa. Waxaan calankeyga saaray xaruntiisa ciidamadeyduna waxay qabsadeen magaaladiisa. Guray wuu dhintay Cabdullaahina waxuu ahaa kii waayeheena Guray dhaxlay. Ninkasta wuu ogyahay kani inuusan ahayn dal Muslim".

Harar waxay ahaan jirtay tan ugu hodonsan magaalooyinka Afrikada Bari, xarunta dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo barashada diinta Islaamka. Waxay ku taallaa dhul buureed oo qaayo leh aan loo soo babacdhigi karin, taasoo qarniyaal difaac dal hoosaadka Soomaaliyeed u ahayd soo galootiga iyo isballaarinta Xabashida. Qabsashadaas Harar waxay keentay inay Xabashidu, goortii ugu horreeysay, toos isu arkaan dadka Soomaaliyeed dalkooduna isku ballaariso. Mililikh waxuu la kaashaday qabsashadii magaalada Harar gumeysteyaashii Yurub, iyagoo ugu hiilliyay masiixinimadiisa iyo inuu helo marin badeed. Gumeysiga Talyaaniga waxuu Menelik, gaar ahaan, ugu dhiirrigeliyay inuu qabsado magaalada Harar si uu Soomaalida uga aarsado xasuuqii sahankii Talyaaniga uu hoggaminaayay Pietro Porro. Raas Makonen oo Menelik ina adeerkii ahaa ayaa loo magacaabay inuu noqdo xaakimkii magaalada Harar, tallaabadii ugu horreeysay uu qaadayna waxay ahayd inuu ciidan sahan ah, uu hoggaamiyo Fitawaraari Mangashe, u diray Jigjiga oo ka jirta magaalada Harar lixdan Mayl dhanka Bari, magaaladaasoo ay ku yaallaan ceelashay ka cabaan Soomaalida ahna marinka socotada ka timaada Harar, Berbera iyo Galbeedka. Jigjiga waxay ku taallaa dhanka Bari xiga oo ay ciidamada Xabashida waagaa ka gaareen gudaha dalka Soomaaliyeed taniyo 1901. Negus Negesti Johanis waxaa waagaa lagu dhaawacay dagaalkii Daraawiishta Suudaan ee Galaba waxuuna geeriyooday, Sannadkii 1889kii, dabadeed Negus Menelik ayaa loo caleemo saaray Boqorkii Boqorada Xabashida. Menelik waxaa lagu caleemo saaray Entoto oo aan ahayn Akhsum ee Boqoradii hore, dhaqan ahaan, lagu Boqri jiray, iyadoo ay ugu wacnayd naceeb uu dadka Tigreyda u qabay awgii iyo isagoo daneynaayay in xarunta Boqortooyadiisa noqoto meel u dhow magaalada firfircoon ee Harar. Durbadii waxuu dhiirrigeliyay in dalka Xabashida iyo dalalkuu isku fidiyay loo aqoonsado magaca "Ethiopia" oo soo jireenka ahaa si uu ugu daboolo isballaarintiisa gumeysi; waxuu ku fiday taniyo 1897kii, dalalka deriska la ah ee Soomaaliya, Caruusi, Gaalla, Sidaamu, Wallega iyo Kafa ee giddigood magaalada Shawa ka xiga dhanka Koofureed iyo Bari (eeg khariidada 2).

ISBALLAARINTA XABASHIDA
(Laga billaabo 1887 taniyo 1897)



2.2. GUMEYSIGII INGIRIISKA

a) QABSASHADII GOBOLLADA SOOMAALIDA WAQOOYI

Sannadkii 1884kii, Masaaridii Harar iyo gobollada Soomaalida Waqooyi gumeysiga maldahan, ku haysatay ayaa goortuu kacaankii Mahdigii Sudaan wiiqay itaalkeedii, lagamamaarmaan ku noqotay inay ciidamadeedu ka gurato Harar iyo gobollada Soomaalida awoodeeduna isugu geysay la dagaallanka kacaanka Daraawiishta Suudaan. [58]Masaaridu, goortay magaalada Harar iyo Gobollada Waqooyi ka kaceysay, waxay awoodii saldanada Harar ku wareejisay Ammiir Cabdullaahi Muxamed Cali oo ahaa wiilkii Ammiirka Masaaridu saldanada ka qabsatay, haseyeeshee, Ammiir Cabdullaahi kuma uu raagin saldanada oo Xabashida ayaa, muddo gaaban kadib, ka qabsatay. Durbadiiba waxaa Gobolladii Soomaalida Waqooyi oo ay Masaaridu ka kacday la wareegay Ingiriiska, isagoo ku awood sheegtay hishiis qarsoodi ah uu Masaarida la lahaa, waxuuna dabadeed [59]jilibyadii Soomaalida Waqooyi la galay hishiisyo maxmiyadeed oo ay mardabo ku dheehan tahay. Ingiriisku danahuu u qabsaday magaalooyinka Soomaaliyeed ee xeebta khooriga Cadmeed waxay ahaayeen, siduu isaguba sheegay, inuu hilib u helo ciidamadiisa Cadan fadhiya, haseyeeshee, waxaa u qarsoonayd, iyadoo ay Cadan u ahayd saldhigga isgaarsiinta iyo difaaca dalalkuu gumeysto inuu ku darsado xeebaha Soomaaliyeed dabadeedna labada dhinac ee Khooriga Cadmeed ka ilaaliyo irridda Koofureed ee Badda Cas.

Sannadkii xigay, Faransiiska ayaa sheegtay Jasiiradda Mushaat, dood dheer kadibna, Ingiriisku u aqoonsaday sheegashadaas dabadeedna Faransiisku isku ballaariyay xeebta Tajura oo ay Masaaridu ka baxday. [60]Horraantii sannadkii 1885kii, gumeysiga Faransiiska waxuu sheegtay dalkuu gumeysto inuu gaaraayo xeebta Tajura taniyo Jabuuti Ingiriiskuna ku dooday inuu Faransiisku soo galay dhulka maxmiyaddiisa Soomaalida Waqooyi oo ka billaabata Berbera taniyo meel ka mid ah dhulka uu Faransiisku sheegtay, murankaasoo ay dood dheer kadib, ku heshiiyeen inay, rasmi ahaan, u kala soohdimaystaan intuu mid walibana qayb u helay dalka Soomaaliyeed, iyadoo aan laga tixgelin dadkii dhulka lahaa. Waxay ku heshiiyeen in Ingiriisku qaato Seylac iyo waxii ka Bari ah Faransiiskuna waxii Seylac Galbeed ka ah. Waxay heshiiskaas ku dhigteen in dhanka xeebta koofureed ee Soomaalida Waqooyi soohdinteeda la mariyo Habaasweyne, Biyoqaboobe iyo Jildeysa uuna ku sinnaado magaalada Harar ka shishe.

Magaalooyinka xeebta Waqooyi waxuu Ingriisku soo dejiyay ciidamo uu ka keenay Cadan waxuuna maamulka Gobollada Soomaaliyeed raaciyay Hindiya. Faransiisku, goortuu la wareegay qaybtiisii dalka Soomaaliyeed, waxuu xarun ka dhigtay Jabuuti waxuuna durbadiiba dhisay marinka birta raylka ee isku xira Jabuuti iyo Addis Ababa. Goortuu marinkaas raylka hirgalay waxaa magaalada Seylac soo food saartay hoos u dhac dhaqale sababtoo ah dhaqaalihii

---

[57] Somali Government = Somali Peninsular = 1962 B.22

[58] Eeg lifaaqa B

[59] Somali Government = Somali Peninsular 1962 B.26

marsada ka soo geli jiray uu yaraaday. Taniyo sannadkii 1898kii maxmiyadda Ingiriiska ee Soomaalida Waqooyi waxaa laga maamuli jiray xafiiskii gumeysiga Ingiriiska ee Hindiya kadibna waxaa loo wareejiyay Xafiiska Arrimaha Dibadda ee Xukuumadda Ingiriiska.

b) KACAANKII DARAWIISHTA

Labaatankii sano ee ugu horreeyay qarnigan waxaa dagaallo kharaar gumeysigii dalka qabsaday kala soo horjeeday kacaan la baxay Daraawiish oo uu hoggaaminayay Sayid Muxamed Cabdulle Xasan. Taariikhda Sayid Muxamed Cabdulle Xasan iyo halgankii dheeraa ee uu la galay gumeysteyaashii Ingiriiska, Xabashida iyo Talyaaniga ayaa ah xudunta taariikhda dalkan waayahaan dhow. Sayid Muxamed, run ahaan, waxaa halgankiisii ku hal qabsado kuna haasaawaan carruurta Soomaaliyeed, iyadoo waayeelkuna gabayadiisii caanka ahaa ku madadaashaan. Waxaa inta badan lays weydiiyaa Sayid Muxamed Cabdulle Xasan kacaankiisii ma sababo diineed ayuu ahaa mise kacaan qiiro Qarameed? Waxaa la oran karaa, inkastoo sababihii ugu horreeyay kacaankiisa ahaayeen arrimo diineed haddana kama ay marnayn mid Qarannimo ah waxayna aad isagu ekaayeen kacaankii Imaam Axmed Guray, waxayse ku kala duwanaayeen labadooda nacab oo midna ahaa nacab aad u horumaray kan kalena ahaa mid dawlado kale ku tiirsan oo awood sidaa u buuran aan lahayn.

Sayidka waxuu ku dhashay dal aan lahayn keyd xusuusdhawrka dhalashada sidaa awgeedna waxba lagama oga carruurnimadiisii. Siday caddeynayaan waayeeladii waagaas, Sayidku waxuu ku dhashay "Balli Sac Madeeqa" ee toddobo Mayl Waqooyiga ka xiga Buuhoodle, Sannadkii 1856kii ee Gobollada Waqooyi looga yaqaan gu'gii "Gobeysane". Aabbihiis waxuu ka dhashay qoys ku noolaa agaggaarka Gobolka Shabeellada Sare oo kaabiga ku haya dhulka Caruusada, haseyeeshee, hooyadii, Carra Seed Magan, waxay ku noolayd agaggaarka Buuhoodle ee Gobolka Nugaal. Soo koritaankii Sayidku kama uu duwanayn tan jiilka dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku da'da ahayd. Qoyskiisii wuu jeclaa si habboona waa loo soo koriyay waxuuna ahaa ubad lagu soo barbaariyay waaya'aragnimo. Inkastoo ay isku si u jeclaayeen reer abtigii iyo adeeradii misana waxuu door biday inuu la noolaado abtiyaashii oo lagu yaqiin fardafuulka aqoon wanaagsanna u lahaa sida loogu dagaallamo. Sayidku waxuu ku soo barbaaray fayoobi iyo laxaadkiisoo dhisan, hanadnimo iyo garaadkiisoo fiicnaa. Waxuu da'yaraantiisa bartay Qur'aanka Kariimka ah waagii dambana dusha ayuu ka qabtay. Waxuu wax la soo bartay dhallinyaradii reerkiisa, gaar ahaan, tabaha ku dagaallanka fardaha, difaaca iyo weerarka. Ma jirin cid dagaalka waagaas u babacdhigi kartay reer hooyadii. Waxuu waaga socdoba Sayid Muxamed waxuu ku dadaalay barashada shareecada iyo mabaadii'da Islaamka waxuu isaga dooli jiray dalka gudihiisa waxuuna raadsan jiray macallimiinta diinta Islaamka ugu aqoonta wanaagsan. Waxuu tagay magaalada barakeysan ee Maka in ka badan hal jeer, isagoo dhex maraya Jasiirada Carabta. Waayahii uu joogay magaalada barakaysan ee Maka waxuu qaatay dariiqada Saalixiya, in mudda ahna waxuu la noolaa Sheekhii aasaasay, Sheekh Muxamed Saalax. Sayidku soo laabashadiisa waxuu soomaray soona booqday magaalada Sawakin ee u dhow dekedda Suudaan, isagoo halkaa kula kulmay Mahdigii Suudaan iyo ciidankiisii oo waagaas dagaal kula jiray gumeysigii Ingiriiska ee dalka Suudaan. Waxaa laga yaabaa inay dareenkii Sayidka raad ku reebeen dhacdooyinkii Daraawiishta Mahdigii Suudaan ee ku saabsanaa dilkii xaakinkii Ingiriiska, R. Gordon.

Xaakimyadii gumeysiga Ingiriiska uu u soo dirsaday Soomaalida Waqooyi waxba kama aqoon dadka iyo dalka mana aysan muujin inay xurmo iyo qaddarin u hayaan diintooda iyo dareenkoodaba waxaana caddeeyd, haddii arrinku sidaa lagu siiwado, inay imaan doonto iska horimaadyo iyo qalaanqal dhexmara gumeysiga iyo dadka dalka deggan. Gumeysigii Ingiriiska oo si fudud u gumeystay dalal badan oo Dunida ah waxay ula muuqatay, sidoo kale, inay mid fudud tahay gumeysiga dalka Soomaaliyeed, haseyeeshee, run ahaan, waxuu kala kulmay daqarrooyin iyo dhaawac waaweyn uu gumeysigiisa Afrika waaya'aragnimo ku qaato kuna dirqisay dagaaluu ku qabjabay inuu Soomaalida la galo, isagoo dhawr jeer la kulmay jabab iyo dullinimo.

Goortuu Ingiriisku hantiyay dalka Soomaaliyeed waxuu durbadiiba billaabay dhagartiisii gumeysi, waxuu dalka keenay Baadariyo fidinaya diinta Masiixiga. Sayidku waxuu dalka dib ugu soo laabtay, Sannadkii 1892kii, isagoo ka yimid magaalada barakaysan ee Maka waxuuna ka soo degay marsada Berbera. Kolkuu xaryankuu saarnaa ka soo degay cagtana soo dhigay marsada ayaa nin Ingiriis ah waxuu ku yiri "Canshuur keen" waxuu ugu warceliyay "Adigu Ingiriis baad tahay, yaa canshuurta kaa qaaday goortii aad dalka soo degtay". Dabadeed afceliyahii, ayaa ninkii Ingiriiska ku yiri; "waa wadaad waalanee innaga siidaa waxba yuusan cashuur bixinee". Sidaas ayuu magaca "Mad Mullah" ugu baxay. Sayidku waxuu aad uga naxay goortuu arkay magaaladoo kaniisado laga dhisayo iyo ubadkii Soomaaliyeed oo macatab qoorta looga lulay. Arrintaas waxuu uga cawday xaakimkii gumeysiga Ingiriiska, haseyeeshee, cabashadiisii dheg awdan ayay ku dhacaysay. Waxaa u muuqatay in dalkiina la qaatay diintii Islaamkuna la xididda siibayo. Sayidku waxuu dabadeed ku tashaday inuu arrintaa ka dagaallamo waxii karaankiisa ahna tillaabo ka qaado dabadeedna waxuu billaabay waano iyo wax u sheeg si uu dadka u garansiiyo ujeeddada gumeysigu waxay tahay ama waxuu doonayay inuu gaaro.

Waxyaalahii uu la kulmay Sayid Muxamed waxaa ka mid ahaa, isagoo Masjidka Jaamacadda Berbera ku tukanaayo, Goor salaad hore ah, ayaa nin Ingiriis ah oo askar watay intuu Masaajidkii isasoo hortaagay toogtay Mu'addinkii oo goortaa addimaayay. Haddii la warsaday sababtuu falkaas u gaystayna waxuu yiri "Aadaankiisa ayaannu la seexan waaynay". Sayidku, isagoo horayba uga caraysnaa Baadariyadii dalka Diinta Masiixiga ku fidinaayay, ayuu caloolxumo ka sii qaaday falkaas sarkaalka Ingiriiska ku kacay waxuuna Masaajidka isla dhex taagay dood baanise ah waxuuna yiri "Nimanyahow bal gardaradaas iyo gaboodka falkaas deya, ma diintaan u daaynaa? ma dalkaa uga tegeynaa? innagaba cida eydiisa kama gama'nee, arrintu qaraaraa oo qiiro weynaa. Kowdii canshuur keen bay joogtay katimidoo carruur gaalays bay soo gaartay, maantana war waad aragtaan, berrina maxaa xiga? waxaa xigi dullinimo iyo dushoo laydinka raro, aan ka digaye; aan ka digaye; aan ka digaye. Ma jahaadnaa mise dhaqayadeedeynu dhawranaa. Aan ka digayoo ka digaye, ninkii doorow halkaasaan hadalku kuugu daayee doqonse yeelkiisa".

Isla goortiiba waxuu ku hadlay Ingiriiskii ayaa loo tebiyay dabadeedna, isagoo wilina Masaajidkii ka bixin, ayaa waxaa loo soo diray askari. Askarigii ayaa goortii Masaajidka laga soo baxay hordhigay Jaliilad oo yiri "Sow Xaaji Muxamad ma tihid, Jaliiladaas soo qaad oo xafiiska sarkaalka lagaa rabaa ee iskeen". Waxuuse askarigii ugu warceliyay " Adiguu ku rartayee qaad Jaliiladiisa". Halkaasuu askarigii Jaliiladii ku qaaday Sayid Muxamadna barbar socday oo loo tagay sarkaalkii Ingiriiska oo ay xafiiskiisa la fadhiyaan la taliyeyaashiisii oo Soomaali iyo shisheeyaba lahaa. Sayid Muxamad waxuu galay xafiiskii laga wacay, isagoo laba

go'oo cadcad qaba cimaamadna madaxa ugu duubantahay. Waxuu sarkaalkii hadalkii ku billaabay "Galab wanaagsan" kadibna Sayidku ugu warceliyay "Belo aan adiga ahayn ma ogin". Waxuu sarkaalkii Ingiriiska kol labaad ku yiri, Isagoo laga warcelinaayo "Wadaadkaagan waalan, intii ayaamahaanba warar baa lagaa soo sheegayay, waxayna leeyahiin inaad lid ku tahay Boqoradda Britaaniya Imberatooriyaddeeda iyo danaheeda oo ay ka leedahay dalka Soomaaliyeed, maxaa ka jira warkaas?". Goortaasuu Sayidkii hadalkii qaatay waxuuna ku warceliyay:- "Adigaagan gibilka cad oo halka fadhiya, ma laguu sheegay inaad lid ku tahay danaha dalkayga, diinta Islaamka iyo aayatiinka ubadkayaga? War duuflaale yahaw, maxaa ubadkayaga u kufrisiin oo Macatab qoorta ugu gelisayna? Ka sii weynee maxaad mu'addinkii Masaajidka, isagoo Ilaah hortaagan oo addimaaya u toogatay? Annaguba eydaada duleedyada cawleysa ma daneynee". Sarkaalkii waxuu la yaabay hadalkii Sayidku taftaafay qota dheeridiisa, hase ahaatee, isma gelin, si aanay u dareemin Soomaalidii kaloo halkaa joogtay qiimana aanay u siin dibaddana ay ugu baawin, ayuu ugu warceliyay "Xukuumadda u dulqaadanmayso maanta kadib hadalladaas isdhaafka ah oo aad Masaajidka ka tiri haddana aad ila hortaagan tahay. Kolkaan waan kuu digayaa, ha u noqon magaaladana ha ka bixin inaad oggolaasho naga heshid mooyee". Waxuuna ku warceliyay; "Waa hadday taadu tahay" oo irriddana ka baxay. Kolkay Saarkaalkii iyo raggii raacsanaa isku hareen oo ay ka sheekaysteen Sayid Muxamed hadalladiisii qof walibana aragtidiisii ka dhiibtay, ayaa waxaa hadlay nin la oran jiray Aw Gaas, waxuuna yiri: "Ingiriisow haddan masaajidkii ogaa waxuu wadaadku ka digay haddana hadalka dhegeystay iga gunud, walle haddaan maanta la qaban meel fog baa laga dooni". Aragtidaas Aw Gaas lama tixgelin, hasayeeshee, sida la sheegaayay waagii dambe gunno ayuu Ingiriisku ku siin jiray Aw Gaas oddoraskaas uu oddorosay Sayid Muxamed waxuu noqon doono.

Sayidku kolkuu muddo joogay magaalada Berbera uuna ogaaday inaan gumeysiga Ingiriiska il wanaagsan ku eegeyn oo ay fidinta dariiqada Saalixiyadana u hirgeli waaysay uuna dareemay in arrintiisu lala socdo, ayuu go'aansaday inuu Berbera miyiga uga baxo, maxaawacay Soomaalidu 70% waa guurto reer miyi ah halkaasayna itaal iyo hantiba ku leedahay. Sannadkii 1897kii, isagoo koox wadaaddo ah wato, ayuu ka soo baxay Berbera dabadeedna degay ceel la yiraahdo Qoorweyn oo lixdan Mayl ka jira magaalada Burco docda Koofur Bari halkaasuuna ku aasaasay ururkii Darawiishta ugu horreeyay. Intay laba sano kasoo wareegin, goortuu Berbera ka baxay waxuuna isku duway dadkii aaggaa degganaa oo idil warkiisuna doc kasta uu ku fiday. Ingiriisku arrintaas ma fileyn maankana kuma uu hayn mana uu maleynayn in Sayid Muxamed col uruursi ku maqan yahay dadoo dhammina raacay. Waxuu warkii Ingiriiska ku noqday argaggaxiso iyo la yaab, waxuuse la sii yaabay goortuu hubsaday waxuu Sayidka meesha ka wado ama uu maagan yahay iyo siduu dadka tiradaas leh, muddo gaabam, isugu dumay.

Sannadkii 1899kii, waxaa dhacday in Ingiriiska basaasiin uu ka daba diray u soo sheegeen inuu Sayidku ku jiro rag iyo fardo uruursi dabadeedna Ingiriisku u diray col ilaala ah uu ka madax yahay dhamme Cosl oo soo hubiya waxaana dhacday in nimankii ilaalada ahaa mid ka mid ah lana oran jiray Ducaale Xersi uu qorigii dhammaha la baxsaday. Ingiriiskii Berbera joogay waxuu war ku helay in Ducaale Xersi uu qorigii Sayid Muxamed ula galay dabadeedna Xaakin Xigeenkii Ingiriiska ee Berbera, Cordeaux, ayaa warqaad u qoray Sayidka uu ku yiri: "Salaan kadib waxaan war ku helay in nin la yiraahdo Ducaale Xersi uu qori ka xaday Dhamme Cosl oo u adeegayay dabadeedna qorigii adiga kuu keenay. Sidaas awgeed ayaan warqaaddan kuugu soo qoray, haddii aad haysid qorigaas, inaad si dhakhsi leh Berbera u keentid.

Sayidku waxuu warcelin ugu qoray isla warqaadda dusheeda oo af Carabi ah waxuuna ku yiri: "Cid la caabudo ma jirto oo aan Ilaah ahayn, waxna idin kama xadin, ka raadso ciddii aad wax ka dooneysid oo ku xaday waxna sii ciddii aad u garatay inaad wax siiso. Waa sidaas iyo nabadeey". Xaakimkii gumeysiga waxuu ka naxay warcelintaa, maxaayeelay waxuu soo arki jiray Maamulkii Hindiya oo xakuuumadda loo arki jiray inay wax kasta ka sarreeyso waxuuna isla goortiiba go'aansaday inuu Sayidka eedsiiyo warcelinta, isagoo u diray Rakuublay Hindi ah si soo diray waxuuna u dhigay dabin uu ku hoobtay, isagoo ka furtay hubkii iyo saanaddii uu watay rakuubkiina Daraawiishta qalatay uguna dabaaldegtay guusha billaawga ah.

Dabayaaqadii sannadkii 1899kii, ayuu Sayidka billaabay inuu ku dhaqaaqo dagaal hubeysan, isagoo waxii hub ah ee uu hayay u qaybiyay Jilibyada Soomaaliyeed waxuuna adeegsaday tabihiisii u gaarka ahaa. Waxuu billaabay inuu jahaad dheer ku qaado gumeysteyaasha Xabashida iyo Ingiriiska. Ujeeddada Sayidku waxay ahayd ka saaridda gumeysiga dalka Soomaaliyeed, isagoo ahaa ruuxii ugu horreeyay ee arrintaa ku dhaqaaqa dagaalna kula galo gumeysi ka awood roon. Jabkii kooxdii Hindida uu Ingiriisku soo adeegsaday kadib, xaakimkii gumeysigu waxuu, kolkale darbiyay koox soo xaaqdo Sayidka iyo Daraawiishta. Inteysan kooxdaasi ambabixin ayuu xaakinkii gumeysiga u soo gudbiyay Sayidka qorraal uu kula talinaayo inuu is dhiibo oo uu soo magangalo Xukuumadda Ingiriiska. Sayidku arrintaa dheg uma uu dhigin kadibna Ingiriisku waxuu dhaqaajiyay ciidankiisa waxuuna faray in nolol ama geeri mid un Sayidka lagu keeno. Wardoonka Sayidku waxuu ahaa mid dhiifoon waxuuna durbadiiba soo tebiyay inuu Ingiriisku ciidankiisa soo dhaqaajiyay. Goortuu ciidankaas soo gaaray meel shan iyo toban Mayl u jirta magaalada Burco, ayaa Sayidka magaalada ciidankiisii koox koox uga bixiyay si ay isugu hertiyaan meel magaalada u jirta afartan Mayl. Ciidankii Ingiriisku goortuu u soo dhowaaday Burco, ayaa koox Daraawiish ah oo buur saarnayd soo xabadeysay kadibna hawdka xuluulatay. Ciidankii Ingiriiska waxuu ku qamaamay magaaladoo cidla ahayd aad ayuuna u dareemay cidlada uu la kulmay. Goortuu weerarkii ku hungoobay waxuu billaabay inuu magaalada iyo hareeraheeda ka boobo awr uu ku rarto biyo iyo saad waxuuna qardajeex ku maray hawdka, isagoo aan kala garanayn halka uu marayay awrtiina daadisay rarkii saarnaa. Daraawiishtu arrintu way u fududayd wax culaysiyana ma ayna sidan oo aan ka ahayn biyo iyo hilib la solay oo fardahooda u saarnaa, xoolihiina magaaladay uga soo tageen. Waxaa dhacday inay kol isku soo dhowaadeen Daraawiishta iyo ciidankii gumeysiga, haseyeeshee, Daraawiishta waxay adeegsatay tabtii ku dhufoo ka dhaqaaq, dabadeedna hawdka horay u sii xushay. Ciidankii Ingiriiska waxaa u caddaatay inaan kolnaba Sayidka iyo Darawiishta loo hollan karin in la jabsho lagana yaabin inuu Sayidku oggolaado shuruudaha gumeysiga Ingiriiska. Goortaa kadib waxuu gumeysiga dibindaabyo iyo cadaadis kula dhaqaaqay dadweynaha, isagoo ku eedaynayay inay u adeegayaan Daraawiishta waxuuna ka dhacay xoolahii oo ay ku noolaayeen kana dhaqaaqay, iyagoo gacma maran. Raggii boobkaas gumeysiga ka carooday ayaa ku biiray Daraawiishta, haweenkii iyo caruurtii oo faramaranna waxay ku qamaameen xerooyinkii ciidamada gumeysiga kadibna loo kaxeeyay magaalada Berbera oo lagu guray xero qaxooti. Waxaa halkaa ka dhashay dadkuu Ingiriisku colaadiyay inuu ka soo hor jeesto, iyadoo taasi taageero u noqotay Daraawiishta.

Koox Daraawiish ah ayaa kol waxay qabsatay awr ay ku raran tahay sanaadiiq hub, Khamri iyo Alkohool. Sayidku waxuu dib ugu ceshay khamrigaas iyo alkoolka xaakimka

gumeysiga Ingiriiska, isagoo u raaciyay qoraal uu ku caddeynayay inaysan Daraawiishtu u baahnayn cabitaankaas xaaraanta ah.

Bishii Maarso 1900kii, Daraawiishta waxay weerarkeedii ugu horreeyay ku billawday magaalada Jigjiga uu Ingiriisku ku taageeray Xabashida inay qabsato, waxuuna duullaankaas aanay filayn Xabashida gelisay cabsi dheeraad ah. Waxay Xabashidu dareentay in Sayid Muxamed tillaabadaas uu qaaday ku kicin rabo dadka Muslimka ah dabadeedna uu ku noqdo Axmed Guraygii labaad iyo halista ay leedahayd ku soo dhowaashada Daraawiishta magaalada Harar. Cabsidaas waxay Xabashidu u keentay inay Ingiriisku kula bahowdo la dagaallanka Sayidka, Waxayna dabadeed ku soo duuleen ciidamada Ingiriiska oo ka soo ambabaxeen saldhigooda Berbera oo u madax yahay G/le Dhexe Eric Swayne iyo ciidamo Xabashi ah ee ka soo baxay Jigjiga oo u madax yahay Fiturari Gabre. Ciidamadaas isbahaystay Daraawiishtu way caabisay wayna ka taagroonatay waxayna, iyagoo guuldarreystay ku laabteen saldhigyadoodii. Kadib goortay Daraawiishta ka guuleysatay ciidamadii Ingiriiska iyo Xabashida oo isbahaystay, ayuu Ingiriisku abaabulay dagaallo is dabajoog ah. Dagaalladaaas kii ugu horreeyay waxuu ka dhacay, 3 Maajo, Afbakayle waxaana ku xigay goobaha ah Samaale, Harardhig iyo Ceelcad. Waxaa dabadeed ku xigay dagaal ka dhacay Faradhiddiin, 16kii Luulyo 1901dii, sidoo kale Febraayo 1902dii,Ingiriiska waxuu ku soo duulay ciidan ka kooban 2300 uu G/Dhexe Eric Suwayne u madax yahay, kaasoo Daraawiishta isku haleeleen meel Gaalkacyo ka xigta Konton Mayl Waqooyi Galbeed oo Daraawishi intay gaaday nabar xungaarsiisay intii ka hartayna isku uruursatay Buuhoodle. Ingiriis oo isu qabay waayahaas inuu Dawladaha caalamka ugu itaal weyn yahay, waa liqi waayay sida Sayid Muxamed uga libaystay, sidaa daraadeed ayuu soo rogaalceliyay, asagoo aan waxba la harin oo wata ciidan xoog leh. Waxaa laysku hardiyay goobaha caanka noqday oo la baxay Beerdhiga, 10kii Agoosto 1902dii, Faragooye, Cagaar weyne iyo daratoole, 17kii Agoosto 1903dii, intaasoo goobood Ingiriiska waa lagaga adkaaday si xunna luugu jabshay.

Sheekooyin laysla dhexmarayay xarumaha siyaasadeed ee gumeysteyaasha London, Rooma iyo Addis abeba waxaa ka soo shaacbaxay, goortay taariikhdu ahayd, Jannaayo 1903dii, inay saddexdda Dawladood ku heshiiyeen in daraawiish laga soo werarro saddex jaho oo laysu celiyo si dabadeena loo tirtiro, haseyeeshee, waxaa diiday Talyaaniga inuu baxsho kharashkii ku bixi lahaa, awood yari dhaqaale awgeed, waxuuse ogolaaday in daraawiish Hobyo lagaga soo duulo ciidamadii Ingiriiskuna marsadeeda laga soo dejiyo. Iyagoo ka ambaqaadayo heshiis dhexmaray gumeysteyaasha Ingiriiska, Talyaaniga iyo Xabashida, ayay dhammaan xoogaggii gumeysteyaasha Daraawiishta ugu soo duuleen saddex col oo ah: Ciidan Hobyo kasoo baxay oo S/Guuto W. Manning madax u yahay; ciidan ka soo baxay Berbera oo G/le Dhexe Swayne u madax yahay iyo ciidan Xabashi ah oo ka soo baxay Jijiga. Ciidamadii Ingiriiska oo S/Guuto W. Manning madaxda u ahaa waxay Daraawiishta isku haleeleen meesha la yiraahdo Gumbure waxayna Daraawiishtu ku qaaday weerar kedis ah dabadeedna ku jabisay, 17kii A briil 1903dii. Guuldarradaas ciidamadii Ingiriiska ku gaartay Gumbure iyo meelaha kale oo ay Daraawiishta isku hardiyeen waxay Ingiriisku ku hawaanisay inuu xilka ka qaado S/Guuto W. Manning oo duullaankaas hogaaminaayay dibna London loogu celiyay, 4 Luuliyo 1903dii, kuna beddelay S/Gaas Egartton inuu dagaalkii Daraawiishta halkii ka siiwado. Egartton waxuu, muddo gaaban gudaheed, abaabulay ciidamo dhan 8 kun kuna tababaray habkay duullaanka isaga kaashan lahaayeen una wada geli lahaayeen. Kol labaad ayay isbahaysatada gumeysteyaasha wadajir duullaan hor leh oo saddex dhinac ah ku soo qaadeen Daraawiishta waxayna isku hardiyeen

Jidbaale oo dagaal kharaar ku dhexmaray, 10kii Jannaayo 1904tii, ugu dambeyntii waxaa lagaga lib helay Daraawiishta oo aafo xun lagu gaarsiiyay oo ahayd gembigii ugu horreeyay ee nacabkeeda libta kaga helo. Guushaas uu gumeysigu gaaray ma noqon miduu ku naalloodo kuna hanto dhul dheeraad ah ama uu ku baabi'iyo Daraawiishta.

Jabkii Jidbaale goortuu Daraawiishta sidaas ugu dhacay oo isbahaysigii gumeysteyaasha ka soo ciriiriyeen Galbeed, Waqooyi iyo Koofur Bari, ayay Daraawiishta u guurtay Bari oo ahayd docda kaliya oo u furnayd dabadeedna degtay Jiidaali. Waxaase jirtay, intaanay Daraawiishtu u guurin Bari, inuu Sayid Muxamed fariin u diray Boqor Cusmaan uu kaga codsanaayay inuu gacan ku siiyo jahaadkay Daraawiishtu kula jirto saddexda nacab ee gumeysiga ah; Boqorku waa yeelay waxuuna ugu soo werceliyay inay saddex walaxaad oo tabaha dagaalka ku habboon ayna Nugaal qabin awgood Daraawiishta Bari ha uga soo guurto, kuwaasoo ah: Buuro dagaalka lagaga gabbado, biyo dad iyo duunyaba ku noolaadaan iyo bad hub iyo saanad laga soo degsado xooluhuna ka dhoofaan. Iyadoo saddexdaas walxaad oo dagaalka qaaya u leh Sayid Muxamed lagu ciilay, ayuu warcelintii Boqorka aad ugu riyaaqay waxuuna durbadiiba Daraawiishta u raray Jiidaali iyo Bari. Hasayeeshee, sababo aan wali la garan awgood, ayuu Boqor Cusmaan col xoog leh Daraawiishta uga hor tegay dooxada Dharoor, iyadoo Daraawiishi itaal daran tahay, abaar xunna soo heshay oo aan weli ka bogsan guuldarradii Jidbaale, ayaa Dagaalkaa Dharoor ka dhacay si xun Daraawiishta loogu galay. Intuu dagaalkaas Dharoor ku dhexmaraayay ciidanka Boqor Cusmaan iyo Daraawiishta, ayaa Ingiriisku ka soo dejiyay Ilig ciidan shan boqol ah waxuuna Daraawiishta ka qabsaday qalcaddii Eyl uga dhisnayd.

Hadday Ingiriis iyo xoogaggay isbaheesteen Daraawiishta ka soo kiciyeen Galbeed iyo Nugaal, Ilig laga qabsaday, Dharoorna Boqor Cusmaan ku jabiyay, ayay Ingiriisku la noqotay inay Sayid Muxamed iyo Daraawiish itaal iyo dagaal dambe ku harin oo uu halkaas ku naafoobay waddo kalena aanay u furnayn inay isdhiibaan mooyee. Waxuu goortaas Ingiriisku farriin u diray Sayid Muxamed uu ku kala dooransiiyo in la tirtiro isaga iyo Darawiishba ama inuu isdhiibo oo kolkaas waxuu doono la siiyo dabadeedna Maka loo dhoofiyo. Hasayeeshee, soo jeedintaas Sayid Muxamed wuu ku gacan seyray waxuuna ku muujiyay gabaygiisii Dardaaran tix ka mid ah. Inkastoo Daraawiishta aad waxyeello u gaartay haddana Ingiriisku siduu malaysanaayay ma noqon waxaana Sayid Muxamed la dejiyay xarunna looga dhigay Eyl. Intii hore oo dagaalku ka socday Nugaal iyo Hawdka waxaa Daraawiishta ka cabsiqabay Ingiriiska iyo Xabashida, goortuuse saldhigtay Eyl cabsidii waxay la soo deristay Talyaaniga oo ay ugu wacnayd baqdin uu ka qabay inuu Sayid Muxamed gacan ku siiyo Kacaankii ka dhashay Sh/Hoose dagaalkuu kula jiray gumeysiga. Si arrintaas looga hortago ayuu gumeysiga la soo degdegay heshiis nabadgelyo ah inuu la dhigto Sayid Muxamed loona aqoonsado inuu ka taliyo Nugaal.

16kii Oktoobar 1904tii, Qonsulkii Talyaaniga, Pastalozza, ayaa Sayid Muxamed kula kulmay Ilig oo hadallo kula yeeshay waxayna isla meel dhigeen inay heshiis nabadgelyo isla galaan. Heshiiskaas waxaa la soo gabagabeeyay [61]5tii Maarso 1905tii, Sayidka iyo Daraawiishta waxaa loo soohdimeeyay dhulka gobollada Nugaal iyo Hawd. Sayidku goortuu heshiiskaas saxiixaayay waxuu raaciyay erayadaan Carabiga ah "WAL QUNSUL YACARIF AL XAALAH" oo macnaheedu yahay (Qunsulku waa ogyahay xaaladda) uu ku muujiyay siduu uga xun yahay

[60] Eeg Lifaaqa R

heshiiskaas gumeysiga ugu qoondeeyay dhaqdhaqaaqiisa dhul kooban, taasoo ka soo horjeeday himiladiisii ahayd mideynta Soomaali Weyn oo hoos timaada xukun Soomaaliyeed. Heshiiskaas Iligeed Daraawiishta waxuu siiyay muddo oo ay dib u xoogeysato yeelatana karaan rogaalcelin hor leh Ingiriiskuna ku dhigto barkin dheer, kol haddii oo ay Daraawiishtu dalka uu gumeysto uga guurtay. Hasayeeshee, Talyaanigu waxuu rabay inuu kala ilaaliyo Boqor Cusmaan, Yuusuf Cali Keynadiid iyo Daraawiishta si aanay isugu garabsan dagaallada ka socda Sh/Hoose iyo tan dhexe, taasoo aan u suuragelin. Daraawiishta wey soo rogaalcelisay oo koofurta Soomaaliya ayay lugaha lagashay taniyo intay ka qabsatay Gaalkacyo saldhiggeeda weynayna ka dhigatay qalcadda la baxday Cagadhiig ee Beletweyne, ciidankii Talyaaniga ee degganaa Buulo Burtena cagta marisay. Sayid Muxamed halkaas kuma ekaaninee waxuu garab iyo gacanba siiyay Soomaalidii Koofurta kula dagaallamaysay gumeysiga Talyaaniga.

12kii, Juunyo 1913kii, ayaa Ingiriiskii Berbera fadhiyay war waxuu ku helay magaalada Berbera mooyee dalka intiisa kale, halbowlayaashood marinnada ganacsiga oo ay socotada Berbera ku nooleyd, inay Daraawiishi gacanta ku dhigtay dabadeedna Ingiriisku isku deyay inuu ilaaliyo marinnadaas u dhexeeya ganacsiga socotada aagagga Berbera iyo Burco. Si arrintaas uu u furdaamiyo waxuu dhisay ciidan la magacbaxay Ciidanka Rakuubleyda Soomaaliyeed (Somali Camel Corps) waxuuna maddax uga dhigay Dhamme Richard Corfield. 8 Agoosto 1913kii, Daraawiishta oo ka soo laabatay duullaan oo ay ku weerartay degmooyin ku yaalay aagga degmada Oodweyne hanti waxay lahaayeenna gacanta ku dhigay, ayay raacdo uga soo birmadeen degmada Burco 300 oo hantiileyaashii xoolaha laga dhacay iyo Ciidankii Rakuublayda uu Corfield hoggaaminaayay oo isasoo biirsaday. Waxay soo garabmareen xoolihii oo Daraawiish meel dhexe marinaysay waxayna u fadhiisteen Buurta Dulmadoobe oo marinkoodu ku abaarnaa. Goortuu waagii dilaacay bishuna ay ahayd sagaal, ayaa Daraawiishtoo aan cabsi qabin xoolihii duudda caasha u saartay; goortay buurta kaabigeeda ku dhowayd oo ahayd meeshii colkii gumeysiga joogay, ayay xoolihii hojisay dagaalna ugu hubqaaday; dhawr tacshiiradood goortii lays dhaafsaday, Richard Corfield oo u madaxda ahaa colkii gumeysiga ayaa lagu dilay, Dhamme G. H. Summedna si xun loogu dhaawacay xogaagii ka haray ciidankii gumeysigana jiqda ku yaaceen. Goortii Daraawiishta xarunta ku laabatay xoolahii oo ay soo dhacdayna galbisay, Cismaaciil Mire oo ka mid ahaa madaxdii colka Daraawiishta, ayaa tix gabay ah ku warbixiyay siduu dagaalka u dhacay Sayidkuna, isagoo ay raynrayn ka badatay, ayuu Corfield u tiriyay gabaygaan fariinta ah oo caanka noqday waxuuna yiri:

Adaa Koofiloow jiitayaan, dunida joogeyne
Adigaa jidkii lagugu wadi, jimic la'aaneede
Jahannama la geeyoow haddaad, aakharuu jahato

Nimankii jannow kacay war bay, jirin inshaaalleeye
Jameecooyinkii iyo haddaad, jowhartii aragto
Sida Eebahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

Daraawiish jikaar nagama deyn, taniyo jeerkii dheh
Ingiriis jabyoo waxa ku dhacay, jac iyo baaruud dheh
Waxay noo janjuunteedba waa, jibashadiinni dheh

Jigta weerar bay goor barqaa, nagu jifeeyeen dheh
Anigana jikray ila heleen, shalay jihaankii dheh
Jeeniga hortiisey rasaas, igaga joojeen dheh

Jiiraayaday ila dhaceen, jilic afkoodii dheh
Sida kuugu jeexeen magliga, jararacdii sheego
Billaawuhu siduu ku jarjaray, jiirarka u muuji

Naf jeclaysigi baan u iri, jaallow iga daa dheh
Jaljalleecadii baa wadnaha, jeex ka soo ruqay dheh
Jeedaaladii baa indhuhu, kor u jillaadmeed dheh

Jimic kagama helin tuugmadaan, jiriyay ruuxii dheh
Markaan jiiq iraahdaba afkay, iga jukeeyeen dheh
Dhaaxaan jaleecaye dheg baan, jalaq la ii siin dheh

Goortaan jarreerana gefoo, nolol ka jaanqaaday
Sidq jananadii hore tashiga, igu jaguugnaa dheh
Taladii jinnigu ii hormaray, jaasadeed helay dheh

Jiidaha xanuunka leh goortii, la igu jeeraarshay
Jibaadka iga soo baxay dadkii, jiifka qaban waa dheh
Goortay, rubaddu jaw iga tiri or bay, iga ag jiibsheen dheh

Jirkaygii bahal baa cunoo, jiitay hilibkii dheh
Jurmidiyo baruurtii dhurwaa, jugux ka siiyaa dheh
Jiljilladiyo seedaha tukay, igaga jaadeen dheh

Haddaan lays jikaareyn tolkay, laga jil roonaa dheh
Weligood waxaa lagu jaraa, jilibdhig duullaan dheh
Daraawiish waa jibindhowga iyo, jowga soo bixi dheh

Sannadkii 1906dii, Daraawiishta goortay xoog iyo hantiba yeelatay, Sayid Muxamedna ku tallaabsaday inay Daraawiishta doc walba jahaad ku qaado, ayay magaalada Cadan Ingiriiska iyo Talyaaniga wadajir shirqool ula sameysteen nin la oran jiray Cabdalle Shixiri oo arrimaha dibbada Daraawiishta u xilsaarnaa, haseyeeshee, waagaa Cadan uga baxsaday shirqoolkaasna ka qaybqaatay si Sayid Muxamed xagga diinta loogu ceebeeyo. Sheekada oraahdu waxay leedahay: "Inuu Cabdalle Shixiri Maka ugu tegay Sheekh Muxamed Saalax una soo qoray warqaad lagu dayrinayo Sayid Muxamed oo oraneysa: "Dariiqa toosan waad ka weecatay sidaa daraadeed isma sheegano ee ha ii soo qorin anna kuu soo qori maayo". Sheeko kaloo oraahdu waxay leedahay inaanu Cabdalla Shixiriba Maka tegin oo Sheekh Muxamed Saalax wax warqaad ah ka soo qaadin, haseyeeshee, ay warqaaddu ahayd mid oo ay wadajir u soo qoreen Ingiriiska, Talyaaniga

iyo Cabdalla Shixiri. Si kastaba ha ahaatee, warqaadaas waxaa loogu talagalay in ay dhiillo iyo qalaanqul geliso halgankii Daraawiishta doodna ka dhaliso xarunta lagu dhex daadshay. Goortuu qaadigii akhristay Daraawiishtuna ogaatay waxaa abuurmay dhiillo, qalaanqul iyo kalsoonidarro oo ah siduu gumeysigu ugu talagalay. Ugu dambeystii waxaa ka dhashay shirqoolkii la baxay "Canjeel talo waa" oo la damcay in Sayid Muxamed lagu dilo mase hirgelin.

Bishii Jannaayo 1908dii, Daraawiishta waxay, rasmi ahaan, u billawday dagaalladeedii oo ay kala soo horjeeday gumeysteyaasha. Kolkaan iyaga lagalama hor'imaan duullaanno kale, balse gumeysiga Ingiriiska ayay sandulle ku noqotay inuu dib ugu laabto dhulka xeebaha ah. Halgankii Sayid Muxamed halkaa kuma ekaan ee waxuu noqday mid laga aqoonsaday caalamka waxaana ugu wacnaa guulahii uu ka gaaray xagga dagaalka ayna u wehelisay kuwo siyaasadeed. 12kii Juunyo 1912kii, waxuu xiriir la yeeshay Lij Yaasu oo goortuu geeriyooday Menelik oo Abtigii ahaa, Dhaxlayna saldanada Xabashida. Lij Yassu waxay dhalashadiisu ahayd Oroomo waxaana dhalay Suldaan Cali oo Muslim ahaa oo dabadeed goortuu diinta Masiixiga u wareegay uuna guursaday Menelik walaashiisa, la baxay Raas Mikael. Lij Yaasu, goortuu oggaaday dhalashadiisa ka hor inuu aabihiis Islaam ahaa, ayuu muslimay oo xiriir iyo dhaqan la yeeshay dadka Islaamka ah ee dalka Xabashida gumeysto degganaa waxuuna xarunta Boqortooyada u raray Harar oo magaalo Islaam ahayd. Goortuu Lij Yaasu falkaas ku kacay, ayaa waxaa ka soo horjeestay kaniisadii Masiixiga Qibdiga iyo Xabashadii reer Shawa oo ay horkacayso Boqorada Taitu dabadeedna uu xiriir la yeeshay Sayid Muxamed. Lij Yassu Waxuu Sayid Muxamed kula kulmay, magaalada Jigjigga 1916kii, waxayna isku dhaafsadeen aragtiyo siyaasasdeed iyo siday isku kaashan lahaayeen. Lij Yassu waxuu Sayid Muxamed u diray nin Jarmal ah oo la oran jiray Emil Kerch oo hubka daraawiishta u sameeyo, haseyeeshee, xiriirkaas kadib, ayaa Xabashidii reer Shawa qabatay nin Lij Yaasu uu u diray Sayid Muxamed oo ay ka ogaadeen xiriirka labadaas nin dhexmaray. 26kii Diseembar 1916kii, waxaa Lij Yaasu lagu qabtay shirqool oo ay wada abaabuleen Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo kaniisadda Qibtiga ah waxaana Boqortooyadii loo dhiibay gabadhii Menelik Zaiditu oo iyaduna waa dambe kala wareegay Tafarra Makonon "oo la baxay Xayle Silasye".

Sannadkii 1918kii, goortuu dhammaaday Dagaalkii Koowaad ee Dunida, ayuu Ingiriisku u gacan bannaanaaday siyaasadihiisii gumeysiga waxayna la ahaan waayday inuu xeebta ku koobnaado uuna Sayid Muxamed dalka intiisa kale u taliyo. Oktoober 1919kii, golaha wasiirada ee Xukuumadda Ingiriiska ayaa fadhi ka yeeshay arrintaas waxuuna go'aanshay, in Sayid Muxamed iyo Daraawiishtiisa weerar kama danbeys ah lagu qaado, wax kastaba ha ku kacdee. In arrintaas fushana waxaa qalqaaliyay oo qayb weyn ka qaatay Winston Churchill oo waagaa wasiir ahaa. Durbadiiba waxuu Ingiriisku billaabay inuu magaalooyinka xeebaha gegi diyaarado ka dhiso uu dhigto shidaal, saanad iyo sahay uu dagaal ku galo. Si kastaba ha ahaatee, dagaalkaas tabahii loo soo qorsheeyay waxay ahaayeen in Daraawiishta diyaarado lagu duqeeyo dabadeedna ciidan lugta ah dhammeystiro waxii ka haro. Si qorshahaas loo fuliyo Ingiriisku waxuu keenay ciidan toban kun ka kooban oo Soomaali Rakuubleey ah, Hindi iyo Suudaan. Isla goortaas waxuu kaloo Badda Cas keenay markab diyaaradaha qaada oo la oran jiray "ARK ROYAL" sidana koox dayuurada ah oo la oran jiray "Z SQUADRON" oo duuliyeyaashooda tababar iyo isku kalsooni ku soo yeesheen Dagaalkii Koowaad, 1914kii taniyo 1918kii.

Ciidankii gumeysiga Ingiriiska u habaystay inuu Daraawiish kaga weerarro cirka iyo dhulka ayaa, 25kii Jannaayo 1920kii, Daraawiishta meelay joogtaba ku weerarray siddeed diyaarad oo ahayd Taariikhda Afrika waagii ugu horreysay oo ay diyaarado ka dagaal galaan

waxayna duqeeyeen Mirishi oo ahayd xarunta Daraawiishta oo Sayidkuna goortaas fadhiyay iyo Baran oo iyana ahayd qalcad Daraawiisheed. Maalintii xigtay waxay duqeeyeen Taleex oo Ingiriiska u gacan gashay, 12kii Febraayo 1920kii, weerar lagu qaadayna Ceeldheere diyaaradahii midkood ayay Daraawiishta ku soo ridday. Inkastoo dayuuradaha iyo ciidamadii Lugta Ingiriiska ay nabarro xun Daraawiishta u geysteen haddana xoogeedii iyo laxaadkeedii ma dhiman waxayna ku talajirtay inay col u qalqaaliso Ingiriis iyo kuwii raacsanaa, haseyeeshee, Adduunku ma dhammi buu dhashaye, duumo iyo furuq ayaa Daraawiishtii ku habsaday weyna tabar dhigtay, raggii madaxada u ahaana badidoodii geeriyoodeen. Dabadeed Sayidka iyo waxii Daraawiishta ka haray waxay tageen Goonaha Iimey ee webi Shabeelle dhankiisa sare ah.

Inkastoo si toos ah wax noogu mariya aanan helin, kutirikuteen waxaan ku maqalnay Cali Dhuux ayaa gabay digasho ah Daraawiishta u mariyay goortay jabeen. Waxaa gabaygaas halkudhigiisu ahaa:

"Waa lagu digtaa ruux hadduu ku darraan jiraye
Bal dayooy wadaadkii wakaa sii dabayshadaye"

Sayidku waxuu kaga warceliyay gabayga soo socda ee loo yaqaan Dardaaran uu kaga warramay dad iyo duunyo waxii lumay oo dhan, duumadii iyo furuqii naafeeyay, tabaha gumeyisga iyo tallaabooyinkuu maagganaa iyo cirib xumada kuwa u adeega ku dhici doonta:

Min daroofle aqal daabya weyn, dadab la heedaamay
Dermo iyo firaash lagu gam'iyo, daalam iyo googgo
Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta

Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheere[61]
Dab wax gubi dayuurado kufrigu, nagu dul gawdiishay
Dumbuq subuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiillay

Dakhal jabay wixii daar burburay, ama bukaar duugmay
Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifay
Diric iyo waxay shiikh dileen, ama duq waayeela

Lo' dirdira wixii deebal geel, nala ka sii daayay
Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyay
Dirrowgii qabsaday reerkayaga, dalankicii gaaray

Dulkneefle kaan soo ag maro, duullan ka hor geyska
Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaseedku

---

[61] Ceeldheere: Ceel 20 mayl u jira Ceerigaabo kana xiga geesta Koofur Galbeed.

Doonyaha shammalka ah haddii, dakhalka loo laalo
Maruun bay dabeylaha sidaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jiray, daraxu caynshaaye

Dabro cudura duumo iyo furuq, waxaa dadkii xaaqay
Annagu diidi maynoo mar baa, daayin noo wacaye

Ninkiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado e
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mowdka dabaqdiisa
Ninkii haatan angu diganayow, dan iyo xeeshaa

Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, doocna nagu cayman
Duuflaalladii naga harow, dan iyo xeeshiina

Doodna waxaan ka leeyahay dadkeer, hadalka deyn waayay
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku waxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne

Dagaalkii Nasaarada anaa, daalib ku ahaaye
Dalka ma lihid anigaa ku iri, doora weynahe e
Daliilkii Rasuulkii anaa, doonayoo halaye

Anaa diiday maantuu lahaa, deeqdan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Anaan labada daarood tan hore, darajo moodayne

Goortay duushay gaaladu anaan, daabbaddu rarine
Goortey dareereen anaan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqyada waddada, dowga sii marine

Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaalkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyo, diinta caasiyne

Dadyow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw yeelan
Ama dhaba darooryiba jiryaye, doxorka yeelkiisa
Nin ragay dardaaran u tahaye, doqon ah moogaado

Dawo lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane
Waa idin dagaayaa kufriga, aad u dabceeysaane
Dirhankuu idiin qubqhayaad, dib u go'aysaane

Marka hore dabkuu idinka dhigi, dumar sidiisiiye
Marka xiggana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunyo dhaafsada e

Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari[62] iyo, Iimey[63] dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan berruu, siin la soo degiye

Sayid Muxamed waxuu u geeriyooday duumo, 23kii Nofeembar 1921kii. Kolkuu Sayid Muxamed geeriyooday ayuu gumeysiga nabad u degay kanshina u helay inuu qabsado danahuu ka lahaa dalka Soomaaliyeed. Siduu Sayid Muxamed saadaaliyay waxaa Soomaalida durbadiiba la dul dhigay culeyskii gumeysiga waxaana dhacday in Ingiriisku ku soo rogay 1922kii, mooro walba oo ari ah in laga bixiyo wan canshuur ah ceelasha Burcona geela cabaa lacag laga bixiyo, arrintaasoo Soomaalidu ku gacan seyrtay dabadeedna dagaal ka dhacay magaalada Burco lagu dilay xaakinkii Ingiriiska u fadhiyay, Mr Gibbin (GIIB). Waxaa arrintaas ka soo baxday, inkastoo rag badani rasaasta ku rideen, misana in la qabay in nin la oran jiray Faacuul Aadan Jugle oo degmada Burco ku dhashay rasaastiisu inay ku dhacday.

Dacwadii waxaa loo dhiibay inuu qiimeeyo qaadigii magaalada Burco Sheekh Muxamed Yare waxuuna ku qiimeeyay saddex iyo toban halaad iyo hal daloolkeed. Ingiriisku waa ka carooday qiimayntaas, sidaas daraadeedna qaadigii ayaa laga qaaday xilkii dadkiina lagu hawaaniyay Mag soddon kun halaad oo ay bixiyeen, waxayse dhalisay inuu Ingiriisku dalka ku soo rogin canshuur dambe taniyo dhammaadkii Dagaalkii Labaad.

Daraawiishta aad bay u hanaqaaday Tobankii sanoo rogaalcelinteedii ugu dambeeyay waxayna isku baahisay in yar mooyee, dalka Soomaalidoo idil. Goortay hanatay dhulkii gumeysiga heshiiskii Eyl ugu qoondeeyay ayay inta Buuraha Hadaaftimo ka rogan mooyee, isku ballaarisay oogada Sanaag iyo Waqooyi Bari. Waxay Qalcado ka dhisatay Baran iyo Jiidali, Galbaribuur oo Maydh dushiisa ahna ka dhigatay rug ka ilaaliso Badda Cas. Waxay kaloo u gudubtay Koofurta ay Gaalkacyo ka dhigatay xuddunta isgaarsiinta xarunta daraawiishta qalcadaheeda Koofureed dabadeedna u gudubtay Jubbada Sare iyo Galbeed lugtana la gashay Banaadir.

---

[62] Adari (Harar) waa magaalo fil weyn oo dalka Soomaalida Galbeed ka mid ah.

[63] Iimey : Buur go'an oo ku taal dhanka sare ee webi Shabeelle

c) QABSASHADII GOBOLLADA DHANKA MIDIGTA EE WEBIGA GANAANE

[65]Sannadkii 1872kii, Suldaankii Sanjibaar, isagoo tixgelinayay codsi kaga yimid Soomaalida, ayuu u soo magacaabay magaalada Kismaayo Waaligii ugu horreeyay ee la oran jiray Seef Nuur, waagaa intii ka dambeysayna, magac ahaan, ayaa magaalada Kismaayo u hoos imaan jirtay Saldanada Sanjibaar. Inkastoo Saldanada Sanjibaar magaalada Kismaayo sheeganaysay ayna aqoonsadeen dawladaha gumeysiga Yurub, haddana awoodda Saldanadaas ma gaarsiisnayn dadweynaha Soomaaliyeed. Sidaan horayba u soo sheegnay sannadkii 1875kii, Kadawi Ismaaciil Baasha waxuu soo diray afar markab uu hoggaaminayo nin la baxay "Mac Qaalib" oo dhalashadiisu ahayd Scotish si uu u sahamiyo Kismaayo iyo hareeraheeda. Mac Qaalib iyo ciidamadiisa waxay qabsadeen Kismaayo iyo tuulada Jumbo saddex bilood kadibna, goortuu Ingiriisku ka dooday tilaabadaas ay Masar qaaday, ay ka noqotay.

[66]Sannadkii 1880kii, Waaligii Suldaanka Sanjibaaoo soo dhoweynaayay markab Faransiis oo Kismaayo booqasho ku yimid, ayaa marsada calammo saaray. Soomaalida oo tuhuntay, inay Yurubta Galbeed doonayso magaalada ogaal la'aantooda la wareegto, ayaa calammadii u jeexjeexday caro ay ka qabtayna tilaabadaas uu Waaligu qaaday awgeed waxayna dhambaal dood ahna u dirtay Waaliga. Ciidankii Waaliga oo doonaayay awgeed inay xirxiraan Soomaalidii arrintaas ka danbeysay ayaa dagaal isaga horyimid, haseyeeshee, dood dheer dabadeed laga heshiiyay.

[67]Sannadkii 1886kii, Ingriiska iyo Jarmalka oo ku tartamayay Afrikada Bari, ayaa ku heshiiyay Suldaanka Sanjibaar inay u aqoonsadaan marsooyinka Afrikada Bari toban mayl oo gudaha ah oo ay ka mid yihiin qaar marsooyinka Soomaaliyeed taniyo Warsheekh. Labadaas awood ee Yurubta Galbeed waxay qeybsadeen dhulka gudaha oo ku dadban jiitin marta waqooyi galbeed taniyo webiga Waanga dhanka koonfureedna xeebta Harada Victoria-Nyanza. Ingriisku wuxuu qaatay dhanka Waqooyi Jarmalkna dhanka Koonfureed. Ingriisku waxuu kaloo oggolaaday doodduu Jarmalku ku sheeganaayay maxmamiyadda saldanada Wiitu iyo deexda ka soo horjeedda saldanadaas. Heshiis kaloo ay wada gaareen, 1dii Luuliyo 1890 ayuu Jarmalku isagoo tixgelnaayo rabitaanka Ingriiska kol hadduu oggolaaday in la wada qeybsado dhulka Heligolan, ayuu uga baxay maxmaiyaddiissii Wiitu hareeraha deexda saldanadaas uuna ka noqday sheegashadii waqooyiga Waasow (Taana). Tallaabadaas Jarmalku waxay keentay in dal ballaaran ee gaaraya webiga Niilka uu hoos yimaado awoodda gumeysiga Ingriiska Jarmalkuna u aqoonsado Zanjibaar, Pemba iyo dhul gudaha ee u dhexeeya Laamu iyo Webiga Ganaane Maxmiyad Ingriis, dhulkaasoo dabadeed sii ballarsatay shirkadda Iingriiska (Imperial East Africa Company).

Shirkadda ujeeddadii loo dhisay waxay ahayd ganacasi, haseyeeshee, 1888, waxaa loo rogay inay mamusho dal aad u ballaaran aan si dhab ah loo aqoon iyadoo wakiil ka noqotay Taajka boqortooada Ingriiska.

---

[64] Corrado Zoli = Oltre Giuba (A cura del Ministero delle Colonie) B.153

[65] Sidoo kale B. 153

[66] Somali Governament - Somali penisula B. 1

[68]Sannadkii 1887kii, shirkad Ingriiska oo horay u haysatay dhulka u dhaxeeya laamu iyo Kibiini, ayaa Kismaayo u soo dirsatay laba nin oo Soomali ah si ay xayaysiin ugu sameeyaan shirkadda oo ka dan lahayd inay degmada Kismaayo ku soo fido, hase yeeshee, Soomaalidoo weligeedba il wanaagsan aan ku arkayn shisheeyaha dalkeeda soo gelaya, ayaa ka hor timid. Shirkadda waxay kolkaa ka dib calaashay maqaawiirtii degmada umana hirgelin dantey dooneysay.

[69]Intay shirkadda ka raadsaneysay suldaanka Zanjibaar inuu u oggolaado la wareegidda marsada Kismaayo, ayay Soomaalidii degganeyd oo ka war heshay arrintaas, dhiillo gashay oo ah in dalkeeda ogaal la'aanteeda la rabo in la qaato waxayna suldaanka kula heshiisay in lagu kordhiyo heshiiska shirkadda lala galaayo in canshuur laga qaado doonyaha loo ogolaanayo inay ku doolaalaan marinka webiga Ganaane. Dooni la oran jiray kenya oo ka doolaali jirtay webiga Ganaane, iyadoo aan canshuur bixin, ayaa muran ka dhexdhalisay shirkadda iyo Soomaalidoo tuhunsanayd in dalkeeda xoog lagu maquuninayo.

[70]Sannadkii 1891kii, goortuu Jarmalku ka guuray dalka saldanada Wiitu ka dib, heshiis ay la gashay sulddaanka Zanjibaar ayey shirkadda Ingriisku kula wareegtay saldanad Wiitu iyo degmada Kismaayo oo idil, iyadoo waagaa shirkadda daneyneysay inay ka hesho dhaqaale canshuur iyo marin isku xira webiga iyo badda oo ay doonyaha mari karaan, arrintaasoo aan kolna u suuragelin.

[71]Intayna shirkadda degmada Kismaayo la wareegin, ayay Soomaalidu dhul ka iibisay ganacsato Hindi ah waxayna ka soo diiwaan gashatay Zanjibaar. Mr. Todd ooshirkadda ka wakiil ahaa, isagoo cuskanaayo heshiis ay shirkadda la gashay suldaanka Zanjibaar ayuu ku dooday dhulkaan la deggenayn oo idil inay shirkadda leedahay, dooddaasoo ay Soomaalidu oggolaan. Haseyeeshee, waxuu Mr. Todd codsaday in shir laysugu yiwaado oo lagu furdaamiyo arrintaas. Soomaalidu waxay ka qaybgalkaas shirka shardi uga dhigtay inay hubkeeda la timaado waana laga oggolaaday. [72]Shirka waxuu qabsoomay 1dii Febraayo 1893kii, intaan shirka qabsoomin waxaa Mr. Todd uu la jiray Conte Luvatelli oo ahaa Talyaani u yimid Kismaayo inuu Sahmiyo webiga ganaane, ayaa la qorsheeyay ciidan badmaaxya ah oo saarnaa markab marsada fadhiyay oo la oranjiray H.M.S Widgeon inay yimaadaan guriga waaliga goortii loogu baaqo calanka guriga saaran oo la dejiyo. Shirka goortuu furmay waxaa hadal dheer ka soo jeediyay Mr. Todd oo uga dan lahaa inuu ku sugo intay ciidankii lala ballamay ka yimaadaan guriga waaliga. Shirku intuu socday ayuu Mr. Todd dareemay inaan heshiiskuu doonaayay lagu gaareyn shirka waxuuna dabadeed u holladay inuu shirka ka saaro odayaashii uu ka dareemay inay ka soo horjeedaan lana haro intii u debacsanayd. Somaalidii oo idil ayaa durbadiiba fadhigii ka kacday dagaal dhab ahna

---

[67] Corrado Zoli- oltre Giuba B. 155

[68] Sidoo kale B. 155

[69] Sidoo Kale B. 155

[70] Sidoo Kale B. 156

[71] Sidoo Kale B. 156

halkaa ka aloosmay oo ay ku dhinteen dhawr Soomaali ah laguna dhaawacay Mr. Todd iyo nin kaloo Ingriis ah. Dhacdadaas kadib Ingriisku waxuu Kismaayo u soo diray ciidan boqol oo Kinderab ah uu hoggaaminayay Mr. Hamilton oo bishii Agooosto gadooday qaarkiisna ku biiray Soomaalida. Arrintii Kismaayo oo ku billaabatay dano ganacsi waxay isu rogtay dagaal gumeysi oo noqotay mid ka tan weyn awoodda shirkadda. Soomaalidu waxay kedis ku weerartay saldhig ku yaalay Buurta Tinkili ee u dhow tuulada Goob-Weyn halkaasoo lagu dilay Mr. Hamilton laguna laayay badi ciidankiisa. Ayaamo ka dib waxay sidoo kale Soomaalidu weerartay magaalada Kismaayo, haseyeeshee, waxaa caabiyay ciidamadii Ingriiska.

[73]Bishii Febraayo 1894kii, waxay Soomaalidu weerar ku qaaday tuulada Goob-Weyn, halkaasoo Ingiriiska iyo ciidankiisa khasaaro aad u ballaaran lagu gaarsiiyay Soomaalidana dad badan uga dhintay. [74]1dii Luulyo 1895kii, shirkaddii "British East Africa Association" waxay maamulka gobolkaas ku wareejisay Dowladda Ingiriiska waxaana 1895kii, maamule loo magacaabay Mr. Harding halkaasoo ay ka billaabatay gumeysigii Ingiriiska ee deggaanka dhanka midgeed ee Ganaane. Bishii Maarso 1896kii, waxuu qabsaday Gosha sidaas ayuu ku hantay gumeysiga Ingiriiska webiga dhankiisa midig taniyo Doolow oo ah dhul masaafadiisu dhantahay 90,000 Km oo afar geesood ah. [75]Sannadkii 1910kii, waxaa dhulkaas cusub loo baxshay Jubaland waxaana loo magacaabay sarkaal sare oo agaasima. Degmada Wajeer waxaa iyana gacanta lagu dhigay sannadkii 1912kii, sidoo kale, bishii Luulyo degmada Mandheera ayuu qabsaday, isagoo ugu soo marmarsooday inuu ka daafacayo weerar kaga yimaado dhanka Xabashida. Habkaas ayuu gumeysiga Ingiriisku gacanta ugu dhigay dhanka midig ee Webiga Jubba.

[76]Sannadkii 1914kii, waxuu gumeysiga Ingiriiska sameeyay soohdin dhalanteed ah uu dhexmarshay Gobollada Waasow iyo Jubaland, isagoo gobolka hore ku magacaabay Degmooyinka Soohdinta Waqooyi (NFD) ee Kenya. Soohdinta iyo Jiritaanka maamul cusub oo la sameeyay ma hakin dhaqdhaqaaqii gobannimodoonka Soomaaliyeed, taasoo gumeysiga Ingiriiska ku abuurtay walbahaar waagii uu socday Dagaal Weynahii Koowaad. Sidaas daradeed gumeysiga Ingiriiska waxaa hawaan ku noqotay inuu isaga baxo degmada Wajeer iyo degmooyinka Koofur Galbeed idil ahaantood intii u dhexeeysay [77]sannadyadii 1916-1917. Ingiriisku waxuu [78]heshiis uu ku wareejinaayo J/Land la gaaray gumemeysiga Talyaaniga, 15kii Agoosto 1924kii, waxaana gobolkaas Talyaaniga loo siiyay abaalgud ay isku bahaysteen Dagaalkii Koowaad ee Dunida oo looga soo horjeeday Jarmalka. Kala wareejintaas waxay dhacday, 29kii Luulyo 1925kii, ayadoo Gobolka Jubaland muddo sannad ah Talyaaniga, gaar

---

[72] Corrado Zoli = Oltre Giuba (A Cura del Minestero delle colonie) B.156

[73] Sidoo kale B. 157

[74] Sidoo kale B. 161

[75] Somali Covernament - Somali Peninsular B. 13

[76] Sidoo kale. B.13

[77] Sidoo kale B. 14

ahaan, u maamulayay dabadeedna ku soo daray dalkii Soomaaliyeed uu horay u gumeysanayay. Tillaabadaas gumesiga qaaday waxay dan u ahayd dadweynaha Jubaland oo ku soo biiray dhulkoodii hooyo, haseyeeshee, [79]Ingiriisku waxuu kala haray si uu Kenya gaashaan uga dhigto, Soomaalidii ku noolayd saddex geesoodka ay masaafadiisu dhantahay 12,000 oo mayl afargeesood ah dabadeed loo baxshay "Northern Frontier Disrtict". Dib u habeyntaas soohidinta labada gumesyi waxay dhexda ku dhufatay dalkii Soomaalida, dhaqan ahaan, daaqsinka u ahaa, iyadoo innaba laga tixgelin dadkii degganaa.

Ingiriiska dalkuu gumeysto ee Kenya waxaa loo sameeyay seero cusub, iyadoo lagu biiriyay dhulalkii waagaa gumeysiga Ingiriisku qabsaday oo ahaa dhinaca Koofureed: Saldanada Wiitu (Laamu iyo Kipini) iyo dhulka xeebta ee Waaso, sidoo kale dhanka Waqooyi ee Turkaana iyo Saburu waxaana lagu soo biiriyay degmooyinkii Soomaalida ee Waaso iyo qaybtii ka hartay Jubaland ee Habaasweyne kadibna geddigood lagu magaacabay Gobolka Waqooyi ee Kenya.

Gumeysigii Ingiriiska si uu Soomaalida uga go'doomiyo qaybaha dalkeeda uu Kenya ku daray waxuu soo saaray xeer u gaar ah uu ku hakinaayo dhaqdhaqaaqa gelitaanka iyo ka bixitaanka gobolkaas. Xeerkaas gumeysigu waxuu gobolka, inta badan, Soomaalidu deggan tahay ka go'doomiyay Kenya inteeda kale taasoo Soomaalida u keentay dibudhac bulsho iyo mid dhaqaale.

---

[78] Somali Government-Somali Peninsula. B.14

2.3. GUMEYSIGII TALYAANIGA

a) QABSASHADII GOBOLKA BANAADIR

Goortuu dhammaaday shirkii lagu qabtay magaalada [80]Barliin oo ay gumeysiga reer Yurub ku qaybsanayay Afrika, ayuu Talyaaniga u dirsaday [81]dhamme Antonio Cecchi oo ka mid ahaa sahamiyeyaashii caanka ku noqday aqoonta Qaarada Afrika, inuu dhul uu gumeysto uga soo qabto Soomaaliya soona sahamiyo aagga webiga Ganaane. Antonio Cecchi, [82]waxuu tegay Sanjibaar, halkaasoo dood dheer kadib, 18kii Maajo 1885kii, la saxiixday Suldaanka Sanjibaar heshiis ganacsi oo aan dhammeystirnayn uu Talyaanigu ku kireeystay magaalooyinka Banaadir ee xeebta Badweynta Hinidiya. Danta Suldaanka Sanjibaar u geysay inuu heshiiskaas Talyaaniga la galo waxay ahayd cabsi uu ka qabay Jarmalka oo rabay inuu ka boobo gobollada Ukami, Usukumu iyo Usenga ujeeddadiisuna ahayd inuu garabsado dawladaha Yurub qaarkood si ay Jarmalka ugaga hiilliyaan. Talyaanigu, sidoo kale waxay ula muuqatay inuu heshiiskaas ku gaaray danihiisa gumesyidoonka uu ka lahaa Afrikada Bari kana abdeystay baahida Suldaanka u qabay inuu hiillo uga garabsado dawladaha Yurub. Talyaaniga si uu Suldaanka ugu muujiyo xiriirka wanaagsan uu la yeeshay, ayuu qunsul u soo magaacabay ganacsade la oran jiray Vicenzo Filonardi oo xiriir ganacsi la lahaa Saldanada Sanjibaar.

Talyaanigu waxuu durbadiiba ku dhaqaaqay inuu raadsado dhul aan muran ka taagnayn uu ka qabsado dalka Soomaaliyeed dabadeedna uu ku tillaabsado himiladiisa gumeysidoonka kulana bedertamo gumeysteyaasha kale ee Yurub. Waxuu ilaaleystay [83]magaalada Cadale oo ugu muuqatay inay gumeysteyaasha isku haysan oo ka xigta Muqdisho 90 mayl dhanka Waqooyi Bari kuna taal xeebta Badweynta Hindiya. Waaberigii 14kii Maarso 1885kii, markab la oran jiray Paraguay oo Talyaanigu lahaa ayaa barroosinka soo dhigtay marsada magaalada Cadale waxaana ka soo degay ciidan uu hoggaaminayo Vicenzo Filonardi iyo dhamme Rosasco. Ciidanku waxuu u badnaa Carab Sanjibaar lagu soo tababaray waxaana halkaa durbadii lagu saaray calankii gumesyiga Talyaaniga. Filonardi waxuu maamulkii magaalada u xilsaaray nin Carab ah oo la oran jiray Saalim binu Saciid Al-Kheyri, isagoo ku magaacabay darajada Caqiid. Saalim waxuu askar carab ah ka soo qortay magaalada Laamu waxuuna dhisay qalcad uu magaalada ku difaaco. Soomaalidii aaggaa degganayd waxaa u muuqatay dalkoodii oo ay fac ka fac gobannimadooda ugu madaxbannaanayeen, in lagala wareegay. Habeenkii 25kii Maajo 1885kii, waxay weerarreen magaalada, dagaal aad u kulul oo socday taniyo waaberigii kadibna, ciidankii Soomaaliyeed dib u gurtay. Waxaa dagaalkaas askartii gumeysiga kaga dhimatay 6 iyo 14 kaga dhaawacantay dhanka Soomaaliduna kaga dhimatay 15 iyo 14 kaga dhaawacantay.

---

[79] Eeg lifaaqa "J" ee ku saabsan heshiiskii Talyaaniga la galay Suldaanka Sanjibaar.

[80] Eeg lifaaqa "T" xogwarrankii Antonio Cecchi

[81] Ministero delle Guerra Italiana = "Somalia" Vol.I 1938

[82] Sidoo Kale

[84]2dii Febraayo 1888kii, gumeysiga Talyaaniga waxuu heshiis maxmiyadeed la galay Suldaanka Hobyo Yuusuf Cali Keynadiid, sidoo kalena, 7dii Abriil 1889kii, Boqorkii Waqooyi Bari Cusmaan Maxamuud Yuusuf.

[85]3dii Agoosto 1889kii, Talyaanigu waxuu la saxiixday heshiis shirkadda Boqortooyada Britanya ee Afrikada Bari, heshiiskaasoo dulucdiisu ahayd in shirkadda Britanya ka kaaliso Talyaaniga siduu Suldaanka Sanjibaar uga kireysan lahaa marsooyinka Gobolka Banaadir (Baraawe, Marka, Muqdisho, Warsheekh) iyo marsada Kismaayo oo ay ku hishiiyeen inay isla maamulaan. [86]1890kii, waxaa Sanjibaar ka soo baxay markab Talyaani ah ee la oran jiray Volta, isagoo xilkiisu ahaa inuu soo sahamiyo xeebta Banaadir. Aroortii 24kii, waxuu markabka barroosinka soo dhigtay marsada Warsheekh waxuuna dhamme Amania oo ahaa taliyaha markabka, xeebta u soo diray, sahan ka kooban, toddoba badmaax iyo afceliye Carab ah uu hoggaaminaayay L/Xiddigle Zangali. Kooxdaas oo goortay xeebta ka soo degtay, durbadiiba Soomaalidii magaalada degganayd weerartay waxaana halkaa ku qurbaxay L/Xiddigle Zangali oo taliye u ahaa kooxda sahanka loo soo diray iyo hal badmaax laba kalana lagu dhaawacay. si uu u samatabixiyo kooxdaas, waxuu Markabka duqeeyay magaalada Warsheekh sahankiina, isagoo guuldarreystay, ayuu dirqi markabka ugu laabtay oo dabadeedna u dhoofay Sanjibaar.

[87]22kii Luuliyo 1892kii, Gumaysiga Talyaaniga waxuu Suldaanka Sanjibaar la galay heshiis uu ku dhammeystirayay kiradii magaalooyinka xeebta Banaadir (Baraawe, Marka, Muqdisho, Warsheekh) iyo magaalada Kismaayo oo ay maamulkeedii shirkadda Britanya la wadaagtay, kiradaasoo ahayd afartan kun Rubiyo uu bixiyo kolkuu la wareego dabadeedna afartii biloodba, uu bixiyo afartan kun Rubiyo oo kiro ah. Talyaanigu waxuu u xilsaaray maamulka gumeysiga dadban ee Banaadir shirkad oo uu madax ka yahay Vincenzo Filonardi waxaana magaceeda loo baxshay "Shirkaddii Filonardi". [88]Gumeysiga Talyaaniga waxuu gobolka Banaadir u kireystay, siduu isagaba sheegay, sababo ganacsi iyo inuu cudbi beeraha gobolka uga helaan warshadahiisa dharka sameeya, waxaase u qarsoonayd inuu dalka Soomaaliyeed kaabad ka dhigto oo uga gudbo dalalkay deriska yihiin oo bad xiranka ah, Gaalla iyo Sidaamu, uuna ku fidiyo ganacsigiisa ugana ribaxsado marsooyinka Soomaaliyeed uu gumeysto.

[89]13kii Jannaayo 1893kii, waxaa magaalada Baardheere tegay dhamme Ugo Farandi, isagoo wakiil ka ah shirkadda Filonardi waxuuna heshiis maxmiyadeed la galay Suldaankii Baardheere Cabdiyow Cusmaan.

---

[83] Eeg lifaaqa "J".

[84] Eeg lifaaqa "X".

[85] Ministero della Guerre Italiana = "Somalia" Vol.I 1938

[86] Sidoo kale

[87] Eeg lifaaqa T.

[88] Ministero della Guerra Italiana - Somalia - Vol. I 1938

[89]3dii Oktoobar 1893kii, ganacsade Filonardi oo ay weheliyaan dhamme Ugo Farandi, Signor Paunti iyo ciidan Carab ah ayaa ka soo baxay Sanjibaar, iyagoo saaran markab la oran jiray "Staffetta", inay la wareegaan Gobolka Banaadir. Goortay ka soo degeen marsada magaalada Marka ayaa durbadiiba waxaa weerarray Soomaalida waxaana ablay lagu dilay L/Xiddigle Maurizio Talmone. Talyaanigu waxuu duqeeyay magaalada dagaal adag kadibna qabsaday; sidoo kalena magaalada Xamar iyo Warsheekh, halkaasoo xukunkii dadbannaa ee gumeysiga Talyaaniga ka billawday. Isla waaga Ingiriiska iyo Talyaaniga waxay ku heshiiyeen inuu Talyaaniga ka haro doodii uu ku sheeganayay degmada Kismaayo, isagoo Ingiriiskuna u aqoonsanaayo inuu Talyaaniga gumeysigiisa ku fido gobollada Kafa, Walega, Boorana, iyo Sidaamu.

[91]18kii Nofeembar 1893kii, dhamme Vittorio Bottego iyo dhamme Ugo Farandi oo hoggaaminayaan ciidan ka kooban 250 askari ayaa qabsaday Saldanada Luuq, iyagoo heshiis la galay Suldaanka Luuq Cali Xasan Nuur. Magaalada Luuq waxay ku taal dhanka Koofur Galbeed u xaggeeya Soomaaliya waxaana waagaa ku loollamaayay Gumaysigeeda Xabashida iyo Talyaaniga waxayse goor dambe ku adkaaday Talyaaniga oo ka dhigtay saldhig ganacsi. Vittorio Bottego waxuu dabadeed sahan ugu gudbay dalka Gaalla iyo Sidaamu uu Talyaanigu danaynaayay inuu ganacsigiisa ku fidiyo halkaasoo lagu dilay.

[92]25kii Nofeembar 1896kii, ciidan uu hoggaaminayo dhamme Antonio Cecchi oo ahaa xaakimkii ugu horreeyay gumeysiga gobolka Banaadir, ayaa Muqdisho uga ambabaxay sababo gurracan, isagoo u jeeda Saldanada filka weynayd ee Geledi. Shan saacadood goortuu ciidankaas sii socday ayuu ku hakaday tuulada Lafooley, si uu ugu habeendhaxo. Madaxdii Soomaalida ee aaggaa degganayd, Muudey Doobaale iyo Sheekh Abiikar, goortay ogaadeen ujeeddada gumesyiga waxay durbadiiba abaabuleen dagaalyahannadii Soomaaliyeed waxayna isku habeyeen inay gumesyiga ka saaraan degaankooda. Iix nin ayaa isla habeenkaas dhuumaalaysi ku gashay xeradii Talyaaniga waxayna ablay ku dileen ilaaladii dabadeedna xooggii Soomaaliyeed oo u qaybsanaa laba horin oo ay kala hoggaaminayeen Ibrahim Muxamed Isaaq iyo Fiidow Cabdi Macow, ayaa xeradii weerarray, halkaasoo uu ka aloosamay dagaal socday taniyo aroortii. Antonio Cecchi, goortuu ogaaday in dagaalka looga taag roon yahay, ayuu ciidankiisa faray inay dhanka Muqdisho u gurto dabadeedna Antonio Cecchi la dilay. Intuu ciidanka Talyaaniga dib u guranaayay ayaa Soomaalidii hareeraha ka weerarraysay mid midna u dilaysay waxaana ka baxsaday horjooge Vianello iyo laba badmaax kaliya (eeg khariidada).

Geeridii Antonio Cecchi kadib, waxay Dawladda Talyaaniga Gobolka Banaadir u soo magacawday, inuu xaakin ka noqdo, sarkaal ciidan ah ee la oran jiray Giorgio Sorrentino. Sarkaalkaas cusub waxuu la yimid aragtiyo isballaaris, naceeb, midabtakoor iyo qaab uu ku gumaado Soomaalida, isagoo maanka ku hayay siduu Ingriisku u gumaaday Hindidii gibilka gadduudnayd ee Ameerika iyo dadkii gibilka madoobaa ee dalka Australia. Durbadiiba waxuu Dawladda Talyaaniga u tebiyay inay Saldanada Geledi ee Shabeellada Hoose tahay saldhiga nabadgelyodarrada uga timaado gobolka Banaadir sidaa daradeedna ay tahay lagamamaarmaan

---

[89] Ministero della guerra Italiana - Somalia - Vol.I 1938

[90] Sidoo kale

[91] Sidoo kale



in lala wareego, haddii kale ayna suuragal noqon doonin inay ka dhalato Gobolka Banaadir shirkad ganacsi ee nabad ku waarta guntaana noqon doonto mid Talyaanigu hanti badan uga baxdo oo lagu hoobto guuldarrana ku dambeysa. Ujeeddada xaaḳinka gumeysiga waxay ahayd inuu qiil u helo falkuu maagan yahay inuu Soomaalida ku gumaado kuna muujiyo awoodda gumeysiga Talyaaniga dabadeedna Soomaalida xoog uga dhigo gun madiidin ah.

9kii Febraayo 1897kii, waxaa degmada Marka maamule lagu soo magacaabay nin la oran jiray Giacomo Trevis oo goortuu marsada ka soo degay ablay lagu dilay. [93]Waagaa waxaa degmada Marka ka dhashay dhaqdhaqaaq gumeysidiid ah oo ay abaabuleen Suldaanka Biyamaal Cali Ciise iyo Sheekh Cabdi Abiikar Gefle oo madax u ahaa dariiqada Saalaxiyada. Soomaalidu, iyadoo ka cabsanaysay inuu dilkii Trevis gumeysiga kaga aarsado, ayay is abaabushay iskuna boorisay wax alaale uu gumeysiga la yimaado in dhiirri iyo isku duubni looga hortago.

10kii Febraayo, xaakinkii gumeysiga Talyaaniga ee Banaadir goortuu sameeystay ciidan awooddiisa Soomaalida uu ku muquuni karo ayuuna weerarray tuulooyinka xeebta ee Nimuhu iyo Jasiira, si aan naxariis lahayna u gubay guryihii, laayay dadkii, sumeeyay ceelashii matidiina uu ku xareeyay Gareesada Muqdisho. 19kii Febraayo, waxaa iyana sidoo kale la weerarray tuulooyinka Golley, Raas iyo Lafooley si naxariisdarrana loo gubay guryihii, dadkii la laayay ceelashiina la sumeeyay.

Ciidankii naxariista darnaa oo falka aarsiga soo fuliyay, goortuu soo laabanaayay, waxaa dhabbaha ku weerarray ciidan Soomaali oo kun gaarayay waxaana lagu mooreyay tuulada Garas Baaley taniyo intuu ciidan gurmad ah oo samatabixiyay uga yimid Muqdisho waxaana dagaalkaas labada dhinacba ka soo gaaray dhaawac weyn uu gumeysiga ku waano qaato. Dadkii tuulooyinka laga soo raafay waxaa lagu dhisay qalcadda la baxday "Forte Cecchi" uu Talyaanigu u dhisay inuu ku xusuusto xaakinkii lagu dilay Lafooley waxaana loo baxshay "FORTE CECCHI".

[94]Shirkadii Filonardi oo Talyaaniga u ahayd baxnaanada gumeysiga dadban uuna dhisay Bangiga Rooma, oo muujisay inay wadi waaysay maamulkii gumesyiga dadbanaa dhibaatooyin ka soo food saaray xag dhaqaale awgii iyo Soomaalidoo hayin u noqowaaysay xukunka gumeysiga, ayaa la baabi'iyay, 1dii Abriil 1900, dabadeedna maamulkii lagu wareejiyay shirkad cusub oo la magac baxday Banaadir.

Gumeysiga Ingiriiska oo maaro u waayay la dagaallanka Ḳăcaankii Daraawiishta Soomaalidii Waqooyi, ayaa ku dooday in labada saldanadood ee Soomaalida maxmiyadda Talyaaniga taageeraan Daraawiishta Sayid Muxamed Cabdulle Xasan waxuuna Boqorka Waqooyi Bari ugu gooddiyay inuu marinnada badda ka xiri doono hadduuna joojin taageerada uu siinaayo Daraawiishta. Gumeysiga Ingiriiska arrintaas doodeeda waxuu ku wareejiyay Talyaaniga, haseyeeshee, Soomaalida Boqortooyadaas kuma ay hakan gooddiskaas iyo daandaansigaas gumeysiga waxayna uga hortagtay si dhiirran. Hishiis qarsoodi ah oo dhexmaray gumeysteyaasha oo ku saabsanaa in ciidamada Ingiriiska ee lagula dagaallamaayo Daraawiishta laga soo dejiyo marsada Hobyo, iyadoo dhawr jeer oo horayna wada galeen heshiisyo kale aan laga wargelin

[92] Ministero della Guerre Italiana = "Somalia" Vol.I 1938

[93] Sidoo kale.

suldaanka Hobyo oo dalkiisa loo adeegsanaayay marin iyo saldhig ciidameed. Arrintaas awgeed waxuu muran aad u kulul ku dhexmaray taliyahii ciidamada Ingiriiska ee ka soo degay Hobyo, Jannaayo 1903dii, S/Guuto W. Manning iyo Suldaan Yuusuf Cali Keynadiid, arrintaasoo taliyaha ciidamada gumeysiga Ingiriiska weydiistay in suldaanka lagu eedsiiyo.

27 Jannaayo 1903dii, waxaa marsada Hobyo barroosinka soo dhigtay markab la yiraahdo "CAPRERA" uu saarnaa qunsulkii u fadhiyay gumeysiga Talyaaniga Cadan waxuuna markabka dushiisa ku marti qaaday Suldaanka iyo wiilkiisa dabadeedna xiray una masaafuriyay Cadan in lagu ilaaliyo. Tillaabadaas gumeysiga Talyaanigu qaaday waxay aad uga caraysiisay dadweynihii saldanada waxayna gumeysiga Talyaaniga ku hawaaniyeen inuu dib u soo celiyo wiilkii suldaanka Cali Yuusuf laguna wareejiyo maamulka saldanada. 1dii Diseembar 1903dii, markab Talyaani oo la oran jiray "ANTE LUPE" oo sahan ku maraayay xeebta Waqooyi Bari ayaa daandaansi ugu leexday xeebta kuna hakaday marsada magaalada Durbo wuxuuna Duqa Magaalada faray inuu saaro calanka gumeysiga Talyaaniga. Duqa magaalada wuu ku gacan seyray waxuuna yiri: "FARRIINTA SIDAAS AH WAXAAN KALIYA KA OGGOLANAAYAA BOQORKA". Waxuu dabadeed taliyaha markabka Duqa magaalada siiyay laba saacadood inuu farrintaas ku fuliyo, goortay muddadii dhammaatayna magaalada duqeeyay. Markab Ingiriis ah ee la oran jiray "MOH-WAK" oo xeebtaa ku dhowaa ayaa u soo ciidmay markabkii gumeysiga Talyaaniga, goortuu isku deyayna inuu ka soo dejiyo marsada ciidan dhan siddeetan tacshiirad ayaa lagu furay waxaana durbadiiba halkaas ka aloosmay dagaal lagu dhaawacay taliyihii markabka Ingeriiska laguna hawaaniyay markabkii iyo ciidankiisaba inay badweynta u laabtaan.

13kii Diseembar, markab gumeysiga Talyaaniga oo la oran jiray "GALILEO" ayaa magaalada Durbo kol labaad duqeeyay dabadeena tegay marsada Baargaal waxuuna taliyihii markabka Boqorka u diray farriin uu ku ogeysiinaayo shilkii ka dhacay magaalada Durbo waxuuna weydiistay magdhow in laga siiyo khasaarahii soo gaaray. [95]Isla goortaa waxaa marsada Xaafuun yimid markab kale oo la oran jiray "VOLTURNO" waxuuna taliyaha markabka Boqorka ugu yeeray markabka dushiisa ugu yimaado, si ay uga wadahadlaan shilkii ka dhacay Boqortooyadiisa, hasayeeshee, Boqorku waxuu ku warceliyay in la siiyo laba ayaamood uu arrintaas uga baraaandego. Taliyihii markabka waxuu warcelintaa Boqorku u qaatay diidmo dabadeedna xaruntiisa duqeeyay.

[96]9kii Diseembar, 1903dii, kolkale Soomaalida Gobolka Sh/Hoose waxay qaadeen tillaabo oo ay ku muujinaysay gumeysi diidkeeda waxayna dishay nin Giriig ah oo u adeegaayay gumeysiga Talyaaniga lana oran jiray Marengo. Arrintaas waxay abuurtay xasilloonidarro waxayna Soomaalidu iyo madaxdeedaba isku booriyeen wax kastoo dhaca inay danaha gumeysiga is hortaagaan. Waxay mooreyeen magaalada Marka oo ay ka go'doomiyeen xiriir kastoo ay Muqdisho la lahayd; waxay billaabeen inay marinnada ku weerarraan dhaqdhaqaaqa socdaalada gumeysiga iyo inay dilaan cid kastoo laga dareemo inuu gumeysiga u adeegaayo. Goortay magaalada cuntadii iyo badeecadii Xamar uga imaanaysay ka go'day ayay gumeysigu hawaan ku noqotay inuu cuntada iyo badeecada badda soo mariyo. Lix bilood goortay magaalada

[94] Ministero della Guerra Italiana - Somalia- Vol. II 1960

[95] Ministero della Guerra -Somalia- Vol. I 1938

hareeraysnayd ayuu gumesigu isku deyay inuu xoog ku furo marinno dhuleed, isagoo Muqdisho taageero weydiistay.

22kii Maajo, 1904tii, ciidan laba horin oo ka kooban 220 oo ay kala hoggaaminayeen L/Xiddigleyaal Mulinari iyo Ragusa, ayaa laga soo diray Muqdisho inay taageeraan ciidan Marka ka soo baxay oo furaya marinnada u dhaxeeya Marka iyo Muqdisho. Soomaalida, goortay ka war heshay si ay u hakiso abaabulkaas gumeysiga, waxay dhabaha dhawr jeer ku weerartay horintii uu hoggaaminaayay L/Xiddigle Mulinari oo la doonaayay inay socoto masaafo dhan 15km, haseyeeshee, dagaal adag kadib ayay u suuragashay inay marin furato dabadeedna ku gaarto horintii kale tuulada Jilib-Marka.

27kii Agoosto, ciidan magaalada Marka laga soo diray inuu ilaaliyo nabadgelyada dhabbeyaasha socdaallada Xamar ka yimaada, ayaa si lama filaan ah loo weerarray dhibaatana loo geystay. Sidoo kale, 14kii Oktoobar, ciidan kaloo ilaalo ah ee ka kooban 190 uuna hoggaaminaayo L/Xiddigle Vitale, ayaa isna lagu weerarray tuulada Melled oo Marka Koofur ka xigta. Gumeysiga Banaadir oo ay maamulaysay shirkadda Talyaaniga muddo 12 sano ah laga billaabo 1892kii taniyo 1904tii, ma uu samayn wax muuqda oo horukac ah, balse waxuu muddadaasoo idil ku hawlanaa inuu Soomaalida gumaado una muujiyo nacayb iyo midabtakoor. Dawladda gumeysiga Talyaaniga, goortay aragtay inaan maamulkeeda dadban wax abdo ah lahayn, 14kii Abriil 1905tii, ayay go'aansatay inay toos maamulka gobolka Banaadir ula wareegto waxayna u soo xil saartay inuu maamulo Luigi Marcatelli oo la yimid awood buuxda iyo dib u habayn. Waxaa qorshihiisa ka mid ahaa, iyadoo aan loo aabayeelin hishiiskii koobnaa oo lagu kireystay gobolka Banaadir, in gumeysiga Talyaaniga lagu fidiyo gobollada Soomaalida koofureed oo idil. Tillaabadii ugu horreeysay uu gumeysigu qaaday waxay ahayd inuu degmada Marka maamule ugu soo magacaabo Dhamme Guerardo Pantano oo loo xilsaaray inuu magaalada ka feydo moorada. Waxuu durbadiiba ku duulay, 21kii Jannaayo 1905tii, tuulooyinka Sakhi, Jilib-Marka iyo Melled waxaana u suuragashay inuu magaalada Marka moorada oo ay toddobada sano ku xeraysnayd ka feydo ciidankii Soomaalidana oo ku hareersanaana u riixay dhanka webiga.

Soomaalida Gobolka Sh/Hoose ee dagaalka kula jirtay gumeysiga Talyaaniga, waxay xiriir la yeelatay Daraawiishta Sayid Muxamed ee Waqooyi kula dagaallamaysay gumeysiga Ingeriiska waxayna ka heshay taageero hub iyo saanad ah dabadeedna abaabushay labakacleyn gumeysidiid ah u hoggaaminaayo Sheekh Cabdi Abiikar Gafle oo madax u ahaa dariiqadda Saalixiya, oo xogogaal u noqday inuusan ciidanka gumeysiga ka badneyn 1500.

[97]23kii Jannaayo 1907dii, gumeysiga waxaa soo gaaray warar sheegaaya inay tuulooyinka SH/Hoose ka jiraan abaabul colaadeed sidaa awgeedna uu u diray sahan soo hubiyo heerka oo ay dhiilladaas gaarsiisan tahay iyo cidda ka dambeysa. Sheekh Cabdi Abiikar, goortuu ka war helay tillaabadaas gumeysiga iyo waxuu maaggan yahay, ayuu durbadiiba abaabulay ciidan saddex kun ah. Sahankii gumeysiga waxuu sheegay inuu Sheekh Cabdi Abiikar shir weyn ku qaban doono, 6da Febraayo, tuulada Majabto ayna ka soo qaybgeli doonaan beelaha aaggaas deggan, sidaa daraadeed gumeysiga waxuu abaabulay ciidan shirkaas baajiyo soona xiro Sheekh Cabdi Abiikar. 5ta Febraayo, Muqdisho iyo Marka waxaa ka baxay laba ciidan oo ka kooban

[96] Ministero della Guerra Italiana- Somalia- Vol. I 1938

shan boqol oo ay kala hoggaaminaayaan L/Xiddiglayaal Pesenti iyo Streva waxayna ku kulmeen, aroortii dambe, Ceel Boqol dabadeedna, iyagoo mideysan u duuleen Tuulada Majabto. Ciidankii gumeysiga, intuu sii socday, waxuu hooshay dabna ku huruyay tuulooyinkii aaggaa. Soomaalida, goortay ka warheshay colka gumeysiga oo ku soo fool leh, shirkeedii ayay baajisay ciidankii gumeysigana waxuu u yimid tuuladii oo cidla ah; waxuu gubay tuuladii xoolahiina dhacay. Saddex maalmood, kolkuu intuu gaarayba gubayay dadna arki waayay, ayuu u gurtay deexda difaacna ka sameeystay meel u dhexeysa Dhanaane iyo Buuraha Baansaale. Waxaa ciidankii gumeysiga soo raacdeeyay col uu hoggaaminaayo Sheekh Cabdi Abiikar oo habeenkii 9ka Febraayo, isagoo gudcurka ka abdeysanaayo laba dhinac weerar uga qaaday col oo ay kala hoggaaminaayeen Muxamed Yuusuf iyo Macallim Mursal. Waxuu dagaalku socday taniyo aroortii oo ciidankii gumeysiga lagu hawaaniyay inuu u gurto tuulada Jasiira. Soomaalida kolkay meydkeedii aasatay, ayay xoolaheedii gumeysiga ka soo dhacay qunsatay dibna u laabatay. Dhimashada iyo dhaawaca labada dhinacba waa badnaayeen (Eeg khariidada 4).

Dhacdadaas waxay gumeysiga u muujisay inaan si fudud Soomaalida loo madiidin karin kuna soo food leedahay timaaddada halis labakaclayn ah ee ka curata Sh/Hoose, ayuu dareenkaas awgiis Rooma ka codsaday in gurmad degdeg ah lala soo gaaro si looga hortago labakaclaynta soo ifbaxday. Labakaclaynta Sh/Hoose waxay socotay taniyo, Luulyo 1908dii, kadibna gumeysigu waxuu hishiis nabadgelyo la gaaray Suldaan Cali Ciise, oo u fududeeyay inuu hanto maamulka Gobolka Banaadir dabadeedna uu ku dhaqaaqo isballaarintiisa.

b) ISBALLAARINTII GUMEYSIGA TALYAANIGA

Gumeysiga Talyaaniga kadib goortuu shan iyo toban sano gumaad iyo dhibaato dhan kastaba leh u geystay dadkii Gobolka Banaadir degganaa, laga billaabo maalintii uu ka soo degay Marsada magaalada Marka uuna Soomaalida Gobolka Banaadir hantay hayinna ka dhigtay , ayuu billaabay inuu isku fidiyo Gobolka Sh/Hoose. 24kii Agoosto 1908dii, waxuu Sh/Hoose uga soo duulay tuulada [98]Dhanaane ciidamo 1500 ka kooban ee ku hubeysan sidded boobe iyo afar madfac waxuuna weerarray tuulada Bariire ee Sh/Hoose, hasayeeshee, waxaa ka horyimid difaac xoog leh uu mari waayay laguna dirqiyay inuu magaalada Marka dib ugu laabto. Maalintii labaad, isagoo ciidankiisa soo xoojiyay, ayuu weerar labaad ku soo qaaday tuulada, dagaal adag kadibna qabsaday kana dhigtay saldhig uu uga duulo Gobolka intiisa kale. Malintii xigtay waxuu qabsaday tuulooyinka Malable iyo Awdheegle waxuuna werarray magaalada Afgooye oo ahayd xarunta suldaanka Geledi Sheekh Cusmaan Axmed. Soomaalidii aaggaa degganayd gumeysiga waxay kala hortimid difaac adag, haseyeeshee, waa laga awood roonaaday waxaana, 2dii Seteembar 1908dii, xaruntii saldanadii Geledi ayaa la saaray calankii gumesiga Talyaaniga halkaasayna ku dhammaatay gobannimadii iyo madaxbanaanidii Saldanadii filka weynayd ee Geledi. Dhanka kale, isla waagaa waxuu gumeysiga ku duulay qabsadayna, dagaal adag kadib,

[97] Ministero della Guerra Italiana- Somalia- Vol. I 1938



DAGAALKII DHANAANE (10/02/1907)

tuulooyinka Kinda iyo Gaywarrow. Ugu danbeystii gumeysigu waxuu isku fidiyay tuulooyinka Sh/Hoose oo idil dadkii degganaana waxaa ka dhuntay dhiirradii dagaalka gumeysiguna ku hantay gobolkooda.

Gumeysiga kolkuu qabsaday Gobolka Sh/Hoose waxuu awood aan la hakin karin u yeeshay inuu, shan sano gudahood, isku ballaariyo gobollada u dhexeeya labada webi. 1910kii, waxuu qabsaday magaalooyinka dhanka bidixeed ee webiga Jubba oo ah: Jumbo, Jilib iyo Baardheere, isagoo webiga Ganaane noqday soohdintii u dhexeeysay gumeysteyaasha Talyaaniga iyo Ingiriiska; 1912kii, waxuu ku fiday: Wanle weyn, Balcad, Mahaday Weyn iyo Buulo Burte; sidoo kale 1913kii, waxuu qabsaday Buur Hakaba iyo Baydhowa, 1914kii waxuu ku fiday Waajid, Tayeeglow iyo Xudur, sidoo kalana 1923kii Belet Weyne iyo Doolow Bay waxaana Soomaalida Koofureed uga haray labada Saldanadood ee Hobyo iyo Waqooyi Bari uu gumeysiga la lahaa hishiis Maxmiyadeed.

[99]30kii Oktoobar, 1922kii, waxaa awooddii xukuumadda Talyaaniga la wareegay Xisbigii Fashiistada uu hoggaaminaayay Binito Mussolini waxaana Soomaaliya loo soo magacaabay inuu xaakin ka noqdo Cesere Maria De Vecchi oo ka mid ahaa afarta ugu sarreeysa Xisbiga Fashiistada oo ay aragtidiisu siyaasadeed ahayd xoog iyo amarkutaaglayn inuu wax ku maamulo awoodna ku maquuniyo ciddii ka hortimaado. 5tii Diseembar 1923kii, De Vecchi waxuu ka soo degay marsada Muqdisho waxuuna la yimid aragtiyo siyaasadeed uu xisbigiisu ka qabay habka lagu maamulaayo gunta Soomaaliya ee ku salaysan dhaca, gumaadka iyo caddaaladdarrada. Waxaa durbadiiba De Vecchi u muuqatay inuu qabsado labada saldanadood ee Hobyo iyo Waqooyi Bari, isagoo iska indhatirayo heshiiskii maxmiyadeed ee ka dhexeeyay saldanadahaas iyo dawladdiisa oo De Vecchi u arkaayay inay kurtummo hortaagan ku yihiin isballaarintiisa gumeysi, hasayeeshee, waxay ku qaadatay labo sano siduu u hirgelin lahaa rabitaankiisa. [100]Tillaabadii ugu horreeysay uu qaaday waxay ahayd inuu soo saaro xeer uu hubka uga qaadaayo Soomaalida Koofureed oo idil, arrintaasoo dhalisay inay Soomaalidii degganayd tuulooyinka Jiliyaale, Ceeldheere, Buur Gooyo iyo Afgooye Baadi Cadde ka gadoodeen. Gadoodkaas waxuu curiyay kacaan uu hoggaaminaayay Sheekh Xasan Sheekh Nuur oo madax u ahaa Jameecada ay xarunteeda ahayd tuulada Jiliyaale. Gumeysiga waxuu ku duulay ciidan ka kooban siddeed boqol oo ay kaalinaayeen laba horin oo ku hubeysan boobeyaal iyo labo madfac waxuuna weerarray tuulooyinkii kacaamay. Dagaal kulul oo socday afar maalmood (29-31 Maarso 1924kii) kadib, kolkuu tuulooyinkii deb ku huriyay, dadkii laayay, xoolahiina ka dhacay, ayaa Sheekh Xasan Sheekh Nuur la qabtay xabsigana loo taxaabay. Inkastoo Soomaalidu ay waayday hoggaamiyaheedii haddana, ma joojin la dagaalkay gumeysiga kala soo horjeeday taniyo bishii Luulyo 1924kii. Sheekh Xasan Sheekh Nuur (Barsane) waxaa lagu xukumay soddon sano oo xabsi ah waxuuna ku geeriyooday xabsiga Xamar, 28kii Jannaayo 1927kii.

24kii Maarso, 1924, waxaa Hobyo booqasho ku tegay Xaakinkii gumeysiga De Vecchi waxuuna suldaankii Hobyo, Cali Yuusuf ku hawaaniyay inuu ku dhaarto u hanuunsanaanta iyo ku kalsoonaanta Dawladda Talyaaniga uuna okobbanyahay xukunkeeda. Bishii Luulyo, waxuu

---

[98] Minister della guerra Italiana-Somalia- Vol. II 1960

[99] Sidoo kale.

Hobyo iyo Xaafuun u soo magacaabay maamuleyaal Talyaani ah, tallaabadaasoo uu ka dhiidhiyay Cali Yuusuf oo aan laga wargelin, iyadoo ay ugu muuqatay in saldanada lagala wareegay. Inkastoo weli loo aqoonsanaa inuu yahay suldaankii Hobyo, haddana lagama talagelinaynin awoodda dalkiisa oo dhab ahaan gumeysiga la wareegay. Arrintaas waxuu suldaanka ka gudbiyay cabasho qoraal ah, hasayeeshee, waxaa loogu soo warceliyay: "WAA INAAD OGGOLAATAA AWOODDA DAWLADDA TALYAANIGA AAD U DHAARATAY WAXAANA HAWAAN KUUGU AH INAAD XURMEYSAA UNA HANUUNSANAATAA OGGOLAATAANA FARRIIMAHA LAGUUGU SIINAAYO MAGACA DAWLADDA KU MAGANGELISAY". Waxay arrintaas ku hawaanisay Cali Yuusuf inuu oggolaado rabitaanka gumeysiga. Cali Yuusuf waxuu dareemay gumeysigu uu maganta u yahay inuu maaggan yahay la wareegida saldanadiisa iyo tan Waqooyi Bariba waxuuna Boqorka u qoray dhambaal uu ku dareensiinaayay shirqoolka socda, isagoo ka codsanaayay inay ka heshiiyaan muranka dhexyaala ee ku saabsan Gobolka Nugaal si ay dabadeed wadajir uga hortagaan nacabka gumeysiga, hasayeeshee, gumeysiga waxuu dhexda ka qabsaday dhambaalkii Cali Yuusuf uu u diray Boqorka sidaasuuna ku dhicisoobay qorshehii Cali Yuusuf watay.

Sidaan horayba u soo sheegnay, 26kii Abriile 1915kii, iyadoo la tixgelinaayo heshiis qarsoodi ahaa oo ay wada galeen Talyaaniga, Faransiiska iyo Ingiriiska, intuuna Talyaaniga kula bahoobin Dagaalkii Koowaad, ayaa Talyaanigu lagu raalligeliyay looguna wareejiyay, 1da Luulyo 1925kii, gobollada Soomaaliyeed ee webiga Jubba dhankiisa midigeed oo ka kooban 90,000km oo wareeg ah uu Ingiriisku ula baxay Juba Land qaarna kala haray, kuwaasoo gaarsiiyay soohdinta Soomaalida Koofureed oo Talyaaniga gumeysto taniyo Raas Kiyambooni.

Xaakinka gumeysiga De Vecchi, fulinta qorshehiisa isballaarineed uu muddo laba sano ahba maagganaa, waxuu u darbiyay ciidamo ka kooban 15,000 oo u qaybsanaa saddex Guuto. Suldaan Cali Yuusuf, goortuu ogaaday in gumeysiga Talyaaniga isku darbinaayo inuu saldanadiisa ku soo duulo, ayuu durbadiiba oggolaaday inuu hubka iska dhigo. 1da Oktoobar 1925kii, waxuu gumeysigu dhaqangeliyay qorshehiisii waxuuna Gobollada dhexe ugu soo duulay saddex Guuto oo kala ah: Guutada koowaad uu hoggaaminaayo G/Sare Di Bello waxay ka duushay Mareeg waxayna qabsatay Hobyo; Guutada labaad oo ahayd Baanda oo uu hoggaminaayo G/le Bichis waxay ka duushay Buulo Burte waxayna qabsatay Ceel Buur iyo guutada saddexaad oo uu hoggaaminaayo G/le Musso oo ka duushay Belet Weyne oo iyana qabsatay Gallaadi iyo Gaalkacyo. Halkaa waxaa ku gunnaanadmay saldanadii 41 sano ahayd oo Yuusuf Cali Keynadiid aasaasay, 1884kii, gumeysiguna dhib la'aan ku qabsaday. Xaakinkii gumeysiga waxuu durbadiiba u magacaabay degmooyinka Hobyo, Ceel Buur, Gaalkacyo iyo Gallaadi maamuleyaal Talyaani ah.

21kii Oktoobar, De Vecchi ayaa u soo diray maamulihii gumeysiga Talyaaniga u fadhiyay Xaafuun inuu u gudbiyo dhambaal digniin ah Boqor Cusmaan. Dhambaaku waxuu Boqorku farayay inuu muddo gaaban hubka dadkiisa ka dhigo uuna okobbanaado awoodda Dawladda Talyaaniga, hasayeeshee, Boqorku waxuu ku warceliyay inuu gumeysigu soo dirto ergo kala hadasha arrintaas. Xaakinkii gumeysiga De Vecchi, goortuu warcelinta Boqorka helay, ayuu horraantii Oktoobar, ku dejiyay Xaafuun iyo Caluula ciidan ka go'doomiyo badda waxuuna maamulaha u fadhiyay Caluula faray inuu ku wargeliyo Boqorka inay tillaabadani tahay middii ugu danbeysay, haddii uusan yeelin inuu dadkiisa hubka ka dhigo inuu yaqaan habkii uu u maqli lahaa. Durbadiiba waxuu farriin ku bixiyay in maraakiibta gumeysiga ay boqortooyada badda ka xirto si aan wax taakulayn ah ay badda uga soo degin waxuuna qabsaday dhawr doonyood oo





Sunlight


SUNLIGHT



SUNLIGHT

SUNLIGHT


SUNLIGHT

SUNLIGHT


SUNLIGHT

SUNLIGHT


SUNLIGHT

SUNLIGHT


SUNLIGHT


SUNLIGHT


AVMBERTO SAVOIA
ROMANAMENTE
MCXX
VIII
ANNO
VI
SUNLIGHT

SUNLIGHT

SUNLIGHT


SUNLIGHT


SUNLIGHT

hantida dadweynaha ahayd. Maamulaha gumeysiga Caluula u fadhiyay ayaa dhambaal goodis iyo digniin ah Boqorka u soo diray uguna sheegay inuu doonyo qabsaday waxuuna Boqorka ku warceliyay: "Waan helay dhambaalkaagii si wacanna waan u gartay, waxaana igu tiri, hubka dadkaaga ka dhig dabadeedna doonyaha ayaan idiin soo celinayaa. Dawladda doonyaha ha iska haysato aniguna hubkaan iska haysanayaa". De Vecchi aad ayuu uga carooday warcelintaas Boqorka waxuuna durbadiiba la wareegay Hoggaankii Gaashaandhigga si uu dareensiiyo Soomaalida awoodda Dawladda Fashiistada iyo inaan hadal lagu celin karin rabitaankeeda. 24ka Oktoobar 1925kii, De Vecchi waxuu tegay magaalada Bandar Beyla oo ahayd xaruntii Xersi Boqor oo la cidleeyay, kolkii la ogaaday inuu gumeysigu ku soo socdo. De vecchi goortuu arkay inay magaalada cidla tahay, caro awgeed waxuu faray in magaalada la duqeeyo dhulkana lagu daro, farriintaasoo la fuliyay dabaddedna hubka xoog looga qaaday dadweynahii degganaa tuulooyinka Afgaaleyo iyo Bareeda lana xirxiray odiyaashii aaggaa. 28kii Oktoobar, waxuu tegay magaalada Baargaal, isagoo islahaa waxaad la kulmi doontaa Boqorkoo soo debcay oggolna waxii la yiraahdo kuna waano qaatay awoodduu ku maquuniyay dadkiisa, haseyeeshee, Boqorku uma imaan caro awgeed. Waxuu kaloo Boqorku dareemay gumeysigu inuu maagganaa badda inuu ka soo dejiyo ciidan weerar ah waxuuna durbadiiba isku dumay ciidan difaaco magaalada. Ciidan gumeysi oo saddex dooni saaran ayaa xeebta ka soo degay waxayna Soomaalidii difaaceysay, durbadiiba ku furtay tacshiirad dabadeedna dagaal muddo dheer socday ka aloosmay. Ciidankii saarnaa laba dooni waxay dirqi ugu laabteen markabka, kooxdii doonidii saddexaad saarnaydna waxay magangashay Masaajid, halkaasoo ay 22 saac ku difaacayeen madaafiic laga soo ridayay marakiibta taniyo maalintii danbe oo markab looga soo diray Caluula u keenay ciidan gurmad ah oo dabadeedna samatabixiyay. Dagaalkaas waxaa gumeysiga kaga dhintay saddex badmaax iyo laba askari shan askarina uga dhaawacantay. Maalintii xigtay waxuu gumeysiga qabsaday Bandar Qaasim, Bandar Siyaad iyo meelo kaloo xeebta ah.

Gumeysiga Talyaaniga, kolkuu Ceel Buur qabsaday, waxuu Cumar Samantar oo horay u ahaan jiray Naa'ibka Suldaan Cali Yuusuf u aqoonsaday Duqa Magaalada muddo kadibna, cadaadis siyaasadeed awgeed, qalcadda ciidankiisa ku xiray saddex oday oo la kala oran jiray Xersi Muxamed Cali, Godagode iyo oday kale, arrintaasoo Soomaalida ka careysiisay. Aroortii 9kii Nofeembar 1925 kii, ayay rag badan oo Cumar Samantar ka mid yahay sababo iyo goor kala duwan ku galeen qalcadda ciidanka gumeysiga ujeeddadooduna ahayd inay weerarraan gumeysiga soona furtaaan odayaasha xiran. Ragguu Cumar Samantar soo abaabulay goortay ku sugnaadeen xerada, waxaa qalcadda ka aloosmay dagaal lama filaan ku noqday ciidankii gumeysiga waxaana lagu dilay xafiiskiisa taliyihii ciidanka, [101]Dhamme Franco Carole, inta badan ciidankiisuna lagu laayay xerada. Dagaal muddo socday kadib, waxay libta raacday Cumar Samantar iyo raggiisa ciidankii gumeysiguna laga qabsaday qalcadda intii ka hartayna u guratay Budbud. Waxay Soomaalidu qalcadda ka heshay 344 Qori oo dadweynaha degaanka hubdhig looga soo ururiyay; 50 Qori oo nooca 91: 2 Boobe oo nooca F.I.A.T iyo 100,000 rasaas. Gumeysiga waxay arrintaas ku noqotay yaab iyo naxdin waxuuna dhacdadaas awgeed u dhoofiyay Muqdisho Suldaan Cali Yuusuf iyo Xaaskiisa. Gumeysiga Talyaaniga waxuu magaalada Ceel Buur dib u qabsaday, 21kii Diseembar, isagoo u riixay ciidankii Cumar Samantar iyo raggiisii dhanka

[100] Eeg lifaaqa "S"

Soomaalida Galbeed oo ay Xabashida gumeysato. 14kii Jannaayo 1926kii, ciidan Baanda gumeysi oo raacda ah ayay isku heleeleen Shilaawe oo dagaal aad u kulul kadib Cumar Samantar uu wehliyo, suldaanka Hobyo walaalkii, Muusa Yuusuf iyo ciidamadiisuba ku laabteen soohdinta Soomaalida Xabashida gumeysato.

25kii Nofeembar 1925kii, ciidan Soomaali ah ayaa weerarray saldhigga Faynuusta Raas Caseyr waxuuna ku dilay Talyaanigii faynuusta ka adeegayay Aldo Jonna iyo afar askari. 2dii Diseembar, ciidan 1000 ah uu hoggaaminaayo Xersi Boqor ayaa weerararay saldhigga ciidanka gumeysiga ee Hurdiya waxuuna baabi'iyay warshaddii awoodda korontada iyo warshadii cusbada ee tuulada Xaafuun, iyadoon ciidankii saldhigga gumeysiga oo ka koobnaa 330 oo ku hubaysan sidded boobe waxba ka qaban waayay, naxdin iyo argagax awgii oo gaarsiisay, inkastoo maraakiib gurmad ah u yimaadeen, inuu cidleeyay saldhiggiisa ugana gurtay Xaafuun. 30kii Nofeembar 1925kii, raxan baabuur ah oo ka timid Budbud una socotay Buulo Burte, ayaa Soomaalidu weerar kedis ah ku qaaday waxaana lagu dilay G/dhexe Splendorelle iyo laba askari.

Gumeysiga, kolkuu dareemay inay fududayn Boqortooyada Waqooyi Bari oo lagaga adkaado lana hanto, iyadoo dhanka badda keliya laga soo weerarro uuna maaro u waayay weerarrada joogtada ah oo ay Soomaalida kala hortimid, ayuu kaga soo duulay Gobollada Dhexe iyo Nugaal, tillaabadaasoo u deddejisay qabsashada Boqortooyada. 1dii Abriile 1926kii, gumeysiga waxuu qabsaday Garacad, Jariiban, Ilig iyo Eyl si uu guul degdeg ah uga gaarona waxuu u gudbay Dooxda Dharoor, haseyeeshee, waxuu la kulmay difaac aad u adag uu kala horyimid ciidankii Xersi Boqor oo aafeeyay hakiyayna gulufkiisa duullaan. Dagaalkaas waxuu soo gabagaboobay bishii Agoosto, kadib goortuu shan bilood Xersi Boqor ku hortaagnaa Nugaal, lagana qabsaday Kallis iyo Qardho.

26kii Seteembar, Koofurta Karin ayuu ciidan Soomaali ah ku weerarray koox burcad iyo qolo Dashiishe ah oo ku ilaalinaayay xoola uu gumeysiga dadweynaha ka soo dhacay waxaana laga dilay afar iyo toban, boqolna laga dhaawacay xoolahiina laga qunsaday. Aaggaas ka sii Koofureed, 9kii Oktoobar, ciidan siddeed boqol ah uu hogaaminaayay Cali Arbe ayaa weerarray saldhigga ee ciidanka gumeysiga Talyaaniga Qardho qabsadayna, goortuu laayay ciidankii gumeysigoo idil. Ugu dambeeyntii, 2dii Nofeembar, ciidan kun ah ayaa weerarray Batiyaala oo ahaa marinka keliya ee Soomaalida uga furnaa dhanka Khooriga Cadmeed, isagoo isku deyayay inuu dib u qabsado, haseyeeshee, waxaa marinwaa ku noqday difaac adag uu kala horyimid ciidanka gumeysiga oo dib u celiyay Soomaalida. Gumeysiga Talyaaniga, goortuu qabsaday gobolka Sh/Hoose, tallaabadii oo durbadiiba qaaday waxaa ka mid ahaa inuu dejiyo dhulka beeraha jiinka webiga shabeelle, beeraley Talyaani uu dalkiisa ka keenay, isagoo xoog uga qaaday dhulkaas Talyaaniga la dejiyay Soomaalida tacbanaysay hantidana u lahayd. Intaa kuma hakan ee waxuu soo saaray xeer uu ku hawaaninaayo beelaha Soomaaliyeed ee aaggaa degganaa inay Talyaanigu lacag la'aan beeraha ugu tacbaan, isagoo aan tixgelin qabka Soomaalida guurto xoolo raacatada ah iyo inuu shaabuug la dhaco qofkii laga dareemo hagar, sidii addoon la soo iibsaday aan dan dadnimo laga lahayn. Intay ciidamada gumaysiga, badidood ugu maqnaayeen hawlgal dagaal Boqortooyadii Soomaalida Waqooyi Bari, ayuu Koofur ka aloosmay dagaal ku saabsan diidmo hawlgalka beero tacabka hawaanka ah, gaar ahaan degmada Marka, kadib kolkii lagu ururiyay 10,000 qof tuulada Jannaale loona qaybiyay beeraleydii Talyaaniga inay beeraha u tacbaan.

[101]26kii Oktoobar, 1926kii, waxaa tegay tuulada Diblay duqa beesha degaankaas Cabduraxmaan Muxamed Abiikar (BARAWE) iyo shan askari oo boliis ah oo gumaysiga ku soo daray si uu u oggoleysiiyo beelaha go'aankii gumeysiga ku doonayay dad ka qaybgala hawlgalka hawaanka ee Talyaaniga beero loogu tacbo. Tuulada waxaa degganaa Jameeco oo u madax yahay Sheekh Muxamed Sheekh Cabdi oo xiriir la leh Jameecada Ceel Xaaji. Sida dhaqanka Soomaalidu yahay duqa iyo askartiisaba waa la soo dhoweeyay waana la sooryeeyay, haseyeeshee, gooray tahay saqdii dhexe ayaa duqii iyo shantiisii askariba la dilay. Xaakinkii gumeysiga ee gobolka, goortuu ogaaday falka dhacay, waxuu u diray ciidan boliis ah oo weerarray tuulada halkaasna lagu laayay Sheekh Muxamed iyo Xertiisoo idil dadkii tuulada degganaana u qaxeen Buulo Mareerta. Waagaa tuulada Ceel Xaaji waxaa degganaa Jameeco uu madax uyahay Sheekh Cali Muxamed Nuur oo ahaa nin diinta u go'doomay waxuuna aad u necbaa gumeysiga Talyaaniga dhaqankiisa xun uu dalka la yimid. Xaakinkii magaalada Marka, ayaa ugu yeeray Sheekh Cali Muxamed inuu wax ka weydiiyo culumadiisa lagu tuhmaayay arrinta tuulada Diblay inay ka qaybgashay, Haseyeeshee, goortuu Sheekha diiday, laba jeer, inuu u tago gumeysigii u yeeray, ayaa loo diray taliyahii saldhiga booliska Marshaallo Aldo Fiorina oo ciidan yar kaxeestay si uu xoog ugu soo wado, goortay xaruntii Sheekha tegayna giddigood la laayay. Arrintaas kadib xaakinkii gumeysiga Soomaaliya De Vecchi ayaa Muqdisho ka soo diray gurmad ciidan 120 ah uu hoggaaminaayo dhamme Guriati waxuuna beeralaydii fashiistada ee shabeellada Hoose faray inay mooreeyaan tuulada inta uu gurmadka ka soo gaarayo. 50 beeraleydii fashiistada oo hubeysan ayaa tuulada Ceel Xaaji mooreysay dad badan ku laaysay. Waxuu ciidankii gurmadka tuulada soo gaaray, 30kii Oktoobar, waxuuna dadkii faray inay isdhiibaan, kolkay diideen inay oggolaadaanna xoog ku galay masaajidka oo ay ka soo saareen caruur iyo haween u galay inay ku samatabaxaan, haseyeeshee, waxuu ogaaday Sheekh Cali Muxamed iyo 70 xertiisa ah inay tuulada ka baxeen habeenimadii. Gumeydiga waxuu madaafiic ku buburiyay tuulada dadkiina ku laayay. Ciidan gumeysi oo ay hogaaminayeen L/xiddigleyaal Pepe iyo Blasi ayaa Sheekha iyo Xertiisa raacdeystay waxayna isku haleelen, 3dii Nofeembar, meel u dhow tuulada Dhanaane mase noqon dagaal cidna libta ku raacdo, hase ahaate, maalintii afaraad ayuu ciidankii gumeysiga ku guuleystay inuu Sheekha iyo xertiisaba hareereeyo uu qofna naf uga tegin, kolay ku tahay kuwii is dhiibay. Dagaalkaas gumeysiga waxaa uga dhintay 21 waxaana uga dhaawacmay 16 askari, dhanka Soomaaliduna 74 dhimatay iyo 170 la xiray.

30 kii Diseembar, xaakinkii gumaysiga De Vecchi waxuu raacay markab la oran jiray "LUSSIN" oo uga degay dekedda Xaafuun, halkaasoo uu kula wareegay hoggaanka dagaalka oo ay ciidamadiisa ka wadeen Boqortooyada Waqooyi Bari oo muddo hakaday dagaallo ka dhacay gobolladuu horay u soo qabsaday awgood. Horraantii bishii Jannaayo, waxuu saddex guuto dalka gudahiisa uga duulay Karin, Eyl iyo Xaafuun waxuuna ugu dambeeyntii, 16kii Jannaayo 1927kii, dagaal dheer kadib jabshay ciidamadii Boqor Cusmaan iyo Xersi Boqor waxayna magangaleen maxmiyaddii Ingiriiska ee Soomaalida Waqooyi oo kol dambe Boqorka loo soo celiyay gumeysiga Talyaaniga. 6dii Nofeembar 1927kii, waxaa Muqdisho lagu qabtay damaashaad uu Boqor Cusmaan Maxamuud ku oggolaaday inuu dalkiisa gun u yahay Talyaaniga halkaasayna ku

[101] Del Boca la conquista dell' impero = B.62

dhammaatay gobannimadii iyo madaxbannaanidii Boqortooyadii Waqooyi Bari ee Majeerteen kana mid noqotay gobol ka tirsan Gobollada Soomaalida Koofureed ee Talyaanigu gumeysto.

Dhammaadkii 1927kii, gumeysiga Talyaaniga waxuu ogaaday inay odiyaal Soomaalida haybad ku lahaa oo ay ka mid yahiin: Cumar Samantar, Xersi Boqor, Muuse Yuusuf oo ahaa Suldaanka Hobyo walaalkii, duqii Ceel Buur, Cabdi Wardheere, Abshir Dhoorre, Godegode iyo odiyaal kale ay ku kulansan yihiin Qorraxeey dhanka soohdinta ay Xabashida gumeysato ciidamana ku ururSadeen oo iskuna dhaarsadeen inay iska illoobaan isafgaranwaagii u dhexeeya wadajirna ula dagaalamaan gumeysiga Talyaaniga. Waxaa gumeysiga dhibaato ku noqotay habkuu ugu duuli lahaa colkaas isku urrusaday soohdinta Talyaaniga meel ka baxsan, isagoo wax u dhimin xiriirka dalkiisa iyo Xabashida. Si aan loo eedeyn waxuu Ulasan ka diray ciidan 400 oo Baanda ah uu hoggaaminaayay nin la oran jiray Warsame Bootaan. Afar maalmood kadib waxuu kedis ku weerarray Qorraxeey iyo ceelasha aaggaa dabadeedna ka soo laabtay, kolkay ciidamadii halkaa lagu abaabulay kala habaabiyeen kana qabsadeen labadii Boobe uu Cumar Samantar Ceel Buur Talyaaniga uga dhacay; ciidan raacdo ah ayaa uga daba yimid Shillaawe aafo aad u culusna u geestay si dirqi ahna ugu laabtay soohdinta. Tillaabadaas gumeysiga Talyaaniga qaaday waxay labada gumeysi ka dhexdhalisay muran dheer aan kolna laga heshiin.

Gumeysiga Talyaaniga, si uu u adkeeyo una caddeeyo soohdinta dalkuu gumeysto waxuu ku taxay ciidan Baanda ah goobo uu ka sameeyay ilaalo joogta ah: Doolow, Cadeyle, Kohrabow, Yeed, Aato, Buqbarde, Ceelgarruun, Kirkeri iyo Belet Weyn. 1930kii, Talyaaniga, isagoo cadeynaayo inay ka mid yihiin gumeysigiisa gobolladii uu ka qabsaday Suldaan Cali Yuusuf ayuu ku fidiyay Feerfeer, Ulasan, Lababaar, Shillaawe, Garloogube, Walwaal, Wardheer iyo Gallaadi, soohdinta degmooyinkaas oo gumeysiga Talyaaniga ku dooday inay ka mid yahiin dalkii Saldanada Hobyo uu kula galay heshiiskii Maxmiyadeed dabadeedna uu kala wareegay. Xabashidana waxay ku dooday in gumeysiga Talyaaniga uu ka soo gudbay soohdintii oo ay ku heshiiyeen, 16 Maajo 1908dii oo ahayd 180 mayl laga soo billaabo badda. Waagaas heshiiskaas labada gumeysi kala dhiganaayeen lagama tixgelinin Saldanada Hobyo oo Maxmiyad Talyaaniga u ahayd. Arrinta kaloo u baahan in la tixgeliyo waxay tahay in Xabashida ku soo fiday dalka Soomaaliyeed goortay qabsatay Saldanadii Soomaliyeed ee Harar, sidaa daraadeedna dooda labada gumeysi midna gar kuma salaysneyn.

Ma'ay jirin dalka Soomalida meel uu gimeysiga Talyaaniga dagaal la'aan kula wareegay ama dhiig Soomaaliyeed ku daadan khasaara ballaaranna ay ka soo gaarin. Kontonkii sano oo gumeysiga Talyaaniga haystay Soomaalida Koofureed, laga billabo 1892 taniyo 1941, ma muuqdaan wax horumar ah uu Tâlyaaniga Soomaalida u qabtay xag bulsho ama xag dhaqaaleba, haseyeeshee, waxuu cadaadis ka saaray koley ku tahay xagga aqoonta, aasaasiga ah loomana oggolayn Soomaalida inay kulmaan isuna gudbaan. Dhulkoodii hodanka ahaa waxaa loo qaybiyay beeraley Talyaani ah iyagana lagu hawaaniyay inay lacag la'aan ugu tacbaan hayinna u noqdaan abbaankooda, iyadoo aan la hanbayn koley ku tahay dumarka uurka leh iyo carruurtaba, qofkii laga dareemana inuu ka soo horjeeddo hannaankaas xabsiga ayaa lagu illoobi jiray isagoo aan maxkamad la horgeyn. Sidoo kale maamulayaasha degmooyinka iyo booliska waxaa la siiyay awood aan falkooda lagu dabagaleyn lagana doodi karin.

c) QABSASHADII TALYAANIGA DALKA XABASHIDA

Horraantii bishii Diseembar 1934kii, waxay gumeysteyaashii Talyaaniga iyo Xabashida isku hertiyeen ceelasha Walwaal oo ka mid ahaa dalka Soomaalyeed waxuuna Talyaaniga weydiistay Xabashida inay magdhow ka siiso kana xaalmariso khasaarihii iska horimaadkaas ka soo gaaray, dawladda Xabashida oo iyaduna ku doodeysay inay Walwaal ka mid tahay dalka Xabashida, waxay weydiisatay in baaritaan lagu sameeyo dabadeedna la caddeeyo ciddii iska horimaadkaas ka danbeysay. God-Dheer, Galaadi, Walwaal iyo Wardheer waxay ahaayeen dal Soomaali oo ceelashooda waxtar u lahaa raacatada waxuuna gumeysiga Talyaanigu qabsaday 1930kii.

Boqor Xayle Silasye oo ahaa wiilkii Raas Mokonon, ayaa Garloogube u soo diray ciidan 15,000 ah inay ilaaliyaan dhulkuu Talyaaniga qabsaday, taasoo inta la ogyahay ahayd goortii ugu horreeysay oo ay Xabashidu ku soo fogaato gudaha dhulka Soomaliyeed. Xabashidu waagaa intii ka horreeysay sooma ay dhaafi jirin Jigjiga, hasyeeshee, goortay aragtay inuu Talyaanigu dalka Soomaaliyeed ku sii fidayo, ayay iyaduna ka soo durugtay saldhigyadeedii hore una soo fiday dhulka hoose ee Soomaalida. Bishii ku xigtay Mussolini waxuu diiday sikastaba inuu arrintaas dhulka Soomaaliyeed Xabashida kala doodo waxuuna ciidamadiisa Soomaaliya iyo Eritreeya faray inay dagaal isu darbiyaan.

Faransiiska iyo Ingiriiska waxay raadiyeen inay joojiyaan ol'olahaas dagaalka ayna dhexdhexaadiyaan Xabashida iyo Talyaaniga. Shir Baariis lagu qabtay, 7dii Jannaayo 1935kii, waxuu Faransiisku u ballan qaaday Talyaaniga inuu ka qaybgelinaayo Shirkadda Reylka ee Addis-Ababa iyo Jabuuti, sidoo kalena Ingiriisku waxuu balanqaaday inuu ku dadaalayo sidii Soomaalida Galbeed Talyaaniga lagu wareejin lahaa, haseyeeshee, Mussolini ayaa ku warceliyay inuusan wax kale yeeleen dalka Xabashida uu qabsado mooyee iyo Boqorka uu madaxa ka gooyo. Arrintaa dhexdhexaadinta dagaal joojinta, Mussolini ma uu oggolayn sidoo kale waxuu ku gacan seyray dhexdhexaadintii laga soo jeediyay Ururka Qaramada (League of Nations) shirkiisii lagu qabtay Jineva.

Dabaadigii bishii Jannaayo, 1935kii, waxuu Talyaaniga Soomaaliya ka billaabay abaabul iyo darbin dagaal. Wasiirkii gumeysiga De Bono waxuu Taliyihii ciidamada Soomaaliya, S/Guuto Luigi Ferusci amar ku siiyay inuu isu darbiyo weerar Xabashida lagu qaado, bisha Oktoobar. Bishii Maarso 1935tii, S/Guud Rodolfo Garaziani ayaa lagu soo magacaabay xaakimkii Soomaaliya, xilka Gumeysiga Soomaaliya weerarka Xabashida kaga aaddanaa waxuu ahaa difaac, haseyeeshee, Waxaa Garaziani u muuqatay inay ciidamadu u darbanayn duullaan oo ay ugu wacnayd dhabbooyinka oo aan dhisnayn iyo gaadiidka oo aan u abaabulnayn, kuwaasoo aan la darbin taniyo bishii Agoosto.

19kii Seteembar 1935kii, Ingiriisku, si uu u hakiyo Talyaaniga waxuu xoojiyay ciidamadiisa Badda Dhexe fadhiyay sidaa awgeedna Talyaanigu faray xaakimkii u fadhiyay Eritreeya in uu darbiyo qorshe lagu weerarraayo Suudaan iyo Kenya.

Duullaankii Xabashida lagu weerarray waxuu billawday, Oktoobar 1935kii, waxuuna Talyaaniga uga soo duulay laba dhinac dalka Xabashida oo ah Waqooyi iyo Bari. Ciidamadii aagga Waqooyi ka weerarray waxaa hoggaaminayay S/Guud Pietro Badoglio waxayna ka koobnaayeen: 5,721 sarkaal, 6,292 sarkaal xigeen, 99,243 dabley Talyaani ah, 53,226 ciidan

Eritreeya ah. Hubka: 173,893 bunduq, 4,209 boobe, 580 madfac, 122 gaarida gaashaaman, 125 dayaaradood iyo 26 markab; gadiidka: 35,653 baquul iyo fardo, 3,683 baabuur.

Ciidamadii aagga Bariyeed ka weerarray waxaa hoggaaminayay S/Guud Rodolfo Graziani waxayna ka koobnaayeen: 1,651 sarkaal, 1,546 sarkaal xigeen, 21,144 dabley Talyaani ah iyo 29,511 ciidan Soomaali iyo Liibiya ah; Hubka: 1,585 boobe ah, 117 madfac iyo 38 dayaaradood; gadiidka: 7,888 baquul iyo fardo. Waxuu kaloo haystay 60 kun oo bambooyin sun ah iyo 55 kun oo ah duubka gaaska madaxa laga gashado.

28kii Seteembar 1935kii, Xaakimkii Talyaaniga u fadhiyay Eriteerya waxuu u sheegay Graziani 5ta Oktoobar, inuu dagaal ku qaadi doono Xabashida xilkiisuna yahay inuu difaac galo. Graziani inkastuu isku dayay inuu farrintaas oofiyo haddana waxuu isku darbiyay inuu qabsado Doolow, Shilaawe iyo Garloogube, waxaana sidaa raali uga ahaa Mussolini oo marmarsiinyo ka dhigtay shilkii Walwaal. Waxaa kaloo Mussolini rabay in dhankaana Xabashida dagaal looga furo si ciidankeeda lagu kala jabiyo.

1dii Juun 1936kii, goortii Addis Ababa la qabsaday waxuu Talyaaniga faafiyay in dalka Xabshida ka mid yahay dalalkuu gumeysto ee Afrikada Bari, isagoo ku magaacabay Eritreeya, dalka Xabashida iyo Soomaaliya "Africa Orientale Italiana" oo macnaheedu yahay Afrikada Bari ee Talyaniga una qaybiyay, maamul ahaan, shan xukuumadood oo kala ah:

1. Xukuumadda Soomaaliya,
2. Xukuumadda Harar,
3. Xukuumadda Amxaara iyo Shawa,
4. Xukuumadda Gaalla iyo Sidaama,
5. Xukuumadda Eritreeya,

Tilaabadaas isballaarinta oo ay qaaday dowlada gumeysiga Talyaaniga waxay keentay in qayb ka mid ah Gobolaka Soomaali Galbeed (taniyo Dhagax Buur) oo ay Xabashida gumeysan jirtay la soo raaciyo Soomaaliya, taasoo curisay saldhig looga amba qaadi karo dib u habaynta Qaranka Soomaaliyeed soona noolaysay himiladii Soomaali weyn. Isballaarinta gumeysiga Talyaaniga Afrikad Bari oo ay Soomaaliya gobal ka mid ah noqotay waxay awood u siisay gumeysiga Talyaaniga inuu nabadgelyo u helo dib u abaabulka maamulkiisa gumeysi taniyo Dagaal Weynihii II ee Dunida oo billawday 1939kii.

QAYBTA AFARAAD

DAGAALKII LABAAD EE DUNIDA IYO DALALKUU TALYAANIGA GUMEYSAN JIRAY

G - MAAMULKII CIIDAMADA INGIRIISKA IYO MURUNKII HORDHACA AHAA

Inkastoo aan halkan lagu soo koobi karin dhammaan dhacdooyinkii ku saabsanaa Dagaalkii Labaad ee Dunida siduu u dhacay ama u saameeyay Dunidoo idil, gaar ahaan, madaxbannaaniday gaareen dalalkii la gumeysan jiray, haddana waxaa muuqata inay lagamamaarmaan tahay in si kooban loo xuso waxyaalahii ka dhacay docda qaaradda Afrika. Kadib goortay ciidamadii Talyaaniga, muddo gaaban, guul ku gaareen oo ay ku qabsadeen, Agoosto 1940kii, maxmiyadii Ingiriiska ee Soomaalida Waqooyi iyo Seteember isla sannadkaas weerarkay ku qaadeen Sidii Barrani, ayuu Ingiriisku weerarro dib ugu soo rogaal celiyay, isagoo ka soo duulay saldhigyadiisii Qaahira, Khartuum iyo Nayroobi waxuuna, bilo gudahood, ku soo ceshaday maxmiyadiisii Soomaalida Waqooyi uuna qabsaday dalalkuu Geeska Afrika Talyaaniga ka gumeysan jiray. 14 Maarso 1941kii, ayaa Soomaaliya, gebi ahaanba, xukunkii gumeysiga Talyaaniga laga xayuubsaday; 1dii Abriile isla sannadkaasna waxaa laga kacshay Eritreeya. 18 Maajo 1941kii, waxaa Ambalaji ciidamadii Ingiriiska isugu dhiibay xaakinkii gumeysiga Talyaaniga ee Afrikada Bari, Amadeo "Duca D'osta", sidaasuuna, sannad gudahiisa, ku soo gabagaboobay dagaalkii geeska Afrika, goortuu Gondar isugu dhiibay ciidamadii Ingariiska S/guud Nasi oo ahaa taliyaha ciidamadii Talyaaniga. Dagaalkii Afrikada Waqooyi waxuu sii socday muddo dheer waxuuna Ingiriisku kol sii horreeysay, Febraayo 1941kii, qabsaday Cerenayka dabadeedna ciidamadiisii 8aad, 24 Diseenbar, qabsadeen Bengaasi oo ay goor danbena dib ugu soo rogaalceliyeen qabsadeena ciidamadii Jarmalka (African Corps) uu hoggaaminaayay Rommel. Gulufka duullaankii Rommel, dhanka Bari, waxii ka danbeeyay, Jannaayo 1942kii, gaabis ayuu ahaa, haseyeeshee, ugu danbeentii waxay labada ciidan isku hardiyeen El Allameyn oo dagaal laba bilood socday kadib, libtii raacday ciidamadii 8aad ee Ingiriiska. Dagaalkaas ciidamadii Jarmalka ee "African Corps" waxaa ku gaaray aafo ayan kasoo kabsan karin, Afrikada Waqooyi oo idilna lagaga saaray. Ingiriisku waxuu dib u qabsaday Cerenayka, Nofeenbar 1942kii, laba bilood kadibna, 23 Jannaayo 1943kii, Tripoli. Intuu duullaankaas Ingiriisku socday, ciidan Faransiis ah uu hoggaaminaayo S/guuto Leclere ayaa isna qabsaday Fezzan.

[103]Waxaa durbadiiba soo ifbaxday siyaasadduu Ingiriisku la maagganaa timaaddada dalalkuu Talyaaniga ka qabsaday oo ahaa: Soomaaliya, Eritreeya iyo Liibiya waxayna ujeeddadiisu ka muuqatay habkay ciidankiisu u maamulayeen dalalkaas, intuu dagaalka socday. Waxay si caddaan ah uga muuqatay talooyinkii iyo wadahadalladii dhexmarayay, Jannaayo

[102] Gianluigi Rossi = Africa Italiana Verso L'indipendenza 1980 B.38-39

1941dii, taliyaha guud ee ciidamada Bariga Dhexe iyo Xafiiska Dagaalka. Ujeeddada wadahadalladaas waxay ahaayeen, intuu dagaalku ka dhammaanayo, dalalkii la qabsaday oo idil in la hoos geeyo taliska guud ee ciidamada Bariga Dhexe si danahuu Ingiriisku timaaddada ka leeyahay looga baaraandego loona wakiisho maamulkooda sarkaal ciidamada ka tirsan oo siyaasadda maamulkaas ka madax noqda. Waxaa Soomaaliya loo soo magacaabay inuu u noqdo madaxa maamulkeeda S/Guuto Wikam, sidoo kale gobollada iyo dagmooyinkana waxaa maamuleyaal looga dhigay saraakiil ciidanka ka tirsan. Qaabka iyo hannaanka maamulkaas, waxaa kolkii hore loo baxshay "OCCUPIED ENEMY TERRITORIES ADMINISTRATION" (O.E.T.A) 1943kiina "BRITISH MILITARY ADMINISTRATION" (B.M.A). Si loo dhawro xasilloonida iyo nabadgelyada Soomaaliya, 1dii Agoosto 1941dii, waxaa la aasaasay ciidan Soomaliyeed oo la magac baxay "SOMALI GENDARMERIE" oo ka koobnaa Soomaali, sarakiisha mooyee, waxuuna u qaybsanaa laba laamood oo ah: mid ilaalisa nabadgelyada, xasilloonida iyo dhawridda shuruucda magaalooyinka oo loo baxshay "POLICE WING" iyo mid ilaalisa xasilloonida iyo nabadgelyada guurtada xoolo raacatada iyo soohdimaha oo loo baxshay "FIELD FORCE WING" waxaana ciidankaas cusub ee Soomaaliyeed taliyeyaal u noqday saraakiil ciidamada Ingiriiska.

Sannadkii 1941kii taniyo 1949kii, dalalkii gumeysiga Talyaaniga laga qabsaday waxaa maamulkoodii iyo siyaasadoodiiba u xilsaarnaa Xafiiska Dagaalka kadibna, laga billaabo 1dii Abriile 1949kii, waxaa lagu wareejiyay Xafiiska Arrimaha Dibedda. Durbadiiba, goortuu billawday maamulka ciidamada, waxaa soo ifbaxday siyaasadduu Ingiriisku, dagaalka ka dib, la maagganaa maquuninta dalalkuu Talyaaniga Afrikada ka gumeysan jiray, waxaana laga dareemay inuu Ingariisku doonaayay laba arrimood oo ah:

1. Inuu si kastaba isuhortaago dib ugu soo laabashada Talyaaniga dalalkuu gumeysan jiray;
2. Inuu toos iyo waarto ahaan ula wareego xilka maamulka dalalkaas, inkastoo kol danbe arrintaas is beddeshay.

Waxaa Ingiriisku ka muuqatay dareen uu ka qabay fulinta qodobka dambe, taasoo aad u soo ifbaxday kadib goortii, 12kii Agoosto 1941dii, madaxweynaha Mareykanka iyo wasiirka kowaad ee Ingiriiska saxiixeen [104]"Xaashidii Atlantic". Sida la ogyahay saddex ka mid ah shanta qodob oo ay xaashidaas ka koobnayd waxay ku saabsanaayeen timaaddada dalalkii la gumeysan jiray oo uu isbahaysiga dagaalka ku qabsaday. Ugu horreeyntii, waxay xaashidaas ku caddeeyeen, inayan dooneyn dal ballaarsi iyo wax la mid ah waxayna ku qeexeen qodobka 1aad oo oranaayay inayan dhacayn isbeddel dal lagu sameeyo aanan ku salaysnayn rabitaan madaxbannaani ee ka timaada dadka dalkaa deggan. Waxay ugu dambeeyntii ballanqaadeen inay dhawrayaan dawga uu dad waliba u leeyahay inuu doorto dawladduu doonayo inuu ku hoos noolaado, gaar ahaan, qodobka 1aad waxaa ka muuqatay inuu Ingiriisku ka reebayay, toos ahaan, inuu la wareego dalalkuu Talyaaniga gumeysan jiray. Sidaas daraadeed qodobkaas waxuu xukuumadda London si dadban uga reebayay ujeeddaday dagaalka ka hor dalalkaas ka lahayd. Waxaa si caddaan ah u muuqatay, arrintu si kastaba ha ahaatee, siduu siyaasad ahaan Ingiriisku u arkayay timaaddada

[103] Gianluigi Rossi = Africa Italiana Verso L'indipendenza 1980 B.4

dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray ee Geeska Afrika iyo rabitaankay Xabashidu ka qabtay Eritreeya iyo Soomaaliya uu Ingiriisku garab ku siinaayay.

Goortii Talyaanigu laga madaxbannaaneeyay dalka Xabashida, maamulkii gobolka Soomaali Galbeed oo laga reebo Jigjiga, Harar iyo Diridawe waxuu ka mid ahaa Soomaaliya, sidaasayna ciidamada Ingiriisku kula wareegeen goortay Talyaaniga ka qabsadeen dalka Soomaaliyeed.

Isla waagaa waxuu dhanka kale Ingiriisku ka waday xayaysiin lagu dhiirrigelinayay rabitaanka isballarineed ee Xabashidu ka qabtay Geeska Afrika. Intuu socday duullaankii Ingiriisku ku qabsaday Eritreeya una dhexeeysay, 1940kii iyo 1941kii, ayay dayuuradaha ciidamada cirka ee Ingiriisku ku daadiyeen Eritreeya warqaaddo uu qoray Boqorka Xabashida uu kula hadlaayay dadweynaha Eritreeya iyo Soomaalida gobolka Banaadir laguna leeyahay: "Dadweynaha Eritreeya iyo Soomaalida Banaadir waxaa laydinka gooyay dalkiinii hooyo ee Ethiopia waxaana leydin hoos geeyay rarka gumeysiga nacabka ah aad weliba ku hoos nooshahiin". Waxaa dalkiinii doogga iyo cosobka ahaa idinka qaatay nacabka Talyaaniga ee naxariista daran idiina diiday inaad beeraha tacbataan xoolihiina dhaqataan. Waxaa la gaaray goortii laydinka nabadgelin lahaa dhibaatada iyo xurmo la'aanta. Waxaan u soo noqday inaan dib ugu soo celiyo gobannimada dalkayga oo ay ka mid yahiin Eritreeya iyo Soomaalida Banaadir oo ay dadkooda ku noolaan doonaan hooska calanka Ethiopia". "Halganka keligayaga kuma aynu nihin hub la'aanna nama hayso; sidaa daradeed waxaan idiinku yeeraynaa inaad iska riddaan heeryada addoonnimada". Sidoo kale warqaado oo ay dawladda Ingiriiska daadisay waxaa ku qornaa: "Dadkiina doonaya inay ku hoos noolaadaan calanka Boqor Xayle Selaasaha laad, waxannu idiin ballanqaadeynaa inaynu dhawreyno dawladaad doonaysaan inaad ku hoos noolaataan. Inkastoo aan loo qaadan karin rasmi arrintaan dambe haddana dhawr jeer ayay Xabashidu ku dooday si ay u adkayso rabitaankeedii dhul ballaarsiga ahaa.

4tii Febraayo 1941kii, aqalka barlamaanka Ingiriiska waxaa hadal ka jeediyay xoghayaha arrimaha dibedda waxuuna yiri: "Xukuumadda Boqortooyada Britaaniya wey soo dhoweynaysaa madaxbannaanida Xabashida iyo wanbarka Boqor Xayle Silaase. Xukuumadda waxay kaloo caddeeynaysaa inay dood u qabin dhulay Xabashida leedahay".

13kii Jannaayo 1942kii, waxaa Ingiriisku Xabashida u aqoonsaday gobannimo buuxda iyo madaxbannaani waxayna labada dhinac isla gaareen heshiis ah inay ciidamada Ingiriisku siiwadaan maamulka labada aag ee ah aagga keydka [105]"Reserved Areas" iyo Soomaali Galbeed, heshiiskaasoo guntiisa ahayd:

1. Inay aagga kaydka ah "Resrved Areas" maamulkiisa siiwadaan ciidamada Ingiriiska sababtoo ah inuu qaayo istraatiji ah u leeyahay hawlgalka ciidamada iyo ilaalinta nabadgelyada marinka reylka Jabuuti iyo Adis Ababa ee ka dhexeeya Faransiiska iyo Xabashida.

2. Gobolka Soomali Galbeed oo ka mid ahaa dalkuu Talyaaniga gumeysan jiray inuu sidiisii uga mid ahaado Soomaaliya ayna maamulaan ciidamada Ingiriiska inta heshiiskaan jiro.

[104] Eeg lifaaqa C iyo F. (Reserved Area)

Waxaa arrimahaasoo idil ka muuqday inuu Ingiriisku u ballanqaaday Xabashida inuu tixgelin doono, dagaalka ka dib, danaheedu ku saabsanaa Eritreeya iyo Soomaaliya. Mareykanku waxuu qabay muquuninta dalalkii Afrika ee la gumeysan jiray in loo dhiibo maamul wasaayad caalami ah, waxayna aragtidiisu soo ifbaxday, bartamihii 1942kii, siyaasaddaasuna rabay in lagu muquuniyo dalalkii Talyaaniga gumeysan jiray ee Liibiya, Eritreeya iyo Soomaaliya. Aragtida Mareykanka qabay oo ahayd in lagu dhaqo maamul wasaayadeed dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray ee Afrika waxay xoogeysatay, bishii Febraayo 1943kii, goortuu xoghayahii arrimaha dibadda Ingiriiska, ka caddeyay Aqalka Barlamaanka inuu raaci doono aragtidaas, iyadoo xukuumadiisu fiiro gaar ah siin doonto arrintaas dagaalka ka dib, hadba halkay siyaasada Qaramada Midoobay u janjeerto ee ku saabsan, guud ahaan, muquuninta dalalka la gumeysan jiray.

Saddexdii sanoo ugu horreysay oo ay Soomaaliya ciidamada Ingiriisku u talinayeen, waxaa hanaqaaday baraarug siyaasadeed waxaana Xamar ka curtay, 15kii maajo 1943kii, kulan dhallinyaro oo la baxay "Somali Youth Club" (S.Y.C.) oo ay aasaaseen saddex iyo toban dhallinyaro uu dareen siyaasadeed ku beermay oo magacyadoodu yahiin:

1. Cabduqaadir Sakhaawadiin.
2. Yaasiin Xaaji Cusmaan Sharma'arke.
3. Sayid Xersi Nuur.
4. Muxamed Cusmaan Baarbe.
5. Daahir Xaaji Cusmaan Sharma'arke.
6. Xaaji Muxamed Xuseen.
7. Khaliif Hundow Macallim.
8. Muxamed Faarax Hilowle.
9. Muxamed Cabdulle Xayeesi.
10. Cusmaan Geedi Raage.
11. Muxamed Cali Nuur.
12. Cali Xuseen Cali.
13. Dheere Xaaji Dheere.

Kulankaas barnaamijkiisii ugu horreeyay waxuu ahaa aqoon isweydaarsi iyo aqoon kororsi, haseyeeshee, waxuu durbadiiba isurogay baraarujin siyaasadeed, meel kastoo ay Soomaali deggan tahay; waxuu sameeystay astaamo lagu yaqiin shuuciga oo uu ka mid ahaa, calan guduudan; kuwaasoo xukuumadii dalka u talineysay tuhuntay una hollatay inay kulanka baa'biso. Dood dheer ee dhexmartay madaxda kulanka iyo xukuumadda kadib, waxaa la garay isafgarasho lagu oggolaaday inuu kulanku hawshiisa wato waxuuna durbadiiba ka hawl galay abaabulid siyaasadeed ee lagu doonayo gobannimo. Muddo gaaban kulanku waxuu xubnihiisu gaaray 30 kun oo ay ka mid yahiin ciidankii Soomaali ee loo aasaasay dhawridda xasiloonida iyo nabadgelyada (Somali Gendarmerie). Inkastoo ay dalka maamuleysay xukuumad ciidan Ingiriis ah, haddana waxaa lagu dhaqayay xeerarkii iyo shuruucdii gumeysigii Talyaaniga ee midabtakoorka iyo caddaaladdarrada ku salaysnaa. Soomaalida looma oggolayn makhaayadaha caddaanka, gadiidka dadweynaha waxuu lahaa laba qaybood oo madow iyo caddaan ah; xukunkaas midabtakoorka ku dhisnaa waxuu dhallinyarada ku dhaliyay baraarug siyaasadeed iyo doonis caddaaladeed.

Xoghayahii arrimaha dibadda Ingiriiska ayaa, kol labaad, ka caddeeyay Aqalka Barlamaanka inayan xukuumadda Ingiriiska oggolayn in Talyaanigu ku soo laabto Afrikada Bari. 7 Juunyo 1944kii, kol la weydiiyay xoghayaha in caddeyntaas ay tahay siyaasadda Ingiriiska iyo isbaheysigiisa, waxuu ku warceliyay inay taasi tahay aragtida Ingiriiska. Aragtidaas Ingiriiska waxay wasiiru dawlaha Talyaanga ku hawaanisay inuu isna caddeeyo waxay xukuumadiisu ka qabtay dalalkii oo ay gumeysan jirtay. Khudbad uu jeediyay, 20kii Agoosto 1944kii, waxuu ka

warramay arrintay dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray ku sugnaayeen dagaalka ka hor waxuuna soo jeediyay in Talyaaniga guntiisa loo daayo, taasoo uu ku sheegay inay dan u tahay reer Galbeedka oo idil. Waxuu kaloo yiri: "Sida kaliya oo aan ku oggolaan karno in nalaga qaado dalalkaas aynu gumeysan jirnay waxay tahay in guud ahaan laysla hoos keeno dalalkii la gumeysan jiray maamul caalami ah. Hadalkaas waxuu ka careysiiyay Ingiriiska waxuuna macnihiisu ahaa in sida kali ah ee Talyaaniga kaga quusan karo dalalkuu gumeysan jiray inay tahay dalalkii la gumeysan jiray oo idil loo dhiibo urur caalami ah, taasoo taabanaysay danahuu Ingiriiska ka lahaa timaaddada dalalkaas.

Welwel weyn ayay Talyaaniga ku abuurtay ballanqaad u bixiyay Xoghayaha Arrimaha Dibbada Ingiriiska, kol uu ka warcelinaayay Barlamaanka, arrin ku saabsanayd war uu qoray wargeys ka soo baxay Wasaaradda Warfaafinta Ingiriiska oo oronayay: "In maamulkii gumeysiga Talyaaniga ee Soomaaliya uu dadka ku ciriirin jiray barashada aqoonta iyo caafimaadka guud lana xiri jiray dadka, iyadoo aan maxkamad la horgeyn", waxuuna yiri: "Xukuumadda Ingiriiska ma ballanqaadayso in Talyaaniga loo celiyo dalalkuu gumeysan jiray". Ballanqaad la'aantas aad ayuu dadweynaha Talyaaniga uga xumaaday waxuuna Talyaaniga uga cawday Ingiriiska.

Wasiirka Kowaad ee Talyaaniga ayaa, 5tii Oktoobar 1944kii, caddeyn weydiiyay danjiraha Ingiriiska u fadhiya Rooma waxaana la soo saaray, Oktoobar 1944, war murtiyeed la xiriira warcelintii danjiruhu uu siiyay Talyaaniga oo oranaysay: "Xoghayaha Arrimaha Dibedda caddeyn gaar ahaaneed kama uu bixin dalalkuu Talyaaniga gumeysan jiray, sida uu u gartay dadweynaha Talyaaniga qoreenna wargeysyadu. Waxaa lays weydaariyay oo kaliya weydiintii Mudane Barlamaanka ah iyo warcelintii" Xoghayaha Arrimaha Dibedda. "Caddeyntaas, inkastay xasilisay welwelkii uu qabay dadweynaha Talyaaniga haddana waxba kama ay doorin halkuu Ingiriisku horey uga taagnaa arrintaas.

Wargeysyada qaarkood waxay farta ku fiiqeen kala fogaanta u dhexeeysa filashada cusub uu Talyaanigu ku doonaayay inuu daw u yeesho ku laabashada dalalkuu gumeysan jiray oo ay gaashaanbuurta reer Galbeedkuna dhiirrigelinaysay iyo Ingiriiskoo lid ku ahaa. Aragtida Mareykanka waxay ka soo horjeeday halkuu Ingiriisku iska taagay arrintaas oo aan oggolayn in Talyaanigu loo celiyo dalalkuu gumeysan jiray, taasoo uu Talyaanigu u haystay inay ku tahay dawdarro lagu sameeynayo waxuuna qabay, isagoo tiradiisu dhan tahay 45 milyan, in hayaankiisa iyo hawl raadintiisu halis gelinayso Yurub, haddii laga qaado dalalkuu gumeysan jiray. Wasiirkii Arrimaha Dibadda Talyaaniga koluu waraysi la yeeshay wargeyska New York Times waxuu yiri: "Innagu waxaynu isuhaysanaa inaynu ka tirsanahay bahda dagaalka ku guuleystay, haddaba sidee ayaa dad sidaas ah goor walba loo xusuusin karaa in laga guuleystay oo misna la cadaadiyo ?". Dawladda iyo dadweynaha Talyaaniga, si wadajir ah ayay ugu doodayaan inay daw u leeyahiin ku laabashada dalalkii ay gumeysan jireen, loomana aanayn karo dagaalkoo aan ku dhicin rabitaanka dadweynaha.

11kii Oktoobar 1944kii, kol nin mudane ahi weydiiyay Xoghaye ku xigeenka Arrimaha Dibedda Ingiriiska in Xoghayihiisu Arrimaha Dibadda yiri: "Sina Talyaaniga looguma celinayo dalalkuu gumeysan jiray", waxuu ku warceliyay Sidaan ayuu yiri Xoghayaha: "xukuumadda Ingiriiska ma aha midda kaliya ee saxiixday Xaashidii Atlaantiga, waxayna arrintu ka dhexeeysaa xubnaha Qaramada Midoobay oo idil". Warcelintaas waxay caddeyneysay inaan Ingiriisku kolnaba kaligiis go'aan ka gaareyn aayatiinka dalalkii la gumeysan jiray, warcelintaasoo welwelka ka saaraysay bahdiisa.

Xafiiska Arrimaha Dibadda Ingriiska, waxaa ku adkaatay warcelintii uu ka siin lahaa xusuus qoraalkii Xoghayaha Arrimaha Dibadda Mareykanka oo si cad u qeexayay in sida ugu wanaagsan ee loo furdaamin karo arrinta dalalkii la gumeysan jiray ay tahay in loo dhiibo xukun Wasaayadeed, iyadoo ay weli doodduu u furnayd labada dawladood waxay ka qabaan arrintaas. Darbinta warcelinta la siin lahaa Madaxweynaha Mareykanka waxay xafiiska Arrimaha Dibadda Ingiriiska hawaan uga dhigaysay in si cad loo qeexo waxa lala maagan yahay aayatiinka dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray. Argtidii ahayd in dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray ee Afrika lagu dhaqo Maamul Wasaayadeed oo ay soo jeedisay dawladda Mareykanka waxay ku xoogeystay magaalada London; halkaasoo, bishii Febraayo 1943kii, Xoghayaha Arrimaha Dibadda Ingiriisku ka muujiyay Barlamaanka Ingriiska in xukuumadiisu raaci doonto aragtidaas iyada ah, kolka laga hadli doono, dagaalka kadib, ayna fiiro gaar ah siin doonto siyaasadda Qaramada Midoobay ee ku saabasan dalalkii la gumeysan jiray. Si kastaba ha ahaatee, aragtidaas, guud ahaaneed, uma muuqan mid ka soo horjeedda danahii iyo mashaariicduu Ingiriisku darbistay waxayna ku koobnayd mashruuca Soomaali Weyn iyo Liibiya oo keli ah kumana jirin arrinta Eritreeya oo goortaas xoog lahayd in loo kala qaybiyo Suudaan iyo Xabashida.

H - KASMADII IYO ARAGTIDII SOOMAALI WEYN

Soomaalida waxaa midnimadeeda saldhig u ah inay tahay qaran isku isir, af, diin, hiddo iyo dhaqanba ah nolosheeduna, inta badan, ay ku salaysan tahay guurto xoolo raacato ah. Inkastoo Soomaalidu waayahii hore ayan yeelan maamul dawli ah iyo calan mideysan, haddana waxaa mideynaayay qarannimadeeda iyo deggaankeeda waxaana maamuli jiray maqaawirteeda iyo madax ku salaysan hab jilibeed; waxay kaloo lahayd xeerar iyo dhaqan filweyn oo ay ku ilaalin jirtay nabadgelyadeeda iyo habsami u noolaashadeeda. Si loo garto bisaylka siyaasadeed ee Soomaalidu, waayahaas gumeysiga kala qaybsanaayay, waxaa habboon in kolka hore si kooban loo caddeeyo heerkay mareeysay garashada qarannimada iyo waagay kasmadaas dadweynaha ku baahday. Cid kastoo daneeysa taariikhda kasmada qarannimo ee waayeheedii hore, waxaa u soo ifbaxayso in aragtida qarannimo heerkeedii ugu horreeyay uusan u muuqan: "Caqiido siyaasadeed ee qaanuun ahaan ku doodaysay dawga qarannimo " waxayna aragtida iyo kasmadii hore ahayd "inay intii isku qolo iyo degaan ahaaba midowdo iskana kaashato difaaca isagana dhawrto dagaal sokeeye ee ka dhexdhasha dabadeedna u keena kala firdhad". Aragtidaas gaaban ee kasmadii hore ku salaysnayd ayuu Soomaalidu qarannimadeedu ku dhisnaa jiil kastana ku habaysan jiray. Aragtida siyaasadeed uu kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed ku dhaqaaqay waxaa ka mid ahaa in uu dadweynahu ka horumariyo aragtidaa iyo kasmadaa gaaban kuna hanuuniyo garashada siyaasadeed oo ay qarannimadu huwan tahay.

Qarnigii 19aad, iyadoo arrinta Soomaalidu sidaa tahay ayay kala qaybsadeen gumeysteyaashii Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Xabashida. Kala qaybintaa waxay Qaranka Soomaaliyeed dhaxalsiisay inuu dhaqan habaabo laguna maamulo sharuuc iyo xeerar shisheeye ee ka fog keedii dhaqan-dhaqaale. Soomaalidu taniyo waaguu gumeysiga kala qaybsaday waxay ku guuxaysay, goortay ahaataba, inuu qarankeedu midoobi doono, haseyeeshee, intuu gumeysigu haystay mayna helin madaxbannaani iyo dhiirrinimo siyaasadeed oo ay ku muujiso rabitaankeeda. Rabitaanka midnimada qarameed waxuu xoogaystay aadna u muuqday 1936kii, kolkuu Talyaanigu ku duulay uuna qabsaday dalka Xabashida mideeyayna maamulka, inta badan, gobolladii Soomaaliyeed ee kala qaybsanaa. Waxuu aad u sii baahay goortuu Talyaanigu, Agoosto 1941kii, qabsaday Maxmiyaddii Ingiriiska ee Soomaalida Waqooyi, waagaasoo ay muuqatay in Soomaali, inta badan, hoos timid dawlad qur ah. Waxay arrintaa abuurtay, aragti ahaan, dabeeshii midnimada Qaranka Soomaaliyeed oo ay dareenkii dadweynahana ku baahday. Waxay aad u soo ifbaxday toddobo sano kadib goortuu, Dagaalkii Labaad ee Dunida, Ingiriisku Geeska Afrika oo idil qabsaday, waagaasoo ay Soomaalidu u muuqatay in badi maamulka dalkeeda dawlad qur ah hoos yimid. Shisheeyaha aan aad u aqoon taariikhda Soomaalida waxay waagaa ugu muuqatay, dhaqdhaqaaqaas doonista midnimada Soomaali Weyn, inuu aad u qoto dheereyn uuna yahay mid shisheeyuhu abaabulay, iyadoo uu ku fushanayo dano siyaasadeed ee waagaa taagnaa. Dagaalkii Labaad ee Dunidu waxuu sii kordhiyay doonistii midnimada, waagaasoo ay Soomaalidu muujisay rabitaan in maamulkeedu meel laysugu keeno ayna hoos timaado dawlad qur ah. Waxaa kaloo si aad ah u baraarujiyay rabitaankaas dheehidii ciidamdii qolo kastba lahayd ee Ingiriisku dalka ku qabsaday iyo awoodii loo helay in wararka dhaqdhaqaaqa Adduunkoo idil lala socdo.

Talooyinka ay Dawladda Ingiriiska soo bandhigtay Dagaalkii Labaad kadib, waxaa ka mid ahaa in la mideeyo Qaranka Soomaaliyeed, aragtidaasoo sida ka muuqatay qoraallada Xafiiska

Arrimaha Dibadda Ingiriisku habaystay, sannadadii 1941kii taniyo 1943kii, waagaasoo ay Soomaalidu rabitaankeedu midnimo aad u soo ifbaxday. Ayaandarraduse waxay ahayd waaguu bilnaa kanshaha mideeynta Soomaali Weyn waxaa dhumiyay hoggaamiyeyaashii Axsaabtii Soomaaliyeed ee aragtidooda iyo kasmadooda siyaasadeed gaabnayd iyo mardabada Ingiriiskoo ujeedda badnayd. [106]Aragtida Soomaali Weyn ee Ingiriisku soo bandhigay waxay ku salaysnayd rabitaanka dadweynaha Soomaaliyeed oo ay danaha Ingiriisku ku qarsoonayd waxaana goortii ugu horreeysay qoraal ku soo jeediyay, 19kii Abriil 1941kii, gaashaanle Erskine oo waa hore qunsul ka ahaan jiray magaalada Gora ee dalka Caruusa (1923-1936kii) waxuuna ku taliyay in la mideeyo Qaranka Soomaaliyeed oo idil. Arrinta Midaynta Soomaali waxaa kaloo isna qoraal ku soo jeediyay, [107]15kii Agoosto 1941kii, "Sir Philip Mitchell" oo kol hore Uganda xaakim ka ahaan jiray waagaasna ahaa madaxa xafiiska siyaasada ciidamadii Ingiriiska ee Bariga Dhexe. Sir Mitchell, isagoo cuskanaayay in Soomaalidu Gobolka Galbeed oo ay Xabashidu gumeysan jirtay, si kastaba u diidan tahay in dalkeeda lagu hoos celiyo Saldanada Xabashida, ayuu ku taliyay in gobolkaas lagu daro Soomaaliya goortaasna Ingiriisku xilwadeen ka noqdo dal ballaaran ee Soomaaliyeed oo ka kooban: Soomaalida oo ay gumeystaan Ingiriiska, Talyaaniga iyo Xabashida. Waxaa dabadeed taladaa la weydiiyay xaakimkii Maxmiyaddii Ingiriiska ee Soomaalida Waqooyi (Clenday) ee asna adkeeyay soo jeedintaas kana digay inaan sinaba loogu celin Gobolka Soomaali Galbeed awoodda gumeysiga Xabashida.

[108]Ingiriisku waxuu watay aragti ah in Qaranka Soomaliyeed lagu mideeyo maamul qur ah waxuuna si cad ugu qeexay xusuusqorkiisii, 20/4/1943 iyo in Talyaaniga gumeysigiisa lagu soo celin Afrika. Waxuu kaloo qoraalka ku soo jeediyay in Boqortooyada Ingiriiska ay qaado xilka maamulka dalka Soomali Weyn gacantana ku hayso intuu ka gaaro hanashada gobannimadiisa. Ingiriisku waxuu qabay in taladaasi tahay midda qur ah uu ku badbaadin karo danahiisa, ha ahaadeen kuwo dalkaas ku kooban ama daneeya dalalkuu gumeysto ee Afrikada Bari. [109]Qaabka maamulka, waxuu Ingiriisku qabay, inuu noqdo mid aad u fudud lana mid ah kii lagu maamuli jiray maxmiyadda Soomaalida Waqooyi dagaalka ka hor, kaasoo ahaa maamul oo ay hoggaaminayeen hawlwadeenno Ingiriis ah iyo kalkaaleyaal Soomaaliyeed. Murti ahaan Ingiriisku waxuu rabay inuu toos u maamulo Qaranka Soomaaliyeed oo la mideeyay si uu danahiisa ugu ilaashado waxuuna raaciyay, si aan loogu eedeyn dhul ballaarsi, inay suurogal tahay kormeer caalami ah, kaasoo la mid ah maamul wasaayadeed oo Ingiriis ah. Aragtidaa waxaa isna la qabay xafiiska dagaalka oo guddi ka kooban wasiirro u xil saaray, gugii 1943kii, inay ka baaraandegaan kana soo taliyaan siyaasadduu Ingiriisku uga dhaadhicin lahaa dawladda Xabashida, guddigaasoo ku taliyay in Xabashida laga wareejiyo Gobolka Soomaali Galbeed

---

[106] Paper suggesting the readjustment of Somalia for 371, J 1167/964/66

[105] Policy for Italian East Africa (Secret) note chief Political Office (Mitchell) Political Headquarter, Italian East Africa and Ethiopia 15 August 1941, fo 371, V 2619/51 G. 70

[107] Italian Colonies In Africa, preliminary note of colonial office views of 20/4/1943, fo 371 u 14324/1/43.

[108] Note Co to fo, 27/6/1943, Fo 371, U 2797/682/70.

Talyaaniguna aan loo celin Eritreeya. Xafiiska dagaalku waxuu ka ambaqaadayay aragti ah, hadduu Eritreeya dego xoog ka soo horjeeda Boqortooyada Ingiriiska, inuu kala goyn karo waddooyinka iyo isgaarsiinta dalalkuu Ingiriisku gumeysto, waxuu kaloo halis u noqon karaa Afrikada Bari oo idil, haddii dalkaas laga dhigto saldhig loogu duulo oogada dalka Xabashida. Taasi ma ahayn aragti kama dambays ah oo ay tahay in Talyaanigu laga qadiyo dalalkuu gumeysan jiray, balse waxay ahayd, iyadoo laga haysto dammaanad buuxda, dalkuu ku soo noqonayo waa inuu ahaadaa Eritreeya oo aanu noqon Soomaaliya. "Eritreeya waa dalka ugu filweyn dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray, haddii loo celiyana ma ay is-hortaageyso abaabulidii Soomaali Weyn".

Ugu dambeeyntii Ingiriisku waxuu isku raacay in Eritreeya loo qaybiyo Suudaan iyo Xabshida waxuuna soo jeediyay in dalka Eritreeya, qaar ka mid ah, loo hibeeyo Xabashida si ay u hesho marin badeed Boqorka Xabashiduna looga doorsado oggolaasho soohdimeed uu ku jiro gobolka Soomaali Galbeed oo dhan. Waxaa hubaal ah in maamulka ciidamada Ingiriiska uu oggolaa qaybinta dalka Eritreeya Dawladda Suudaana ay oggolayd aragtidaas. Dawladda Suudaan waxay arrintaa Ingiriiska kala hadashay, xagaagii 1942kii, waxayna sannad kadib, ugu wargelisay Ingiriiska inay u darban tahay maamulka degmooyinka Keren iyo Ogordaat, iyadoo aan waxba ka qabin in la siiyo ciddii kaloo ay dani ka hayso degaanka dadka masiixiga ee afka Tigrayga ku hadla.

[109]Waxaa Ingiriiska mashaqo ku noqotay warcelintii uu siin lahaa -Mareykanka ee ku saabsanayd taladiisa oo ahayd in loo dhiibo maamul wasaayadeed dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray. Mashaqadaas waxay uga imanaysay, isagoo hay'adahiisa oo ay arrinta danayso, hab ahaan, aan weli arrinta meel isla dhigin. Iyadoo ay Ingiriisku weli arrintu u laalan tahay, ayaa [111]Mareykanku u soo gudbiyay xusuusqor kale oo uu ku muujinayay taladiisa oo ah inay tahay maamul wasaayadeed furdaaminta ugu qumman ee lagu muquunin karo dalalkuu Talyaaniga gumeysan jiray. Shirkii lagu qabtay Durbantan Osks, Agoosto-Oktoobar 1944kii, ayna ka soo qayb galeen Mareykanka, Midoowga Sofiyeeti, Ingiriiska iyo Shiinaha, waxaa la isla meel dhigay in la sameeyo urur caalami ah, haseyeeshee, arrintii maamulka wasaayadda ee Mareykanku watay meel layslama dhigin waxaana dib loogu dhigay furdaaminteeda goortii ururkaas caalamiga ah la sameeyo.

Ingiriiska taladiisii ku saabsanayd timaaddada Soomaaliya iyo Eritreeya waxay ahayd:

1. In dalka Soomaaliya uu Talyaaniga gumeysan jiray, dalalka Soomaaliyeed oo ay gumeystaan Ingiriiska, Faransiiska iyo gobolka Galbeed lagu mideeyo Soomaali Weyn;

2. In qarankaas la mideeyay uu hoos yimaado maamul wasaayadeed ee caalami ah uuna Ingiriisku xilkiisa maamul qaado.

---

[109] Hood for Poynton letter 10/10/40 FO. 371, U 7468 / 874 G. 70

[110] Memorandum of Acting Secretary of State for Roosevelt 15/11/44.

3. In Eritreeya la raaciyo Xabashida loogana doorsado gobolka Soomaali Galbeed oo lagu darayo Soomaali Weyn, iyadoo laga reebayo gobolka Bani Caamir oo la raacinayo Suudaan;

4. In Masawac laga sameeyo saldhig difaac oo ay ku adeegato Qaramada Midoobay, iyadoo la raaciyay dhul gudaha ah oo ay ku jirto Casmara;

5. In dalkaan dambe Xabashida laga madaxbannaaneeyo uuna hoos yimaado maamul wasaayadeed ee Ingiriis ah.

[112]Qorshahaas Ingiriisku waxuu ku caddaa warbixintii Xafiiska Arrimaha Gumeysiga, billawgii Diseembar 1944kii, taasoo uu oggolaaday Xafiiska Arrimaha Dibbadda Ingiriiska kadib, goortuu wax ka beddalay. Arrinta Eritreeya waxaa lagu taliyay in Mareykanka loo sheego laguna adkeysto in dalkaasi ku habboon yahay in la qaybiyo loona kala saaro isir jilibeed. In inteeda badan Xabashida la siiyo, waxaa lagu xiray shuruudo oo ay ka mid yahiin, in Xabashida laga gooyo gobolka Soomaali Galbeed iyo inay saxiixdo isbeddalkaas soohdimeed.

Billawgii Janaayo 1945kii, guddiga abbaaduulka ciidamada Ingiriiska goortuu ka baaraandegay arrintaas, waxuu caddeeyay, istraatijiya ahaan, inay lagamamaarmaan tahay dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray midkoodna inuusan gelin gacan nacab. Dalalkaasi waxay ku yaallaan marin badeed waxayna soohdin la leeyahiin Masar, Suudaan iyo Kenya oo looga soo duulli karo, haseyeeshee, waxuu soo jeediyay in laga digtoonaado si Talyaanigu ayna isu-afgaran dal nacab ah, iyadoo dalkiisa Badda Dhexe (Mediterranean Sea) uu kaga yaal meel istaraatijiyad ah. Goortii dalalka la gumeysto midba gaarkii looga baaraandegay waxuu guddiga abbaaduulkasoo jeediyay, in Ingiriisku loo sugo adeegga dekedda Masawac oo haddii dagaal dhaco si fudud looga gaari karo Oogada Casmara; in Bengaasi laga sameeyo saldhig maraakib iyo dayuuradeed lana fariisin karo ciidan meel kastoo "Cyrenaica" ku taal . Haseyeeshee, Ingirisku waxuu qabay inay lagamamaarmaan tahay in la tixgeliyo aragtida guddiga abbaaduulka ciidamada Bariga Dhexe oo idil.

[113]Dhammaadkii Jannaayo 1945kii, ayaa Xafiiska Arrimaha Dibadda Ingiriisku dhammeeyay qoraalladii loogu warcelin lahaa Madaxweynaha Mareykanka oo ku saabsanaa mashaariicdii uu Ingiriisku watay kana mid ahayd Soomaali Weyn, haseyeeshee, gudbinta warbixintaas Ingiriisku waxuu dib ugu dhigay shirka Yalta goortuu dhammaado, iyadoo arrintii maamulka wasaayadeed uu watay Mareykanku loogana dooday shirkaas ay cuslaatay.

[114]Dagaalkii waxuu dhammaaday 1945kii, sannadadii xigeyna arrinta dalka Soomaaliya waxaa kolkale lagu dhex tuuray murankii siyaasadaha caalamka. Furdaaminta dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray ayaa mashaqo ku noqotay bahdii dagaalka ku guuleysatay. Shirarkii ka dhacay Yalta, San Francisco iyo Botsdam, waxaa looga wadahadlaayay dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray, haseyeeshee, loogana gaari wax heshiis ah, aayahooda dambe.

---

[111] Fo 371, J 3160/ G 4/7/1943

[112] Memo Stettinius (Acting Secretary of State for Roosevelt of 15/11/1943

[113] Frus, 1945 The Conference of Malta and Yalta 1945.

Bishii Seteembar 1945kii, fadhigii ugu horreeyay ee Golaha Wasiirada ee dawladahaas laguna qabtay magaalada London, Xukuumadda Mareykanku waxay ka soo jeedisay in Maamul Wasaayadeed loo habeeyo dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray, iyadoo la cuskanaayo qodobka 81aad ee Axdiga Qaramada Midoobay. Arrintaas Xukuumadaha Faransiiska, Ingiriiska iyo Ruushka ayaa, sababo kala duwan awgood, ugu gacanseyray. Bishii Abriil ee xigtay ayay kolkale ku kulmeen Paris Wasiirada Arrimaha Dibadda, halkaasoo Ingiriisku ku soo jeediyay in la mideeyo dhulalka Soomaali Galbeed, Soomaalidu Ingiriisku gumeysto iyo Soomaalida Talyaanigu gumeysan jiray loona dhiibo maamulkiisa Ingiriiska. Waxuu weliba, Wasiirka Arrimaha Dibadda ku sii faahfaahiyay, bishii Juunyo, khudbadii uu ka akhriyay Barlamaankiisa ee [115]oranaysay: "Qaybtii dambe ee Qarnigii la soo dhaafay, Geeska Afrika waxaa qabsaday Ingiriiska, Faransiiska iyo Talyaaniga. Isla waagaa innagu qaybtayada waannu qabsanay, ayadoo Xabashiduna isla waagaa qabsatay dhul gudaha ah oo laba meelood meel sannadka barkiisa guurtada Soomaalida Ingiriisku gumeysto xoolo daaqsi u ahaa. Sidoo kale xoolo daaqsin awgii ayay dhib la'aan Soomaalida Talyaanigu gumeysto soohdinta uga tallaabi jirtay. Haddaba waxaannu soo jeedinaynaa in dhulka Soomaalida Talyaanigu gumeysan jiray iyo qaybta dariska la ah ee Xabashida, haddii Xabashidu oggolaato, laysku daro korna laga xukumo goortaasna dadka guurtada ah waxaa u suuragelaysa inay, sida loo bartay, noloshooda u wataan oo aan wax halis ah uga imaanin, ayadoo isla goortaas lagu filasho weyn yahay inay timaado awood dhaqaale ee dhab ah oo nolol deggan leh; hadduuse shirku jeclaysan taladeennu kuma mitidayno waxaannuna u darban nahay inaannu indhaheennu ku aragno dhul Soomaaliyeed oo loo dhiibo Talyaaniga, iyadoo ay xil qaadayso Qaramada Midoobay". Taladaas Ingiriisku soo jeediyay layskuma raacin, ayadoo ugu wacnayd in Boqorkii Xabashida uu la soo bannaanbaxay sheegasho qayb ka mid ah dhulka Soomaaliyeed waxuuna diiday in gebi ahaanba laga hadlo arrinta Soomaalida Galbeed oo aan ahayn Xabashida oo dib loogu soo celinaayo mooyee. Faransiiska ayaa ka dib soo jeediyay in Dawladda Talyaaniga loogu dhiibo Soomaaliya Maamul Wasaayadeed.

Bishii Luulyo 1946kii, waxay Soomaalida qaaday tillaabadii ugu horreeysay oo ay ku muujinaysay kacaannimadeeda iyo diidmada gumeysiga waxaana magaalada Muqdisho ku fiday war sheegaayo inuu Ingiriisku maaggan yahay dadka Soomaaliyeed inuu ku soo rogo koodhi (cashuur) iyo lamabar aqoonsi ee qoorta lagu xirto, taasoo macnaheedu yahay in qofka la canshuuro siduu horeyba u yeeli jiray dadka dalalkuu gumeysato.

Kulanka dhallinyarada Soomaaliyeed oo waagaa dareenkiisa siyaasadeed heer sare gaaray waxuu durbadiiba abaabulay bannaanbax lagaga soo horjeedo arrintaas, iyagoo dadka bannaanbaxaayay ku dhawaaqaayay "Ha Noolaato" oo macnaheedu yahay Soomaali ha noolaato. Bannaanbaxaas waxaa ka dhashay iska horimaad Soomaalida iyo ciidamadii maamulka Ingiriiska, kaasoo dad badan ee Soomaali ah ku dhintay kuna dhaawacmay. Bannaanbaxaas waxuu ahaa kii ugu horreeyay ee Soomaali ku muujiso dareenkeeda siyaasadeed waxaana ka soo baxay in maamulka Ingiriiska burriyo sharuucdii gumeysiga Talyaaniga ee ku dhisnaa midabtakoor iyo caddaaladdarrida, waxuu kaloo saldhig u noqday isbeddelka siyaasadeed ee ku dhacay Kulanka

[114] Parliamentary Debates: House of Commons official report, London H M So 1944 Vol. 440, Col. 1331.

Dhallinyarada Soomaaliyeed. 1947kii, waxuu Kulanka Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.C) aan horey u soo sheegnay, isu beddelay xisbi waxuuna la baxay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L) isagoo degsaday barnaamij cusub oo ka kooban afar qodob oo ah:

1. In la mideeyo qaranka Soomaaliyeed ee lagu gaarayo baabi'inta heeryada gumeysiga iyo dhaqanka qabiilka;
2. In la kordhiyo aqoonta dhallinyarada, iyadoo dugsiyo casri ah loo marayo;
3. In wax kastoo hortaagan danaha Soomaaliyeed lagaga gudbo hab qaanuuneed;
4. In lagu hirgaliyo afka Soomaalida farta Cusmaaniyada ah.

Talyaanigii dalka joogay ayaa isna isla goortiiba abaabulay axsaab lid ku ah (S.Y.L) waxuuna barnaamijkoodu ahaa inuu gumeysiga Talyaaniga dalka ku soo laabto kana hor tagaan barnaamijka (S.Y.L) waxaana ka mid ahaa "Unione Patriotica di Beneficenza", "Ex Combatenti", "Unione Africane", Hisbiya Digil Mirifle", "Hidaaya Al Islaam" iyo kuwa kaloo yaryar ee ku wada dhisan hab jilibeed. Waxaa durbadiiba dalka ka dhashay iskahorjeed siyaasadeed iyo buuq aan la soo koobi karin. Axsaabta Talyaaniga la bahowday waxaa abaabulay rag Talyaani ah ee maamulka magaalada Muqdisho haystay oo ay ka mid ahaayeen: Pietro Periteeli oo ahaa duqa magaalada Xamar, Vicenzo Calzia oo ahaa xoghayaha maamulka magaalada Muqdisho iyo saddex hawlwadeen ee la oran jiray Biasi, Odipinti iyo Bascheri oo xilkoodu ahaa inay xayaysiin u sameeyaan Talyaaniga ku soo noqoshadiisa Soomaaliya iyo inay kala dhantaalaan awoodda Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L). 30kii Diseembar 1947dii, waxuu Talyaanigii degganaa Soomaaliya dhisay guddi loo baxshay "Comitato Rapresentativo Italiana" oo guddoomiye u noqday Peritelli.

Carabtii degganayd dalka oo u badnayd Yamaniyiin Talyaanigu ku keenay askarinimo iyo waxay dhaleenba oo u badnaa iska dhal Carab iyo Soomaali ah ayaa noqday kuwa abaabulo fulinta siyaasadda Talyaaniga. Waxay, 28kii Oktoobar 1947kii, socod dhoollatus iyo daandaansi ah oo ay ka soo billaabeen xaafada loo yaqaan "Villagio Arabo", ku soo mareen Afar-Iridoodka Xamar Weyne, goortay marayeen Afar Irdoodka lana sinaayeen daarta Fakhi, dagaal ka dhexdhashay, iyaga iyo Soomaalida. Dagaalkaas waxa ku dhaawacmay kuna dhintay Soomaali iyo Carab badan, haseyeeshee, durbadiiba waxaa soo dhexgalay ciidankii nabadgelyada oo kala joojiyay.

Halgankii gobannimodoonka Koofureed waxaa sidoo kale garab socday halgan lagaga soo horjeeday gumeysiga Ingiriiska ee maxmiyadii Waqooyi oo ay hoggaaminaayeen axsaab oo ka mid ahayd xisbiga S.N.S. oo goortii dambe isu rogay S.N.L. Ragii halgankaas Ingiriiska lagaga soo horjeeday ku caan baxay waxaa ka mid ahaa halgamaa Faarax Oomaar. Habkuu Faarax Oomaar gumeysiga Ingiriiska kula dagaallamaayay waxuu la mid ahaa tabtuu isla waagaa Gandi Ingiriiska kula dagaalamayay, isagoo aqoontiisa la kaashanayay ayuu Faarax Oomaar si dadban isku hortaagayay tillaabooyinkii lidka ku ahaa danaha Qaranka Soomaaliyeed. Goortuu dareemo arrin lid ku ah danaha Soomaaliyeed waxuu dood qoraal ah u gudbin jiray barlamaanka Ingiriiska oo sababi jirtay in saraakiisha Ingiriiska qaarkood xilka laga wareejiyo. Tillaabooyinkaas Faarax Oomaar waxay u dhaliyeen inay xilwadeenada Ingiriiska abaabulaan eedo lagu xiro ugu dambayntiina loo masaafuriyo jasiiradda la yiraahdo Kamaraan ee Badda Cas. Ingiriisku siyaabo badan oo cadaadis ah ayuu Faarax Oomaar kula kacay misana uma soo liicin waxuuna geeriyooday 1948kii. Waxaa la yiraahdaa Ingiriis ayaa sun siiyay goortuu ku jiray guriga

bukaanjiifka Jigjiga ayaamo dabadeed suntaas ayuu u dhintay Waxaa halgemayaashii gobannimodoonka isna ka mid ahaa Sheekh Bashiir oo abaabulay kacaan lid ku ahaa gumeysiga Ingiriiska; waxaase dhacay, isagoo aan laxaadsan in Ingiriisku col, si kedis ah, ku kacshay laguna dilay Ulasan isaga iyo siddeed xertiisa, bishii Abriil 1948kii.

Golaha Guud ee Qaramada Midoobay waxuu soo saaray bayaan oo fulintiisa u xilsaaray Afarta Dawladood oo Itaalka Weyn, si kastaba ha ahaatee, ma fududayn inay Qaramada Midoobay gaarto go'aan, taasoo ay ugu wacnayd isafgarashowaa iyo gorgortan ka dhex jiray dowladahii badnaa ee laga rabay inay go'aan ka gaaraan dalalkuu Talyaaniga gumeysan jiray.

Dood dheer kadib Qaramada Midoobay waxay go'aansatay in loo diro dalka Soomaaliyeed ee Talyaanigu gumeysan jiray guddi baaritaan ee ka kooban Afarta Dawladood ee Itaalka Weyn. Maalmo ka hor, guddiga tegidiisa Soomaaliya, ayuu gumeysiga iyo dabadhilifyadiisa abaabuleen dhaqdhaqaaqyo lid ku ah kacaanka Soomaaliyeed abuurana xasilloonidarro. Waxuu guddiga tagay Soomaaliya, 6dii Jannaayo 1948kii, waxaana durbadiiba abuurmay iskahorimaad dhaliyay dagaalkii caanka ahaa, 11kii Jannaayo 1948kii, oo ay ku naf waayeen konton iyo laba Talyaani ah iyo kow iyo toban Soomaali ah dhaawaceeduna aad u badnaa. [116]Soomaalidu meel kastoo ay joogtaba waxay guddiga u soo gudbisay aragtideeda waxayna codsatay dalkeeda oo midaysan in loo dhiibo wasaayad ahaan Qaramada Midoobay xilka maamulkana [117]Afarta Dawladood ee Itaalka Weyn.

Iyadoo arrintu sidaas tahay uu dareenka iyo dhaqdhaqaaqa siyaasadeed ee dadwaynuhu kordhay, ayuu Xisbiga dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L) shaaca ka qaaday barnaamijkiisa hawlgalineed iyo adkaynta doonista Soomaali Weyn. Aragtidaasi waxay noqotay mid dadweynahoo idil u guuxay si furana looga hadlo. Tillaabadaas kadib Xisbiga Dhallinyarada Soomaaiyeed (S.Y.L) iyo Xisbigii Qarannimada Soomaaliyeed (S.N.L), waxay abaabuleen shir lagu qabtay magaalada Muqdisho, bishii Febraayo 1948kii, ayna ka soo qayb galeen ergooyin ka kala socday dalka Soomaaliyeed oo idil. Shirkaasi waxuu si wadajir ah u soo saaray bayaanka soo socda oo ay hab codsi ah loogu gudbiyay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay: "Meel kastannu joogno, maqaawiirta iyo suldaannada Soomaaliyeed, Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed, Xisbiga Qarannimada Soomaaliyeed iyo ergooyinka ka kala socda jilibyada Soomaaliyeed waxannu iskugu nimid magaalada Muqdisho shir Soomaali ku dhan tahay, 1dii Febraayo 1948kii, halkaasoo si wadajir ah loogu go'aansaday in loo gudibiyo codsigan soo socda Golaha Guud ee Qaramada Midoobay". "Inaannu dhammaan Muslim nahay oo isku isir iyo isku af ah; lehna qaab nololeed iyo dhaqan mideysan, in naloo wada yaqaan magac qur ah ee Soomaali ah tiradeeduna tahay afar milyan. Waxaa nagu adag lidna ku ah danaha dhabta ah ee dadkeena inannu kala qaybsanaano. Waxaannu daw u leenahay inaannu ka doodno aaya ka talinteena qarameed iyo dhawritaanka dawga dadnimadu leedahay. Waxaannu si aad ah u rabnaa inaannu mid ahaan la noolaano walaalaheenna kale ee Soomaaliyeed ayna nagu weyn tahay rabitaanka in dalka Soomaaliyeed oo idil oo ay kala gumeystaan Ingiriiska, Faransiiska iyo

[115]Eeg lifaaqa "SH" ee codsiga Soomaalida ee loo gudbiyay Guddigii Baarista Afarta Dawladood ee Tabarta Weyn 17/1/1948.

[116]Eeg LIfaaqa "DH" oo S.Y.L ku dalbatay maamulka Afarta Quwadood.

gobolada oo ay Talyaaniga iyo Xabashida gumeysan jireen lagu mideeyo maamul siyaasi ah, dhaqan qur ah iyo dhaqaale midaysan". " Waxaanu si kalsooni ku dheehan tahay u codsanaynaa turidda iyo taageerada Qaramada Midoobay inay naga kaalmeeyso furdaaminta arrinta gurracan oo loo dulqaadan karin uu ku sugan yahay dad hal farac ah oo ay awoodaha shisheeye u kala qaybiyeen shan gobol oo aan isu gudbi karin, taasoo lid ku ah danahooda iyo horumarkooda". Intaa kadib Soomaalidu waxaa u soo ifbaxay codsigoodii ahaa in Afarta Dowladood ee Itaalka Weyn Maamul Wasaayadeed loogu dhiibo uu ahaa mid aan abdo u lahayn, iyadoo ay u muuqatay in Afarta Dowladood ee Itaalka Weyn ka dhexeeyay tartan mabaadi' ay isaga soo horjeedan oo aafo ku noqon karta himiladoodii midaynta Soomaali Weyn. Si kastaba ha ahaatee, Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L.) [118]waxuu si degdeg ah ugu gudbiyay codsi Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay dhambaal uu ku wargelinayay inay Soomaalidu ka noqotay codsigeedii hore ee ku saabsanaa maamulkii Afarta Dawladood ee Itaalka Weyn ayna u darban tahay tillaaba kastoo u cuntamaysa dadweynaha Soomaaliyeed ayna si adag uga soo horjeeddo ku soo laabashada dalka Soomaaliyeed gumeysiga Talyaaniga

Tillaabadii hore oo ay Soomaaliydu ku weydiisaneysay in maamulkeeda loo dhiibo Afarta Dawladood oo Itaalka Weyn waxay ahayd miday ku degdegtay oo aan arrimaha caalamka waagaa halkay maraysay laga fiirsan. Ingiriisku, codsigaa dambe ee Soomaaliyeed, waxaa uga muuqatay inuusan Soomaaliya ka gaari karin danahii uu qorsheystay waxuuna durbadiiba ka haray dadaalkii iyo taageeradii uu ku doonaayay midaynta Soomaali Weyn. Waxuu ku tillaabsaday, 42kii Oktoobar 1948kii, inuu ku wareejiyo gumeeysiga Xabashida Gobolka Soomaali Galbeed. Falkaas ku wareejinta Xabashida qayb weyn oo dhulka Soomaliyeed ka mid ah ka sokow, Bishii Maarso 1950kii, intuuna xilka dalka ku wareejin Maamulkii Wasaayadda Talyaaniga, ayuu dib usoo riixay soohdintii dhulka Soomaalida ee Talyaaniga gumeysan jiray uuna kaligii u sameeyay soohdin ku meelgaar ah oo aan weli lagu heshiin. Sidoo kale maamulkii qalafsanaa ee ciidamadii Ingiriiska ayay heshiis la galeen dabadhilifyadii lidka ku ahaa danaha dalkooda kadibna galayol'ole lagu cadaadinaayo hoggaamiyeyaashii Soomaaliyeed iyagoo laga fogeeyay dhaqdhaqaaqa siyaasada Soomaaliyeed. Dhammaan saraakiishii Ingiriiska ee lagu tuhmayay inay u turayaan ama u naxariisanayaan Soomaalida waa la beddelay, iyadoo saraakiishii Soomaaliyeedna laga qaaday jagooyinkay xilalka ka hayeen, gaar ahaan, saraakishii Booliska waxaana xilkoodii lagu wareejiyay saraakiil Ingiriis ah. Waxuu Ingiriisku ku caddeeyay Xarunta Qaramada Midoobay inuu ka haray aragtidiisii hore ee midaynta Soomaali Weyn, waxuuna tageeray ku soo laabashadii Talyaaniga dalkii Soomaaliyeed oo horay u gumeysan jiray.

[117]Eeg Lifaaqa "C" oo ku saabsan codsigii Ururka S.Y.L.

I - DOODII IYO GO'AANNADII QARAMADA MIDOOBAY

Sida la ogsoonyahay Dagaalkii Labaad ee Dunida kadib, [119]10kii Febraayo 1947kii, shir lagu qabtay Paris oo ay ka soo qaybgaleen dawladdihii Gaashaanbuurta Yurubta Galbeed ee dagaalka ku guuleystay iyo xoogaggii kala qayb galay dagaalka ee isku dhan ah iyo Dawladdii Talyaaniga oo dhanka kale ah Xabashiduna goob joog ahaan uga qayb gashay, waxay ku gaareen heshiis nabadeed uu qodobkiisa 23aad dhigayay in Talyaanigu wax daw ah ku lahayn dalalkuu Afrikada ka gumeysan jiray ee ahaa: Liibiya, Soomaaliya iyo Eritreeya. Waxaa aayatiinka dalalkaas uu Talyaanigu gumeysan jiray lagu wareejiyay Qaramada Midoobay inay go'aan waxtar leh ka gaarto.

Goortii Qaramada Midoobay loo xilsaaray inay go'aan ka gaarto arrinta dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray, waxaa Golaha Guud la soo gudbaanatay inuu door weyn ka ciyaaro go'aan ka gaaridda arrintaas. Go'aankaas waxuu ku soo baxay bayaan cad uu soo saaray Golaha Guud oo talooyin ku bixinayay habka loo furdaaminaayo arrintaas. Waxaa xusid mudan inay bayaankaas oggolaadeen Dawladaha Itaalka Weyn ayna qaadeen tillaabadii looga baahnaa si loo fuliyo talooyinkaas. Bayaankaas Golahu waxuu ahaa mid layisku afgartay, iyadoo ay horay u oggolaadeen Afarta Dawladood ee Itaalka Weyn, haseyeeshee, go'aankaas kama uu qaadayn awoodday lahaayeen dawladaha xubnaha ka ah Q.M. inay dib uga baaraan degaan.

[120]21 Seteembar 1948kii, goortii Golaha isugu yimid kalfadhigiisii, waxaa kontonkii dawladdood ee ka soo qaybgalay ku cuslaatay inay gartaan qoraalladii faraha badnaa ee uu soo hordhigay Golahii Wasiirrada Arrimaha Dibadda, sidaas awgeed goluhu waxuu go'aansaday, 24kii Seteembar 1948, inuu arrinta dalalkuuii Talyaaniga gumaysan jiray dib ugu celiyo guddigiisa u xilsaaranaa arrimaha siyaasadda iyo nabadgelyada. Dib u dhigaasi waxuu keenay dood diblomaasiyeed ee ka dhexdhalatay Talyaaniga iyo Xabashida oo ku loollamaayay siday Soomaali, kolkale, u gumaysan lahaayeen iyo Mareykankoo Xabashida ku taageeraya danahiisa iyo Ingriiskoo leh kol haddii aan waayay sidaan rabay maxaa iga galay, haseyeeshee, aan ka fogayn aragtida Mareykanka.

Faransiisku waxuu soo jeediyay in "Cirenaica" la siiyo Ingiriiska "Fezzanna" Faransiiska iyo in "Tripolitania" sannad kadib lagu wareejiyo Talyaaniga, haseyeeshee, arrintaas layskuma raacin. Ingiriisku iyo Mareykanku waxay labaduba soo jeediyeen in maamul wasaayadeed Talyaaniga loogu dhiibo Soomaaliya sidoo kalana loo dhiibo Cirenaica Ingiriiska, arrinta "Tripolitaniana" dib loo dhigo. Arrinta Soomaaliya waxaa si gaar ah loo xusay inaan Talyaaniga laga saarin dalalkuu gumaysan jiray si ay dawladda cusub ee dimuqraadiga ah u muujiso karaankeeda, Talyaaniguse waxuu qabay in durba Soomaaliya loogu dhiibo maamul wasaayadeed arrimaha kalena dib loo dhigo, haseyeeshee, waxaa arrintaas is-hortaagay Ingiriiska oo rabay in isku kol go'aan laga gaaro maamulka Soomaaliya oo loo dhiibo Talyaaniga iyo kan "Cirenaica" oo isaga loo dhiibo. Waxuu Ingiriisku u arkaayay inuu Talyaanigu rabo, si doqon ma garato ah, inuu ula soo noqdo dalalkuu gumeysan jiray oo ay "Cirenaica" ka mid tahay.

---

[118] Gianluigi Rossi = L'Africa Italiana Verso L'Iindipendenza P.243 / 268

[119] Gianluigi Rossi = L'Africa Italiana Verso l'Indipendeza B.306.

Dabayaaqadii bishii Oktoobar 1948kii, Cabdullaahi Ciise Maxamuud oo ahaa Xoghayaha Guud ee S.Y.L. ayaa loo diray dalalka Yurub iyo Ameerika isagoo wata aqoonsi buuxa si uu ugu bandhigo Qaramada Midoobay danaha Soomaaliyeed. Waxuu ku horreeyay magaalada London, isagoo doonaaya inuu ka dhaadhiciyo dawladda Ingiriiska danaha Soomaaliyeed oo goor dambe aragtideedii hore iskarogay kuna dhaqaaqday fal lid ku ah danaha Soomaliyeed. Waxuu dabadeed u gudbay dalka Faransiiska, isagoo kaga qaybgalay fadhigii Qaramada Midoobay ee lagu qabtay magaalada Paris loogana hadlaayay aayaha dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray. Gumeysiga Ingiriisku waxuu taageeray in dib loo qaybiyo dhulka Soomaaliyeed, Mareykanka iyo Faransiiskana waxay iyana si buuxda u taageereen talada Ingiriiska.

[121]Billawgii bishii Nofeembar 1948kii, dawladda Talyaanigu waxay weydiisatay xafiiska Arrimaha Dibadda Ingiriiska inuu taageero Soomaaliya iyo "Tripolitania" in loo celiyo, iyadoo arrinta Eritreeya aan go'aan cad ka istaagin, lagumase heshiin arrintaas. Isla waagaa Talyaanigu waxuu isku dayay inuu go'aankiisa uga abdeysto doorashada ka dhacaysay Mareykanka, codka dadka isirkoodu yahay Talyaani dhalashadooduna Mareykan. Thomas Dewey oo xisbiga Jamhuuriga u sharaxay Aqalka Cad waxuu caddeeyay inuu oggolyahay in Talyaaniga maamul wasaayadeed loogu dhiibo dalalkuu gumeysan jiray, haseyeeshee, Harry Truman oo u sharaxnaa xisbiga Dimuqraadiyadda, waxba ma uu ballanqaadin, isagoo sheegay in arrintaas ay hortaal Qaramada Midoobay, hadday go'aan ka gaari waaydana oo ay furdaamintoodu leeyahiin Afarta Dawladood ee Itaalka Weyn. Si kastaba ha ahaatee, doorashadii Truman waxay dhalisay inaan halkuu Mareykanka iska taagay arrintaas ay waxba iska beddelin.

Isla bishaas, Mareykanka waxuu oggolaaday codsigii Xabashida ee ahaa in lagu taageero siismada Eritreeya, inteeda badan oo ay ku jiraan Asmara iyo Masawac. Mareykanku, inkastoo uu Xabashida ku taageerayay baahida ay u qabto marin badeed haddana dantiisa qarsoon waxay ahayd inuu haysto Saldhigga Isgaarsiinta Asmara, adeegsiga dekedda Masawac iyo gegida dayaaradaha ee u dhexeeysa Asmara iyo Masawac. Mareykanku waxuu ogaa in Dawladda Addis Abbaba ay u darban tahay inay taageerto go'aan kasta si ay u hesho Masawac ayna is-hortaagayn maamul wasaayadeed oo loogu dhiibo Mareykanka iyo Ingiriiska Liibiya kan Soomaaliyana Talyaaniga. Bishii Nofeembar dhammaadkeedii, ayuu Xoghayaha Arrimaha Dibadda Mareykanka u ballan qaaday Wasiirka Arrimaha Dibadda Xabashida taageeridda Mareykanka, haseyeeshee, waxuu diiday inuu qoraal siiyo. Xiriirka Mareykanka iyo Xabashida waxuu sii wanaagsanaaday goortii Soomaalida Galbeed lagu celiyay gacanta Xabashida.

Dalalka Koofurta Mareykaka waxay soo jeediyeen in "Tripolitania" iyo Soomaaliya loogu dhiibo Talyaaniga maamul wasaayadeed, "Cirenaica" Ingiriiska, iyo "Fezzanna" Faransiiska. Arrinta Eritreeya waxay badankoodu taageersanaayeen in dhanka Waqooyi loo dhiibo Talyaaniga dhanka Koofureedna lagu daro dalka Xabashida. Dawladda Talyaanigu goortay ogaatay inay Mareykanka iyo Ingiriiska oggolayn arrintaas waxay codsatay in dib loo dhigo.

Arrinta dalalkii la gumeysan jiray aad ayay ugu baahsanayd aragtidii dadweynaha Talyaaniga waxaana Dawladda lagu cambaareeyay inay isu jilcisay Mareykanka iyo Ingiriiska, kuwa garabka midigtuna waxay codsadeen in la ilaaliyo danaha dadweynaha Talyaaniga. 20kii Nofeember, Wasiirka Arrimaha Dibadda Belgium Mr. Spar waxuu Wasiirka Kowaad ee Talyaaniga u sheegay in Ingiriisku uusan cidna u oggolayn "Cirenaica", haddii Talyaaniga taas

---

[120] Gianluigi Rossi = l'Africa Italiana Verso l'Indipendenza B.313

oggolaaduna uu u dayn doono saddexda dal ee kale, kolka laga reebo qayb ka mid ah Xabashida. Furdaaminta arrimaha dalalkaas waxaa la hordhigay shirkii Golaha Guud ee gu'gii 1949kii. Talyaanigu waxuu rumeysnaa in furdaamintaa dhibaatada la soo gudboonaatay laga heli karo London. Kulan ay yeesheen Xukuumadda Talyaaniga iyo Ingiriiska waxaa ka muuqatay inay aad u adkayd si Ingiriisku heshiis Talyaanigu ula gaaro waxaana laysku raacsanaa in Talyaaniga iyo Ingiriiska maamul wasaayadeed loogu kala dhiibo Soomaaliya iyo Cirenaica, haseyeeshee, Ingiriisku waxuu kaloo rabay in Eritreeya la siiyo Xabashida.

Cabdullaahi Ciise Maxamuud oo ka wakiil ahaa Xisbigii (S.Y.L) waxuu si degdeg ah ugu kicitimay Qaramada Midoobay waxuuna ol'ole ku qaaday xubnihiisii, isagoo ka doodaayo heshiiskii qarsoodiga ahaa ee dhexmaray gumeysiga Ingiriiska iyo Xabashida ee ku saabsanaa dhulka Soomaaliyeed. Soo jeedintiisa waxaa si isdabajoog ah u diiday oo ugu gacanseyray gumeysiga Ingiriiska iyo dhammaan gumeysteyaasha kaloo goortaa taageerayay aragtida gumeysiga Xabashida.

Guddigii siyaasada Qaramada Midoobay si weyn ayuu ugu riyaaqay kolkuu Talyaanigu si kama dambays ah uga haray in gobolka Tripolitania maamul wasaayadeed loogu dhiibo , gaar ahaana, waxaa hoos u dhacday dhiilladii dalalka Carabta iyo kuwa Aasiya oo ka soo horjeeday in Soomaaliya loogu dhiibo Talyaaniga maamul wasaayadeed, waxaana xoogaysatay dadaalkii furdaaminta loogu raadinayay dalalka Soomaaliya iyo Liibiya. Talyaanigu waxuu u arkaayay maamulka Soomaaliya oo loo dhiibo inay u ahayd libin gaar ahaaneed ee u soo hoyatay, inkastoo ay iska yaraayeen ama ay quursanayeen abdada ay ka heli karaan dalkaas, haddii loo diidana waxay Talyaanigu la ahayd inay meel ka dhac ku noqon lahayd. Wasiirka Arrimaha Dibadda Talyaanigu waxuu arrintaas kala hadlay Ergooyinka Qaramada Midoobay, gaar ahaan, dalalka Carabta.

26kii Seteembar, waxuu Wasiirka Kowaad Talyaaniga u sheegay ergooyinka Qaramada Midoobay in Masaaridu ay soo dhoweysay aragtida dawladda Talyaaniga. Ergada Baakistaan oo Golaha ka hadashay waxay codsatay in Liibiya degdeg loo siiyo madaxbannaani, Soomaaliyana uusan waxba ka qabin in maamul wasaayadeed loogu dhiibo Talyaaniga. Aragtidaas waxaa la qabay dalalka Carabta, Hindiya iyo Turkiga, inkastoo dalalkaas midkoodna uusan sheegin in xilka maamul wasaayadeed loo dhiibo Talyaaniga, haseyeeshee, waxaa tageersanaa Latin Ameerika in maamul wasaayadeed Talyaaniga loo dhiibo. Goluhu si ay madaxbannaanida Liibiya isugu raacaan waxaa loo baahnaa taageerada dalalka Latin Ameerika, kuwaasoo taageeraayay halkuu Talyaaniga istaagay. Waxaa isku tala ahaa Ciraaq, Hindiya, Turkiga iyo Siiriya oo iyagu qabay in Liibiya si dhakhso ah madaxbannaani loo siiyo. Ergada Ciraaq waxay codsatay in la soo gaabiyo mudadda awooda lagu wareejinayo dawlad Liibiya. Ergadii Hindiya waxay soo jeedisay in la sameeyo gole dastuuri ah oo ka soo taliya qaabka dawladda lagu dhisayo iyo xiriirka ka dhexeeyn doona qaybaha kala duwan. Masaaridu waxay soo jeedisay in Liibiya madaxbannaani degdeg ah la siiyo waxayna intaas raacisay in la saxo kolka hore lana ansaxiyo soohdinta u dhexeeysa Masar iyo Liibiya. Arrinta Soomaaliya, Turkiga oo kaliya ayaa si cad u codsaday in Talyaaniga loo dhiibo Soomaaliya. Arrintaas oo Carabtuna qabtay, inkastoo ayan tilmaamin dawladda loo dhiibayo. Bayaankaas waxaa ka soo shaac baxay kooxo raali ka ah in Soomaaliya maamul wasaayadeed loogu dhiibo Talyaaniga. Dawladaha Carabta iyo kuwa Aasiya wey oggolaadeen aragtidaas waxayna ku xireen in Talyaaniga iyo dalalka Laatiin Ameerika ay oggolaadaan madaxbannaanida Liibiya iyo Eritreeya. Ergeyga Venezuela Mr. Stolk waxuu

muujiyay rajada uu ka qabo in Eritreeya madaxbannaani la siiyo, waxuuna sheegay, si loo furdaamiyo arrimaha dalalkuu Talyaaniga gumeysan jiray ay ku xiran tahay tixgelinta halkuu Talyaaniga ka taagan yahay. Kolay ku tahay Ha'iti oo kolkii hore ka soo horjeeday talada Ingiriiska iyo Talyaaniga, waxay kol dambe taageertay in Talyaaniga maamul wasaayadeed Soomaaliya loogu dhiibo. Halkaa waxaa ka muuqatay Soomaaliya arrinteedii inay ku dhacday gorgortan lesyku dhaafsanayo madaxbannaanidii Liibiya iyo u dhiibidda Talyaaniga maamulka wasaayadeed ee Soomaaliya taasoo macnaheedu yahay "Isii aan ku siiyee".

Ugu dambayntii waxaa Golaha la soo hordhigay bayaan lix qodob ah oo ay ku uruursan yahiin talooyinka la doonayay in lagu maquuniyo dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray. [122]Bayaanka lixda qodob ee Goluhu ka dooday, waxay muujiyeen in la isku afgartay arrinta Liibiya, haseyeeshee, aan la isla meel dhigin arrinta Soomaaliya. Codsigii Ruushka oo ahaa in Liibiya madaxbannaani degdeg ah la siiyo waxba lagama soo qaadin, haseyeeshee, waxaa barbar socday bayaan uu watay Mareykanka oo qorayay:

a) In Liibiya gobannimadeeda iyo madaxbannaanideedaa la siiyo saddex sano gudahood, iyadoo qaabka dawladda halkaas lagu dhisayo dooran doonaan dadweynaha dalkaasi, waxaana maamulkaas kaalin doona gole latashi oo lix xubnood ah (Masar, Faransiis, Talyaani, Mareykan, laba wakiil oo ka socda dadweynaha) iyo madaxda maamulka;

b) In Eritreeya gobolka Galbeed ma ahee inteeda kale la raaciyo Xabashida, gobolkaasna lagu daro Suudaan;

c) In Soomaaliya maamul wasaayadeed loogu dhiibo Talyaaniga, iyadoo Qaramada Midoobay ay kolkol soo kormeeri doonto, si ay u hubiso goortuu dalkaasi madaxbannaani u bisilyahay.

Bayaanka Baakistaan waxuu kan Mareykanka kala mid ahaa halka uu ka taagan yahay arrinta Liibiya, haseyeeshee, waxuu qoraayay in Eritreeya saddex sano gudahooda madaxbannaani lagu gaarsiiyo, iyadoo isla goortaas Xabashida loo sugayo marin badeed, Soomaaliyana, waxuu bayaankaas qorayay in muddo toban sano ah loo dhiibo maamul wasaayadeed oo si toos ah u hoos yimaada Qaramada Midoobay.

Bayaannada kale waxay qorayeen kolka la isku celceliyo:

a) In Liibiya gobannimadeeda iyo madaxbannaanideeda la siiyo laguna wareejinayo hay'adaha maamulka dalkaas ka jira si ay u habeeysato ulana socoto horukaca siyaasadda iyo dhaqaalaha. (Ciraaq);

b) In Liibiya loo sameeyo gole soo diyaariya dastuur la soo hordhigo muddo laba sano gudahooda ah guddi gaar ahaaneed ee Qaramda Midoobay (Hindiya);

---

[121] Gianluigi Rossi = l'Africa Italiana Verso l'Indipendenza B.528

c) In Soomaaliya madaxbannaani la siiyo muddo toban sano gudahood ah iyadoo muddadaas Qaramada Midoobay si toos ah u maamuliyaan (Laybeeriya).

Bayaannada codsanaayay in Liibiya la siiyo madaxbannaani degdeg ah oo aan ahayn kuwii Midowga Sofyeeti iyo bahdiisa, waxaa barbar socday kuwii Mareykanka, Ciraaq iyo Hindiya oo tilmaamayay goor kala duwan in dalkaas madaxbannaanidiisa loogu darbiyo oo ay Faransiiska iyo Ingiriiskuna u janjeereen muddo intii la doonaba dheer. Waxaa kaloo muran ku jiray arrinta mideynta Liibiya, taasoo si cad ugu qeexnayd bayaannadii Ciraaq iyo Hindiya oo ahaayeen "in la sameeyo dawlad Liibiya oo mideysan", haseyeeshee, doodii ergeyga Ingiriiska iyo weliba tii Faransiiska oo si kharaar uga soo horjeedeen mideynta Liibiya, waxayna u janjeereen hab fedaraali ah. Sidaas waxaad mooday, inay la qabeen Mareykanka iyo Talyaaniga, haseyeeshee, kooxda Slaviga ahi waxay mudnaanta siinayeen midnimada Liibiya. Codsigii Ingiriiska ee ahaa in dadweynaha dalkaas loo daayo siday ka yeeli lahaayeen midnimadooda kadib kolkay madaxbannaani gaaraan, ayaa u muuqatay furdaaminta ugu wanaagsan ee la raaci karo. Runtii waxay ahayd mid u cuntami karta intii ku doodaysay in dad kastaa daw u leedahay talada aayatiinkiisa, haseyeeshee, isla goortaas, arrintaasi waxay awood siinaysay xukunnadii dalka maamulaysay inay dadka ku dhaliso dhibaato uunan dalka ku midoobaynin. Si kastoo arrinta Liibiya loo furdaamin karo wey furnayd doodaas waxayna fure u ahayd in la isku afgarto arrinta Soomaaliya oo loo dhiibo Talyaaniga maamulka wasaayadeed. Intuu socday kalfadhigii afraad ee Qaramada Midoobay arrinta Eritreeya wey calawday waxayna u muuqatay mid adag; taageerada ay siiyeen dalalka Laatiin Ameerika codsigii Talyaaniga oo ahaa in Eritreeya la siiyo madaxbannaani degdeg ah, waxay is-hortaageysay dhanka kala horreeynta soo jeedintii bayaankii Ingiriiska iyo Mareykanka. Dhanka kale isla arrinta ah madaxbannaani siinta oo aan ka haysan Golaha aqlabiyad ku filan. Isla goortaas is afgaradkii ahaa meel dhexe isugu imaadka kooxaha Carabta, Aasiya iyo Laatiin Ameerika waxuu dibadda dhigay Eritreeya waxuuna fududaynayay in arrintaas furdaaminteeda dib loo dhigo. Mareykanku, isagoo garwaaqsan dhibaatadaas, ayuu ku dadaalay inuu ka dhaadhiciyo dalalka Latiin Ameerika inaan laysku xirin furdaaminta arrinta Liibiya iyo Soomaaliya, taasoo keeni karto in laysku afgaranwaayo dibna loo dhigo arrimaha dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray oo sidaas hadday dhacdo, Mareykanku uu ka baqayay inay heybadda Qramada midoobey hoos u dhacdo ayna dhaawacanto. In dib loo dhigo arrinta Eritreeya waxay ka soo shaac baxday codsiyadii dawladaha Carabta; inkastoo ay ka soo horjeedeen in la qaybiyo, haddana waxay qabeen in kol labaad baaritaan dib loogu sameeyo. Waxaa si kulul u diidanaa in dad Islaam ah lagu daro Xabashida oo Masiixi ah, Sir Safrullah Khan oo u arkayay in arrintaasi labada dhinacba dhibaato u keenayso, waxuuna yiri: "Maxaad kuul mandiil ah ugu xiraysaan surka Xabashida ee taagdaran? Maxaadse isu saaraysaan dad aan is qaadi karin". Waxaa aragtidaa la qabay ergeyga Laybeeriya oo isagu tageersanaa in madaxbannaani la siiyo Eritreeya, iyadoo la tixgelinayo isla goortaas baahida oo ay Xabashida u qabto marin badeed.

Waxaan muran ku jirin in halka Talyaaniga taagnaa uu xambaarsanaa furdaaminta loo heli lahaa arrintaas isku calawday ee Eritreeya, sidaas waxaa laga garanayay khudbadii Wasiirka Arrimaha Dibadda Xabashida, 30 Seteembar 1949kii oo ay ka muuqatay codsi uu ulajeeday Talyaaniga waxuuna yiri: "Haddii Talyaanigu uu aqoonsado Eritreeya inayna kolnaba noolaan karin, iyadoo ka go'an Xabashida oo ay labada dadna himilooyinkoodu midnimo ku gaari karaan

uuna aqoonsado in arrimintaas oo keliya lagu gaari karo nabadgelyo ka waarto gobolka uuna ku kalsoonaado in Xabashida dhawreyso danaha Talyaaniga ee Eritreeya, goortaas waxaan muran ku jirin inuu furmaayo dhabbe mira dhala oo ay dadka Talyaaniga ku soo degaan dalka Xabashida.

[123]Lixdii Oktoobar 1949kii, Xabashida waxay gaashaanka ku dhufatay in Eritreeya loo diro guddi baaritaan waxayna Qaramada Midoobay uga digtay inaan Xabashida lagu sameeyn caddaaladdarradii hore oo kale uu Goluhu ku sameeyay. Haddii Goluhu go'aansado in Eritreeya madaxbannaani la siiyo Somaaliyana Talyaaniga dib loogu celiyo, Xabashidu waxay goortaas qaadanaysaa tallaabo kasta oo ay isku daafacayso sida ku qoran xaashida Qaramada Midoobay. Sidaas awgeed ma ayna suuroobi karin in Talyaanigu ka soo dego halkuu arrintaa ka taagnaa maxaayeelay, waxaa isla waagaaba Eritreeya ka curtay xoogeystayna dhaqdhaqaaqii kasmada madaxbannaani.

Arrinta Eritreeya waxay noqotay mid sabbaynaysa waxayna muujisay siduu u adkaaday isku raacida arrinta Mareykanka oo ahayd in la qaybiyo dalkaas. Mareykanka hadduu ku adkeysto taladaas waxuu halis u noqonayay inuu dhaawaco haybadiisa iyo tan Xabashida. 7dii Oktoobar, ergeygii Mareykanka, siduu sharaftiisa u ilaaliyo, waxaa ku soo dhashay aragti cusub ee la xiriirta Eritreeya, uuna kolkeedii hore soo jeediyay ergayga Ingiriiska. Aragtidaasi waxay ahayd in Eritreeya gobolladeeda oo ay deggan yahiin dadka Masiixiga Qibdiga ah la raaciyo Xabashida, iyadoo la sameeynayo guddi gooya soohdinta. Aragtidaasi waxay raacsanayd aragtidii hore ee Mareykanka oo ahayd in la qaybiyo Eritreeya, haseyeeshee, aragtidaas Talyaaniga iyo dalalkii Laatiin Ameerika midkoodna kama horimaan karin. Si kastaba ha ahaatee, Mareykanku waxuu u janjeeray, hadday u suurowdo, talo federaali ah ee Eritreeya oo dhan iyo Xabashida, la hoos keeno Wanbarka Boqorka Xabashida.

Sidaas ayay ku sugnaayeen arrimaha dalalkii Afrikada Bari ee Talyaanigu gumeysan jiray, goortii, 11kii [124]Oktoobar, Guddiga Siyaasadda go'aansaday in la sameeyo guddi hoosaad ka kooban 21 xubnood una xilsaaray inuu ka soo baaraandego bayaankooda Golaha la soo hordhigay dabadeedna ay talooyin ka soo jeediyaan. Guddi hoosaadkaasi waxuu oggolaaday madaxbannaanidii Liibiya, waxuuse isku afgaranwaayay muddada xil wareejinta, mideynta dalkaas iyo doorka Qaramada Midoobay. Ugu dambayntii waxaa la isku raacay:

a) In madaxbannaani Liibiya la siiyo, 1da Janaayo 1952;

b) In kolkiiba la billaabo tillaabooyinka xil wareejinta awoodda;

c) In Golahu magacaabo maamule sare oo ay kaalinayaan guddi ka kooban toban xubnood (Masar, Faransiis, Talyaani, Bakistaan, Mareykan iyo min hal wakiil ee ka socda qolooyinka tirada yara) oo ka kaalmeeya dadka reer Liibiya sameeynta dastuur.

---

[122] Gianluigi Rossi= l'Africa Italiana Verso l'Indipendenza B.541.

[123] Sidoo kale B.547

Soomaaliya Guddi Hoosaadku si fudud ayuu isugu raacay in madaxbannaani lagu siiyo 10 sano inta ka horreeysana maamul wasaayadeed loo dhhibo. 18kii Oktoobar, waxaa la jabiyay mashruuc qorayay maamulku in uu noqdo mid loo wada dhan yahay, waxaana laysku raacay in maamul wasaayadeed Talyaaniga oo kaliya loo dhiibo, iyadoo mashruucaas lagu daray mabaadi'i dastuuri ah ee ay soo jeedisay Hindiya.

Arrinta Eritreeya waa laysku afgaranwaayay waxaana laysku raacay in dib loo dhigo lana sameeyo guddi ka kooban toban xubnood oo ka soo baaraandega arrinta dalkaas dabadeedna u soo jeediya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay laba ama saddex mashruuc ee lagu furdaamin karo. Waxaa kale oo guddiga isku raacay qaybta (B) ee la xiriirta Soomaaliya, haseyeeshee, intii doodii socotay waxaa soo shaac baxay muran ah in dadka dalkaasi uu oggolaan doono maamulka Talyaaniga iyo in kale. Maamulka Wasaayadeed ee Talyaaniga waxaa si kulul uga soo horjeeday Xabashida, Laybeeriya iyo dalalka Slaviga ah. Ergeyga Talyaanigu waxuu sheegay in dawladiisu ay ku kalsoon tahay maamulkoodana u fulin doonto sidii loogu dhiibay oo aan wax takoorid ahna lagu sameeyn doonin madaxdii Soomaaliyeed ee Talyaaniga lidka ku ahayd.

Si kastaba arrintu ha ahaatee, tacdiilaadkii lagu diidanaa sharaxaada in Soomaaliya loo dhiibo maamul wasaayadeed Talyaaniga cod kama helin Guddiga. Kooxda Carabtu waxay taageertay in Talyaanigu noqdo madaxa maamulka wasaayadeed, haseyeeshee, taageeradaas Carabtu waxay ku xirnayd in loo ballanqaado xaqdhawrka dadka dalkaas ku nool. Sidaa daradeed fadhigii 5tii Nofeembar 1949kii, ergeyga Lubnaan waxuu soo jeediyay in bayaanka lagu daro faqradda soo socoto: "Madaxa Maamulka" waxaa hawshiisa ku kaalin doono gole latashi ah oo ka kooban wakiilo shan dal ay xaruntiisu noqon doonto Muqdisho. "Awooda golaha waxaa si cad loogu qeexi doonaa xeerka wasaayadeed laguna soo dari doono tilmaamo sheegayo dalalka golahaasi xubnaha ka ah". Soo jeedintii Golaha latashga ah waxay ahayd arrin kooxaha Carabta iyo Aasiya ay ku weydiisanayeen beddelka taageerada ay u fidinayeen u dhiibida Talyaaniga maamul wasaayadeed. Codsigaasi waxuu kaloo muujinayay sida uu isugu dhowaaday arrinta Talyaaniga iyo Carabta oo heerkii guddi hoosaadka ku soo jeediyeen in maamulka wasaayadeed loo dhiibo saddex dal.

Abuuridda hay'ad latashiga maamulka wasaayadda Talyaaniga, muddada 10 sano ah iyo ku darida heshiiska maamul wasaaydeed mabaadiidii dastuuriga ahayd ay Hindiya soo jeedisay, waxay Soomaalida ka saaraysay tuhunkii iyo walwalkii ay ka qabtay Talyaaniga inuu ku tiigto kalsoonida maamulka loogu dhiibay. Waxaa xeerka lagu daray inay xubno ka ahaadaan Masar, Colombia iyo Filipin. Golaha latashiga ugu dambaystii waxuu oggolaaday wax ku daridii ay soo jeediyeen dalalka Latin Ameerika oo u oggolaanayay Talyaaniga inuu qabto wasaayada Soomaaliya, sida raacsan mabaadi'da qaabka wasaayadeed ee caalamiga ah, muddadii u dhexeeysay gunnaanadka heshiiska go'aankaas iyo oggolaanshida Golaha Guud.

Tacdiishaas ayaa noqotay aragtidii ugu dambeeysay bayaankii ku saabsanaa Soomaaliya. Wax tacdiil ah, siyaaso ama saxidba laguma sameeyn qaybta (C) ee la xiriirtay arrimihii Eritreeya. Arrinta Eritreeya cidina raalli kama ahayn go'aankii dib u dhigida Guddi Hoosaaka, iyadoo wax heshiis ahna laga gaari waayay arrintaas lana rabay in layska dhawro wax kasta ee carqaladayn kara go'aan laga gaaro Soomaaliya iyo Liibya. Ergayga Mareykanku waxuu sheegay, isagoo ka xun, inuu ka noqday soo jeedintiisii ahayd in Eritreeya lagu daro Xabashida, haseyeeshee, aan loo baahnayn in dalkaas loo diro Guddi baaritaan ee Qaramada Midoobay.

Ergayga Ingiriiska waxuu kol labaad caddeeyay inuu taageersan yahay aragtidii ahayd in la kala qaybiyo Eritreeya; ergeyga Midowga Sofyeeti waxuu gaashaanka ku dhuftay bayaankii Guddi Hoosaadka waxuuna taageeray bayaan oo ay soo jeedisay Poland oo qorayay in Eritreeya la madaxbannaaneeyo saddex sano gudahood oo ay si toos ah u maamusho Qarmada Midoobay, iyadoo Casab la siinayo Xabashida.

Waxaa cod buuxda lagu oggolaaday bayaankii Guddi Hoosaadka oo lagu tilmaamay dalalkii ka mid noqon lahaa Guddiga Baarista: Birmaniya, Guatemala, Bakistaan iyo Koofur Afrika. Bayaankaa waxaa cod buuxda lagu oggolaaday, 12kii Nofeembar. Waxaa kale oo la oggolaaday bayaankii Guddi Hoosaadka ee la xiriiray habka magacaabidda maamulaha Liibiya iyo bayaan kale oo ay keeneen Turkiga iyo Argentina ee u xilsaarayay Guddiga ku meel gaarka ah inuu ka soo baaraandego xeerka lagu caddeeynayo soohdimaha dalalkii Talyaanigu gumeysan jiray; labadaas bayaanba waxay ku noqdeen dheeraad bayaankii weynaa ee la xiriiray arrimaha saddexdaas dal waxaana bayaanka Golaha Guud la soo hordhigay, 19kii Nofeembar 1949kii. Doodu goortay billaabatay waxaa soo shaacbaxay aragtiyo ka soo baxday doodii guddiga. Ingiriiska iyo Mareykanka waxay sheegeen inay raali ka yahiin arrinta Soomaaliya iyo Liibiya, haseyeeshee, ay ka xun yahiin inaan la furdaamin arrinta Eritreeya. Kooxdii Bariga aad ayay u dhaliishay bayaanka kol labaad, waxayna ku tilmaantay inuu yahay mid laga soo min guuriyay is-afgaradkii imberiyaaliga ahaa ee Bevin-Sforza, siiba waxay dhaleeceeysay in guddiyada la tashiga ee Liibiya iyo Soomaaliya aan lagu darin USSR iyo dalalkii shuuciga ahaa. Xabashida iyo Laybeeriya waxay si kulul u dhaleeceeyeen qaybaha bayaanka ee la xiriira Soomaaliya iyo Eritreeya, iyagoo tixraacayay taariikhda gumeysiga Afrika, waxay sheegeen in ku noqoshada Talyaaniga ee Soomaaliya ay halis gelinayso xasiloonida Geeska Afrika. Isafgaradka kooxaha Carab, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ayaa is hortaagay in dood laga furo mashruuca bayaankii uu soo gudbiyay Guddigii Siyaasaddu, iyadoo tilmaamaya in kalsooni lagu qabo loona baahan yahay in la siiyo kalsoonidaas Dawladda Talyaaniga ee Dimoqraadiga ah.

Sannadkii 1949kii, Ingiriiska iyo Talyaaniga kol kale, waxay dhameysteen in Soomaaliya gumeysigii Talyaaniga dib loogu celiyo, isagoo maamulkiisa hoos imaanayo Qaramada Midoobay. Ergeyga Soomaaliyeed ee Qaramada Midoobay loo diray waxuu si xoog leh ugu gacanseyray awoodda uu Ingiriisku isasiinayo iyo ku soo laabashada dhulka Soomaaliyeed ee gumeysiga Talyaaniga wax kastoo dhaca. Dabadeed furdaaminta arrinta Soomaaliyeed waxaa loo gudbiyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay xaruntiisa New York.

Waagaa Boqorada Carabtu waxay ku hawlanaayeen gobannimada Liibiya iyo dalalka Carbeed ee Waqooyiga Afrika. Kooxda dalalka Carabta midkoodna dheg uma raaricin arrinta kulul ee aayaha Soomaaliyeed. Cabdullaahi Ciise Maxamuud, waxuu tegay lana wadahadlay dal kastoo Carab ah waxuuna isku deyay inuu ku baraarujiyo inay indhahooda ku soo arkaan rabitaanka dadweynaha Soomaaliyeed. Doodii la xiriirtay maamulka dhulkii Soomaliyeed ee Talyaanigu gumeysan jiray kana socotay Qaramada Midoobay way fogaatay, ergeyaga dalka Baaksitaan Mr. Safrullah Khan waxuu ku dooday in dhulka laga hadlayo ee Soomaaliyeed uuna Talyaaniga gumeysan jiray uu yahay oo kaliya gobol ka mid ah Soomaali Weyn loona baahan yahay in Soomaali Weyn la mideeyo si loo dhiso Qaran Soomaaliyeed oo madaxbannaan lehna siyaasad mideysan. Run ahaan dalalkii siiyay taageeradda arrinta Soomaaliyeed waxay ahaayeen Aasiya oo ay Hindiya hoggaamineysay.

Gumeysiga Talyaanigu waxuu awoodiisa oo dhan iskugu geeyay siduu shuruud la'aan dib ugu laaban lahaa Soomaaliya wax kastaba ha ka qaadatee, ayadoo ujeeddadiisu ahayd inuu

gumeeysto. Intaa oo kaliya ma ahayn ujeeddadiisu ee waxaa u dheeraa inuu ujeeddo uu ku caburiyo rabitaanka ummadda Soomaaliyeed. Soomaalidu waxay si aad ah u muujisay siday u diidan tahay oggolaashada ku soo laabashada Talyaaniga dalka Soomaaliyeed wax kastaa ha ka dhacaane inay ka doorbidayaan dhimasho intay arki lahaayeen Talyaanigoo ku soo laabtay Soomaaliya.

Goortay Soomaalidu u muuqatay in Qaramada Midoobay go'aan ka gaarayso dalkooda ayaahiisa iyo in uu u janjeero in loogu dhiibo Maamul Wasaayadeed Talyaaniga ayaa, 5tii Oktoobar 1949kii, dalka Soomaaliyeed oo idil bannaanbax laga sameeyay oo lagu diidan yahay ku soo laabashada Talyaaniga dalka. Magaalada Muqdisho bannaanbaxiisa waxaa lagu sameeyay buur magaalada ka baxsan, halkaasoo ciidamadii Ingiriiska ee saldhiga Muqdisho loogu yeeray inay bannaanbaxaas kala diraan. Soomaalidii bannaanbaxaysay waxuu hubkoodu ahaa dhagaxyo ay isaga dhicinaysay ciidamadii Ingiriiska oo soo weerarray dabadeedna tacshiirado ku furay dadkii bannaanbaxayay waxaana goobtaas ku dhintay siddeed qof inbadanna ku dhaawacantay. Si loo xusuusto goobtaas waxaa lagu magacaabay "Dhagaxtuur" oo tilmaan u ah hubkey Soomaalidu ku dagaallamaysay. Waxaa sidoo kale ka dhacay magaalada Doolow bannaanbax lagu dilay kormeerihii Xisbiga S.Y.L, Cabdulwaaxid Sheekh saldhigga booliska hortiisa dad badanna lagu dhaawacay.

21kii bishii Nofeembar, sannadkii 1949kii, Qaramada Midoobay waxay cod ku oggolaaday siduu Talyaanigu rabay oo ah ku laabasho Soomaaliya hab maamul wasaayadeed ahaan muddo toban sano ah. Golaha Gunaandka Arrimaha Gumeysiga ee Qaramada Midoobay waxuu gumeysiga Talyaaniga oggoleeysiiyay habkuu dalka u maamuli lahaa. Ergeyga Soomaaliyeed raalli kuma ahayn shuruudaha Golahaasi soo hordhigay gumeysiga Talyaaniga. Cabdullaahi Ciise Maxamuud waxuu ka gudbiyay talooyin soona bandhigay taarar laga soo kala diray dalka Soomaaliyeed oo dhan laguna diidan yahay ku soo laabashada gumeysiga Talyaaniga dalka Soomaaliyeed, isagoo u gudbiyay Golaha Guud ee Qarmada Midoobay iyo Golaha Gunaanadka Arrimaha Gumeysiga.

Waxaa dawladaha Aasiya ka muuqatay laablakac iyo naxariis walaaltinimo oo ay u qabeen welwelka Soomaali ka haystay ku soo laabashada qaabka Faashistiga foosha xun. Dalka Hindiya waxuu lifaaq qoran u gudbiyay Golaha Gunaanadka Arrimaha Gumeysiga. Lifaaqii waxuu galay gacantii gumeysiga Talyaaniga oo doonayay inuu dib ugu soo laabto dalka Soomaaliyeed shuruud la'aan uuna dusha uga habsado kol labaadna madiidin uga dhigto.

Ergeyga Soomaaliyeed wuu ka hortagay, isagoo og halista uga imaan karta nin kastoo shisheeye ah. Waxaa weliba dhacday Dawladda Mareykanku inay ku tiri ergeyga Soomaaliyeed ha nooga bax dalka. Waxuu carro kula noolaa dalka Kanada, isagoo sugayay dib u cusboonayn visa uu ku galo dalka Mareykanka.

Intuu socday shirweynihii 250aad ee la qabtay, 21dii Nofeembar 1949kii, Golaha Qaramada Midoobay waxuu, bayaankiisa 289 (14), ku go'aamiyay in Soomaaliya loogu dhiibo Talyaaniga toban sano oo maamul wasaayadeed ah dabadeedna ay madaxbannaanaato. Waxa kaloo la go'aamiyay in Talyaaniga maamulkaas xil gudashadiisa kala taliyaan ergooyin ka kala socda: Masar; Kolombiya iyo Filipin.

9kii Diseembar 1949kii, Qaramada Midoobay hay'adiisa maamulka wasaayadeed waxay magacawday guddi ka kooban Mareykanka; Ingiriiska; Faransiiska; Iiraan; Filipin iyo San Domenico waxaana goobjoogeyaal ahaan loogu daray Talyaaniga, Masar iyo Xabashida. Waxa

Guddiga loo xilsaaray inuu soo sameeyo qaanuun lagu maamulo wasaayadda Soomaaliya, Guddiga qaanuunkii uu sameeyay waxuu soo hordhigay Golaha Guud waxuuna ansixiyay, 12kii Diseembar 1950kii, kadib goortuu Talyaanigu oggolaaday.

Dooddii goortay dhammaatay, galabtii 21kii Nofeembar 1949kii, waxaa cod loo qaaday saddexdii bayaan ee la soo bandhigay, iyadoo kolkii hore, cod loo qaaday qaybihiisa saamaynta lahaa. Bayaankii saldhiga u ahaa waxaa lagu oggolaaday 48 cod, waxaa diiday hal (Xabashida) waxaana ka aamusay sagaal (Kooxda Shuuciga, Faransiiska, Yuguslavia, New Zeland iyo Svezia). Bayaankaa waxuu ka koobnaa saddex qaybood oo ah : A. Liibiya, B. Soomaaliya, C. Eritreeya waxaana isla kolkaa dib loo riixay Bayaannadii kale ee la soo bandhigay. Bayaanka la oggolaaday waxuu u qoran yahay sidan soo socota:

> Bayaankii 289 (IV), 21kii Nofeembar 1949kii, UNGAOR, IV, Bayaannadii, 20kii Diseembar 1949, Lake Success (1949) PP 10-42:
>
> 1. Golaha Guud, isagoo haleelsiinaayo Lifaaqa XI faqradiisa 3, heshiiskii nabadda ee Talyaaniga lala galay 1947kii, isagoo cuskanayo awoodahaas waxuu halkan ku oggolaaday talooyinka Golaha Guud oo ku saabsan sidii loo furdaamin lahaa dalalkuu Talyaanigu gumeysan jiray loona qaato tillaabooyin lagu hirgelinaayo, kolkaan ka baarandegnay warbixintii Guddiga Baarista ee Afarta Dawladdood ee Itaalka Weyn, goortaan dhageysnay qaybihii matelaayay, inta muunada leh, aragtida ay qabaan dalalka ay matelyaan, kolkaan tixgelinay rabitaanka iyo wanaag ku noolaanshada dadka degaannada, danta xasiloonida, aragtida dawladaha iyo xaashida Q.M. waxay soo saartay bayaanka soo socda.
>
> A. Arrinta Ku Saabsan Liibiya:
>
> 1. Waa in Liibiya oo ay ka mid yahiin Cyrinaika, Tripolitania iyo Fezzan loo aqoonsadaa Saldanadooda ayna yahiin dawlad madaxbannaan;
>
> 2. Waa inay Madaxbannaanida si degdeg ah u hirgashaa kol alaale goortay suuragal noqoto, si kastaba ha ahaatee, waa inay ka dabamarin, 1dii Jannaayo 1952ka;
>
> 3. Waa in dastuur uu ka muuqdo qaabka xukuumadda Liibiya oo ay sameeyaan iyagoo u dhan dadka metala Cyrenaika, Triplolitania iyo Fezzan oo ku kulma Gole Qaran kana dooda.
>
> 4. Ula jeeddadaas lagu kaalmeynaayo dadweynaha sameeynta dastuurka iyo dhismaha xukuumad madaxbannaan, waa in Guddi Qaramada Midoobay ay magacaabeen Golaha Guud iyo Golaha la Tashiga ka kaalmeeyo;
>
> 5. Guddiga Qaramada Midoobay, asagoo la tashaday Golaha la Tashiga, waa inuu, sannad kastaa, warbixin u soo gudbiyaa Xoghayaha Guud iyo kol kasta ay la noqoto mid gaar inuu ku wargeliyo Q.M.;

6. Waa inuu Golaha Latashiga ka koobnadaa toban xubnood oo ah:

   a) Min hal xubin oo metela dadka saddexda gobol ee Liibiya iyo hal xubin ee metela dadka yar ee ku nool Liibiya;

7. Waa in Guddiga Q.M. ka magacaabaa xubnaha lagu tilmaamay faqradda 6aad matelayaal madax ah, siyaasiyiinta axsaabta iyo hay'adaha dalka;

8. In Guddiga Q.M. si uu xilkiisa u guto kala tashado raacana tilmaamaha Guddiga la Tashiga, taas waa in loo qaataa, inuu xubnihiisa kala duwan midkuu doono la xiriiri karo talana weydiin karo gobollada kala duwan;

9. Guddiga Q.M. waa u soo gudbin karaa talooyin Golaha Guud, Guddiga Arrimaha Dhaqaalaha iyo Bulshada sidoo kalena Xoghayaha Guud tillaabooyinka laga doonayay inay qaado Q.M. muddada ku meelgaarka ah ee ku saabsan dhibaatooyinka arrimaha dhaqaalaha ama bulshada Liibiya;

10. Awooddaha maamulka iyo wadashaqeynta Guddiga Q.M.:

    a) In tillaabo kasta degdeg loo billaabaa si loogu wareejiyo awoodda xukuumadda la dhiso;

    b) Ha ahaado maamulka dalka mid ujeeddadiisu ku dhisan tahay midnimada Liibiya iyo madaxbannaanideeda; la shaqeynta lagu dhisaayo hay'adaha xukuumadda iyo adeegyadooda

    c) Waa in Golaha Guud loo soo diraa warbixin sannad kastaa waxyaalihii la qabtay iyo sida loo fuliyay talooyinka;

11. Waa inay kol alaale kolkay dhalato Liibiya oo Qaran madaxbannaan ah ka mid noqoto Q.M.

B. Arrinta Ku Saabsan Soomaalida Talyaaniga:

Waxaa lagu taliyay:

1. Waa inay Soomaalida Talyaaniga gumeysan jiray noqotaa mid gobannimadeeda leh ee dawlad madaxbannaan.

2. Waa inay gobanimadaas iyo madaxbannaanidaas gaartaa muddo toban sano kadib oo ka billaabata goortii Golaha Guud oggolaado heshiiska Wasaayadda;

3. Muddadaas lagu sheegay faqradda 2, Soomaalida Talyaaniga gumeysan jiray waxaa la hoos keenayaa qaab wasaayadeed ee caalami ah uu Talyaanigu yahay awoodda maamuleysa;

4. Waa in hay'adda maamulka wasaayada dhinac kala taliyaan Gole latashi oo ka kooban dawladdaha soo socda: Colombia, Masar iyo Philippines. Xarunta Golaha la Tashigu waxay noqonaysaa Muqdisho. Golaha latashigu xilkiisa waa in lagu daraa heshiiska Wasaayadda sidoo kale waa in lagu daraa inuu u yeero dawladaha xubinta ka ah Golaha latashiga haddii ayan ahayn inuu ka qayb galo cod la'aan doodda Golaha Wasaayadda, arrin kastaa oo saameyso dalkan;

5. Waa in heshiiska Wasaayadda lagu daraa lifaaq oo lagu caddeynayo mabaadii dastuur oo dhawraayo xuquuqda dadka deeggaanka Soomaaliyeed iyo in loo sameeyo hay'addo loogu talagalay inay hirgeliyaan horukac iyo gaarsiinta ismaamul;

6. Waa in Golaha Wasaayadda kala doodaa hay'adda maamulka Wasaayadda darbinta heshiiska Wasaayadda sidii loogu soo gudbin lahaa Golaha Guud, haddi ay suuragal tahay kal fadhigaan si kastaba waa inuu kadambayn kal fadhiga caadiga ah ee shanaad;

7. Waa taliska maamulka goortii la darbinaayo lifaaqa Golaha Wasaayadda inay raacaan mashruuca lifaaqa ay soo darbisay ergeda Hindiya;

8. Talyaniga waa in loogu yeeraa inuu si ku meel gaar ah ula wareegaa maamulka dalka:

   a) Goorta iyo habka ay si hannaansan u kala wareegsan lahaayeen ku heshiiyaan Talyaaniga iyo Ingiriiska, kadib goortay ku heshiiyaan Golaha Wasaayadda iyo Talyaaniga heshiiska Wasaayadda.

   b) Waxaa shardi ah in Talyaanigu oggolaado inuu dalka ku maamulayo sida waafaqsan hannaanka Xaashida Q.M. ee ku saabsan habka Wasaayadda kadib goortuu oggolaado Golaha Guud heshiiska Wasaayadda ee dalka;

9. Golaha latashiga waa inuu fuliyaa xilkiisa kol alaale goortuu Talyaanigu billaabo maamulka ku meel gaarka ah.

c) Arrinta Eritreeya waxaa lagu taliyay:

1. Waa in la magacaaba Guddi aan ka badnayn shan dawladood oo ka mid ah: Burma, Guatamala, Norway, Paksitan, South Africa oo si dhab ah u soo hubiya sida ugu wanaagsan ee lagu horumarin karo hab nololeedka dadka deggan Eritreeya iyo in la soo baaro sidii wax looga qaban lahaa arrinta Eritreeya iyo in la soo darbiyo warbixin iyo talooyin loo soo gudbiyo Golaha Guud sida ugu habboon ee loo furdaamin karo arrinta Eritreeya;

2. Guddiga, goortuu xilkiisa gudanaayo waa inuu dhab ahaan u hubsadaa waxyaalaha oo ay ka mid yahiin qoraallo ama oraah uu ka helo maamulka maanta jira iyo kuwa matalaaya oo ay ku jiraan qolooyinka yaryar, xukuumadda iyo hay'addaha waana inuu tixgeliyaa shaqsiyaadka loo maleeyo inay leeyahiin mudnaan gaar ahaaneed.

   a) Rabitaanka iyo wanaag ku wada noolaanshaha daweynaha Eritreeya oo ay ka mid yahiin aragtida dadka, isirka, diinta iyo siyaasadda ku kala duwan danaha nabadda iyo nabadgelyada Afrikada Bari;

   b) Dawga ay Xabashidu ku doodayso ee ku saabsan sheegashada diin ahaan, tariikh ahaan, isir ahaan ama sababo dhaqaale oo ay ka mid tahay inay Xabashida daw u leedahay inay marin badeed hagaagsan hesho;

   c) Waa inuu tixgeliyaa soo jeedinadii talooyinka kala duwanaa oo ku saabsanaa sidii arrimihii Eritreeya loo abyi lahaa ee loo soo gudbiyay Golaha Guud kalfadhigiisii afraad;

3. Guddigu waa inuu ku kulmaa xarunta Q.M. kol alaale goortay suuro gal tahay. Wuu u socdaali karaa Eritreeya waana booqan karaa meelo kale haddii ay la noqoto inay dan u tahay xilkiisa. Guddiga waxuu ku hawlgelayaa hab uu degsaday ee ku saabsan warbixintiisa iyo talooyinkiisa waana inuu la soo xiriiraa Xoghayaha Guud kama dambeeyntii 15 Juunyo 1950, si loogu qaybiyo warbixinta dawladaha xubnaha ka ah kalfadhiga shanaad ka gaaraan go'aan kama dambeeys ah.

QAYBTA SHANAAD

TOBANKII SANOO WASAAYADDA IYO MIDEYNTA LABADII GOBOL EE SOOMAALIYEED

J - TOBANKII SANOO WASAAYADDA TALYAANIGA.

Talyaanigu waxuu Soomaaliya ku soo laabtay, 2dii Febraayo 1950kii, isagoo xambaarsan xeerkii Wasaayadda Qaramada Midoobay ugu dhiibtay inuu Soomaaliduu gumeysan jiray gaarsiiyo, muddo toban sano ah, gobannimo madaxbannaan. Waxaa xeerkaa Wasaayadeed si qeexan ugu faahfaahsanaa hab dastuur ah uu ku maamulayo dalka Wasaayadda loogu dhiibay. waxuu kaloo u xilsaarnaa inuu si habboon u horumariyo dhaqdhaqaaqa siyaasadda, dhaqaale iyo bulsho muddada tobanka sano ah uu ku gaaro dalka dadka deggani hanashada gobannimadiisa madaxbannaan. Xeerkaas dastuurka ah waxuu Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ansixiyay, 2dii Diseembar 1950kii, isagoo uu ku lifaaqan yahay qanuun Maamulka Wasaayadda oo ka reebayay inuu ku tagrifalo xilkiisu. Sidoo kale, waxaa ku qeexnaa in Maamulka Wasaayadda uu la taliyo Gole Latashi oo ka kooban ergo saddex dawladood oo ah: 1. Masar 2. Philippine 3. iyo Colombia oo fadhigoodu yahay Muqdisho. Waxaa kaloo Maamulka Wasaayadda loo xilsaaray inuu sannad kastaba Qaramada Midoobay u gudbiyo warbixin buuxda ee ku saabsan horumarkii laga sameeyay dhaqdhaqaaqa arrimaha siyaasadda, maamulka, bulshada iyo dhaqaalaha.

Talyaanigu waxuu xilka Maamulka dalka kala wareegay Ciidamadii Ingiriiska, 1dii Abriil 1950kii, waxaana, 25kii Maajo isla sannadkaas, booqasho Muqdisho ku yimid Wasiir Ku/Xigeenkii Arrimaha Talyaaniga Giuseppe Brusasca oo hoggaaminayay ergo ka kooban hawlwadeenno heer sare ah. Waxay ujeeddada booqashadiisu ahayd: Inuu hubiyo heerka arrimaha siyaasadda, bulshada iyo dhaqaalaha uu dalku kolkaa ku sugnaa si dabadeed Xukuumadda Talyaanigu go'aan uga gaarto waxay ka qaban lahayd timaaddada. Muddadii uu booqashada ku joogay Wasiir Ku/Xigeenku Soomaaliya waxuu soo kormeeray goobo badan oo qaaya leh, isagoo la kulmay maqaawiirta hoggaamisa bulshada iyo madaxda siyaasadda Soomaaliyeed. Waxuu kaloo la kulmay madaxda Maamulka Wasaayadda iyo Mudane Aadan Cabdulle Cusmaan oo madax u ahaa Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L). Aadan Cabdulle iyo Brusasca waxaa dhexmaray muran aad u kulul oo ku saabsanaa sababtuu Talyaanigu ugu soo laabtay Soomaaliya, isagoo Aadan Cabdulle qeexay dhibaatooyinkii gumeysigii Talyaaniga u geeystay dadka iyo dalkaba. Goortay doodii kululayd dhammaatay waxaa la isku afgartay in la wadahowlgalo, taasoo 9kii Juunyo, Golahii Dhexe ee Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed oo idil ka qaybgalay sagootiska ambabixii Brusasca, tillaabadaasoo muujinaysay in Xisbiga S.Y.L uu ka debcay halkuu ka taagnaa soo laabashadii Talyaaniga. Inkastoo Aadan Cabdulle iyo Brusasca ay ku heshiiyeen in laysla wadahowlgalo haddana waxba iskama beddelin dareenkii iyo iska soo horjeedkii u dhexeeyay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed iyo Maamulkii Wasaayadda. Durbadiiba Maamulka Wasaayadda waxuu ku billaabay cadaadis siyaasadeed, intii ka soo horjeeday ku soo laabashadiisii Soomaaliya oo ay ka mid ahaayeen xubnihii Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed, isagoo adeegsanaayo tabahii uu 50 sano dalka ku gumeysan jiray. Madaxda xisbiga waxay la kulmeen hagardaamooyin badan oo ay ka mid ahaayeen dil iyo eedayn la abaabulay in lagu xirxiro xubnihiisa waxaana durbadiiba billawday iskahorimaad Maamulka Wasaayadda iyo

Soomaalida, kaasoo ka dhashay dagaalkii Baydhowa uu Talyaanigu u adeegsaday Xisbigii Digil iyo Mirifle oo ka soo horjeeday Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed S.Y.L. Qoysaskii Xisbiga S.Y.L taageersanaa oo idil ayaa magaalada laga eryay guryahoodiina la hooshay lana gubay, iyadoo si loo badbaadiyo uuna ciidanka nabadgelyada far u dhaqaajin. Nin kastoo hawlwadeen ama boolis ah ee laga dareemay inuu taageeraayo Xisbiga S.Y.L xabsiga dhexe ee Muqdisho lagu tuuray ama hawshaba laga eryay, taasoo keentay inuu Xisbigii Digil iyo Mirifle magaalada bililiqaysto. Waxaa sidoo kale uu dagaal ka aloosmay, 1950kii Gaalkcayo iyo 1951kii Beled-Weyne. Bishii Agoosto 1952kii, waxaa Kismaayo ka dhacay dagaal oo ay ku dhinteen laba askari oo Boolis ah iyo L/Xarigle Cawad Saalim waxaana ku dhaawacmay taliyihii Booliska L/Xiddigle Valerio Morati, Xisbiga Leegadana madaxdeedii uu ka mid ahaa Bashiir Qoslaaye lagu guray xabsiga. Waxaa, intuu xabsiga ku jiray jirdilyo u dhintay Muxamed Jaamac qaar naagihiina ku umuleen oo ay ka mid ahayd Timiro Cukaash oo ahayd marwadii Muddane Salaad Cabdi Maxamuud oo loo yaqiin Salaad Cagalaab. Iyadoo ay maamulka wasaayadda Talyaaniga ka walaacsantahay sugidda nabadgelyada dalka, ayaa 25kii Agoosto 1952kii, loo diray dalka Talyaaniga siddeed Kormeere Booliis oo loo xulay inay tababar laylis sarkaal ku soo qaataan kuwaasoo ahaa:

1.	Saddex Xarigle	Muxamed Siyaad Barre
2.	"	Xuseen Kulmiye Afrax
3.	Laba Xarigle	Muxamed Ibraahim Muxamed
4.	"	Muxamed Abshir Muuse
5.	"	Cabdalla Cali Muxamed
6.	Xarigle	Daa'uud Cabdulle Xersi
7.	"	Muxamed Caynaanshe Guuleed
8.	"	Muxamed Bin Khamiis

Waxaa sidoo kale, Sebteembar 1953kii, loo diray dalka Talyaaniga saddex iyo toban hawlwadeenno Soomaaliyeed oo loo xulay inay ku soo qaataan tababar siyaasadda maamulka kuwaasoo ahaa:

1- Xaaji Cumar Sheegow;
2- Xaaji Bashiir Ismaaciil;
3- Cabdirashiid Cali Sharma'arke;
4- Daahir Xaaji Cusmaan;
5- Cali Shiddo Cabdi;
6- Cali Cumar Sheegow;
7- Nuur Axmed Cabdulle (Castelli);
8- Axmed Cadde Muunye;
9- Cusmaan Cumar Sheegow;
10-Xasan Muxamed Xasan (Waqooyi);
11-Cabdi Sheekh Aadan;
12-Muxamed Sheekh Gabyow;
13-Awees Sheekh Muxamed.

Isla waagaa Maamulka Wasaayadda Talyaaniga waxuu billaabay inuu laaluusho Axsaabta taageerta, iyo inuu lacag siiyo raggii ka tirsanaa ciidamadiisa gumeysigii hore si ay garab u siiyaan iyo inuu kuwo horleh dhiso. Waxuu kaloo billaabay inuu ka soo wareejiyo dadka mabda'laabeyaasha ah Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed kuwii uu kari waayayna cadaadiyo. Muddo goortuu dalka ku maamulaayay dhibaatooyinkaas ka dhaliyaya isafgarashawaagii ku salaysnaa tuhunka iyo baqdinta, ayuu beddelay siyaasadiisa uuna billaabay horumarinta maamulkiisa oo raalli laga noqday. Sidoo kale waxaa axsaabtii dalka ka jirtay u caddaatay himiladoodii siyaasdeed waxayna la yimaadeen debecsanaan iyo wadahowlgalid, iyagoo doorbiday inay illawaan iska horimaadkii ka dhexeeyay iyaga iyo Maamulka Wasaayadda si kolkaa loo helo wadahowlgal dalka lagu horumariyo.

Horraantii 1954kii, waxaa dalka ku soo laabtay saraakiishii booliska iyo howlwadeennadii tababarka ugu maqnayd dalka Talyaaniga. Isla waagaa waxaa la dhisay Golaha Latashiga dalka ee loo yaqiin "Consiglio Territoriale" ee ka koobnaa 51 xubnood oo laga soo magacaabay axsaabta dalka ka jirtay iyo jaaliyadaha shisheeye xilkiisuna ahaa inuu Maamulka Wasaayadda kala taliyo hannaanka sharuucda dalka lagu maamulaayay. Goortaa kadib, Soomaalidu waxaa u muuqatay, saacadba saacadda ka danbeysa iyo maalinba maalinta ka danbeysa, mirihii halgankoodii dheeraa inay soo bislaanayaan ayna soo dhowdahay kolkay guran lahaayd. Dadweynaha Soomaaliyeed waxuu dareemay waxii wayihii hore la moodaayay suuragalkoodu inuu fog yahay soo dhowaaday ayna muuqato waxqabad cad oo la taaban karo.

Gelinkii hore oo ay ayaantuna Isniin ahayd, 6ii Seteembar 1954kii, waxaa Aqalka Golaha Latashiga dalka ka furmay kalfadhigii saddexaad ee Hay'adda Qaranka ugu sarreysa waxuuna ahaa kalfadhigii taariikhiga oo lagu go'aaminaayay jiritaanka calanka astaanta u ah Soomaalida. Waxa ugu horreeya oo qof kastoo Soomaali ah isweydiinaayo waxay tahay, bal horta in la caddeeyo calan waxuu yahay. Calan waxaa weeye astaan dad isku dal, dhqan iyo dan ah mideysa walaaleysana, iyadoo aan lagu kala soocin siyaasad, af, isir, hiddo, diin iyo midab; waa astaan jiritaankooda dawladnimo iyo gobannimadooda madaxbanaan oo uu dadku jeelkiisa iyo jiritaankiisa nafta u huro. Waxaa kalfadhigaas taariikhiga ah ee lagu go'aaminaayay Calanka Qaranka Soomaaliyeed oo ka koobnaa 51 xubnood uu guddoominaayay Mudane Gasbarri oo ka tirsanaa hawlwadeennada Maamulka Wasaayadda iyo labadiisa ku xigeenno oo kala ahaa Mudane Aadan Cabdulle Cusmman iyo Cabdinuur Xuseen, waxaa ka soo qaybgalay marti sharaf oo ay ka mid ahaayeen Wasiir Ku/Xigeenkii Arrimaha Dibadda ee Dawladda Talyaaniga, Mudane Badine Confalonieri iyo Maamulahii Wasaayadda, Mudane Danjire Martino. Shirkaa goortuu furmay waxaa lays dhaafsaday khudbaddo oo ay akhriyeen Mudane Cabdinuur Xuseen Ku/Xigeenka Guddoomiyaha Golaha; Islaw Cumar Cali oo matelaayay "Partito Democratico Somalo" oo ka koobnaa Associazione Giovani Abgal, Hiddaayad Suleymaan, Shiidle iyo Moobleen; Mudane Xaaji Faarax Cali Cumar S.Y.L; Mudane Macallim Cumar S.D.M; Suldaan Cabdiraxmaan Cali Ciise, Suldaanka Biimaal; Mudane Xaaji Muxamed Cubeyd, Jaaliyadda Carabta; Mudane Buna, Jaaliyadda Talyaaniga iyo Indo-Pakistani iyo Mudane Sheekh Faqi Sheekh. Waxaa dabadeed kalfadhiga ka hadlay Mudane Danjire Martino, Maamulahii Wasaayadda waxuuna ka warbixiyay horumarka oo ay maamulka Wasaayaddu, afartii sanoo ugu horreeysay sameeysay xag bulsho, dhaqaale iyo siyaasadba iyo waxay ku talo jirto inay timaaddada qabato. Waxuu khudbaddiisa ku sheegay in la dhisi doono machad sare ee heer jaamacad ah oo lagu barto aqoonta qaanuunka bulshada iyo dhaqaalahaba oo dabadeed ardayga loo aqoonsanaayo labo sanoo heer jaamacad ah. Ugudambeyntii Guddoomiye Ku/Xigeenkii

Mudane Aadan Cabdulle Cusmaan ayaa Golaha u soo bandhigay mashruuc xeer sharci ee ku saabsanaa Calanka Qaranka Soomaaliyeed oo ka warbixiyay heerarkuu mashruucii soo maray intii aan Golaha loo soo bandhigin. Calanka Qaranka Soomaaliyeed oo Golaha loo soo bandhigay waxuu midabkiisu yahay buluug furan oo cir-uyaal ah muuqaalkiisuna yahay laydi ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shan geesood ah oo madaxyo siman leh oo astaan u ah Soomaali weyn. Gelinkii hore saacadda goortay ahayd kow iyo tobanka, ayaa mashruuca loo qaaday cod waxaana lagu oggolaaday sacab iyo rayrayn. Calanka Qaranka Soomaaliyeed waxaa la bannaanbixiyay, 12kii Oktoobar 1954kii oo ay ayaantu ahayd Isniin saacaduna sagaalkii gelinkii hore, ciidan Boolis ah oo ka kooban lixdan uu hoggaaminaayay Xiddigle Muxamed Ibraahim Muxamed (Liiqliiqato) oo ay kala wateen Kormeere Aadan Cabdi (Kuukay) iyo Kormeere Cabdi Jeelle ayaa salaan sharaf daarta Xarunta Xukuumadda korkeeda dhanka bidix ku saaray Calanka Qaranka Soomaaliyeed, iyadoo dhexduna uu ka saarnaa kan Qaramada Midoobay dhanka midigtana kan Talyaaniga. Dadweynaha waxuu goortaas isugu soo baxay fagaaraha calanka lagu saaraayay, isagoo rayrayn ugu dabaaldegaayay muuqaalka iyo midabka calankiisa. Dhacdadaas Calan saarka ahayd waxuu abwaanka weyn, Cabdullaahi Qarshe, calanka u tiriyay heesta ee soo socota ee caanka noqotay:

Qolaba calankeedu, waa caynoo
Innaga keenu, waa cirkoo kale e,
Aan caadna lahayn, ee caashaq ee,

1. *Xiddig yahay cadi, waad na ciidamisee,*
Carrada kaligaa, adow curadee,
Cadceeda sideeda, caan noqde ee,

Qolaba calankeedu, waa caynoo
Innaga keenu, waa cirkoo kale e,
Aan caadna lahayn, ee caashaq ee,

2. *Cashadaad dhalataa, caloosheenaa,*
Sidii culaygii, cadaad marisee,
Allow ha ku, celin cawooy dhaha ee,

Qolaba calaankeedu, waa caynoo,
Innaga keenu, waa cirkoo kale e,
Aan caadna lahayn, ee caashaq ee,

3. *Shanteena cududood, cadkii ka maqnaa,*
Adow celiyoo, na caawimeyee,
4. *Waa calaf cimrigaa, ku keen simayee,*
Qolaba calaankeedu, waa caynoo,
Innaga keenu, waa cirkoo kale e,
Aan caadna lahayn, ee caashaq ee.

Waagaa ka dib, waxaa suurageshay in dadkii aqoonta laha loo oggolaado inay ka mid noqdaan saraakiishii iyo hawlwadeennadii maamulaka dalka, iyagoo kuwo badan, kadib kolkay ka soo laabteen tababarro ay ku soo qaateen dalka Talyaaniga loo dhiibay jagooyin sare ee Maamulka Wasaayadda.

Horraantii 1954kii, waxaa dalka ka dhacay doorashadii ugu horreeysay ee lagu soo dooranaayay Golaha Maamulka Degaannada, kaasoo kuraastii ugu badnayd ku guuleystay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L). Tallaabooyinkaas waxay Soomaalidu ku abuurtay kalsooni waxaana u muuqatay inuu Maamulka Wasaayadda fulinayo go'aannadii Qaramada Midoobay. 1955kii, Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed waxuu beddelay siyaasadiisii ka soo horjeeday Maamulka Wasaayadda Talyaaniga waxuuna caddeeyay inuu goortaas kadib ku dhaqmi doono siyaasad uu kula shaqeynayo Maamulka Wasaayadda ee u janjeerta gaarsiinta dalka gobannimo madaxbanaan.

Maarso 1956kii, waxaa dhacay doorashadii Golaha Sharcidejinta ee ugu horreysay oo ay xisbiyo badan ku tartamaan, iyadoo lagu soo doortay 60 Mudane iyo 10 xubnood oo laga soo magacaabay jaaliyadaha shisheeye ee dalka degganaa. Doorashadaas 43 kursi waxaa ku guuleystay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L), kaasoo laga dhisay Golahii Latashiga oo loo rogay Hay'ad Sharcidejin ah oo ka kooban 60 xubnood oo la soo doortay iyo 10 xubnood oo jaaliyadaha laga soo magacaabay, waxaa loo magacaabay Wasiirka Koowaad Mudane Cabdullaahi Ciise Maxamuud oo loo xilsaaray inuu soo dhiso Xukuumad maamusho arrimaha gudaha dalka waxuuna soo dhisay xukuumad gebi ahaan laga soo xulay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L) oo ku guuleystay aqlabiyada doorashada, taasoo ahayd Xukuumaddii taariikh ahaan Soomaaliya ugu horreeysay, oo xubnaheedu ahaa:

1- Wasiirka koowaad	Cabdullaahi Ciise Maxamuud;
2- Wasaaradda Arrimaha Gudaha	Xaaji Muuse Boqor;
3- Wasaaradda Dhaqaalaha	Xaaji Faarax Cali Cumar;
4- Wasaaradda Arrimaha Guud	Maxamuud Cabdi Nuur (Juujo);
5- Wasaaradda Arrimaha Bulshada	Sheekh Cali Jimcaale Baraale;
6- Wasaaradda Maaliyadda	Salaad Cabdi Maxamuud (Cagalaab).

Sidoo kale, Juunyo isla sannadkaas, waxaa la Soomaaliyeeyay maamulka Gobollada iyo Degmooyinka loo dhiibay hawlwadeenno iyo saraakiil Booliska Soomaaliyeed oo xilkii kala wareegay hawlwadeennadii iyo saraakiishii Talyaaniga, kuwaasoo ahaa:

1. Governatoraha Gobolka Bandar Qaasim	Mudane Cali Cumar Sheegow.
Taliyaha Qaybta Booliiska ee Gobolka	L/Xiddigle Cabdalla Cali;
2. Governatoraha Gobolka Mudug	Mudane Daahir Xaaji Cusmaan;
Taliyaha Qaybta Booliiska ee Gobolka	L/Xiddigle Muxamed Ibraahim Muxamed;
3. Governatoraha Gobolka Hiiraan	Mudane Xasan Nuur Cilmi;
Taliyah Qaybta Booliiska ee Gobolka	L/Xiddigle Daa'uud Cabdulle Xersi;
4. Governatoraha Gobolka J/Sare	Mudane Xaaji Bashiir Cismaaciil;
Taliyah Qaybta Booliiska ee Gobolka	L/Xiddigle Muxamed Abshir Muuse;
5. Governatoraha Gobolka J/Hoose	Mudane Nuur Axmed Cabdulle (Kastelli)
Taliyaha Qaybta Booliiska ee Gobolka	L/Xiddigle Muxamed Caynaanshe Guuleed;

6. Gobolka Banaadir waxaa laga Soomaaliyeeyay Taliyaha Qaybta Booliiska oo loo magacaabay L/Xiddigle Muxamed Siyaad Barre.

Tillaabooyinkaas uu Maamulka Wasaayadeed qaaday waxay dhiirigelisay siina kordhisay kalsoonidii dadweynaha Soomaaliyeed aadna u fududaysay wadahowlgalkii ka dhexdhalatay Maamulka Wasaayadda iyo Xisbiga Dhallinyarada Soomaliyeed. Goortuu Maamulkii Soomaalida lagu wareejiyay muddo gaaban ku socday dardar xamaasad iyo qiiro ku dheehan tahay, ayay Xukuumadii Cabdullaahi Ciise soo food saareen dhibaatooyin siyaaso, dhaqaale iyo bulsho. Waxuu Xisbigii Dhallinyarada Soomaaliyeed ka weecday himiladiisii ahayd gobannimodoon iyo mideynta Qaranka Soomaaliyeed uu muddo 15 sano u soo halgamaayay waxaana xisbiga ka dhexdhashay muran awooddoon ah ee ku salaysan kasmo qoloqolo oo u keentay inay taageereyaashiisa u kala leexdaan jilibyo. Waxaa dhacday in la wiiqo midnimadii halganka gobannimaddoonka iyo inay yaraato kalsamaduu dadweynaha u qabay hoggaankii xisbiga waxaana dhacday, iyadoo lagu muransan yahay madaxa hoggaanka xisbiga, in loo doortay Xaaji Muxamed Xuseen oo waxbarasho ugu maqnaa Qaahira. Doorashadaas Xaaji Muxamed Xuseen waxay sii kala fogeysay xubnihii xisbiga oo u kala jabay laba qaybood; kuwa taageersan doorashada Xaaji Muxamed Xuseen iyo kuwa diidan oo taageersan Aadan Cabdulle Cusmaan oo ahaa madaxa xisbiga. Waxaa aad u weynaaday qaybsanaantii iyo maanwareerkii siyaasadeed waxaana sidaas ku dhashay xisbi la magac baxay Kulanka Soomaali Weyn (GSL) oo ay aasaaseen xubno jilib ahaan uga baxay Xisbigii Dhallinyarada Soomaaliyeed uuna madax u noqday Xaaji Muxamed Xuseen. Waxaa durbadiiba muuqatay ifafaale iska soo horjeed siyaasadeed oo ay ka abuurantay kala jabka ku dhacay xisbigii hormoodka u ahaa gobonnimadoonka iyo madaxbannaanida kana dhisnayd Xukuumaddii Arrimaha Gudaha. Kala jabkaas xisbigu waxuu kaloo halis galiyay xasilloonidii iyo hannaankii nabadda dadweynaha ku noolaa dhibaatana u abuurtay Xukuumadda curdunka ahayd ee taariikh ahaan kolkii ugu horreeysay ka dhalatay dalka.

Guddigii ergooyinka latashiga Maamulka Wasaayadda oo ka koobnaa saddexdii dawladood ee Masar, Philipines iyo Colombia waxaa ugu firfircoonaa Ergaygii Masaarida, Muxamed Kamaaludiin Saalax oo aad ula talin jiray Maamulka Wasaayadda tillaabooyinkuu siyaasadda dalka ka qaadi jirtay, taasoo in badan uu is-hortaagi jiray tillaabooyinkii uu Talyaaniga rabay inuu qaado kana dhan ahaa qaanuunkii Maamulka Wasaayadda oo dhaliyay iska horimaad, kolkolna keenay in la necbaysto talooyinkiisa. Waxay Talyaanigu iyo axsaabtii tageersanayd abaabuleen shirqool lagu dilay xafiiskiisa, isagoo sooman, 17/4/1957kii, gooray saacaddu ahayd 1:30 duhurnimo. Ninka dilay oo la oran jiray Muxamed Wiilow, si aan runta loo ogaan, waxaa isaguna lagu dilay xabsiga habeenkii ka horreeysay maalintii gobannimada madaxbannaan la qaatay. Maamulka Wasaayadda, isagoo hirgelinayay Soomaaliyeynta maamulka dalka, ayuu sannadkii 1958kii, xilka Taliskii ciidanka Booliska ku wareejiyay G/le Dhexe Muxamed Abshir Muuse oo kala wareegay G/le Sare "Alfredo Arnera", waxaana taliye Ku/Xigeen ciidanka Booliiska ka noqday G/Dhexe Daa'uud Cabdulle Xersi. Dhammaadkii sannadkaas, Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay "Dag Hammershoeld" ayaa Muqdisho booqasho gaaban ku yimid. Munaasabadaas Xisbigii Kulanka Soomaali Weyn (Great Somali League), Xisbigii Dastuuriga ee Madaxabannaanida (H.D.M) iyo Xisbigii Midnimada Qaranka Soomaaliyeed, ayaa sameeyeen bannaanbax aan sharciyeysnayn oo ay ku muujinayeen dareenka ay ka qabeen maamulxumida iyo eexda oo ay u dhici doonto doorashada xubnaha Golaha Sharcidejinta Qaranka. Goor dambe ayuu Ciidanka Booliska soo galay si bannaanbaxaas aan qaanuuniga ahayn u kala diro. Waxaa ka dhashay iska horimaad ciidamadii nabadgelyada iyo ururradii bannaanbaxaayay. Waxaa iska horimaadkaa ku dhimatay gabadh waxayna dabadeed ciidamadii awood u heleen inay kala diraan

dadkii bannaanbaxayay. Arrintaa waxaa ka dhashay in Xisbigii Kulanka Soomaali Weyn xaruntiisa la xiro lagana joojiyo kulamadiisii, iyadoo lagu eedeeyay inuu abaabulay xasilloonidarro iyo hoosh dalkoo idil saameeyay waxaana loo cuskaday qaanuunkii u yiil axsaabta. Waxaa magaalada Xamar ka dillaacay dagaal kharaar ay isaga horyimaadeen Xisbigii Kulanka Soomaali Weyn iyo ciidamadii nabadgelyada, kaasoo keenay dhimasho iyo dhaawac badan waxaana la qabqabtay madaxdii xisbigaas dalkana lagu soo rogay bandoo socday taniyo 25kii Febraayo 1959kii. Axsaabtii lidka ahayd waxay xukuumadda ku eedeeyeen tagrifalka awooddeed oo lagu doonaayay in doorashada lagu maamulo. Goortii madaxdii xirxirnayd lagu soo oogay eedayn aad u kulul waxaa la siidaayay, bishii Seteembar, iyadoo lagu caddayn waayay eedihii lagu soo oogay. Arrintaasi waxay keentay inay dhibaatada dalka ku sii korodho. Axsaabtii xukuumadda lidka ku ahayd waxay isku deyeen inay ka qaybgelin doorashadaa una direen Qaramada Midoobay wakiillo ka dooda sharcidarrada iyo ku tagrifalida lagu darbinayo doorashada. Cabashadaasoo ay ku doodayeen axsaabtii Xukuumadda lidka ku ahayd ma helin garowsi diiran, inkastoo ay siiwadeen ol'olahii ay ku hayeeen siyaasadda Xukuumadda Arrimaha Gudaha iyo Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed waxayna go'aansadeen inayna ka qayb galin doorashada lana soo noqdeen codsigii oo ay u direen Q M. Doorashadaas waxay ku dhacday, xasillooni Bishii Maarso 1959kii, waxaana si weyn ugu guuleystay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed oo ahaa xisbiga Xukuumadda Arrimaha Gudaha ka dhisanayd faahfaahinteeduna waxay ahayd sida soo socoto: kuraasta la soo bandhigay ee loo tartamayay waxay ahaayeen 90 kursi: Xisbiga dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L) 83 kursi ku helay 237,134 cod, Xisbiga Dastuuriga ah (H.D.M.S) 5 kursi uu ku helay 35,768 cod. Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed waxuu ku guuleysatay 60 kursi ee ka mid ahaa kuraasta la soo bandhigay ee aan cidina kula tartamin. Waxuu ka abdeystay ka qaybgelid la'aantii doorashada axsaabtii lidka ahayd cadaadis siyaasadeed awgii. Doorashadaasi kadib kol labaad ayuu Cabdullaahi Ciise, isagoo haystay oggolaashada Maamulka Wasaayadda, 17kii Luulyo 1959kii, soo dhisay xukuumad cusub oo idil ahaanteed ka koobnayd Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L.).

25kii Agoosto 1959kii, dood shan ayaamood socotay kadib, ayuu Golaha Sharcidejinta cusub guddoonsaday go'aan lagaga codsanayay Maamulka Wasaayadda Talyaaniga gobannimo madxbannaan oo degdeg ah, iyadoo laga soo horumarinayo tariikhda wasaayadda oo ahayd, 2dii Disembar 1960kii. Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, isagoo tixgelinayay talo soo jeedintii Guddigiisa Wasaayadda, 27kii Nofeembar 1959kii, ayuu fadhigiisii 14aad ee 5tii Diseembar 1959kii, si buuxda isugu raacay in gobannimada iyo madaxbannaanida dalka Soomaaliyeed laga soo horumariyo, 2da Diseembar, lagana dhigo, 1da Luulyo 1960kii.

12kii Abriile 1960kii, Maamulka Wasaayadda Talyaaniga, codsi uga yimid Xukuumadda Arrimaha Gudaha Soomaaliyeed awgii, ayuu oggolaaday in dalka loo aasaaso ciidan difaaca waxaana taliye loogu magacaabay G/Sare Da'uud Cabdulle Xersi, abbaaduulana G/Sare Muxamed Siyaad Barre. Ciidankaas waxaa loo baxshay Xoogga Dalka Soomaaliyeed. Isla waagaa waxaa taliye ku xigeenka ciidanka Booliiska Soomaaliyeed loo magacaabay G/Sare Muxamed Ibraahim Muxamed. Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxaa lagu aasaasay saraakiil, saraakiil xigeenno iyo dabley laga wareejiyay ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyo 2000 ciidan hor leh oo kolkaa la qoray.

K - MAXMIYADII INGIRIISKA EE SOOMAALIDA WAQOOYI

Ingiriisku waxuu dib u qabsaday Gobollada Soomaalida Waqooyi, Bishii Abriil 1941kii, waxaana xukunka maxmiyadda loo dhiibay ciidamada oo maamulayay taniyo 1948kii. Ingiriisku waxuu durbadiiba billaabay inuu beddelo habkii uu dagaalka ka hor ku maamuli jiray oo ahaa inuuna waxba ka qaban horumarinta arrimaha dhaqaalaha, bulshada iyo siyaasadda. Isla goortuu soo laabtay dhibaatooyinkii uu la kulmay waxay ahaayeen dib u habaynta ganacsiga uu dalka dhaqaalihiisa qaybta ugu weyn ay ku salaysnayd, sugidda nabadgelyada iyo xasilloonida.

Iyadoo Berbera dhaawac weyn ka soo gaaray Dagaalkii Labaad ee Dunida, si uu ugu dhoweeyo xukunka dadweynaha waxuu Ingiriisku xaruntii Maxmiyadda u raray Hargeysa. Luulyo 1946kidii, waxuu dhisay Gole Latashi (Advisory Council) oo laga soo magacaabay degmooyinka. Dhaqdhaqaaqa Ingiriiska sameeyay waxuu dhaliyay dareen uu dadweynaha ugu baraarugo siyaasadda timaaddada maxmiyadda iyo guud ahaan gobollada Soomaaliyeed. Arrintaas waxay keentay in uu Xisbiga Bulshada Qaranka Soomaaliyeed (Somaliland National Society) oo Dagaalkii Labaad ee Dunida ka hor jiray ku biiro ururro kale ee dalka ka jiray dabadeedna laga aasaasay Xisbiga Qaranka Soomaaliyeed (Somali National League) oo himmiladiisu ahayd mideynta Soomaali Weyn, horumarinta tacliinta iyo la dagaallanaka jilibeysiga. 1947kii, waxaa Maxmiyadda laga furay laan Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L) oo ku baraarujisay dadka siyaasad ayna Maamulka Maxmiyadda aad u jecleysan.

Goortuu Ingiriisku ka baxay qorshihiisii mideynta Soomaali Weyn, uu in mudda ahba watay, waxuu billaabay inuu dib u eego siyaasadiisii ku saabsanayd Geeska Afrika, gaar ahaan, arrinta Soomaali Weyn. Soomaalida gobollada Galbeed, goortay dareemeen isbeddelkaas siyaasadeed ee Ingiriisku ku dhaqaaqay, waxay billawday dhiillo ay ku diidan tahay in dalkooda lagu wareejiyo gumeysiga Xabashida. Inkastoo dadka gobolladaas degganaa dareenkooda siyaasi uu hooseeyay haddana baraarujintii Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed waxay kor u qaaday garaadkoodii siyaasadeed. Waxuu kolkii ugu horreeysay, dhaqdhaqaaqooda billawday sannadkii 1942kii, goortay Xabashidu u hollatay inay dadka magaalada Harar iyo Jigjiga canshuur ku soo rogto sannad kadibna madaxdii gobolladaas waxay dhambaal codsi ah u direen maamulkii ciidamada Ingiriiska oo ay ku codsanaayeen inaan dalkooda lagu wareejin maamulka gumeysiga Xabashida, haseyeeshee, Ingiriisku, isagoo fulinaya heshiisyo kala dhexeeyay Xabashida ee la sameeyay, sannadihii 1942kii iyo 19kii Diseembar 1944kii, ayuu ku wareejiyay gumeysiga Xabashida gobollada Soomaalida Galbeed. Goortuu Ingiriisku magaalada Jigjiga kaga dhawaaqay go'aankii wareejinta gobollada Soomaalida Galbeed waxaa durbadiiba magaalada ka aloosmay dagaal oo ay ku naf waayeen 25 Soomaali ah. Wareejiskii gobollada Soomaalida Galbeeed waxuu dhacay, 23kii Seteembar 1948kii, isagoo Ingiriisku la haray dhulka Hawdka iyo aagga loo baxshay kaydka (Reserved Area). Xabashidu waxay aad uga abdeysatay dagaalkuu gumesyiga Talyaaniga dalkeedu ku qabsaday oo ay ku heshay taageerada Ingiriiska ugu wareejiyay gobollada Galbeed ee dalka Soomaaliyeed aayan goortaas ka hor waligeed u talin, aqoonsiga qur ah oo ay haysatayna uu ahaa heshiisyadii, dhexmaray iyada iyo gumeysteyaashii Talyaaniga iyo Ingiriiska, 1897kii iyo 1908dii oo ay ku kala qaybsanayeen dalka Qaranka Soomaaliyeed.

Bishii Nofeembar 1954kii, Ingiriisku, goortuu ogaaday inay Maxmiyaddii Soomaalida Waqooyi farahiisa ka baxayso, ayuu gumeysiga Xabashida ku wareejiyay dhulkii lagu magacaabi jiray: "Hawdka iyo Aagga Kaydka ah" (Reserved Area) oo ahaa dhulkii daaqsiinta

xoola raacatada Soomaalida gobollada Waqooyi, isagoo cuskanaayo heshiis uu Xabashida la [123]galay, 19kii Diseembar 1944kii. Arrintaas waxay tagrifal ku ahayd heshiiskii uu horay ula galay jilibyadii Maxmiyadda Waqooyi oo ka reebayay inuu ku talabaxo dalkooda. Tagrifalkaas Soomaalidu meelay joogtaba, waxay ka sameeysay bannaanbaxyo oo ay ku muujinayso siday uga soo horjeeddo tillaabadaas tagrifalka ah uu Ingiriisku qaaday.

Goortay soo dhowaatay muddadii tobanka sano ahayd ee Talyaaniga Maamulka Wasaayadda loogu dhiibay dalka Soomaalida Koofureed oo gumeysan jiray, waxaa Ingiriisku lagamamaarmaan ku noqotay inuu wax ka qabto arrinta Maxmiyadiisa Soomaalida Waqooyi. Isla waagaa Maxmiyadda Ingiriiska Soomaalida Waqooyi waxay sameeynaysay tillaabooyin horukac ah ee ku saabsan dhanka siyaasadda gobannimadoonka ah. 9kii Febraayo 1958kii, Mr. Lennox Boyd ee ahaa Wasiiru Dawlaha Arrimaha Ingiriiska, ayaa Hargeysa ka caddeeyay arrinta soo socoto: "Ujeeddada xukuumadda Boqortooyada Britaaniya waxay tahay, dabaadiga 1960ka, inuu Golaha Latashiga Sharcidejinta gaaro aqlabiyad aan rasmi ahayn, sidoo kalana la habeeyo xukuumad ay xubnaha Golaha ka noqdaan Wasiirro". Sidaa daraadeed waxaa, dabaadigii 1960ka, Golaha Latashiga Sharcidejinta gaari doonaa aqlabiyadd, taasoo Soomaalidu u oggolaan doonto inay qabsato awoodda fulinta. Xukuumadda waxay kaloo tixgelin doontaa rabitaanka ay muujiyeen aqlabiyada Soomaalida inay xukuumadda Maxmiyadda la yeelato xiriir sokeeye gobolka Soomaalida ee maamusho Wasaayadda Talyaaniga. Isbeddelkaas dastuuriga ah uu ku dhawaaqay Wasiiru Dawlaha Britaaniya waxaa horay Golaha Latashiga Sharcidejinta ee Maxmiyadda hortiisa ka caddeeyay, xaakimkii Maxmiyadda Mr. Theoder Pike 12kii Nofeembar 1958kii, oo yiri:

b. "Waxuu Golaha Latashiga Sharcidejinta ee cusub ka koobnaan doonaa, guud ahaan, 13 xubnood oo la soo doortay iyo 3 xubnood oo rasmi ahayn uu xaakimka Maxmiyadda soo magacaabo".

t. "Sharci doorasho ee cusub oo lagu habeynayo Golaha Latashiga Sharcidejinta ayaa la sameeyn doonaa oo Golahu ka koobnaan doono xaakimka gobolka, gudoomiye, 3 xubnood aan rasmi ahayn oo la soo magacaabo, 17 xubnood oo rasmi ah iyo 16 xubnood aan rasmi ahayn oo 13 ka mid ah la soo doorto".

j. "Xubnaha aan rasmiga ahayn waxay ka imanayaan qaybaha kala duwan ee maamulka si ay taladooda uga dhiibtaan Golaha Fulinta".

Waxaa xusuus mudan in la ogaado taniyo goortii Golaha Latashiga Sharcidejinta laga aasaasay Maxmiyadda 1957kii, waxuu ka koobnaa 3 xubnood oo rasmi ahaan loo tilmaamay, 5 xubnood oo rasmi ahaan loo soo magacaabay iyo 6 xubnood aan magacaabid rasmi ahayn iyo intuu xaakimka Maxmiyadda doono. Doorashadii waxay dhacday, 27kii Maarso 1959kii, haseyeeshee, Xisbiga Qaranka Soomaaliyeed wuu diiday inuu ka qayb galo, isagoo sabab uga dhigay inay xubnaha golaha u badan yahiin xubnaha la soo magacaabay. Ka qaybgal la'aantaas

---

[124] Eeg lifaaqa "C iyo F" heshiisyadii ku saabsanaa (Hawd and Reserved Areas)

waxaa ka abdeystay xisbiga N.U.F. oo la aasaasay 1959kii barnaamijkiisuna ahaa in la soo celiyo dhulkii "Hawd iyo Aagga Kaydka ah" (Reserved Area) uu Ingiriisku gumeysiga Xabashida ku wareejiyay. Waxuu ka helay 7 kursi 13kii kursi ee lagu tartamaayay, kursi waxaa helay Ururkii Dhallinyarada Soomaaliyeed, 5 kursina waxaa helay dad raacsan Xisbiga Qaranka Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee, cadaadis siyaasadeed ee ka yimid axsaabta awgii xukuumadda Maxmiyadda waxay dib u habeysay qaab doorasho cusub, bishii Febraayo 1960kii oo ay ka dhigtay Golaha xubnihiisa 33 kursi ee la soo doorto.

17kii Febraayo 1960kii, waxaa xukumaddii Maxmiyadda ku dhawaaqday natiijadii doorashada oo u dhacday sida soo socoto:

1.	Somali National League	20 kursi
2.	Somali United Party	12 kursi
3.	National United Front	1 kursi

Ifafaalihii doorashadaas ka soo baxday waxay ahaayeen in saddexdii xisbiba, guud ahaan, ay codsadeen in Maxmiyadda isla goortiiba la siiyo gobannimadeeda iyo in la mideeyo gobollada Soomaaliyeed oo idil ay ka mid yahiin kuwa Xabashida iyo Kenya.

L - MADAXBANNAANIDA IYO MIDEYNTII LABADA GOBOL EE SOOMAALIYEED

Bishii Febraayo 1960kii, waxaa doorashadii ka dhacday Maxmiyaddii Soomaalida Waqooyi ka dhalatay Xukuumad Arrimaha Gudaha maamusha uu Wasiir Koowaad u yahay Muxamed Xaaji Ibraahim Cigaal waxaana dadweynaha ku kordhay rabitaankii mideynta labada gobol ee Soomaaliyeed, haseyeeshe, waxaa jiray aragtiyo kala duwan oo ay kala qabeen xisbiga S.N.L. iyo U.S.P. oo kolkaas Xukuumadda Arrimaha Gudaha dhismaheeda isku bahaystay oo ku saabsan goortii tillaabooyinka mideynta labada gobol la qaadi lahaa. Madaxa Xukuumadda Maamulka Gudaha iyo qaar xisbigiisa waxay qabeen midnimada labada gobol inaan la dedejin sababtoo ah in muddo loo baahan yahay oo laysugu soo dhoweeyo dheeliga u dhexeeyay horumarka guud iyo dhaqaalaha labada gobol, axsaabta kalena waxay qabeen haddii aan la dedejin mideynta oo ay dhibaatadu kordhi doonto si kol dambe loo mideeyo labada gobol, aragtidaasoo loo badnaa goortii dambena hirgashay.

6dii Abriile 1960kii, Golaha Latashiga Sharcidejinta Maxmiyadda waxuu go'aamiyay in degdeg loo helo gobannimo madaxbannaan si loola midoobo gobolka Soomaalida Koofureed. Dhanka kale, isla goortaa, waxaa Muqdisho ka socday shir oo ay ku kulmeen siyaasiinta Soomalida Maxmiyada iyo kuwii Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Qaramada Midoobay oo socday, 16kii taniyo 25kii Abriile oo ay ku furdaaminaayeen siday u midoobi lahaayeen labada gobol waxayna go'aamiyeen qoddobada soo socda:

b. Soomaalida Maxmiyadda Ingiriiska iyo Soomalida Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Q.M. waa inay noqdaan Jamhuuriyadda Midowday ee Soomaaliya, 1da Luulyo 1960, iyadoo la cuskanayo codka oggolaashaha labada Gole ee Sharcidejinta Qaranka;

t. Golaha Sharcidejinta Soomaalida Maamulka Wasaayada Talyaaniga ee Q.M. iyo Golaha Latashiga Sharcidejinta Soomaalida Maxmiyadda Ingiriiska waa inay kulmaan, 1da Luulyo, iyagoo matelaayo Golaha Sharcidejinta Qaranka;

j. Golaha Sharcidejinta Qaranka ee cusub waa inuu doortaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda mideysan;

x Axsaabta labada gobol awooddooda haya waa inay dhisaan Xukuumad isbaheysatay.

kh. Magaalamadaxda Jamhuuriyadda cusub waa inay noqotaa Muqdisho sidoo kalena noqoneysa Xarunta Golaha Sharcidejinta Qaranka iyo Xukuumaddaba;

d. Labada dal ee Soomalida Maxmiyadda Ingriiska iyo Soomaalida Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Q.M. waa inay noqdaan dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya loona qeybiyaa [126]sidded gobol

---

[126] Banaadir(Muqdishu), J/Sare(Baydhowa), J/Hoose(Kismayo), Hiiraan(Belet-weyne), W/Bari(Boosaaso), Togdheer(Burco), W/Galbeed(Hargeysa), Mudug (Gaalkacyo).

r. Guddiyo gaar ah waa inay ka soo taliyaan soona bandhigaan dhibaatooyinka ka dhasha mideynta maamulka, maaliyadda iyo qaanuunnada Qaranka;

s. Xukuumadda cusub waa inay raadisaa siday u qoran lahayd aqoonyahanno iyo farsameyaqaanno shisheeye ama weydiisataa Qaramada Midoobay aqoonyahannadaas, iyadoo ujeeddadu tahay sidii loo habeyn lahaa mideynta labada gobol ee Jamhuuriyadda ku midoobay;

sh. Ciidanka Qaranka ee cusubi waa inuu ka koobnaadaa isku darka ciidamada Soomaalida Maxmiyadda Ingiriiska (Somali Scouts) iyo Xoogga Dalka Soomaalida Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Q.M.

dh. Soomaalida Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Q.M. waa inay u soo dirtaa goobjooge shirka dastuuriga Soomaalida Maxmiyadda Ingriiska ee lagu qaban doono London, Bisha Maajo horraanteeda:

Shirkii dastuuriga ahaa ee lagu qabtay magaalada London, 2da taniyo 12kii bishii Maajo oo ay ku kulmeen ergadii Soomaalida Maxmiyadda iyo Ingiriiska waxaa lagu ansaxiyay in Soomaalida Maxmiyadda qaadato gobannimadeeda madaxbannaan, 26ka Juunyo 1960ka, si ay ula midowdo Soomaalida Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Q.M.oo iyaduna qaadanaysa gobonnimadeeda madaxbannaan, 1da Luulyo 1960.

Shirkii dastuuriga ahaa waxaa guddoominaayay Xoghayaha Xafiiska Gumeysiga, Mr. Macloed, waxaana ka soo qayb galay xaakimkii Maxmiyadda, Mr. Douglas Hall, dhanka Soomaalidana Wasiirkii Koowaad iyo saddex Wasiir oo la soo doortay oo ahaa: Muxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, Wasiirkii Koowaad, Axmed Xaaji Ducaale, Wasiirkii Arrimaha Deegaanka, Cali Garaad Jaamac, Wasiirkii Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta, Xaaji Ibraahim Nuur, Wasiirkii Arrimaha Bulshada.

5tii Maajo 1960, Mr. Macleod waxuu ku dhawaaqay in la ansaxiyay go'aankuu, 6dii Abriile, gaaray Golaha Latashiga Sharcidejinta Maxmiyadda oo ahaa inay Soomaalida Maxmiyadda qaadato gobannimadeda madaxbannaan, 26ka Juunyo 1960ka. 12kii Maajo, Mr. Macloed waxuu Aqalka Hoose ee Barlamaanka Ingiriiska hordhigay go'aankii ka soo baxay shirkii dastuuriga ahaa ee caddeeynayay, gaar ahaan, arrimaha soo socdo:

b. Mehradsiinta hawlwadeennada Ingiriiska oo ay wax ka taabaneyso mideeynta Soomaalida.

t. La haridda Maxmiyadda muddo lix bilood ah hawlwadeennada Ingiriiska qaarkood kadib hanashada gobannimada madaxbannaan.

j. La haridda saraakiisha ciidanka ingriiska ee ka hawlgeli doono "Somali Scouts".

x. Sameeynta Dastuur Dimuqraadi ah.

kh. In la habeeyo waddaniyadda cusub, iyadoo waddaniyaddii dadka Maxmiyadda Soomaalida oo ay horay u haysteen ugu egtahay, 26ka Juunyo 1960ka.

d. Siismo deeq maaliyad oo dhan Starliin 1,500,000 Jamhuuriyadda cusub oo barkeed lagu bixin doono qorshe kala duwan ee horumarineed. Isla maalintii Boqor Xayle Selasse waxuu u yeeray safaaradaha Ingiriiska, U.A.R. iyo Yuguslaafiya u fadhiyay Addis Ababa waxuuna u gudbiyay eed sheegasho ka soo horjeedo mideynta labada gobol ee Soomaalida waxuuna yiri: "Arrinta mideynta labada gobol ee Soomaalida waa mid bukta oo loola jeedo in wax lagu yeelo dalka Ethiopia qaarkii uuna isku hortaagi doono awooddiisoo idil". Doodaas waxay dabajoogtay mid ka horreeysay uu Mr. Macmillan ka caddeeyay Guriga Hoose ee Barlamaanka Ingiriiska, 11kii Abriile oo ahayd inay Xukuumadda Ingiriiska, si kastaba ha ahaatee, gacan ku siinayn sheegasho Soomaaliyeed ee ku saabsan Soomaalida Faransiiska, Kenya ama tan Xabashida.

26kii Juunyo 1960kii, waxaa Hargeysa lagu qabtay dabbaaldegii gobannimada madaxbannaan ee Maxmiyaddii Soomalida Waqooyi, halkaasoo lagu saaray Calankii Qaranka Soomaaliyeed laguna dejiyay kii gumeysigii Ingriiska. Dabbaaldeggaas waxaa lagu sagootiyay gumeysigii Ingriiska oo si aan la illoowi karin uga qayb galay kala qaybsigii Qaranka Soomaaliyeed waxuuna gabyaagii weynaa, Cabullaahi Suldaan " "Timacadde", u tiriyay gabayga hoos ku xusan ee tilmaamaayay dareenka dadweynaha Soomaaliyeed waxuuna yiri:

I

Anigoo sabi ahoo, sita leeb iyo qaanso,
Siigadoon isku aasiyo, sabta reer ka fogaaninow,
Lay aaminin soofkiyo, saacan maanta aan joogno,
Gabayga weygu sugnaaye, haddii aan sarsariibo,
Amba aan samaaseejiyo, ambaba aan sixi waayo,
Ambaba aan ka salguuro, ambaba laygu saluugo,
Soomaalida i maqleysaay, i su'aala ha dhowto,
Ilaahaan waxba seegine, suuradiisa Quraankiyo,
Sabaxooyin ku sheegayoow, Siciira iyo Niciima,
Rabigii kala seerayoow, goortay suurtu dhawaaqdo e,
La soo saaro makhluuqa, shaqiga iyo saciidka,
Maalintaad kala soocdo, dambigaanu sameynay,
Rabigayoow naga saamaxee.

II

Subcayay ka dugkeeyay, ka siddeetan sabaaneey,
Calankaannu sugeynaye, sahankiisa ahaynow,
Seerma weyda hillaacdayoow, sagal maanta daroorayoow,
Siigadii naga meyrayow, saq dhexaannu ahayne,
Kii soo saaray cadceedoow, samada kii u ekaaye,
Xiddigaha mid la siiyayoow, saaxirkii kala guurnaye
Sarreyoow ma nusqaamoow, aan siduu yahay eegno e,
Kaana siib kana saareey.

III

Saahidiinta Islaamka, subcisaa Jimcayaashiyo,
Sibyaanta iyo haweenka, calankay sahadsheenoow,
Cidina kaanay na siinine, saatir noogu yaboohayoow,
Saaxirkii kala guuraye, sarreeyoow ma nusqaamoow,
Aan siduu yahay eegno e, kaana siib kana saareey.

IV

Salaantii istiqlaalkoow, sadada kay ku xireydoow,
Seyruukhii Afrikaadoow, saaxirkii kal guurayee,
Sarreeyoow ma nusqaamoow, aan siduu yahay eegno e,
Kaana siib kana saareey.

V

Sanku leefle dhammaantii, khlaqiga kii u siinaaye,
Mid saxiib la ahayne, singil iska diidayoow,
Saaxirkii kala guuraye, sarreeyo ma nusqaamoow,
Aan siduu yahay eegno e, kaana siib kana saareey.

VI

Soomaalo is cunaysoo, saqda qaylo dhawaaqdiyo,
Sulub laysu cabaystiyo, hadba soof la xabaariyo,
Saraara dami wayday, siinleydiisuna na saaqday,
Kii sadqeeyay qabaa'le, isu saaray gacmahee,
Saf walaala ah ka yeelayoow, saaxirkii kala guuraye,
Sarreeyoow ma nusqaamoow, aan siduu yahay eegno e,
Kaana siib kana saareey.

VII

In sideyda tihiiniyo, in kalaanan saxeynine,
Soomaaloo calan taagta, saakaa noogu horreysoo,
Saddex wiik iyo maalmo, haddii aan soor cuni waayooy,
Safrad laygama yaabo, sarinameyso naftayda,
Sarreeyoow ma nusqaamoow, saaxirkii kala guuraye,
Aan siduu yahay eegno e, kaana siib kana saareey.

VIII

Nimankii na siraayay, waax waax noo kala saaftaye,
Solanaayay cadkeenniye, inakoo dhexda suunku,
Sabarkeena qarqooray, kii sadkeena cunaayay,
Sarartiisa ka muuqdaye, surwaalkii ka yaraadaye,
Daaro loo sibireeyay, sariira lagu seexdiyo,
Sabar suuf laga buuxshiyo, mid baabuurka sifeeyiyo,

Aay saarta carruurtiyo, sagal booy iyo kuukiyo,
Weliba seeska lahaaye, saabaanka u laabayoow,
Saaxirkii kala guuraye, sarreeyoow ma nusqaamoow,
Aan siduu yahay eegno e, kaana siib kana saar.

IX

Sowjarkaa hubka qaatay, intuu soorka ku taagay,
U diyaara salaantiyo, saraakiisha amreysay,
Sifihii isticmaarka, ka siyaadiya maanta,
Sibilkeena ag joogoow, sibirtiisa istaagoow,
Nin walba sididdeel, sara taaga gacmaha oo,
Sacabka isku garaacoo, nin walbow saddex goor,
Subxaanoow waa mahadaa dheh.

1da Luulyo 1960kii, Afar ayaamood kadib, goortay Maxmiyaddii Ingiriiska ee Soomaalida Waqooyi gobannimadeedii madaxbannaan qaadatay, waxaa dhalatay Jamhuuriyadda Soomaaliya ee Gobolka Koofureed uu Talyaaniga tobanka sano ku maamulayay Wasaayadda Qaramada Midoobay waxaana dabbaaldeggii dhalashada Jamhuuriyadda Koofureed iyo mideynta labada gobol ee lagu qabtay Muqdisho ka soo qaybgalay 70 dal. Wasiirkii Waxbarashada Talyaaniga, Singor Giuseppe Medici, waxuu goobtii dabbaaldegga ka akhriyay dhambaal u ka siday Madaxweynahii Talyaaniga, Singor Gronchi oo oranayey: "Waxaa ii sharaf ah inaan ku dhawaaqo in goortaan kadib uu Talyaanigu u aqoonsanayo Soomaaliya Qaran Gob ah oo madaxbannaan. Waxaan kaloo sugayaa inay Soomaaliya ku tashan karto wadaaynimada iyo taageerada Xukuumadda Talyaaniga iyo dadweynaheedaba". Sidoo kale Mr. John Profumo oo ahaa ergeyga rasmiga ah ee Boqortooyada Britaaniya, ayaa isaguna akhriyay dhambaal uu ka siday Boqoradda oo loogu talagalay, 26ka Juunyo oo oranayay: "Aniga, Xukuumadeyda iyo dadweynaha Biritaaniyada Weyn waxaan kal iyo laab idiinku rajeyneynaa rayrayn iyo barwaaqo maalinta weyn ee gobannimadiina madaxbannaan. Xiriirka labadeena dal u dhexeeyay waxuu soo jiray 130 sano waxaana horay u eegaynaa xiriirka labadeena dal u dhexeeyaa inuu waaro". Fadhi aan caadi ahayn oo isla maalintaa loo qabtay ayna ku kulmeen labada Gole ee Sharcidejinta waxaa lagu dhawaaqay Gobolada Waqooyi iyo Koofur inay ku midoobeen Jamhuuriyadda Soomaaliya waxaana loo doortay Madaxweyne ku meelgaar ah Adan Cabdulle Cusmaan oo ahaa guddoomiyaha Golaha Sharcidejinta Qaranka ee Gobollada Maamulka Wasaayadda Talyaaniga. Madaxweynaha cusub doorashadiisa waxaa oggolaaday 107 cod fadhigaas oo ka koobnaa 114 xubnood waxaana loo doortay in si ku meel gaar ah u hoggaamiyo Jamhuuriyadda mideysan ee Soomaaliya muddo hal sano ah. Golahu waxuu kaloo oggolaaday mashruuc [127]Dastuur cusub oo badidiisa laga soo miinguuriyay Dastuurka Talyaaniga, in loo qaado afti oo ay ku ansixinaayaan dadweynaha sannad gudahiisa. Dastuurka qodobkiisa koowaad faqradahiisa koowaad & labaad waxay u qoran yahiin sida soo socota:

[127] Eeg lifaaqa K Dastuurkii ugu horreeyay Jamhuuriyadda Soomaaliya.

1. Soomaaliya waa dawlad gobannimadeeda buuxda. Waa Jamhuuriyad mideysan oo Dimuqraadiyad matalid ku salaysan ee madaxbannaan. Dadweynaha Soomaaliyeed waa mid aan qaybsamin.

2. Gobannimada waxaa leh dadweynaha waxuuna ugu dhaqmaa si waafaqsan Dastuurka iyo Sharuucda. Ma jirto qayb dadweynaha ka mid ah ama qof gaar ahaan ugu doodi karta gobannimada ama la wareegi karta maamulkeeda.

Labadii Wasiir Koowaad, Cabdullaahi Ciise Maxamuud iyo Muxamed Xaaji Ibraahim Cigaal waxay sii hayeen jagadoodii intii madaxweynaha cusub uu ka magacaabay Dr. Cabdirashid Cali Sharmaarke oo soo dhisay Xukuumad ka kooban 14 Wasiir uu Cabdi Xasan Buuni u yahay ku/Xigeenka Wasiirka Koowaad. Labadii Gole ee Sharcidejinta oo ka koobnaa 33 xubnood gobollada Waqooyi iyo 90 xubnood gobollada Koofureed waxay noqdeen Golaha Sharcidejinta Qaranka waxaana Guddoomiyaha Golahaas loo doortay Jaamac Cabdullaahi Qaalib. Xukuumadda cusub waxay durbadiiba la kulantay dhibaatooyin laga dhaxlay labadii gumeysi ee muddada badan dalka maamulayay iyo baahi dhaqaale. Inkastoo Maamulkii Wasaayadda Q.M. gaarsiiyay horukac siyaasadeed iyo mid maamulba, haseyeeshee, mideynta labada gobol dhaqaale ahaan isma bixin karin. Waxuu kaloo Qaranka cusub dhaxlay dhibaatooyin ku saabsan gobollada Soomaliyeed ee weli ku hoos jiray gumeysiga dalalka shisheeye oo ay ka mid yahiin Soomaali Galbeed, Waasow ama N.F.D., iyo Xeebta Soomaalida Faransiiska gumeysto. Iyadoo arrinta ka dhexeeysay Soomaaliya iyo gumeysiga Xabashida uu xil ka saarnaa Q.M. ayuu ka codsaday 1958kii, Boqorka Norway inuu u xilsaaro dhexdhexaadinta arrintaas Mr. Trygve Lee oo warbixin uu soo qoray ku taliyay in arrintaas loo dhiso maxkamad dhexdhexaadisa oo ay xubno ka yahiin Finland, Switzerland iyo Yuguslaafiya oo ay. awooddeeda ku murmeen Soomaalida iyo gumeysiga Xabashida. Arrimahaasoo idil, iyagoo weli laallan aan wax laga qaban, ayay dhalatay Jamhuuriyadda Soomaaliya dhaxashayna dhibaatooyinkii gumeysiga dhaliyay oo doc kastaba lahaa.

Sannadkii 1961kii, waxaa soo ifbaxay inuu dadweynaha woqooyi ku andacoodo inay koofurtu duudsisay dawgoodii siyaasadeed, dhaqaale iyo bulshaba oo ay dabadeed koox saraakisha ciidanka woqooyi uu hoggaaminaayay Dhamme Xasan Keyd Cabdulle, isku deyday inay sameeyaan faldambiyeed oo ay ku kala gooynayeen labada gobol, haseyeeshee aan u fulin. Goortii saraakiishaas lagu soo oogay eedeynta falkooda waxaa sharcigii ciqaabta woqooyi laga waayay qodobbo lagu eedeeyo. Sidaa daraadeed Golaha Sharcidejinta Qaranka waxuu Xukuumadda siiyay awood lagu mideynayay sharuucda ciqaabta dalka oo dabadeed magacaawday sharciyaqaanno fuliyo oo ka kooban:

1. Sharciyaqaan Papale - Talyaani
2. Sharciyaqaan Angeloni - Talyaani
3. Sharciyaqaan Contini - Mareykan
4. Sharciyaqaan Yusuf Dhuxul - Soomaali
5. G/Sare Muxamad Ibrahim Muxamad

Gudd. Maxkamadda Sare - Ku-xigeenka Taliyaha Ciidanka Booliska

Isla sannadkaas dadweynaha Woqooyi si wacan ugama qeybgelin aftidii lagu ansixinayay dastuurkii ugu horreeyay Jamhuuriyadda Somaalida mideysan, taasoo ay ku muujinayeen inayna raalli ka ahayn mideynta labad gobol.

M - BUUGGAGTA RAADREEBKA AH

Al Yaaquubi	Al Buldaan, 890-893
Al Yaaquut	Al Mujmac, 1224
Ibna Batuuta	Al Rixla, 1331
Shihaab Al-Diin	Fatuh Al-Habash (The Conquest of Abyssinia) 1540
Burton, R.F.	First Footsteps in East Africa, 1856
James, F.L.	The Uknown Horn Of Africa 1888
Drake-Brockman, R.E.	British Somaliland, 1912
Hippolus	The Periplus Of The Erithrean Sea (Translated by W.H. Shoff), 1921
Jardine, D.	The Mad Mullah Of Somaliland, 1923
Ministero della Guerra	Somalia Vol. I, 1938
Italiana	Somalia Vol. II, 1960
Trimingham, J.S.	Islam In Ethiopia, 1952
Trimingham, J.S.	Islam In East Africa, 1969
Coupland, R.	East Africa And It's Invaders, 1956

Cerruli, E.	Peoples Of South Africa/West Ethiopia (Translated 1956, Rome)
	Somalia (Scritti vari editi ed endediti) 1957
	Suldanato dello Shoa nel secolo XIII, 1941
Lewis, I.M.	A Pastoral Democracy, 1961
	The Modern History Of Somaliland, 1956
Greenfield, R.	Ethiopia, (A New Political History), 1956
Earl of Lytton	The Stolen Desert, 1966
Brodie, Fawn F.	The Devil Drives, 1967
Drysdale, J.	The Somali Despute, 1969
Information Service The Somali Goverment	The Somali Peninsula, 1962
Robecchi, Bricchetti, L.	Nel Pease Degli Aromi, Milano 1903
Breasted, J.H.	Egypt Through The Stereoscopes. Anceint Record Of Egypt Vol 2, Chicago 1909
Hess, Robert L.	Italian Colonialism In Somalia, 1966
Fabio Grassi	Le Origini dell'Imperialismo Itaiano Il Caso Somalo, 1980
Corrado Zoli	Oltre Giuba, 1927

Gianluigi Rossi	L'Africa Italiano Verso L'Indipendenza, (1941-1949) 1980
Ravenstein, E.G.	Somal And Gallaland, London 1884
Cox P.Z. And Abud H.M.	Genealogies Of The Somali Including Those Of The Aysa And Gedabursi, 1896
Carselli, F.S.	Ferro E Fuoco In Somalia Roma, 1931
Elliott, F.	Jubaland And It's Inhabitants, London 1913
J.D. Clark	The prehistoric Culture Of The Horn Of Africa, Cambrige 1954
Dr. Edoardo Mayer	Storia dell'antico Egito, Vol I. 1973
Angelo del Boca	Gli Italiana In Africa Orientale:
Angelo del Boca	Dall'Unita alla marcia su Roma; Vol. I, 1976
	La Conquista dell'Impero Vol. II, 1986
	La Caduta dell'Ipero Vol. III, 1982
	Nostalgia delle Colonie Vol. IV, 1984.

N - LIFAAQYADA

LIFAAQA "B"

Heshiis magengeliyo oo ka mid ah kuwa dhexmaray Jilibyada Soomaalida Waqooyi iyo Xukuumadda Boqortooyada Britaaniya, 1884-85

Annagoo ah odayaasha hoos ku saxiixan (oo jilib ahaan halkan ugu xusan), waxaan go'aansanay inaan heshiis la galno Xukuumadda Boqortooyada Britaaniya si aannu u sugno madaxbannaanidayada, u ilaalino hannaanka iyo sababo kaloo qaayo leh awgood.

Haddaba waxa halkan lagu heshiiyay layskuna afgartay sida soo socota:-

Qodobka I

(Jilibka halkan ku xusan) waxuu halkan ku caddeynayaa inuu ballanqaadayo ayna hawaan ku tahay inuu weligiis bixin, iibin, curaarin ama haddii kale siinin cid kaloo qabsata, ayna u dhawraan Xukuumadda Boqortooyada Britaaniya qayb kasta oo ka mid ah degaanka ay hadda deggan yahiin ama hoos yimaada awooddiisa.

Qodobka II

Dhammaan maraakiibta ku doolaalaysa calanka Boqortooyada Britaaniya waxay oggolaansho buuxdo u haystaan inay ka ganacsadaan dekedaha iyo meelaha kale ee ku dhexyaalla degaanka (Jilibka halkan ku xusan) oo dhan.

Qodobka III

Dhammaan dadka dhalashada Boqortooyada Britaaniya haysta ee deggan ama booqanaya degaanka (Jilibka halkan ku xusan) waa inay helaan badbaado iyo nabadgelyo dhab ah waana inay daw u yeeshaan inay ku socdaalaan degaanka aynu soo sheegnay oo idil oo hoos imanaya badbaadada odoyaasha Jilibka.

Qodobka IV

Dhaqdhaqaaqyada saameeya addoomanka ee degaanka (Jilibka halkan ku xusan) oo idil, waa in la joojiyaa si waaratiin ah, taliye, kastoo ka mid ah maraakiibta Boqoradda ama sarkaal

kaloo Britaaniya ah oo u xilsaaran waa inuu yeeshaa awoodduu uga baahan karo in addoon kasta loogu dhiibo iyo inuu adeegsado xoog hubeysan oo dhul, bad iyo cirba ah, haddii loo baahdo.

Qodobka V

Xukuumadda Boqortooyada Britaaniya waa inay yeelataa awoodda ay ku magacaabato ergey, si uu u dego degaanka (Jilibka halkan ku xusan) iyo in ergey kastoo jaadkaas ah loola dhaqmo si muuno iyo tixgelin leh iyo inuu daw u yeesho inuu helo ilaalintiisa oo noqoto mid ay Xukuumadda Boqortooyada Britaaniya u aragto inuu ku filan yahay sugidda nabadgelyadiisa.

Heshiiska kor ku qoran waxuu dhaqangelayaa awood ahaana u soconayaa, waxii ka bilawdo maalinta la saxiixo.

Astaanta gabaggabada ee Sharcigan iyo muunada (magacyada odoyaasha waa in halkan lagu muujiyaa).

iyo

(magaca kaaliyaha ergeyga siyaasadda, waa in halkan lagu xusaa iyadoo ay weheliyaan markhaatiyo) iyo kuwii beddelaba, iyagoo metelya Xukuumada Boqortooyada Britaaniya, waa in iyagoo markhaatiyo la joogaan ay saxiixaan kuna muujiyaan astaantooda iyo shaabadooda (meesha loogu talagelay) (Taariikhda halkan lagu xusaa).

(Magacyada odoyaasha halkan ha lagu muujiyo).

(Waxa saxiixay) G/le F.M. Hunter
Ergeyga Siyaasadda, Xeebta Soomaaliyeed.

Heshiis Kaabe Guud oo dhexmaray Xukuumadda Britaaniya iyo Jilibyo Soomaaliyeed

(Jilibka halkan ku xusan)

Xukuumadda Britaaniya iyo odoyaasha (Jilibka halkan ku xusan) ee saxiixay heshiiska waxay go'aansadeen inay sugaan oo adkeeyaan xiriirada saxiibtinimo iyo nabadgelyo ee ka dhexeeya.

Xukuumadda Britaaniya waxay u magacawday Gaashaanle Frederik Mercer Hunter inuu noqdo ergeyga siyaasadeed ee xeebta Soomaaliyeed si uu u soo gebaggebeeyo heshiiska ujeedatan.

Gashaanlaha aynu soo sheegnay ee F.M. Hunter iyo odoyaasha oo ah Habargarxajis waxay isku raaceen go'aanna ka wada gaareen qodobada soo socda:-

Qodobka I

Xukuumadda Britaaniya iyadoo raacaysa rabitaanka odoyaasha hoos ku saxiixan ee (Jilibka halkan ku xusan) waxay halkan ku ballanqaadeysaa inay u fidiso iyaga iyo degaanka awooddooda iyo xeerarkooda hoos yimaadada samafalka iyo maganta Boqoradda.

Qodobka II

Odoyaasha aynu soo sheegnay ee (Jilibka hoos ku xusan) waxay oggolaadeen ballanna ku qaadeen inaanay wax xiriir ah la yeelan ama heshiis la gelin dawlad shisheeya ah ama awood kale, iyada oo ay ogtahay oggolaato xukuumadda Boqoradda mooyee.

Qodobka III

Heshiiskani waxuu dhaqan gelayaa maalinta ugu horreeysa ee Febraayo sannadka kun siddeed boqol siddeetan iyo lixda.

(Magacyada odoyaasha halkan ha lagu muujiyo).

(Waxa saxiixay) G/le F.M. Hunter
Ergeyga Siyaasadda, Xeebta Soomaaliyeed.

LIFAAQA "T"

Warbixintii Cecchi uu u diray Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Talyaaniga Agoosto, 1892

Mudane, haddii aad iweydiisay aragtida aan ka qabo tixgelinta iyo sababta aan kagala wareegnay Suldaanka Sanjibaar dekedaha Banaadir heshiiskii, 12 Agoosto 1892, waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa dhawr aragtiyood oo ku saabsan aqoonta aan gobolladan u leeyahay. Taariikhda xeebah Banaadir waxay innaga inoo billaabatay 1885kii, waxayna, gebi ahaanba, la xariirtaa qabsashadeenii Masawac, taasoo ahayd kaabe qaaya u leh barnaamijka Guntayada laga billaabo Masawac taniyo iskudarka webiga Jubba iyo Badweynta Hindiya, oo maanta qayb ahaan hirgalay. Run ahaan waxaa mahadaas leh, habka aynu wadahadallada heshiisyada u galnay, iyo tabta dhiraandhirinta qunyar socodka ah ay dawladdu adeegsatay. Qaabka xulashada ee xeebahan Geeska Afrika uu garwadeenka iigu ahaa A. Barbarigo, inkastoo ugu horreentii aannu dhibaato kala kulanay hanashadii Guntayada, haddana kolkiiba wey isbeddeshay, waxaana dhihi karaa inay fududeeyeen ilaysna noo bixiyeen sahannadii ay ku sameeyeen sahamiyeyaasheenii qayb ka mid ah degaankaas, taasoo aad iigu raaligelisay lagamamaarmaannimada iyo qummanaanta waxqabadkeena halkan.

Kolkaan intaa ku hormariyo waxaan Mudane, hadda u soo gondadegayaa, weydiintaadii si aan faahfaahin dheeri ah kaaga siiyo, warbixinteyduna waa sidatan:- "Inkastoo maalgelin sannadeedka 300,000 liire oo ay sii yaraanayso kolkii loo eego qandaraaska, 25ka sannadood ah, haddana waxtar ayuu inoo leeyahay degaankani, waxtarkaas hadda iyo timaaddada, aynnu ka heleyno ganacsiga degaannada waxuu dhowaan, si la taaban karo, uga muuqandoonaa dalka Talyaaniga. Ganacsiga Banaadir waxuu aad uga muuqda siday dad badani u taageersan yahiin helitaanka Guntaan cusub, kamana taariikh dhowa ganacsigii Hindida, Carabta, Ethiopia iyo Masaarida. Xeebta maanta loo yaqaan Banaadir, ganacsi ahaan, waxay ka mid tahay dekedaha aad loo qadariyo ee Geeska Afrika. Qaybo badan oo ka mid ah tacabsoosaarkii Azaaniyiintii hore ayay magaalada Muqdisho xarun u tahay, dadka qaarkiina waxay ku tilmaamaan inay Muqdisho xarun u tahay ganacsiga furan, laga soo billaabo Os-Balaros taniyo Baraawe.

Webi Shabeelle oo Muqdisho agteeda mara oo ay soo maraan miraha hodanka ah ee dhulka gudaha dalka, waxa aad ugu hawlan ganacsigooda dad Carab ah oo la yiraahdo "El-Muqadas". Degaanka ballaaran ee Talyaaniga hoos yimaada waxuu ku hakadaa xeeb dhererkeedu yahay taniyo 1800 km. Waxuuna ku yaallaa dhul cimiladiisu wanaagsan tahay oo hodan ku ah waxyaabo farabadan, sida fool maroodiga, xabkaha, geedaha uunsiga, baalka gorayada, cudbiga iyo tubaakada, iyadoo siyaabo kala duwan looga soo saaaro mid kasta oo ka mid ah afarta degmo ee Banaadir:- Baraawe, Marka, Muqdisho iyo Warsheekh.

Taniyo sannado dhow ka hor, intii aannu cudurka dabaruubka saamayn degmooyinka oo dhan, lo'du aad ayay ugu badnayd, ganacsiga Banaadirna waxuu ka heli jiray subagga iyo alaabta hargaha laga sameeyo. Dhaqdhaqaaqa ganacsiga ee xeebtu, dhawr sano ka hor, waxuu gaaray taniyo 8 milyan oo Liire. Iyadoo weliba ay jiraan dhibaatooyin fara badan oo ay ka mid yahiin dhaqan qallafsanaanta dadka degaanka iyo isgaarsiin xumo. Si aan u adkeeyo aragtida habboon ee aan weligayba ka qabay timaaddada gobolka, waxaan si joogto ah ugu baaqayaa aragtiyadii ay qabeen sahamiyeyaasheenii. Weliba waxaan ku ekeynayaa naftayda inaan xusuusto kuwii ugu caansanaa sida X/le Christopher, taliyihii ciidan badeedka Faransiiska Guillein, Aabbe Leon des

Avancheres, Baron von der Deken, G/le Sare Chaille-Long iyo weliba kuweenii Talyaaniga ahaa ay ugu dambeeyeen Filonardi, Robecchi, Ferrandi, Ruspoli iyo weliba taliyihii geesiga ahaa ee Sorrentino. Dhammaan sahamiyeyaashaasi waxay ka qoreen warbixino yididiilo wanaagsan qiimaha iyo timaadadda degaankaas.

Kolkaan si gaar ah uga hadlo ganacsiga dhulka Ogaadeen, waxaan u arkaa inuu yahay gobolka ugu dhow khooriga Cadmeed, dekedaha Banaadina way ka waxtar yar yahiin dekedaha Berbera iyo Bulaxaar oo ah kuwa dabiici ah. Kolkaa beddelkooda waxaynu ribax badan ka heli karnaa gudaha dhulka Soomaalida, ganacsiga Koofurta Ethiopia iyo Galla-Sidaamo oo ka billaabma xariiqa 8aad, kolkaad ka eegto maraakiibta xeebteena soo gasha aanay cidi inagu ciriirinayn, ugu yaraan, waxay la tartami karaan dekedaha kale ee Waqooyiga. Kol haddii sayladaheenu keenayaan alaab ay farsameeyeen dadka dhulka u dhashay, meel kasta waxaynu u helaynaa wakiillo innaga ah, kuwaasoo ganacsigeena ka dhigi kara mid fudud oo aan dhib lahayn. Muddo badan ma qaadanayso sida waddo cusub oo isgaarsiin ah loogu furo gudaha dalka. Si aynu uga baxsano ganacsiga u xakamaysan Beniyaanka una raadsanno ganacsi furan oo madaxbannaan, sida kan aynu ku haysano Seylac iyo Berbera. Socdaallada awrta ee xeebta la marinayo weynu adeegsan karnaa, haddii loo baahdo, inkastoo socdaalku muddo dheer qaadanayo uu u baahanayo magdhow la xariira dhibaatooyinka la marayo iyo waqtiga socodka ku lumaya.

Ilbaxnimada had iyo jeer waxay hormuud u tahay guusha, gaar ahaan, goorta Afrika laga hadlayo, waa inaad heshaa kaaliye muhiim ah, sida webiga. Arrintan waxaan u soo xiganayaa Silva White, goortuu ka hadlaayay timaaddada Afrika, waxuu yiri: "Habka ugu fudud gaadiidka aad qaybaha gobolka gudaha uga imaanayso ee aad ku soo gaarayso xeebta ayaa saldhig u ah horumarka gobol aan weli la sahamin", isagoo hadalkiisa sii watay waxuu yiri: "Qaayaha gobolkan oo kale waxay aad u weynaanaysaa hadduu leeyahay webi maridiisa lagu doolaali karo, kaasoo awoodda ilbaxa ahi ka heli karto ribax farabadan".

Innaga arrinteena, gobolka ina saameeyaa waxuu leeyahay laba webi oo murti wax ku ool ah leh: Jubba iyo Shabeelle oo labaduba maridooda lagu doolaali karo qayb dheer oo ka mid ah. Webiyada had iyo jeer waxay ahaayeen astaanta ugu filweyn ee jidka ay dadku adeegsadaan. Waxay jid u fureen oo adeegsaday Thermoforouskii wax qabsanayay, wadaadadii Masiixiyiinta ahaa iyo ganacsatada.

Waa gobol aan gebigiisa wada qalalnayn, hasayeeshee tacabsoosaarka ku filnayn oo teelteel ku yahay, sababna ay u tahay roob yaraan, ama roobku si isku mid ah ugu qaybsanayn daawyada. Webiga waxuu ka soo askumaa gobollada buuraleyda ah, halkaasoo uu ku badan yahay roobku. Ma jiro meel, Afrika iska dhaafee, adduunka oo dhan aan ka faa'iidaysan waraab ku meel gaarka ah, iyagoo u dooraya miraha ku habboon hadba iyo goorta la joogo. Haseyeeshee, waxaa aad loo ogyahay oo joogto ah kaalinta ay biyamareenada webiyadu ka qaateen ilbaxnimada Aadanaha.

Sida aan horay u soo sheegnay, tani ma fureyso isgaarsiin keliya, haseyeeshee waxay abuuraysaa jidad halbowlayaal oo dabiici ah, ay fudud tahay, hantida ku baxaysana ay yar tahay. Innaga oo ogsoon in ku doolaalida marinka webiga Jubba aanay dhaafsiisnayn waxii ka sarreeya Baardheere, tan Shabeellana ay ku egtahay Iimey, haddana waxaan si sahlan u soo ururin karnaa miraha ka soo baxa degaannadaas oo dhan. Innagoo kolka hore ka billaabeena tacabsoosaarka hodanka ah ee Kaffa, Borana iyo Galla, kadibna higsanayna Ogaden iyo Caruusada Gaallaha ah. Socdaallada waxay had iyo jeer helayaan waddo toos ah oo fudud, iyagoo uga soo daadegaya

buuraha Ethiopia ee dhinaceenna, intii ay sameeyn lahaayeen socod dheer oo ka soo billawda dhinaca Shawa si ay u soo gaaraan jidka xeebta ee Harar taniyo Seylac. Si kastaba ha ahaatee, qaabka isgaarsiineed ee aynu ka adeegsanaynaa, waxuu u baahan yahay warbixin intan ka faahfaahsan, intii aynu ku ekaan lahayn waddooyinkaan socdaalka billawga ah ee aan soo sheegnay. Alaaba kolka Afrika laga hadlaayo, sababaha joqraafi iyo kuwa tobograafiyeed, ma dabraan dhaqaalaha. Sidaa darteed ganacsiga iyo dhaqdhaqaaqa rarkeena waxuu ku xiran yahay hadba sida looga hawlgalo gobollada, tirada dadka iyo kala fogaanshaha degmooyinka. Haddaba haddii si dhaqso ah loo diyaariyo waddooyin cusub oo masaafadoodu la yaqaano, waxaan muran ku jirin inay fududaynayaan xawliga socodsiinta ganacsiga. Haseyeeshee, waxaa doqonniimo weyn inoo ah inaynu ku talagalno uun arrimaha waddooyinka degaankeenna oo aynu sugno uun taniyo inta tacabsoosaarka ka soo gaarayo dekadaheenna. Innagu ma aha inaynu oggolaano uun arrimaha dabiiciga ah ee wanaagsan, haseyeeshee, waa inaynu aad uga shaqeynaa sidii aynu arrimahaas u sii hagaajin lahayn, u furi lahayn jidad cusub oo dhinaceenna ah, isuguna dayi lahayn waddo kasta oo aynu taagteen isugu xiri lahayn ganacsiga iyo shirkaddaha doola.

Sababo badan ayaa ii geeyay inaan dawladda Talyaaniga kula taliyo in ay maxmiyadeeda ku fidiso taniyo xeebta Banaadir, isla goortaasna ay kordhiso aasaaska shirkado ganacsi oo waaweyn oo Talyaani ah. Sababahaas waxaa ka mid ah, aniga oo ku qanacsan in Talyaaniga xarumahaas ku maamuli doono dhammaan ama qayb weyn oo ka mid ah dhaqdhaqaaqa ganacsi ee Sidaamo iyo Gaalla. Haddii aan ku daro, horumarkaa ganacsi waxuu raad xoog leh ku yeelanayaa kaalinteenna siyaasadeed ee Koofurta Ethiopia iyo kordhinta ganacsiga ee sayladahaas.

Haddaba ujeeddadaa awgeed, dhammaan dadka Talyaaniga waa inay xoogooda isugu geeyaan sidii ay u hanan lahaayeen dhulkaas. Run ahaantii ganacsiga aynu hadda ka hadlayno waxuu leeyahay miisaan weyn, haseyeeshee, sida dadka qaarkii rabaan ma dabooli karo in badan ee tacabsoosaar ah si wershadeheena u kordhaan. Sababtoo ah waxaa inooga horreeyay dawladdo kale oo darbistay sayladaha xeebta Afrika.

Haddii cid diidan tahay degaanka aan ka hadleynaa inaanu ku habboonayn, kolka xagga tacabsoosaarka laga hadlayo, sida qof waliba rumeysan yahay iyo in dadku ku yar yahay oo aanay u darbanayn inay daboolaan qayb weyn oo ka mid ah baahideenna wax dhoofineed ama aanay kaalin mug leh ka qaadan karin iibsiga tacabsoosaarka warshadaheena. Waxaan ugu warcelinayaa, anigoo aan ka badbadinayn, in qof kasta oo doonaya inuu wax ka ogaado tacabsoosaarka degaankan (waxaan u jeedaa Kaffa iyo degaannada la dariska ah) waa inuu halkan ku noolaadaa sidaan aniguba yeelay, kolkaas uun buu rumeysan karaa sida ganacsigeenu ku taaba galay.

Dadka Islaamka ee Soomaalida xeebta Banaadir, inkastoo, goor ka goor, ay yahiin dad u janjeera dagaal iyo dhiig ku aarsasho, haddana layskama indhatiri karo inay ku hawaansan yihiin xiriirkeenna iyo megangelinteena, sida qolooyinka aan ka dhibka yareen ee deggan Khooriga Cadmeed ay yeeleen durbadiiba goortay runsadeen dantooda iyo abdadooda. Taniyo haatan waddada Webi Shabeelle iyo kan Jubba, iyadoo aan ku mahadinaayo socdaaladii sahanka wanaagsan oo ay dadkeenna sugeen, ayay, in yar in yar, dhibaatadooda ku soo yaraanaysaa maskaxdii wareersanayd ee dadka degganina uu ku hawlanyahay horumarinta aayahooda, iyagoo aad u rumeysan inuu aayahooda ku xiran yahay tan ninka cad. Feejignaanta dadka cad waxay ku jahaysan tahay sidii dadka degaanka looga nabadgelin lahaa hagardaamada Xabashida iyo sidii Carabta addoomada ka ganacsata looga badbaadin lahaa.

Faahfaahintaa aan bixiyay ma noqonayso mid aan waxtar lahayn, haddii ay ku filan tahay, Mudane, ka dhaadhicintaada in degmada ballaaran oo hoos timaada Talyaaniga ay si walba u leedahay, la hubo suurogalinta barwaaqada timaaddada iyo in maalgelinta 300,000 oo liire ah ay codsatay shirkadda Filonardi aan hubo in magdhow iyo waxtar weynba u yeelanayso u furidda dhaqdhaqaaqa ganacsi ee Talyaaniga degaannadaa hodanka ah.

Mudane, haddii aan u gudbo weydiintaadii labaad ee aad ii soo jeedisay ee ahayd "In qorshaha heshiis ee ay soo gudbisay shirkadda V. Filonardi uu u baahan yahay wax ka beddel ama kordhin", waxaan si daacad ah uga jawaabayaa heshiiska ay soo gudbisay shirkadda V. Filonardi, muddada saddexda sano ahayd ee sharribaada ah ay tahay mid maangal ah oo sax ah. Sidaa darteed waxay aniga iigu muuqataa iyadoo ay tahay shaqo hawl badan, isla kolkaana ay magac iyo muuno u soo jiidayso Talyaaniga, in aanay dawladda Talyaanigu ka leexleexan sidii dhaqso ugu soo gudbin lahayd misaaniyadda yar ee 300,000 oo Lire ee sannadlaha ah. Waxaa loo adeegsanayaa degaanka ballaaran dhulka Talyaaniga laftiisa. Haseyeeshee, ujeeddada ugu weyn ee dalwaddu ugu xisaabtamayso in ay aqbasho heshiiska kor ku xusan, waa inay noqotaa kor u qaadidda iyo horumarinta ganacsiga.

Dhammaan qodobada kale ee heshiisku xusayaa, waxay aniga ila tahay inay yahiin hawlo shirkadda aynu soo magacawnay ay kor ka ilaalinayso; maha inay ahaato ilbixiye nabadgelyo badan. Ujeedadaas oo ah mid dadka dhulka deggan u darbinaysa waxtar iyo abdo ee aanay noqon mid doc walba ka baabinaysa laga billaabo xagga diintooda, dawga qoyska iyo qofka taniyo hantidooda gaar ahaaneed iyo ganacsigoodaba.

Hadda way innagu filan tahay, waynu dhex gelnay waxaanay noqonaysaa gef weyn haddii aynu ka guurno degaanka oo aynu ka laalaabano. Yaa sheegi kara maanta kaalinta dhaqdhaqaaqa siyaasadeed iyo dhaqaale ee Yurub ku leeyahay Afrika. Waa arrin qaaya leh, weliba saami aynu, siday doontaba ha ahaatee, ku leenahay, sidaa daraadeed waa inaynu ku noolaanaa dawga aynu u leenahay inaan muujino miisaankeena. Goortaan la joogo, awoodda iyo baaxadda dawladdeed waxay ku xiran tahay murtida iyo tirada ilaha ganacsi ay leedahay. Qabashada dekedaha ganacsi ee suuqyada cusub waa timaaddada ummadda waxayna ka muhiimsan tahay guul siyaasadeed oo aad hub ku gaartid.

Waxaa jira dad fara badan oo ujeeddooyin iyo dano kala duwan leh, sidaa darteed waa inaynu Ethiopia kaalinteena ka adkeynaa waxaana lagamamaarmaan ah inay dawladdu ka feejignaato raadisana dhabba kasta oo lagu horjoogsan karo in ciddii inagu dayato oo inagaga daba timaado howsha aynu dhulka ka hayno.

Waxaa Saxiixay
Antonia Cecchi

LIFAAQA "J"

Heshiis magengeliyo oo dhexmaray Xukuumadda Talyaaniga, Suldaanka Majeerteen iyo kan Hobyo ee ka dhacay Bendar Caluula Abriil 7, 1889

Maalinta 6aad ee bisha Shacbaan 1306 lana gudboon Abriil 7, 1889:

Annaga, Suldaan Cusmaan Maxamuud Yuusuf, Suldaanka Majeerteen oo dhan ayaa waxaan rabitaankayaga ugu galay heshiisakan una saaray suulkayga iyo shaabaddayda.

Waxaan dadkayga iyo dhammaan hantidayda laga soo billaabo Raas Cawad taniyo Raas Al-Keyle hoos geeyay ilaalinta Taalyaaniga iyo Xukuumadda Boqorka Talyaaniga Sarreeye Umberto I, annagoo heshiis la galnay ergeyga Sarreeye Boqorka Vicenso Filonardi, qunsulka Talyaaniga ee Sanjibaar, Dhamme Morreti, taliyaha markabka Sarreeyaha ee Rapid iyo Dhamme Porcelli, taliyaha markabka Sarreeyaha ee Staffetta.

Waxaanu isku raacnay in calanka Talyaaniga la suro dalka kor lagu xusay waxaana caddayeneynaa in aanan heshiisyo ama qandaraasyo la gelayn dawlad ama dad kale.

Waxa kale oo aannu weliba caddayneynaa inaannu difaacno, intii aannu kari karno, dhammaan falalka aan habboonayn ee lagula kaco Talyaaniga iyo saaxibadiisa degaankayaga oo dhan.

Waxaanu ku saxiixnay heshiiskan rabitaankeena iyo annagoo garwaaqsan, heshiiskan aanu saxiixnay waxuu ka go'aa annaga, kuwa na dhaxla, walaalahayaga, dadkayaga iyo faracooda.

Waxaan caddeyneynaa saxiixayaga heshiiskan iyo xiskayaga iyo jirkeenuba dhan yahay.

Waxaa lagu dhiibay Bendar Caluula, 6dii bisha Shacbaan 1306 lana gudboon Abriil 7, 1889.

Waxaa Saxiixay,

V. Filonardi
Qunsulka Talyaaniga Sanjibaar,
Dhamme Morreti,
Dhamme Porcelli.

Waxaa Saxiixay,

Cusmaan Yuusuf Maxamuud,
Suldaanka Majeerteenya,
Yuusuf Cali Yusuf
Suldaanka Hobyo.

LIFAAQA "X"

Heshiis dhexmaray Shirkadda Boqotooyada Britaaniya ee Bariga Afrika iyo Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga, Agoosto 3, 1889.

Heshiis ay wadagaleen 3dii bishii Agoosto 1889, Shirkadda Boqortooyada Britaaniya ee Bariga Afrika, oo halkan loogu yeerayo "Shirkadda Britaaniya", oo hal dhinac ah iyo T. Catalani arrimo fuliyaha London ee Sareeye Boqorka Talyaaniga, isagoo metalaya dawladda Boqortooyada Talyaaniga oo dhinaca kale ah, waxaana lagu heshiiyay sida soo socota:

Iyadoo wadahadallo u socdeen in muddo ah oo goorhore ah, Shirkadda Britaaniya iyo Sayid Khalifa, Suldaanka Sanjibaar, welina ay qabyo yahiin si Suldaanka aynu soo sheegnay uu u siiyo qayb dhul ah iyo degaan ku yaalla xeebta laga billabo Kismaayo iyo Waqooyiga isku darka webiga Jubba iyo Badweynta Hindiya oo ay ku jiraan dekedda Baraawe, Marka iyo Muqdisho oo gaarsiisan taniyo 10 mayl badeed iyo tan Warsheekh oo gaarsiisan 5 mayl badeed. Iyadoo, Sayid Khalifa, Suldaanka Sanjibaar, uu warqaad u qoray Sarreeyaha Boqorka Talyaaniga, 15kii bishii Jannaayo 1889kii, isagoo u sii mariyay Boqoradda Britaaniya qunsulkeeda guud ee Sanjibaar oo awood u siiyay Xukuumadda Boqorka Talyaaniga inay wada darbiyaan sidii ay u wada qabsan lahaayeen Kismaayo,iyadoo Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga dooneyso inay degaan iyo dekedba ka hesho xeebta Afrikada Bari iyo shirkadda Britaaniya oo u darban inay ka kaalmeyso Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga sidii ay u gaarilahayd ujeeddadatan:

1. Hadda waxa halkan ay si wadajir ah ugu wadagaareen labada dhinac in kolka Sayid Khaliifa uu gacanta ka geliyo siduu uu horreyba u ballan qaaday shirkadda Britaaniya dhulalka la soo sheegay degaannada ku fidsan xeebta laga soo billaabo Kismaayo iyo Waqooyiga isku darka webiga Jubba iyo Badweynta Hindiya, iyadoo oo ay ku jiraan Baraawe, Marka iyo Muqdisho oo gaarsiisan taniyo 10 mayl badeed iyo Warsheekh oo iyana gaarsiisan 5 mayl badeed. Shirkadda Britaaniya iyadoo haysata ka warqabka iyo oggolaanshaha Suldaanka Sanjibaar iyo rabitaanka Xukuumadda Talyaaniga waa inay ku wareejisaa ama sababtaa wareejinta ergayga awoodda u leh ee Xukuumadda Talyaaniga dhulka aynu kor ku soo xusnay, degaannada iyo inta ka sarreeysa dekedaha Baraawe, Marka, Muqdisho iyo Warsheekh inay ka heshaa Xukuumadda Talyaaniga arrimo la mid ah kuwa ay ku haysato Shirkadda Britaaniya degaannada iyo dekedaha aynu kor ku soo sheegnay ama arrimo ugu wanaagsan ee Suldaanka oggolaanshihiisa laga helo.

Waxaa ka reeban Kismaayo iyo degaannada dhulkeeda ah ee la xariira oo si wadajir ah ay labada dhinac u wada haysanayaan, kolka gadaal laga darbiyo.

2. Xukuumadda Talyaaniga waxay halkan ku oggolaatay inay bixiso waxii kharash ah iyo waxii loo baahdo ee suuragal ah iyo weliba, haddii ay jiraanba waxii ay sheegtaan, oo ka soo dhexbaxa inta lagu jiro heshiiska.

3. Shirkadda Britaaniya iyo Xukuumadda Boqortooyada Talyaanigu waxay isku raaceen inay si siman u wada qaybsadaan Kismaayo iyo degaanka duleedkeeda ah, taasoo ah siduu oggolaaday Suldaanka, isla goortaana ay saami siman ku yeeshaan maamulka labada dhinac. Shirkadda Britaaniya iyo Xukuumadda Talyaaniga waa inay Kismaayo iyo degaannada duleedkeeda ah ku wada yeeshaan daw iyo maamuus siman.

Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga iyo Shirkadda Ingiriisku waa inay saami siman ku bixiyaan waxii kharash ah ee ku baxa maamulka, sidoo kalena waa inay si isla'eg u qaybsadaan waxii faa'iido ah ee ka soo baxa Kismaayo iyo degaannada duleedkeeda ah. Faahfaahinta waa inay u dhacdaa si wadaaynimo iyo kalgacaltooyo ah waana in lagu dhammeystiraa Kismaayo, iyadoo ay isla gunaanadayaan sida ugu dhaqsaha badan laba ergay oo ka kala socda Shirkadda Britaaniya iyo Dawladda Talyaaniga oo awood loo siiyay, kadib goortuu Suldaanka Sanjibaar, ku wareejiyo Shirkadda Britaaniya, iyaduna ku wareejiso Dawladda Talyaaniga.

4. Dawladda Talyaaniga waxay caddeyneysaa raadkeeda iyo hawlgalladeeda xeebta Bariga Afrika iyadoo iska reebaysa inay wax faragelin siyaasadeed ah ama si kaleba ah ku yeelato. Waxay oggolaaneysaa maxmiyadaha, waxay darbineysaa lahaanshaha Galbeedka ama Koofurta xariiqa lagu soo jeexay daanta Waqooyi ee isku darka webiga Jubba iyo Badweynta Hindiya looguna talagelay in had iyo jeer lagu hayo Waqooyiga iyo dhinacyada Bari ee webiga Jubba taniyo iyo halka ay iska gooyaan darajada 8aad ee loolka Waqooyi iyo darajada 40aad ee dhigta Bari iyo xariiq toos uga soo billaabma dhibicda aynu kor ku soo sheegnay isagoo goynaya darajada 35aad ee dhigta Bari ee Greenwichka.

Dhinaca kale Shirkadda Britaaniya waxay oggolaatey inay caddeyneyso raadkeeda iyo hawlgalkeeda xeebta Bariga Afrika iyadoo iska reebeysa inay wax faragelin siyaasadeed ama dhinacyo kaleba ku yeelato, waxay diyaarineysaa lahaanshaha dhulka, waxay faragelineysaa raadka u fiditaanka Talyaaniga ku leeyahay degaannada ama beelaha ku teedsan Waqooyiga iyo Waqooyi Bari ee xariiqda aynu kor ku sheegnay. Haddii sahanka loo sameeynaayo socodka webiga Jubba la ogaado inuu ku beegan yahay Waqooyiga ama Bariga xariiqyada aynu soo sheegnay oo goortaa noqoneysa dacallada Waqooyi ama Bari ee webiga, halkaasi waxay noqoneysaa xariiqa kala qaybisa labada dhinac ee heshiiska wada saxiixay. Heshiiska waxa keliya oo wax laga beddeli karaa haddii socodku webigu leexdo taniyo iyo halka darajada 8aad ee loolku ka gooyo darajada 40aad ee dhigta Bari. Xariiqyada aynu kor ku soo tilmaanay waa inay si gaar ah u sumadsanaadaan khad guduuddan khariidadda ay labada dhinac saxiixayaan, iyadoo ay ujeedadu tahay aqoonsi.

5. Waxaa kaloo halkan la isku raacay in Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga ay yeelato daw la mid ah tan shirkadda Britaaniya ee ku doolaalidda webiga Jubba iyo faracyadiisa si loogu fududeeyo inay la xariirto degaannada aynu kor ku soo sheegnay.

6. Labada dhinac ee heshiiskan wada galay waxay isku raaceen, haddii wax isafgaranwaa ahi ka dhasho fulinta heshiiskan ama wax muran ka yimaadaan, waxa loo soo gudbin doonaa kolka ay labada dhinac ku daalaan inay arrintooda ku dhammaystaan si wadaag ah, iyadoo loo soo gudbinayo gudiga sare kadib labada dhinac waxay ku hawaansan yahiin inay qaataan guddoonka ay soo saaraan guddiga sare. Guddiga sare waxuu ka koobnaanayaa xubno isla'eg oo ay soo kala doortaan labada dhinac, iyada oo weliba xubnahaasi goorta oo ay isu tegaan iska dhex dooran doonaan xubin gudoomiye ah.

7. Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga waxay awood buuxda u leedahay inay dawga iyo maamuuska ay leedahay ama ay ku heshay heshiiskan, ay ku wareejiso ama u wakiilato shirkad Talyaani ah oo la magacaabi doono kolka la sameeyo "Shirkadda Boqortooyada Talyaaniga ee Bariga Afrika", ama magac sidaas oo kale ah ama mid la mid ah. Shirkadda Talyaaniga ee aynu soo sheegnay, waxay si buuxda uga mas'uul tahay una fulisaa dhammaan qodobadda ay Xukuumadda Talyaaniga ku heshay heshiiskan. Qodobbada heshiiskan waxa uu ku saleysan yahay sharciga Britaaniya. Waxaa lagu sameeyay laguna saxiixay London, isagoo labo nuqul oo af Ingiriisi iyo af Talyaani ah, iyadoo la aqoonsan yahay in qaybta af Ingiriisigu dhaqan gelayso maanta oo ah 3dii bisha Agoosto, sannadka 1889.

Sir W. Mackinnon — Singor T. Catalani

Waxa saxiixay labada Mudane ee aan kor ku xusnay ee W. Mackinnon iyo T. Catalani iyadoo uu goobjoog ka yahay Sir George S. Mackenzie.

LIFAAQA "KH"

Warbixin Qunsulka Talyaaniga ee Cadan uu u diray Wasiirka Arrimaha Dibedda kuna saabsanayd masaafurintii Suldaan Yuusuf Cali iyo Wiilkiisa. Hobyo, 30/1/1903.

Waxaan sharaf ii ah inaan Mudane ku ogeysiiyo inaan shalay arroortii un gaaray Hobyo, sababtoo ah markabkii aan saarnaa ayaa muddo siddeed ayaamood ah ku xirnaa Berbera, si uu uga qaado awr iyo baqlo.

Isla goortiiba waxaan si degdeg ah u koray markabka "Caprera", kadibna dhamme Finzi ayaa warbixin gaar ah iga siiyay arrinta dhabta ah ee Hobyo. Waxuu kaloo igala hadlay sidii Yuusuf Cali ula dhaqmay maamulka ciidamada ee Britaaniya. Dhamme Finzi waxuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay in kolka la eego waxyaabahii billihii ugu dambeeyay dhacayay ay haboon tahay in Suldaan Yuusuf iyo inankiisa Caliba ay iskaga tegaan magaalada Hobyo.

Goortii aan dhuuxay qaybyadii ugu muhiimsanayd ee warbixintii dhamme Finzi, waxaan u soo degay dhulka, halkaasoo aan wadahadallo dheer kula yeeshay Sarreeye Guuto Manning iyo Count Lavatelli kuwaas oo ku saabsanaa arrinta dhabta ah ee hadda inna haysata, waxaanan ogaaday in Taliyaha Guud ee aan kor ku soo xusnay uu ka soo taagan yahay aadna u diidan yahay Yuusuf Cali. Waxuu dusha ka saaray, isaga iyo wiilkiisa, dhibaatooyinkii iyo khasaarooyinkii aan yarayn ee soo gaaray Britaaniya taniyo goortii ugu horreeysay ee ay soo gaareen maxmiyadeena.

Ereygii ugu dambeeyay iyo codsigii ugu cuslaa ee uu soo jeediyay S/Guuto Manning waxuu ahaa in si degdeg ah Suldaan Yuusuf Cali iyo wiilkiisuba Hobyo uga saaro anigoo aan maalin keliya sugin. Waxa arrinkaas la qabay isna Count Lovatelli.

Waxaan ku tallamay inaan Yuusuf Cali u yeero anigoo aan waxba dib u dhac ah sameeyn kadibna aan talo siiyo. Hasyeeshee, S/Guuto Manning falkaas ma jeclaysan, isagoo ku kalsoon inaan Yuusuf Cali wax abdo ah aan laga halayn si kasta oo la isugu dayo. Waxuu si diirran iiga codsaday inaan Yuusuf Cali la kulmin, haddii aan la kulmana aan xiro.

S/Guuto Manning waxuu run ahaantii maleynaayay in Yuusuf Cali goortii ugu horreeysoo ee aannu muranno uu baxsan doono, isaga iyo dadkii raacsanaaba, dabadeena si xiriir isbahaysi uu ulayeesho wadaadka, haddii taasi dhacdana waxay sii adkaynaysaa arrintii ciidamada Britaaniya iyo guud ahaan dhulka Soomaaliyeed. Inkastoo warbixinta S/Guto Manning, gaar ahaan tan aan kor ku soo xusnay, aan u arko mid la buunbuuniyay, haddana kolkaan eego waxyaabaha dhacaya sida ay iigu muuqdaan iyo gaar ahaan, kolkaan maanka ku hayo halista weyn ee sida uu i dareensiiyay S/Guuto Manning ku soo fool yeelan karta ciidamada Britaaniya, waxay ila tahay inaanay habboonayn in aynu diidno codsiga Manning.

Waxaan ku kalsoonahay inaan ku guulaysan karo Yuusuf Cali inaan shaqadiisa ku soo celin karo, haseyeeshee, iima muuqato inaan arrintaa hubaal ka dhigi karo. Run ahaantii, haddii ay timaaddada dhacaan wax dhibaatooyin ah, sida uu ii sheegay S/Guuto Manning, eedda wax kastoo halkaa ka dhaca iyo khasaarihii ka yimaadaba innaga ayaa dusha u ridandoono.

Arrintu waa mid adag, hase ahaatee, shaqadaydu waxay tahay inaan si uun u dhammeeyo. Waa inaan Suldaan Yuusuf Cali iyo wiilkiisa Cali Yuusuf bannaanka u diraa, aniga oo maskaxda ku haya talooyinkii iyo farriimadii aad i siisay. Waa waxa kaliya ee la sameeyn karo, inkastoo aan si buuxda loo caddayn karin, in labaduba ay mutaysteen ciqaabta intaas la'eg ee kulul. Waxaan farriin u diray Yuusuf Cali iyo wiilkiisa inaan berrito ku sugayo markabka "Caprera" dushiisa. Farriintaydii way oggolaadeen, kol allaale kolkay markabka dushiisa iigu yimaadeena waa la xiray. Berrito waxa la saarayaa markabka "Newshera" oo ku sii jeeda Cadan, halkaas oo loogu dhiibi doono Xukuumadda hoose taniyo intaan adiga amar dambe kaa helayo. Arrimaha jira ma oggolaanayaan in Yuusuf Cali lagu sii daayo Cadan, iyadoo, aynaan halkaa ku lahayn awood sharciyeed oo wax xukunta, waxaana ku hawaansan nahay inaan ka codsado Xukuumadda hoose inay inoo hayaan maxaabiista.

S/Guuto Manning, aad ayuu u mahadiyay cayrinta Yuusuf Cali iyo wiilkiisa Cali Yuusuf, waxaanu ii cadeeyay inaanu intii muddo ah inooga baahnayn wax gargaar ah oo gaar ah. Sidaa darteed waxaan muddo toban maalmood kadib ku noqonayaa goobtaydii shaqada markabka dagaal ee "Pomone" kaas oo xilligaas ugu sii jeeda Cadan arrimaha ciidanka.

Mahadsanid

F. to. F. Sola

LIFAAQA "D"

Warbixin Qunsulka Talyaaniga ee Cadan uu u diray Wasiirka Arrimaha Dibedda kuna saabsan Suldaan Yuusuf Cali iyo Wiilkiisa
Hobyo, 14/2/1903.

L. 8320

Uj: Ka Saaridda Hobyo Yuusuf Cali iyo Cali Yuusuf

Mudane;

Warbixintaydii 30ka Jannaayo, waxaan ku xusay, sababaha halista ugu dambaystii igu hawaaniyay in Suldaanka Yuusuf Cali iyo wiilkiisa Cali laga saaro Hobyo. Sababta keentay in labadoodaba loo diro Cadan, halkii lagu hayn lahaa markabka "Caprera", run ahaantii ma ahayn qorshahayga. Haseyeeshee, waxa igu hawaaniyay arrimaha jiray iyo aniga oo waayay hab kale oo aan ku soo afjaro hawshayda, Taliye Finzi, isna waxuu ii sheegay inaan markabkiisa lagu hayn karin labadaa nin, sababtoo ah ayuu yiri: "markabka oo aan lahayn meel loogu kalsoonaan karo oo lagu xiri karo.

Arrinta dhabta ah ee aan ugu kalsoonaan waayay Suldaanka iyo wiilkiisa inay hayaan maamulka dawladda Britaaniya ee Cadmeed, iyadoo weliba aanan u oggolaanaynin inay sii daayaan, waxay la xiriirtaa dhibaatooyinkii cuslaa ee uu ka cabanaayay S\Guuto Manning, kuwaasoo aan anigu kuugu soo gudbiyay warbixintaydii, 30kii bishii Jannaayo, kuwaasoo kolkaan kuu sii kala qeexa la xiriiray arrimaha soo socda, taasoo ah, in kadib goortuu Taliyaha Guud ee aan kor ku soo xusay ii soo gudbiyay warqad rasmi ah, oo uu ku sheegayo in la tixgeliyo baahida ah in Yuusuf Cali laga fogeeyo xeebta Soomaalida si waarta ah, oo gef ahayd. Kolka laga eego dhinaca aragtida uu qabay S\Guuto Manning waxuu u arkaayay Yuusuf Cali inuu halis ku yahay labada maxmiyadood ee Ingiriiska iyo Talyaaniga oo run ahaantii gef ahayd. Goortii aan tegay Hobyo cabashada S\Guuto Manning kuma ay ekayn hunguri weynida iyo dheef raadinta degdeg ah ee Yuusuf Cali goorta uu ka iibinayo lo'da iyo geela ciidanka Ingiriiska oo keliya, haseyeeshee, waxuu ku soo oogay dacwado waaweyn oo mug leh, isaga oo aad uga kalxun. Waxuu ku edeeyay in Yuusuf Cali uu ka maleegayo dalka dibindaabyo, si uu u wiiqo hawlgalaada ciidanka, waxa kale oo uu xusay hadallada dareenka leh ee ay ka go'an tahay inuu la midoobo wadaadka.

Sida uu ii sheegay S\Guuto Manning, Yuusuf Cali waxuu xiriir qarsoodi ah la leeyahay wadaadka oo ay isku aragti ka yahiin sida arrimaha loo xumayn lahaa, taasoo ah sidii ay u guuldarreysan lahaayeen ciidanka saddexaad ee ay habaysay dawladda Ingiriiska, isla kolkaana u soo gaari lahaa khasaare xoog leh, kuna lumi lahayd haybadda qaranku.

S\Guuto Manning, waxuu ku daray hadduu Yuusuf Cali la midoobo wadaadka oo ah siduu rumeysan yahay ay hawaan ku noqonayso in ciidanka laga qaado 250 askari, si looga ilaaliyo in kuwa raacsani ay dhibaato u geystaan maxmiyadeena.

Ciidamada kolka sidaa la yeelo way yaraanayaan, ayaa uu hadalkiisii ku soo gunaanaday Manning, kolkaa ma jiro wax himilo ah oo guul ah oo u haray ciidanka.

Aniga dhinacayga, aad ayaan uga fogahay ra'yiga noocan ah ee S\Guuto Manning, waxaanan ka duwanahay dareenka uu Yuusuf Cali ka qabo kolka loo eego xoogeenna iyo weliba xiriirka uu Yuusuf Cali la leeyahay wadaadka.

Haseyeeshee, sida aynu uga hortagnay arrintan, kolkay arrintan oo kale jirto, waxay noqonaysaa inaan kala doorano laba arrimood oo kala ah inaynu sidaa ku dhameeyno arrinta Yuusuf Cali inkastoo aanay gaarsiisnayn ciqaabta taniyo intaas la'eg iyo inaynu Ingiriisku siino dhul oo aynu qaadano dhaleecaynta ah inaynu maxmiyadeena u oggolaanay oo runtii iyaga waxtar u leh si ay u joojiyaan hawlgallada ciidamada.

Waxaan aad ugu qanacsanahay dhinaca kale samafalka iyo muujinta ay dawladda Talyaaniga u muujisay saxiibtinimada diirran iyo tanaasulaadkeeda ay ka samaysay inay ciidamada Ingiriisku tagaan Hobyo. Dhacdadani waxay maamuus iyo tixgelin u tahay dawaladdo saxiib ah.

Kolkaa ma waxaan oggolaan karnaa inaan xiriirka si dhakhso leh u jebino? Taasoo annaga nagu reebaysaa calool xumo kolka laga eego dhinaca Ingiriiska, isla kolkaana waxay ummadda Ingiriisku awood u helaysaa inay ina dacweyso, naguna eedayso waxii guuldarro ah ee ka iman karro ciidanka oo dhan. kolka aan anigu iska hadlana, waxaan u arkaa shaqo fudud oo aynu beylahaynay.

Taasina waa sababta aan hadda u doorbidayo, texgelinta Suldaanka, haddii aad, Mudane, sii go'aansatana, waxaynu ku soo celin karnaa halkaas innaga oo aan wax dhibaato ah la kulmin. Wax walba dib u habayn waa ku sameeyn karnaa, heybadeenii iyo maasmuuskeeniina sidiisa ayuu ahaanayaa.

Xagga warka wargeyska Reuter, ee sheegayaa in wadaadkii waalnaa uu degay webi Shabeelle oo ciidamada Ingiriiskuna ay damacsan yahiin inay ka guuraan Hobyo, saldhig hawgallada ciidamada ay ka samaysanyaan Buuhoodle waa war gebi ahaan sal iyo raadtoona lahayn.

S\Guuto Manning, waxuu aad uga carooday wakiilka wakaaladda wararka, waxuuna beeniyay inuu asaga warkaas bixiyay, haddana waxuu Manning ku talo jiraa siduu weriyahaas dalka uga cayrin lahaa.

Mudane, waxaan hore kuugu soo gudbiyay warbixintaydii 10ka Febraayo, habka aanu ugu hawlgalnay guriga Yuusuf Cali, inuu awoodda fulineed amray Count Lovattelli, sidaas oo kalena tallaabooyin kale oo aan soo xusay ayaan ku qaadanay ammarkiisa.

Warbixintaydan kor ku xusan, waxa si aan ulakac ahayn uga illoobay, inaan Mudane ku ogeysiiyo in guriga Yuusuf Cali aanu ka helnay 106 qori iyo dhawr sanduuq oo rasaas ah. Waxa qaaday Count Lovttelli, loomana celin hubkaas qoyska Suldaanka.

Waxaan Mudane, kaa codsanyaa inaad iga oggolaatid inaanu kuu soo gudbiyo salaan qaayo iyo qiimo leh.

F. to. F. Sola

LIFAAQA "R"

Heshiis Nabadgelyo

Heshiis magengeliyo iyo nabadeed oo dhexmaray Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga iyo Sayid Muxamed Cabdulle Xasan. Waxaa lagu saxiixay Illig, 5tii Maajo, 1905. (Waxaa laga tarjumay af Carabi).

Waxaa ammaan leh Ilaaha naxiirsta badan.

Iyadoo la raacayo rabitaaka labada dhinac ee heshiiskan wadagalay oo ah in la ilaaliyo degganaanshaha iyo nabadda Soomaalida oo dhan, iyadoo dhinaca Xukuumadda Talyaaniga uu ka socdo Cavaliere Pestalozza oo ah ergeyga gaarka ah ee metelaya Xukuumadda Talyaaniga, dhinaca kalena Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo metelaya naftiisa, maqaawiirta iyo nabadoonada qabiilooyinka isaga raacsan. Waxay isku raaceen oggolaanshaha buuxa ee arrimaha iyo qodobada soo socda.

1. Waxaa nabad buuxda iyo degganaansho dhextaalaa Sayid Muxamedka aynu soo sheegnay iyo daraawiishta isaga raacsan iyo Xukuumadda Talyaaniga iyo dhammaan dadka ku xiran oo ay ka mid yahiin Majeerteenka Soomaalida ah iyo qaar kale.

Kolka dhinaca xiriirada kala duwan laga eego, waa in sidoo kale nabadgelyo dhexmartaa Sayid Muxamed iyo daraawiishtiisa iyo Xukuumadda Ingigiiska iyo dhammaan dadka ku xiran oo ay ka mid yahiin Soomaalida iyo kuwo kale. Sidoo kale waa inay nabadi dhexmartaa Sayidka iyo daraawiishtiisa kor ku xusan iyo Xukuumadda Boqortooyada Xabashida iyo dhammaan dadka ku xiran. Xukuumadda Talyaanigu waxay bixinaysaa damaanadqaad buuxa oo nabadgelyo, iyadoo metelaysa dadka ku xiran iyo Xukuumadda Ingiiska.

Isafgaranwaa kasta oo dhexmarta Sayidka iyo dadkiisa iyo dadka ku xiran Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga iyo kuwa kale oo ay metalayso, sida Ingiriiska iyo dadka ku xiran, waa in lagu dhammeeyaa qaab nabadgelyo iyo saxiibtinimo, iyadoo la adeegsanyo ergooyin ka kala socda labada dhinac oo uu Talyaaniga guddoomiye ka yahay, waa inuu goobjoog ka ahaadaa ergey ka socda Ingiriiska, goorkasta oo laga hadlayo danaha Ingiriiska lug ku leeyahay.

2. Xukuumadda Boqortooyada Talyaanigu waxay u oggolaatay Sayid Muxamed iyo dadkiisa degaan joogto ah oo uu ka heli karo xiriirka ugu haboon ee badeed, inta u dhexeysa Raas Garaad iyo Raas Gabbe, iyadoo la haysto oggolaanshaha Suldaan Yuusuf Cali iyo Boqor Cusmaan Maxamuud.

Degaanka iyo dhammaan dadka deganiba waxay hoos imaanayaan ilaalinta Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga iyo calankeeda. Haddii ay goortaa go'aansato Xukuumadda Boqotooyada Talyaaniga inay madaxbannaani bixiso, si ay degaankaasi u dhigato ergey dhalasho

Talyaani ah leh ama qof kale oo guddoomiye ah oo leh askartiisa iyo qaab canshuur ururineed, Sayid Muxamed waa inuu kaalin ka geystaa taageerada Xukuumadda ee dhinac kasta taniyo inta Xukuumadda cid ka magacaabaysona isaga ayaa u ahaanaya arrimo fuliye.

Beelaha isaga ku xiran ee dhulka durugsan degganina Sayid Muxamed ayay hoos imaanayaan waana inuu ku dhaqaa cadaalad waana inuu darbiyaa nabadgelyada jiddadka iyo socdaalada raran ee maraya.

3. Degaanka aan kor ku soo sheegnay, waxuu u furan yahay ganacsigu dadka oo dhan, iyadoo goorkasta la raacayo xeerarka iyo sharciyada u yaalla dawladda. Waxaase la oggolayn soo dejinta iyo dhoofinta hubka sida qoryaha, rasaasta, birta iyo budada baruudda. Sayid Muxamed iyo dadkiisu iyagoo Ilaahay hortii ku dhaartay, waa inay is-hortaagaan gadiid kasta oo soo dejinaya ama dhoofinaya addoomo iyo hub cir iyo dhul kii loo adeegsadaba.

Qof kasta oo iska dhegatiraya sharcigan waxuu muteysanayaa ciqaab ay dawladdu fulineyso meel marintiisa.

4. Degaanka loo qoondeeyay Sayid Muxamed iyo dadkiisu, waxa weeye Nugaal iyo Hawd, iyadoo ka kooban taniyo inta danaha Talyaaniga ku eg yahiin.

Balse kolka laga eego dhinaca heshiiska gaarka ah ee dhexmaray Ingiriiska iyo Talyaaniga, kadib dhoofitaanka iyo soo noqoshada ergada Soomaaliyeed ee loo soo diro la sameynta nabadgelyada ee Ingiriiska, iyadoo la eegayo caadooyinkooda iyo dejinta arrimaha degganaanshaha guud, Ingiriisku waxuu oggolanayaa Sayid Muxamed iyo dadka raacsan inay soo galaan degaannadooda (kuwa Ingiriiska) ee dhulka Nugaal si ay u daaqdo lo'doodu, sidii goortii horeba u caadada ahayd. Haseyeeshee, lo'da aynu soo sheegnay looma oggola inay soo dhaafto ceelasha aynu soo tirin doono, kuwaas oo kala ah: ceelasha Xalin taniyo Xudun iyo Xudun taniyo Tifafle iyo Tifafle taniyo Damoot. Sidoo kale dhinaca Majeerteenka waa in nabadgelyo dhexmartaa iyaga oo dhan iyo Sayidka iyo Daraawiishtiisa. Arrinta ah dhinaca daaqsinka oo hadda ka dhexeysa Sayidka iyo Ciise Maxamuudka iyo weliba Cumar Maxamuudka, waa in labada dhinac ku dhammeystaan habkii dhaqankooda ahaa. Degaanka Mudug iyo Gaalkacayo waxay sii ahaanayaan dhul ay leeyahiin Yuusuf Cali iyo carruurtiisu. Dhammaan arrimaha u dhaxeeya Daraawiishta iyo deriskooda, waxay hoos imaanayaan baarista iyo go'aanka dawladda Talyaaniga.

Iyadoo la hubsanaayo dhammaan waxyaabaha kor ku xusan iyo sida ay u oggol yahiin dhinacyada heshiiska wada galay, heshiiskan waxaa wada saxiixay Sayid Muxamed Cabdulle Xasan oo u saxiixay naftiisa iyo Daraawiishta iyo dadka raacsan iyo Cavalieri Pestalozza, ergeyga Xukuumadda Talyaaniga waxaana lagu saxiixay Illig, maalin Axad ah 20ka Dulxija, 1322kii ee Hijrada oo la gudboon 5ta Maarso, sannadka 1905.

Waxaan akhriyay heshiiskan waana fahamay dulucdiisa waxaana u oggolaaday si buuxda waana saxiixay. Ergeyga Xukuumadda Boqortooyada Talyaaniga Cavaliere Pestalozza ayaa xaaladayda og, sidaan ugu kalsoonahay.

Illig 5tii Maarso, 1905.

Sayid Muxamed Cabdulle Xasan
Sig. Cavaliere Pestalozza.

↑ 190

↓ 192

LIFAAQA "S"

Taar uu Xaakimka Gumeysiga Talyaaniga ee Soomaaliya
u diray Wasiirka Arrimaha Gumeysiga

Sum: 1893 Noofembar 17, 1925
Waqtiga: 14:00

Mudane, Wasiirka Arrimaha Gumeysiga ee Rooma
Qarsoodi dhoorsoon oo qof ahaaneed

Tixraaca taarakaygii summadiisu ahayd 1890, ee shalay. Dhamme De Marchi, taliyaha Buulo Buurte ayaan u diray Bot, si uu u keeno ciidamo xoojin ah una adkaysto saldhigiisa, waxii xog ahna u qaato, waxaan filayaa Mudane, inuu kula socodsiiyay taarka tirsiigsu yahay 101 ee Nofeembar uu kaaga soo diray Buulo Buurte.

Aroortii ay bishu ahayd sagaalka, koox tiradoodu gaarayso 40 oo dadka degaanka ah oo uu ku jiro Naa'ib Cumar Samatar ayaa soo galay xerada iyagoo aan sidan wax hub ah uu u oggolaaday Dhamme Carolei si ay hargo uga qaataan meesha. Qaar kale oo iyaguna ah dadka degaanka ayaa ku sii jiray xerada iyagoo marmarsiiyo ka dhigtay inay cunto u geynayaan maxaabiis. Askari ilaaliye Faarax Ciise oo Majeerteen ah oo arkayay tirada ragga ah ayaa isku dayay inuu is-hortaago. Yusbashi Warsame Xasan ayaa la socodsiiyay dhammaha oo ka soo caddeeyay amarka oggolaanshaha. Naa'ib Cumar Samatar iyo kuwo kale oo agtaagnaa ayaa qabtay Yusbashiga iyadoo kuwo kale oo fallaago ahina ay ilaalinayaan askar hawlo kala duwan ugu filiqsanaa xerada dhexdeeda.

Waqti yar kadib Naa'ib Cumar Samatar ayaa soo galay xerada kadibna waxuu ka guddoomay ilaaliyaha btaniyowe, isla goortaasna u suuldhabaaleeyay, fallaagada oo ku hubaysan ulo iyo billaaweyaal ayaa si fajaciso leh goortiiba askarta uga qaaday qoryihii. Fallaago kale ayaa ilaaladii ku dilay toorey soona galay xerada oo ku guuleystay inay qabsadaan. Dhamme ciidanka lugta ah iyo gacan yarihiisii ayaa lagu dilay xafiiskooda. Yusbashi Warsame Xasan, dhawr sarkaal oo aan hubaysanayn iyo askari ayaa iyana la dilay. Sida aanu warka ku hayno dhimashadu waa taniyo 16 qof. Waxaana aan filayaa in dhimashadu intaa ka badato. Maydkii dhammaha maalintii labaaad ee fadqlallada ayaa xerada laga soo tuuray. Maalmihii xiggay waxaa socday shirar waanwaaneed oo ay ka soo qayb galeen dad fara badan oo xoolo lagu qashay oo taniyo afar maalmood socday. Sababta uu dagaalku u dhacay waxay ahayd, iyadoo ragga xerada soo weerarray ay doonayeen inay xabsiga ka sii daayaan saddex duqow. Dhammaha horey ayaa loogu digay, haseyeeshee, waa uu ka hawl yaraystay inuu warkaa caddaysto. Weerarku waxuu ahaa mid horey loo soo abaabulay waxaana lagu beegay goor ku habboon fulintiisa. Fallaagadu waxay xerada soo galeen, iyagoon hubaysnayn, tooriyaha waxa lagaga qaaday irrida, haseyeeshee, warar qarsoodi ah oo aannu helnay ayaa tibaaxaya in askarta, qaar ka mid ahi, ay qoryaha ugu dhiibeen xerada gudaheeda. Waxaan war ka sugayaa Bot oo la xiriirtay askari dib ugu soo biiray ciidanka, sidaa darteed, sida uga dhakhsaha badan ayaan kuula soo xiriirayaa.

Mudane, sida aad dareemi karto, waxaa la caddeeyay warkii aan shalay ku soo diray. Falkani waxuu la mid yahay falal joogto ah oo isku mid ah oo soo noqnoqday oo aan wax badan

digniin ka bixiyay sidii looga hortagi lahaa. Waxay iigu muuqataa in warka shilka loo gudbiyo qoyskii dhamme Carolei oo ku nool Rooma, Via Covour 357, waxaan Mudane, kaa codsanayaa inaad waxii karaankaaga ah aad u qabato. Si dhakhso ah ayaan ugu soo dirayaa taar tacsi ah, aniga oo ku hadlaya magacayga iyo ka mustacmaradaba.

Halkan wax walba waa naloo fududayn karaa. Waxaannu darbinaynaa sidii aannu mar labaad u qabsan lahayn Ceelbuur, annagoo waax walba u hurayna waxaan filaynaa guul wanaagsan.

War wanaagsan iyo nooli kulantee,

De Vecchi De Val Casmona.

LIFAAQA "SH"

Arji ay dadka Soomaaliyeed u qorteen kalfadhigii saddexaad Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 1948kii

Arji ka socda dadka Soomaaliyeed oo kaga hadlayaan timaaddada dhulka Soomaaliyeed iyo mideynta dhammaan dadka Soomaaliyeed, iyadoo la hoos geynayo gobanimo gaarsiinta Qaramada Midoobay.

Ku Socota: Guddiga Afarta Dawlad ee Taakta Weyn ee Baarista Arrimaha Soomaaliya

Annagoo ah dadka Soomaaliyeed, waxaanu doonaynaa in dalkayaga lala mideeyo dalalka kale ee Soomaaliyeed. Waa arrin geeri iyo nolol ah kolka loo eego qarannimadayada. Waaxanu si adag ugu kalsoonnahay in dalkayagu horumar dhab ah sameeyn karin inta uu sidan uga go'doonsan yahay Soomaalida kale. Sidaa daradeed waa arrin murti waxtar weyn u leh in Soomaaliya iyo dhulalka kale ee Soomaaliyeed laga mideeyo xagga siyaasadda, maamulka, dhaqaalaha iyo dhaqanka.

Kala qaybinta hadda jirta ee dhulka Soomaaliyeed ee Talyaaniga, dhulka Soomaaliyeed Ingiriiska, dhulka Soomaaliyeed ee Faransiiska, Degmada Waqooyi ee Keeniya iyo dhulka Soomaaliyeed ee Xabashida waa mid dhalanteed ah oo quwadaha waaweyni dusha kaga keeneen dadka Soomaaliyeed si ay danahooda ugu fushadaan, goor aanay dadka Soomaaliyeed dareensanayn dhaawac la gaarsiiyay. Dagaalkii u dambeeyay ee adduunka ayaa u keenay dadka Soomaaliyeed ee ku kala nool dalal kala duwan, inay yeeshaan xiriir haddana waxay oggaadeen inta ay gaarsiisan tahay dhibaatada ay u keentay kala qaybsanaanta caalamiga ah. Hadda waxay ku doodayaan kolka laga eego xagga xuquuqda Aadamiga inay ula noolaadaan qaybaha kale ee qoyskooda mid ahaan.

Qodobada soo socda ayaa ah qaar ka mid ah dhibaatada ugu weyn ee ay arrintaasi ku keentay horumarka dalka Soomaaliyeed:

b) Waxaa jira shan qaybood oo Soomaaliyeed oo la kala dhexdhigay soohdimo dhalanteed ah oo ku kala gudban.

t) Waxa jira nooc kala gaar ah oo maamul iyo siyaasadeed oo ay leedahay dawlad kasta oo ka mid ah shanta qaybood ee Soomaaliyeed.

j) Waxa kaloo jira shan af oo rasmi ah oo kala duwan oo ay leeyahiin shanta qaybood ee Soomaaliyeed.

x) Waxaa jira sharciyo iyo xeerar kala duwan oo ay kala leeyahiin shanta qaybood ee dhulka Soomaaliyeed.

Qolooyinka Soomaaliyeed, iyagoo ah tobonaan kun ayay ku nool yahiin soohdimaha caalamiga ah. Waxay daw u leeyahiin inay xoolahooda daaqaan kana waraabiyaan dhinacyada soohdimaha, iyagoo sidaa dhaqankoodu yahay ayaa sannadkiiba labada xilli roobeed ee Guga iyo Dayrta uga gudbaan labada dhinacaba soohdimaha.

Haddaba soohdimaha caalamiga ah waxay qolooyinka Soomaaliyeed ku hayaan hagardaamooyinka soo socda:

1. Haddii ay dhibaato dhexmarto laba dad oo ku kala nool laba dal oo kala duwan, qofka dhibbanaha ahi waxuu u baahan yahay inuu ka gudbo soohidnta kuna socdaalo taniyo iyo boqol mayl dhul aanu garanayn, waa inuu tagaa maxkamad oo xubnaheedu dhibbanaha ay u arkayaan shisheeye, sharciyada iyo qaab maxkamadeedkuna uu yahay kuwa ku duwan kuwii uu yaqaanay. Sidaa daraadeed, madaama uu arkaayo dhibaato farabadan iyo waqti lumin, waxa uu ka door bidaa inaanu marka horeba dacwo u tegin dalkaa kale. Goortaa dhibbanahu waxuu ka aargutaa qof ay qaraabo yahiin dadka uu dhibka ka tirsnayo oo uu gaari karo. Kadib weerar kastaba waxaa ka yimaado raacdo, taniyo uu arrinkii fududaa isu beddelo dagaal ballaaran oo qolooyinka dhexmara oo ay ku dhintaan nafo badan, isla goortaana lagu kala dhaco xoolo fara badan. Haddii aanay jiri lahayn soohdimahaas rasmiga ahi waxa dhici kari lahayd in si sharci ah arrimahaas lagu dhammayn lahaa, waxaas oo dhibaato ah ee mood iyo noolba leh laga badbaadin lahaa.

2. Xagga dhaqaalaha iyana waxaa jirta dhibaato la mid ah, Qof kastoo ka gudba soohdinta waxuu la kulmayaa cashuuraha laga qaadayo goortuu alaab ka gudbinayo soohdintaas. Intaas waxaa weliba u dheer, tusaale ahaan, haddi qof Soomaali ah oo ku nool Galbeed uu rabo inuu alaab u dhoofiyo dalalka dibedda, waa inuu bixiyaa kharashyada dekedda iyo dhoofinta. Culaysyadaa faraha badan waxay hakinayaan ganacsiga u kala socda soohdimaha Soomaaliyeed. Ganacsiga furan ayaa ah kan ugu wanaagsan ee suga qiimaha, socodka iyo qaybinta alaabta. Dhulka Soomaalida, waxaa kolkolka qaarkood ka dhacda in degaan ka mid ah, alaabo ay ka mid yahiin dhar ama cunto laga waayo oo ay ciriiri gasho, isla kolkaana degaan kale oo Soomaaliyeed oo soohdintu kala baxsan ay isla alaabtaasi ku badan tahay oo ay dheeri ku tahay. Inta badan waxaa dhacda in maamulka dhulka ka jiraa joojiyo dhoofinta ganacsiga. Haseyeeshee, haddii taa laga qaado, waxaa haddana niyad jebineysa ganacsatada cashuuraha lagaga qaadayo labada dhinac ee soohdinta. Dhibaatooyinkaas iyo qaar kale oo badan ayaa ah kuwa luggooyo ku ah socodsiinta iyo kobcinta dhaqaalaha dhulka Soomaaliya.

3. Dhibaatada ugu weyn ee keli ah ee ka dhalata soohdimaha caalamiga ah, waxa weeye, iyadoo ay jiraan afaf rasmi ah oo kala duwan oo laga adeegsado degaannada Soomaalida; kuwaasoo kala ah Ingiriisi, Talyaani, Faransiis, iyo Amxaariga. Ka soo qaad inay Soomaalidu waxbarasho sare ku bartaan afafkaas qalaad timaaddada fog waxtar intee la'eg ayay yeelanaysaa waxbarshada lagu bartay afaf kala duwan oo ay leeyahiin awoodo kala xukuma dhulalkaasi.

Aqoontooda iyo qiimeyntooda waxbarasho midna waxtar uma yeelanayso Soomaalida kale, sababtoo ah koox walba waxay aqoontoodu ku ekaanaysaa degaankooda oo keliya. Waxaan muran ku jirin in waliba dadka adeegsada geyeysiiyo inay qaataan caadooyinkiisa iyo suugaantiisa, isla kolkaana raad laga dareemi karo uu ku reebo dhaqanka qofka adeegsada. Kolkaa waxa marag ma doonta ah in hoggaamiyeyaasha Soomaaliyeed ee timaaddadu ay yeelan doonaan dhaqamo kala duwan oo sii xoojineya is afgarashawaagooda. Haddaba arrinta kala qaybsanaanta ee hadda jirta, waxbarashada oo ah xubinta ugu qaaya horumarka dadka, ayaa waxay noqoneysaa tiirka uga weyn ee abuuri kara kala qoqobnaanta iyo is garasha la'aan qarameed.

4. Adkenyta dhaqdhaqaaq iyo isu socodka Soomaalida degaannada kala duwan, ayaa si weyn u muujineysa dhibaatada ay soohdimaha dhalanteedka ah ku hayaan dadweynaha. Soomaalida ku nool degaannada deriska ah way kala guursataa. Goortaa waxa kolkol badan dhacda in qof Soomaali ahi uu yiraahdo soo booqo walaalkaa ama walashaa oo ku nool soohdinta dhinaceeda kale dabadeedna la xiro oo ay dib u soo dhoofiso xukuumadda halkaa ka talisaa, iyadoo lagu eedaynayo inuu soo galay dal kale, isagoo aan haysan oggolaasho socdaal. Ninka reer miyiga ah ee socod kaga gudbay soohdinta, ma garan karo dulucda dhabta ah ee soohdinta dhalanteedka ah iyo xeerarkeeda, sidaa daraadeed waxuu goortiiba go'aansanayaa in dawladda ay cadaawad u hayso qoladiisa.

5. Soohdinta dhalanteedka ahi waxay dhibaato culus ku keentay beelaha Soomaaliyeed, iyadoo xubno hal beel ka tirsan, lagu kala sooco dhalashooyin kala duwan sida: Ingiriis, Faransiis iyo Xabashi. Iyadoo la abuuro Soomaali mideysan oo keliya ayaa lagaga gubdbi karaa dhibaatoooyinkaa xanuunka badan. Soomaali mideysan oo keliya ayaa dadka Soomaaliyeed ku heli karaan horumar xagga dhaqaalaha, siyaasadda, bulshada iyo waxbarshada.

Sidaasoo keliya ayaa dadka Soomaaliyeed ku fili karaan in ay qoys ummadaha adduunka uga mid noqon karaan, iyagoo xubin maamuus leh ah. Ma doonayno inaan carrabka ku adkeyno horumarka weyn ee laga gaari karo xagga ganacsiga, waxbarashada, heerka nolosha iyo ilbaxnimada ee dhammaan isgaarsiinta iyo adeegga guud oo hoos yimaada dawlad keliya. Ujeeddadaydu waxay tahay inaan muujino dhibaatada naga haysta kala qoqobnaanta aanu ku kala qaybsnahay soohdimo dhalanteed ah oo kala duwan annagoo dad walaalo ah.

Samatabixinta iyo timaaddada 4 milyan oo Soomaali ah oo horumar la'aan hayso ayaan cidi ka war hayn oo halis ku jira. Run ahaantii waxaanu si daran uga xunnahay soohdimaha dhalanteedka ah ee lagu kala gudbay. Soomaalidu hadda, siyaasad ahaan, taniyo heer way u bisishahay. Waxa ugu horreeya uguna badan ee ay hadda ku doodaysaa, waa iyagoo dareentay baahida ay u qabto midnimadeeda iyo go'aankeeda qoys ahaaneed ee ay ku doonayso qaab dawladeed oo ay iyadu leedahay oo hoos yimaada wasaayad Qaramada Midoobay. Dib uguma sii dulqaadan karno inay sii kala xirxirnaadaan iyadoo aanay jirin wax himilo dadnimo ah oo timaaddada u muuqda. Soomaalida waxay wadaagtaa isir, dhaqan, hiddo iyo dal. Waxay ku wada

hadlaan af keliya, waxaanay leedahay diin isku mid ah. Ma jiro kala duwanaansho loogu cudur daaran karo kala qaybsanaanteeda.

Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Dawladda Boqortooyada Britaaniya si cad ayuu u sheegay in midnimada dhulalka Soomaaliyeed ay lagamamaarmaan u tahay danaha dhabta ah iyo daryeelka dadweynaha Soomaalida. Waxa la rumeysan yahay in kor u qaadidda mashruucan dadnimo in dawladda Britaaniya ay doonayso dhulka Soomaaliyeed ay xukunto ku wareejin doonto wasaayadda Q.M. waxaana aanu ku kalsoonnahay haddii aan helno taageerada iyo iskaashiga Afarta Dawlad ee Taakta Weyn in dhulalka kalena ku soo biiri karaan, si loo helo dhul iyo dad Soomaaliyeed oo mideysan.

Waxaa Saxiixay

Jamaammuurta Soomaaliyeed ee
Shirka Hoggaaminaysay

LIFAAQA "DH"

Arji ay **Xisbiga Dhalinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L)** u qorteen Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Paris, France.

Muqdisho,
20 Sebteembar,
1948.

Uj: **Timaaddada Dhulka Somalia**

Mudane,

Waxaanu si maamuus leh kaaga codsanaynaa inaad arjigaygan hor keento shirweynaha Golaha Guud ee Qaramada Midoobay.

1. Annagoo ah dadka ku dhaqan Soomaaliya, kuna hadala codka dadka intiisa badan oo aanu metelno waxaannu codsanaynaa caddaalad, waxaana kaa filaynaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay inuu si deggan u baaro dhacdooyinka dhabta ah ee ay soo ururiyeen Guddiga Afarta Dawladood ee Taagta Weyn ee baarista arrimaha Soomaaliya. Waxa kale oo aanu ka filaynaa Golaha Guud ee Qaramada Midoobay. Waxaa kaloo aannu ka filaynaa Golaha Guud inuu tixgeliyo rabitaanka runta ah ee dadka Soomaalida. Guddiga Afarta Dawlad ee Taagta Weyn waxay warbixintooda ku muujiyeen in dadka Soomaaliyeed, intooda badan, ay taageersan tahay barnaamijka Xisbiga Dhalinyarada Soomaaliyeed (S.Y.L), kaasoo codsaday maamulka Afarta Dawlad ee Tabarta Weyn, si xoog lehna uga soo horjeeda midab kasta oo maamul Talyaani ah.

2. Waxaannu rumeysanahay in arrinta maanta jirta caalamka codsigayga maamulka Afarta Dawlad ee Taakta Weyn inuu aad u adag yahay una muuqan mid suurageli karta. Sidaa darteed waxaannu idinku wargelinaynaa inaannu go'aansannay inaan beddelnay codsigaa waxaanan ka filiaynaa Golaha Guud inuu naga oggolaado dawga aanu u leenahay codsigaas aan beddelnay. Wafdigayaga si dhakhso leh ayuu u imaanayaa Paris, si uu go'aankayaga cusub ugu soo bandhigo shirweynaha Agoosto waxaana ku kalsoon nahay in shirku si naxariis leh u soo dhoweyn doono wafdigayaga.

3. Waxaanu jecelnahay inaan shirka xusuusinno waxa mudunaanta kowaad noo lehi inay tahay, dhulka Soomaaliya oo lala mideeyo degaannada kale ee ay Soomaalidu deggan tahay. Soomaalida oo dhammi waa isku isir, waxay ku wada kalsoon tahay Diinta Nabi Muxamed N.N.K., waxay ku wada hadashaa af keliya, xagga dhaqaalahana wey isku wada xiran tahay. Soomaalida ku nool dhulka Waqooyi ee Ingiriisku gumeysto, kuwa ku nool degmooyinka Waqooyi Bari ee Kenya, kuwa

ku nool gobollada Galbeedka iyo Soomaalida kale ee hoos timaada maamulka Faransiiska, waxay gidigood codsiyo farabadan u gudbiyeen dawladda Britaaniya iyo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, iyagoo ka codsanaaya in dhulalkooda lala mideeyo Soomaalia.

Waxaanu ku kalsoon nahay in midnimada lagu xigsiiyo ismaamul ama gobannimo. In dhulalka Soomaaliyeed sidii hore lagu kala hayo maamulo kala duwan xag dhaqan, dhaqaale iyo siyaasadeedba suuragal ma'aha. Soohdimaha dhalanteedka ah ee hadda dhexyaalla dadweynaha Soomaaliyeed, waxay kadeedayaan dhabbaha dadka Soomaaliyeed ku heli lahaa ismaamul ama gobannimo. Waxaanu rumeysanahay in soohdimayntaas horumarkayaga ay ka soo horjeeddo iyo ujeeddooyinka Qaramada Midoobay oo aannu kalsooni weyn ku qabno. Inkasotoo aan dareensannahay inaannu metelno dalka Soomaaliya oo keliya ee aanaan metelin dhulalka kale ee Soomaalidu degto, kuwaasoo isir iyo dhaqaalaba la wadaaga dhulkayaga, haddana waxaan rumeysan nahay, in Qaramada Midoobay oo ah Golaha ugu ballaaran ee caalamiga ah inuu kaalin mug leh ka qaadan karo isku keenidda iyo mideynta dalka Soomaaliyeed ee walaalaha ah ee isku isirka ah. Soomaalida adduunka ku nool oo dhammi waxay codsanaysaa midnimo degdeg ah ee dhulka Soomaaliyeed iyo baabi'inta soohdimaha dhalanteedka ah ee hadda jira.

4. Codsigayga kale ee aannu u jeedinayno Guddiga Afarta Dawlad ee Taagta Weyn ee baarista arrimaha Soomaaliya waxa weeye inaanan kolnaba qaadan karin in dib naloogu soo celiyo maamul Talyaani qaab kastaba ha ahaadee. Iska dhega tiridda codsigan iyo qaadashada go'aan li'ida waxay malaayiin Soomaali ah u tahay geeri, iyagoo maamul Talyaani ka xiga geeri.

Urur Talyaani taageera ayay asaaseen maamulka Talyaanigu, bilo yar ka hor intii aanay dalka iman Guddi Afarta Dawlad ee Taagta Weyn ee baarista arrimaha Soomaaliya oo intuu socdaalka ku joogay dalka, ururkaas aynu kor ku soo sheegnay, ku andacooday inuu metelo boqolaal kun oo taageereyaashiisa ah. Tiradaasi waa mid si aad iyo aad ah loo buubuuniyay, sababtoo ah tirada dhabta ah ee ururkani waa mid aad u yar, inta yar oo taageertaana waxay ku nool yahiin Muqdisho. Ma rumeysanin in Guddiga Afarta Dawlad ee Taagta Weyn ee baarista arrimaha Soomaaliya uu la kulmay, intii uu sameeynayay baarista dalka oo dhan, taageereyaal ku filan oo urur Talyaani taageera. Waxa arrin aad u xiiso badan ah inaan halkan ku xusno in xubnaha ururkan oo dhammi ay ka kooban yahiin dadkii dagaalkii ugu dambeeyay ka qayb galay, askartii hore ee Talyaaniga, shaqaalihii gaboobay ee dalwadda Talyaaniga iyo kuwo kale oo ka sugaya mushahaarooyin taniyo siddeedii sanno ee ugu dambeeyay iyo ballanqaadyo ay siisay dawladda Talyaaniga iwm. Sidaa darteed dadkani waxay ilaashanayaan danahooda gaarka ah mana aha dad u danaynaya Soomaaliya iyo timaaddeeda.

5. Mudane waxaan kugu qabnaa kalsooni buuxda adiga iyo hoggaamiyeyaasha ka soo qayb gelaya Golaha Guud ee Qarmada Midoobay. Waxaanu filaynaa in arrintaas lamataabtaanka ah ee aasaaska u ah in Soomaali oo dhammi ay horumar sameeyso oo ay hoos timaado hal dawlad oo aan lagu xirin gorgortanka siyaasadeed ee dawladdaha reer Yurub, sida tixgelin siinta dawladda Talyaaniga si ay uga guuleysato Yurubta Galbeed ama Bari. Waxa kale oo aanu fileynaa in qodobada aan kor ku soo xusnay la siiyo tixgelin, waxaanan sugaynaa in Qaramada Midoobay ay furdaamin caaddil ah u helo dejinta dadkayaga iyo timaaddada dalkayaga mana aha Soomaaliya oo keliya, haseyeeshee, dhammaan Geeska Afrika.

Waxaa saxixay,

Golaha Dhexe ee Xisbiga
Dhalinyarada Soomaaliyeed
(S.Y.L.)

LIFAAQA "C"

Arji ay **Xisbiga Dhalinyarada Soomaaliyeed S.Y.L** u qorteen
Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Paris, France.

Paris/France

Muqdisho, 24 Oktoobar 1948.

Uj: **Timaaddada Soomaaliya**

Waxaannu si maamuus leh kaaga codsanyaa in aad arjigaygan hordhigto Golaha Guud ee Qaramda Midoobay.

Annaga oo tixraacaya arjigaygii 20kii Seteembar 1948kii. Kolka laga eego tuducda "3" ee arjiga aannu kor ku soo xusnay, waxaannu halkan ku muujinaynaa go'aankayga ah, in codsigaygan laga beddelo Afar Dawlad ee Taagta Weyn.

Waxaan halkan kugu ogeysiinaynaa inaanu go'aansanay Soomaali Weyn, go'aankanina waa mid Soomaaliya ah aan kaga hadaleyno dhulalka Soomaaliyeed oo idil. Wax timaadda ah ma lihin, haddii sida aannu hadda nahay nalagu sii kala hayo maamullo kala duwan oo ah xagga qaab cashuureedka, dhaqaalaha, waxbarashada iwm. Waxay noqonaysaa waxaan suurtagal ahayn in la helo Soomaali Weyn, haddii ay sii jiraan soohdimaha dhalanteedka ahi. Soomaali Weyn lagu helo darbinta Golaha Guud ee Qarmada Midoobay, ma noqonayso mid looga damaashaado Soomaaliya oo keliya, hase ahaatee, waxaa aad looga soo dhoweynayaa meel kasta oo Soomaali ku nooshahay.

Maadaama, mideynta Soomaali Weyn ay tahay lagamamaarmaan, waxaan halkan ku muujinaynaa go'aankayaga kowaad oo ah, gobannimo gaarsiinta toos ah dhulkayaga ee Qaramada Midoobay. Kaasoo noqonaya hab Gole gobannimo gaarsiineed isla goortaana yeelanaya awood maamul. Run ahaantii aad iyo aad ayay u adag tahay sida loo kala sooco codsigayagii hore ee ahaa Afarta Dawlad ee Taagta Weyn iyo kan dambe ee ah gobannimo gaarsiin toos ah ee Qarmada Midoobay. Waxaanu ka filayaa Golaha Guud in haddii codsigayaga kowaad aannu soconayn, in kan dambe uu suuragal yahay.

Haddii gobannimo gaarsiinta tooska ee Qarmada Midoobay ee Soomaaliya la isku raaci waayo, waxaan halkan ku muujinaynaa, inaan raali ka nahay nooc kasta oo dawladeed oo ah keli ama wadar kolka laga reebo Talyaaniga iyo Ethiopia.

Ma oggolaanayno soo celinta maamul Talyaani ah qaab kasta ha ahaadee, sidii aan horeyba u soo sheegnay, sababtoo ah:

b) Waxaan rabnaa Soomaali Weyn, sidaa darteed haddii aan oggolaano, soo celinta maamul Talyaani, weligayo kama filayno inaannu u helayno dantayada.

t) Dawladda Talyaanigu waa sabool oo si habboon uma maalgelin karto dalkayaga, sidaa daraadeed faraha ha nooga qaado dhulkayaga Soomaaliyeed.

j) Talyaanigu waxaa u dhulkayaga u rabaa, dhulkiisa ayaa dadku ku batay, kolkaa waxuu doonayaa inuu dadkiisa ka soo buuxiyo dhulkayaga, kuwaasoo aannu kula tartami karin hawl kasta oo nololeed.

x) Haddii aan Soomaali nahay, Talyaanigu nama siin waxbarasho kontonkii sano uu na gumeysanaayay.

kh) Dadka Soomaaliyeed Talyaanigu uma oggolayn isku imaansho ama urur siyaasadeed, mana jirin madaxbannaani hadalka iyo waxqabadka toona.

d) Kolka laga eego xagga arrimaha bulshada, waxuu Talyaanigu noola dhaqmi jiray sida lo'da.

r) Dadka Soomaaliyeed waxaa laga ilaalin jiray dhammaan ilaha dhaqaale waxaana wada haystay dad Talyaani ah, dadka Soomaalida waxaa loo oggolaa oo keliya hawlaha hoose sida: ilaaliye, warceliye, wade baabuur, cunto kariye iwm.

Qodobada (x, kh, d iyo r) ee aan kor ku soo xusnay, waxay aad u saameeyeen noloshayada sannadahii u dambeeyay ee maamulka Talyaaniga, sidaa darteed kolna suuragal ma aha inaannu rumeysano inuu si wanaagsan noola dhaqmi doono kol kale. Haddii uu Talyaanigu shaatiga iska soo beddelo iyo haddii kaleba, waxa naga go'aan ah inaanan kol dambe arag soo noqoshodiisa.

Soomaalida tirada yar ee codsanaysa gobannimo gaarsiinta Talyaanigu, kama badna boqoliiba shan dadweynaha Soomaalida, waa dad sabool ah aqoona lahayn, la marinhabaabiyay waxaana dhaqaale ahaan u tageera Talyaaniga. Intooda badani waxay ku tiirsanaayeen ciidanka Talyaaniga waxayna ahaayeen ciidamadii ka qayb galay Dagaal Weynihii Labaad ee Aduunka ee loogu ballanqaaday mushaharsiinta siddeedii sano ee la soo dhaafay iyo dib u shaqaaleyn. Talyaanigu waxuu ururkan u abuuray inuu mucaarad ku noqdo Xisbiga Dhalinyarada Soomaaliyeed, mucaaradkaasoo la xaqiijiyay inaanu waxtar lahayn.

b) Dalkayagu lama wadaagaan dalka Ethiopia xiriir isir, af, diin iyo dhaqan midnaba.

t) Waxaanu aad u ogsoonahay oo keliya, in dawladda Xabashida aanay waayo arag ahayn, dhaqaale ahaana ay curyaansan tahay.

j) Ma jiro qof keliya oo Soomaali ah oo codsaday maamulka Xabashida, intii Guddiga Afarta Dawlad ee Taagta Weyn socdaalka ku marayay dalka.

Waxaannu Mudane, si xushmad leh kaaga codsanaynaa inaad runtan hordhigto shirweynaha Golaha loo dhan yahay ee bisha Agoosto. Waxaannu filaynaain tixgelin weyn la siin doono arrinkayaga. Waxaanu metelnaa Soomaalida "Geeska Afrika" ku nool badankeeda qiyaas ahaan (95%) waxaana codsnaynaa in nalaga kaalmeeyo geeddi socodka aannu ugu jirno

ummadnimadayada iyo dimuquraadiyadda. Waxaanu ku kalsoon nahay in Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay uu naga kaalmayn doono sidii aanu u gaari lahayn ujeeddadayada, isagoo ballanqaad buuxa naga siinaya gundhigga dantayada oo ah Soomaali Weyn.

Mudane,
Waad Mahadsantahay.

Xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed

1.	Xaaji Muxamed Xuseen	Guddoomiye
2.	Axmed Shire Cadaawe Xuseen	Gudd. ku Xigeen
3.	Cabdullaahi Ciise Maxamuud	Xoghayaha Guud
4.	Cusmaan Axmed	Kaaliye Xog. Guud
5.	Sheekh Ciise Muxamed	Keyd Haye
6.	Cabdirashiid Cali Sharmaarke	Xubin
7.	Muxamed Cawaale Liibaan	Xubin

Iyo lix xubnood oo kale

LIFAAQA "G"

Heshii Dhexmaray Sareeyaha Boqorka oo metelaya Boqortooyada Midowday iyo Sarreeyaha Emberorka Xabashida

(Ethiopia No: 1, Cmd, 1945)
Addis Ababa, 19ka Diseembar, 1944.

Sarreeyaha Boqorka Biritaanyida Weyn, Ireland iyo maxmiyadaha Ingiriiska ee badaha ka tallowsan, Emberorka India (oo halkan loogu yeerayo Sarreeyaha Boqorka) iyo Sarreeyaha Emborarka Xabashida, qabsahadii libaaxa ahaa ee qabiilka Juda, doortihii Ilaahay (oo halkan loogu yeerayo Sarreeyaha Emborarka).

Waxay 31ka Jannaayo, 1942kii, heshiis iyo ballamo ciidamo ku dhexmaray, Sarreeyaha Emborarka iyo dawladda Sarreeyaha Boqorka ee Boqortooyada Biritaanida Weyn iyo Waqooyiga Ireland, kaas oo oggolaanaya inay cudud ciidamo ahaan ku sii negaadaan, taniyo lagu beddelayo heshiis uu soo jeedintiisa leeyahay Sarreeyaha Emborarku.

Tixgelinta arrimahaas way isbeddeleen intii heshiiska aynu soo xusnay la gabagabeeyay, haseyeeshee, madaama uu dagaal socdo ma muuqato awood lagaga wada hadlo hehsiis rigli ah.

Iyagoo ah xubno ka tirsan Qaramada Midoobay, waxay go'aansadeen inay isu kaalmeeyaan si laba geesood ah, sida ay qorayaan xeerarka Qaramada Midoobay iyo inay sameeystaan heshiis ku meel gaar ah oo cusub oo ku saleysan xiriirka laba geesoodka ah:

Arrintaas awgeed waxay magacaabeen ergooyinkooda:

Sarreeyaha Emberorka;
Mudane Bitwedad Makonnen Eadalkachau;
Wasiirka Kowaad;
Sarreeyaha Boqorka Boqortooyada
Midowday ee Birtaaniyada Weyn
iyo Waqooyiga Ireland:

Mudanaha sare Earl De La Warr, xubin Golaha Latashiga; iyagoo isweydaarsaday awooddooda buuxda, ayay si toos ah isugu raaceen waxyaabaha soo socda:

Qodobka I

Heshiiskii iyo ballankii ciidamo ee la galay, 31kii Jannaayo 1942kii, waxaa burriyay heshiiskaan.

Qodobka II

Xiriirka siyaasadeed ee u dhaxeeya labada dhinac ee heshiiska wada gelaya waxaa ka hawlgalay ergeyga heer wasiir ee Ethiopia u fadhiya London oo uu oggolaaday Sarreeyaha Boqorku iyo ergeyga heer wasiir ee Ingiriiska u fadhiya Addis Ababa oo uu oggolaaday Sarreeyaha Ingiriisku

Qodobka III

1. Xukuumadda Boqortooyada Ethiopia waxay la haraysaa ama magacaabaysaa dad Ingiriis ah ama shaqsiyaad ajanabi kale ah oo waayo aragnimo ama aqoon gaar ah u leh, si ay la taliyayaal ama saraakiil ay uga noqdaan maamulkooda, haddii ay u arkaan inay u baahan yahiin.

2. Xukuumadda Boqortooyada Midowday, waxay ka kaalinaysaa dawladda Boqortooyada Ethiopia, sidii ay u heli lahayd dad dhalasho Ingiriis ah oo ku habboon inay xil u magacawdaan.

Qodobka IV

1. Awoodda Maxkameynta dadka Ingiriiska ah, dadka Ingiriisku ka mas'uul yahay iyo shirkadda Ingiriiska waa in loo adeegsadaa maxkamaddaha Ethiopia ee ku saleysan xeerka maamulka caddaaladda ee uu soo saaray Sarreeyaha Emporarka 1942 iyo sharciyada maxkamaddu soo saartay 1943, iyadoo:

   b) Qodobka 4aad ee qaybta III ee xeerarka laga beddelo weerta "qaadiyaal dhalashadoodu Ingiriis tahay" laguna beddelo weedha "qaadiyaal la hubiyay " iyo waaya'aragnimadooda garsooreed ee dal kale.

   t) Sidoo kale dhegaysiga maxkamadda sare arrin kasta ha ahaatee, ay dadka oo idil daw u yeeshaan inay codsan karaan in mid ka mid ah garsoorayaashu u yeesho waaya'aragnimada garsooreed oo dalal kale ah.

2. Dadka Ingiriiska ah iyo dadka Ingiriisku maganta u ah, waxa lagu xiri karaa oo keliya xabsiyo uu oggolaaday sarkaal waaya'aragnimo u leh maamulka casriga ah.

Qodobka V

1. Xukuumadda Boqortooyada Midowday waxay

   b) Faraha ka qaadaysaa kormeerka iyo maareynta qaybta wadaaga ee Faransiiska iyo Xabashida ee jidka reelka ee mara gudaha dhulka

Xabashida muddo saddex bilood gudahooda, haddi ay ka hesho dawladda Boqortooyada Xabashida ballanqaad toos ah oo ay ku sii wadayso habsami u socodka maamulka khadka reelka.

t) Ku wareejinaysaa xukunka iyo maamulka qaybta jidka reelka ee ku xusan xubinta (b) ee qodobkan shanaad urur cayiman oo ku muujisan ballanqaadka tooska ah.

2. Xukuumadda Boqortooyada Xabashida waa inay aqoonsataa in habsami u socodsiinta haqabtiran ee socodka jidka reelka, inay tahay qayb door weyn ku leh hawlgallada dagaalka, weliba waa inay oggolataa in waxii alaab ah ay timaaddada ka codsato xarunta qaybinta ee Bariga Dhexe ama maamulka ciidamada Ingiriisku, inay mudnaanta kowaad siiso.

3. Xukuumadda Boqortooyada Xabashida, kolka ay darbinayso habaynta dagaalka iyo maamulka jidka reelka, waxay qaadaysaa tallaabooyin aan waxba u dhimayn xuquuqda sharciga ah ee shirkadda jidka reelka ay wadaaggaan Faransiiska iyo Xabashida.

4. Xukuumadda Boqortooyada Midowday, sidoo kale ka hor inta aan la soo gunaanadin, goorta ku xusan tuducda 1aad ee kor ku xusan, waxay ciidamadu ka guurayaan xarunta Diridhabe iyo aagga Waqooyi Galbeed ka xiga jidka reelka oo goortii hore ka tirsanaa aagga ku xusan tuducda Iaad ee faahfaahinaya guuridda ee hishiisyada ciidamada Ingiriiska iyo Xabashida, 1942.

Qodobka VI

1. Xukuumadda Boqortooyada Midowday, waxay u darbinaysaa Xukuumadda Boqortooyada Xabashida ergo ciidan ah, oo noqonaysa qayb ka mid ah ciidamada Boqorka oo amarkooduna hoos imaanayo taliyaha ergada. Waxa loogu yeerayaa "Ergada ciidamada Ingiriiska ee Xabashida".

2. Mudanaanta iyo xushmada xubnaha ka tirsan ergada ciidada, waxa lagu maamulayaa arrimaha qodobkan hadda uu tilmaamayo.

3. Madaxda ergada waxay xilwadeen ka noqonaysaa hawlgallada dagaalka ee Xukuumadda Boqortooyada Xabashida ee habaynta, tababarka iyo maamulka ciidamada Xabashida.

4. Siyaasadda xukumidda habayntan, tababarka iyo maamulka Xukuumadda Boqortooyada Xabashida isagoo la tashaday madaxa ergada Ingiriiska. Madaxa ergada waxuu daw u leeyahay inuu raalli ka noqdo in qorshihii la dejiyay la fuliyo.

5. Hoggaanka dagaalka Xukuumadda Boqortooyada Xabashida iyo madaxa ergada ciidamada Ingiriiska ee Xabashida waa inay isku raacaan qaabka hawlgalka guud iyo dhaqdhaqaaaq xubnaha ergada iyo awoodoodaba.

6. Ergada Ciidamda Ingiriiska waa inay kaga guurtaa Ethiopia gundhiga heshiiskan, goortay wada tashi yeeshaan labada dhinac ee sare ee heshiiskan wada galay, sidaa daraadeed dhinacna keligii ogeysiis kuma siin karo bixidda ciidamdan. Haddii ay dhacdose, ciidamadu waxay ka guurayaan saddex billood ka dib maalinta ay xaashida ogeysiiska guddoomaan.

Qodobka VII

Si ay u ahaato saaxiib kaalin ka qaadanaya hawlgalka dagaalka oo aan wax walaac ah ka qabin saldanadeeda, Xukuumadda Boqortooyada Xabashida waxay oggolaatay in inta heshiiska socdo, degaannada ku magacaabaan degaanka kaydka ah (Reserved Area) iyo Soomaalida Galbeed, sida uu muujinayo lifaaqa ambabuxu, ay hoos yimaadaan maamulka ciidanka Ingiriiska.

Qodobka VIII

(Waxa uu la xiriiraa awoodda Xukuumadda Boqortooyada Xabashida ee fariisimada hoos yimaada heshiis ciidamo).

Qodobka IX

Waxa uu la xiriiraa:

1. Oggolaanshaha laba geesoodka ah ee maridda jidka hawada.

2. Oggolaanshaha loo oggolaanayo ururka gadiidka cirka ee Ingiriiska inuu ka hawlgelo Xabashida iyo inuu dulmaro iyo adeegsiga qalabka diyaaradaha iwm.

3. Arrintaan waxa lagu maamulayaa, heshiisyo caalami ah oo timaaddada ah.

4. U fududaynta Xabashida ee Ingiriiska iyo xoogga ciidanka cirka ee isbahaysiga.

Qodobka X

(Waxuu la xiriiraa meel uga soo wada jeedsashada waxii cadaw ah).

Qodobka XI

(Waxuu la xiriiraa qabashada waxii dhibaato keenaya).

Qodobka XII

Heshiiskani waxuu dhaqan gelaya laga billaabo taariikhda maanta.

Qodobka XIII

Heshiiskan sidiisa ayuu ahaanayaa taniyo inta lagu beddelo heshiis ay wada galaan labada dhinac ee sare. Haseyeeshee, goort kastoo ka dambeysa dhicidda goorta labada sano ee ka soo billaabma maalinta uu dhaqan galay, labada dhinac ee sare ee heshiiskan wada galay midkoodna keligii ogeysiis kuma bixin karo in la joojiyo. Haddiise ay dhacdo, heshiiku waxuu dhammaanayaa saddex bilood kadib maalinta heshiiska la bixiyay.

Iyadoo laga markhaati yahay, ayaa dhinacyada hoos ku saxiixan, qalinka ku duugeen heshiiskan, kuna dhufteen shabadahooda.

Waxa lagu saxiisay Addis Ababa, maalinta sagaal iyo tobnaad ee bisha Diseembar 1944kii, isagoo ah labada nuqul oo kala ah af Ingiriisi iyo af Amxaari oo labadooduba isku awood ah, kolka laga reebo, haddii muran yimaado oo la tixraacayo nuqulka af Ingiriisi ah.

(LS) Da Le Warr
(L.S) Makonnen Endalkachau.

LIFAAQA "F"

Heshiis Dhexmaray Xukuumadda Boqortooyada Midowday ee Britaaniyada Weyn iyo Waqooyiga Ireland iyo Xukuumadda Boqortooyada Xabashida oo la xiriira arrimaha ka bixidda Maamulka ciidamada Ingiriiska degaannada ku magacaaban Aagga Kaydka ah (Reserved Area) iyo Soomaalida Galbeed.

London, Noofembar 29, 1954
(Ethiopia No.1 (9155) Cmd. 9348)

Xukuumadda Boqortooyada Midowday ee Britaaniyada Weyn iyo Waqooyiga Ireland iyo Xukuumadda Boqortooyada Xabashida;

Iyagoo go'aansaday inay joojiyaan habayntii ku meel gaarka ahayd ee Qodobka VII ee heshiiska Ingiriiska iyo Xabashida ee lagu saxiisay Addis Ababa 19kii Diseembar, 1944.

iyo

Iyagoo go'aansaday inay fuliyaan Qodobadii heshiiska Ingiriiska iyo Xabashida ee lagu saxiixay Addis Ababa 14kii Maajo 1897kii ee la xariiray dawga daaqa waxay isku raaceen sidatan:

Qodobka I

Madaxbannaanida buuxda ee Xabashida ee degaannada laga soo gudbiyay ambabaxa lifaaqa ah (oo halkan loogu yeerayo "degaannada"), waxaa lagu aqoonsaday heshiiska Ingiriiska iyo Xabashida 1897kii, halkanna lagu sii sugaayo kol labaad. Laga billaabo Febraayo 28, 1955kii, maamulka ciidamada Ingiriiska ee sida ku meelgaarka ah ugu joogay heshiiska Ingiriiska iyo Xabashida ee Diseembar 19, 1944kii, waxuu ka baxayaa Aagga Kaydka ah, sida ku cad goorta ambabaxa ee heshiiska iyo qaybta Galbeed oo hadda hoos timaadda maamulka ciidamada Ingiriiska. Dawladda Boqortooyada Xabashida, laga billaabo maalintaa waxay dib ula soo noqonaysaa awoodeedii sharci fulinta iyo maamulka degaannada.

Qodobka II

Dawga ay qolooyinka ka kala imanayo Xabashida iyo Maxmiyadda Somaliland ee u kala gudbaya soohdinta si ay xoolohoodu u daaqaan, siday horeba ugu caddayd heshiiskii Ingiriiska iyo Xabashida ee 1897kii iyo Xaashiyihii ka dambeeyay, dib ayay, kol labaad, u sugeen labada dhinac ee heshiiskan wada galay, iyagoo qaadaya tillaabooyinka lagu hubinayo intii suuragal ah in la ilaaliyo dawga ay daaqa u leeyihiin.

Qodobka III

Iyadoo la arkay awoodda sharciga iyo maamulka Xukuumadda iyo xilka ka saaran sugidda amarka iyo kala dambaynta, fududaynta iyo awoodda hoos ku xusan, halkan waxa la xisaabinayaa degaannada Xukuumadda Boqortooyada Xabashida inay si gaar ah u darbiso si loo habaynayo

arrimaha ku habboon beelaha ka imaanaya Maxmiyadda Somaliland ay u adeegsanyaan daaqa degaannada, iyadoo halkan loogu yeerayo "Beelaha".

a) Iyadoo aan wax walaac ah ka qabin beelaha ku nool degaannada sharci fulinta Xukuumadda Boqortooyada Xabashida, ururka beelaha oo ka kooban maamulka hoose ee (Maqaawiirta), Booliska Beelaha (Ilaalo) iyo odoyaasha oo u habaysan qaab ay aqoonsan tahay Xukuumadda Maxmiyadda Somaliland, si ay wadaan hawshooda beelaha waa in la siiyaa talooyin iyo tusaalooyin ku habboon arrimaha dhexmara beelaha, iyadoo arrimahaas lagu dhammaynayo hab ay raali ka tahay Xukuumadda Maxmiyadda Somaliland. Ururka beelaha waxay xilwadeen ka noqonaayaan sugidda amarka iyo kaladambaynta ee beelaha dhexdooda. Ururka beelaha waa inaan loo adeegsan kicin siyaasadeed oo Xabashida dhexdeeda ah, heshiiskan ma oggola in arrintaa loo adeegsado beelaha iyo xubnahooda. Lama oggola wax ka badan 700 ilaalo ah inay kol wada joogaan degaanka. Kolka laga reebo nabaddoonnada, ilaalada, odayaasha iyo sarkaalka xiriirinta iyo shaqaalihiisa, ma ay jirayso degaannada aynu soo sheegnay wax saraakiil ah oo ay u soo magacaawdo Xukuumadda Maxmiyadda Somaliland, iyadoo aan heshiis lagala gelin Xukuumadda Boqortooyada Xabashida, sida ku cad tuducyada (x) iyo (kh).

b) Arrimo ku lug leh qofqof ka mid ah beelaha ama shaqaalaha sarkaalka xiriirinta, waxa lagu qaadi karaa dacwadooda maxkamadda Maxmiyadda ee fadhida Maxmiyadda Somaliland. Dacwaddaha ku lug leh Xabashida iyo beelaha, waxaa lagu qaadayaa maxkamaddaha Xabashida, haseyeshee sida ku cad tuducda (x) ee hoose sarkaalka xiriirinta ama xubin ka mid ah shaqaalihiisa ayaa daw u leh inay joogaan maxkamadda. Waxaa awood loo siinayaa inuu bixiyo ama soo diyaariyo waxii xog ah ee maxkamaddu u baahato.

c) Iyadoo aan wax muran ah laga qabin awoodaha buuxa ee xiridda ee degaanka ee dhinaca booliska Xabashida, ilaaladu waxay awood buuxda u haystaan inay xiraan xubnaha beelaha iyo qofkii kale ee loo baahdo in la xiro ee ku lug leh fal dambiyeed daneeya xubnaha beelaha ama sarkaalka xiriirinta ama shaqaalihiisa ama qof baxsanaya kadib goortuu dambi galay. Qof kasta oo Xabashi ah oo ay xiraan ilaaladu, waa in sida ugu dhakhsaha badan loogu soo celiyaa maamulka Xabashida. Sidaas oo kale qof kasta oo ay xiraan booliska Xukuumadda Xabashida ee uu xusayo tuducda (t) ee qodobkani, waa in dacwadiisa lagu qaadaa maxkamadda Maxmiyadda Soomaaliland, waana in sida ugu dhakhsiyaha badan loogu gudbiyaa maamulka beelaha.

d) Waa inuu jiraa sarkaal xiriiriye ee Ingiriis ah oo wata shaqaalaha uu u baahan yahay oo ay u soo magacawday Xukuumadda Maxmiyadda Somaliland oo degaannada, loona oggol yahay inuu si madaxbannaan u dhexmaro degaannada. Sarkaalka xiriiriyaha ah iyo adeegeyaashiisuba waa inay had iyo jeer wada tashiyo

la yeeshaan maamulka Xukuumadda Xabashida, si loola wada socdo haddba waxii ku soo kordha arrimaha beelaha degaannada. Beelaha degaannada, sarkaalka xiriirinta iyo adeegeyaashisuba waxay xilwadeen uga yahiin u soo gudbinta amarrada Xukuumadda Maxmiyadda Somaliland ee ku xusan tuducda (b) ee aynu soo sheegnay waxaana u gudbinayaan Xukuumadda Xabashida dulucda iyo amarrada. Waxaa kaloo ay u gudbinayaan beelaha amarrada Xukuumadda Xabashida goortay ka codasato.

e) Daawooyinka caafimaadka ee dadka iyo xoolaha iyo adeegyada waxbarashada ee loo darbiyay beelaha degaannada, waxay u sii soconayaan heerka ay hadda yahiin, inta ay beelaha joogaan degaannada. Labada dhinac ee heshiiskan wadagalay ayaa ka wada hadlaya, haddii loo baahdo in la kordhiyo heerka adeegyada oo ay ku jiraan biyuhu.

Qodobka IV

Adeegyada iyo awoodaha loogu oggolaaday heshiiskan beelaha Maxmiyadda Somaliland, kuwo la mid ah ayay daw u yeelanayaan beelaha reer Xabashida ee u gudba dhinaca soohdinta Maxmiyadda Somaliland, iyadoo goorkasta la tixraacayo Qodobka II ee heshiiskan.

Qodobka V

Dulucda heshiiskan dib ayaa loo eegi karaa, kol kasta oo uu codsado dhinac ka mid ah qaybaha heshiiskan kala saxeexday. Haddii aanay taasi dhicin heshiiskan waxuu dhaqangal ahaanayaa muddo shan iyo toban sano. Dhammaadka goortan waa inuu lix bilood ka hor dhinacyada mid ka mid ah bixiyaa ogeysiis, dabadeed heshiiskaa waa uu sii soconayaa taniyo lixda bilood ee ogeysiisku dhammaato. Joojinta heshiiskan raad kuma yeelanayo dawga daaqa ee ku xusan Qodobka II.

Qodobka VI

Heshiiskan waxuu dhaqan galayaa goortii la saxiixo waxaana uu beddelayaa arrimihii la xiriiray degaannada ee heshiiskii Xabashida iyo Ingrisiika ee 19ka Diseembar 1944kii, oo ay ku jiraan la wareegidda iyo gooreynta ambabaxa ee la hakiyay iyo waxyaabihii la xiriiray habmaamuuska (Protocol) ee Luulyo 24, 1948kii. Waxa kale oo la isku raacay in dhammaanba weydiimaha ku lug leh maamulka degaannada ee heshiiska iyo habmaamuuska kor ku xusan lagu beddelay heshiiskan hadda.

Iyadoo markhaati laga yahay, dhinacyada hoos ku saxiixani waxay qalinka ku duugeen iyagoo awood buuxda ka haysta Xukuumadahooda.

Waxaa nuqul ahaan loogu qoray London, isagoo af Ingiriis ah, maalinta 29ka Nofeembar 1954kii.

Anthony Eden
Akililou.

Qaabka Soohdinta

Degaannadu waxay ka kooban yahiin dhulka ku dhereran soohdinta Xabashida oo ku jeeda Galbeedka iyo Koofurta xariiqihiisuna yahay sidatan:

Waxuu ka billaabmayaa dhibic ku taalla soohdinta caalamiga ah ee u dhexeysa Xabashida iyo Maxmiyadda Somaliland oo ku taalla inta u dhexeysa bartamaha dhibcaha saddexagaleed iyo astaroonamiyeed ee Eirile iyo Cule oo ku aaddan xariiq ka soo billaabana geska Maskan taniyo dhibicda saddexagaleed iyo asataroonamiyeed ee buurta Dulleti, xariiqu waa inuu dabamaraa xariiqa toosan oo aada buurta Dulleti oo u gudba tuulad Darimu. Darimu kolka uu tago xariiqu waxuu aadaa Abose-Cololeia-Serir Gerad-Gara taniyo Buulada Weyn, Buulo Qaaxo taniyo Libaaxfuul-Subul-Hanafle-Subul Bardood-Gadiid Caddoole-Subul Nirig-Subul Bardood Subul Odle-Abai Folan; kadib ku dheraran xariiqda Qaaxo taniyo Talweeg oo ka tirsan Tog Gerar taniyo dhibic toban kiloomtir ka saraysa Dhagaxbuur. Halkan laga billaabo xariidu waxay martaa Dhagaxbuur, iyadoo u gudubta Waqooyiga iyo Bariga Dhagaxbuur, iyadoo weliba toban kiiloomitir hoos ka maraysa Dhagaxbuur oo ku soo noqonaysa Tog Gere meel Waqooyi Galbeed siddeed kiiloomitir ka xigta Bullaale, halkan laga billaabo xariiqda waxay martaa Bullaale agtiisa meel Koofur Bari ka xigta ceelsha Bulaale, iyadoo sii maraysa jidka Hara Caddo (oo khariidadda ku magacaaban Qabridahare KCN 4280) oo laba ceel ku kalayaalla xariiqda tooska ah ee Walwaal taniyo Gallaadi kala kulmeysa meel lix iyo toban kiiloomitir Bariga ka xigta Walwaal, isla jidkaasna uga gudbaysa Gaalkacayo taniyo halka ay iska gooyaan dhulka Soomaaliyeed ee Wasaayadda Qaramada Midoobay.

LIFAAQA "Q"

DIIWAANKA ABTIRSIGA SOOMAALIDA

Samaali Hiil Abroone waxuu dhalay sagaal wiil oo ah sidatan: Iriir Samaali, Gardheere Samaali, Mayle Samaali, Yaabuur Samaali, Maqarre Samaali, Gariirre Samaali, Karuure Samaali, Xamarre Samaali iyo Xariirre Samaali saddexda ugu danbeeya lama haayo faracooda halkuu ku danbeeyo.

Irir Samaali

1	**Aji**	Irir	5	Albaweyne	Horedarre
2	Digale	**Aji**	4	Muxamed	Madaxweyne
3	Maadinle	Digale	4	Yaxye	Madaxweyne
4	Waaqle	Maadinle	4	Cali	Madaxweyne
4	Diinle	Maadinle	3	**Maaha**	Dir
3	Mogoosiile	Digale	4	Xanaftire	Maaha
2	Dir	**Aji**	5	Rambade (Muxamed)	Hanaftire
3	**Madoobe**	Dir	6	Eeramage (Biyomal)	Rambade
4	Ciise	Madoobe	7	Ismiin	Eeramage
5	Dalool	Ciise	7	Sacad	Eeramage
6	Walaaldoon	Dalool	7	Daadoow	Eeramage
6	Qoolle	Dalool	7	Gaadsan	Eeramage
6	Urroone	Dalool	6	Baajamaal	Rambade
5	Wardiiq	Ciise	7	Godle	Baajamaal
6	Waaqtashile	Wardiiq	7	Daarooddile	Baajamaal
6	Runwaaq	Wardiiq	7	Madoobelabe	Baajamaal
5	Abgaal	Ciise	6	Quraaniyow	Rambade
6	Maamatan	Abgaal	7	Asarre	Quraaniyow
6	Uurweyne	Abgaal	7	Kelliye	Quraaniyow
6	Muuse	Abgaal	7	Baane	Quraaniyow
3	**Madaxweyne**	Dir	7	Furkashe	Quraaniyow
4	Gurre	Madaxweyne	7	Daraawe	Quraaniyow
4	Gurgura	Madaxweyne	7	Sugtuure	Quraaniyow
4	Horedarre	Madaxweyne	7	Berkaayo	Quraaniyow
5	Ijaja	Horedarre	7	Kaalmaweesh	Quraaniyow
5	Khayre	Horedarre	6	Dabruubo	Rambade

7	Gaarsis	Dabruubo	10	Ciise	Samaroone
7	Garweyne	Dabruubo	10	Yuusuf	Samaroone
6	Isaaq	Rambade	10	Subeyr	Samaroone
7	Toljecle	Isaaq	9	Makahiil	Saciid
7	Muusa	Isaaq	10	Basanay	Makahiil
7	Sanbuur	Isaaq	10	Yoonis	Makahiil
7	Cibraan	Isaaq	10	Makahil Dheer	Makahiil
7	Awal	Isaaq	10	Cabdalla	Makaahiil
7	Ayuub	Isaaq	9	Muxamed Case	Saciid
7	Garxajis	Isaaq	10	Abreeyn	Muxamed Case
7	Arab	Isaaq	10	Muuse	Muxamed Case
4	Surre	Maaha	10	Aadan	Muxamed Case
6	Qubeys	Surre	10	Abokar	Muxamed Case
6	Wayaale	Qubeys	10	Reer	Muxamed Case
6	Toonle	Qubeys	3	**Deel**	Dir
6	Midkishe	Qubeys	4	Xaniifa	Deel
6	Axadow	Qubeys			
5	Cabdalle	Surre			
6	Agoon	Cabdalle			
6	Faqi Muxamed	Cabdalle			
6	Suleybaan	Cabdalle			
3	**Madaluug**	Dir			
4	Cali	Madaluug			
5	Abuukar	Cali			
6	Xuseen	Abuukar			
7	Daa'uud	Xuseen			
8	Saciid	Daa'uud			
9	Samaroone	Saciid (Gadabuursi)			
10	Makador	Samaroone			

1	**Hawiye**	Irir	7	Wayersan	Madoone
2	**Karanle**	**Hawiye**	7	Waceesle	Madoone
3	Kaariye	Karanle	7	Rabadheere	Madoone
3	Sixaawle	Karanle	3	**Jibade**	Gugundhabe
4	Bad	Sixaawle	4	Moolkaal (Baadicade)	Jibade
4	Sanbuur	Sixaawle	5	Suur	Jibade
3	Raranle	Karanle	5	Tigale	Moolkaal
4	Gidir	Raranle	6	Warable	Tigale
5	Abshacle	Gidir	7	Gaadale	Warable
5	Warneef	Gidir	8	Jiir	Gaadale
5	Abuukar	Gidir	9	Burde	Jiir
3	Waadeere	Karanle	10	Cawl	Burde
4	Sebti	Waadeere	11	Samaroob (Curad)	Cawl
4	Foolculus	Waadeere	9	Utubeen	Jiir
2	**Xaskul**	**Hawiye**	10	Nabadoon	Utubeen
3	Idde	Xaskul	10	Maamiye	Utubeen
3	Xareed	Xaskul	10	Ciise	Utubeen
3	Cali	Xaskul	11	Quuriwaay	Ciise
2	**Gugundhabe**	**Hawiye**	11	Quraanjecel	Ciise
3	**Jidle**	Gugundhabe	11	Gacal	Ciise
4	Murile	Jidle	12	Afgaab	Gacal
4	Waytaan	Jidle	12	Subeer	Gacal
5	Xagal	Waytaan	12	Odale	Gacal
5	Xaadle	Waytaan	13	Ibraahim	Odale
6	Gumaadle	Xaadle	13	Ilkajar	Odale
7	Aadan	Gumaadle	14	Cadowyar (Wabarada)	Ilakajar
8	Barre	Aadan	14	Caryahan	Ilkajar
8	Maalin	Aadan	14	Ilaabe	Ilkajar
8	Maxamuud	Aadan	14	Xaamud	Ilkajar
6	Madoone	Xaadle	15	Dumaal	Xaamud

F.G Jiiryar iyo Jaladeen Gugundhabe ma farcamin.

15	Duudow	Xaamud	6	Abroone	Waaqle
15	Dawaale	Xaamud	5	Mege	Hintire
16	Khalaf	Dawaale	6	Waalle	Hintire
16	Faqow	Dawaale	7	Abtidoon	Waalle
17	Kudbaale	Faqow	7	Magow	Waalle
17	Cusmaan	Faqow	4	Waranle	Baalcad
18	Waasuge	Cusmaan	4	Garuure	Baalcad
6	Baydiisle	Tigaale	4	Aruure	Baalcad
6	Muumin	Tigaale	2	**Gorgaati**	Hawiye
4	Jajeele	Jibide	3	Mareexaan	Gorgaati
5	Kulubkay	Jajeele	3	Tigaale	Gorgaati
5	Nuur Faarax	Jajeele	3	Wadalaan	Gorgaati
5	Kadshe	Jajeele	4	Wadmahore	Wadalaan
5	Dudbiye	Jajeele	5	Wiliwili	Wadmahore
5	Shalashame	Jajeele	6	Gumcadle	Wiliwili
5	Cabdi Isuge	Jajeele	7	Muuse	Gumcadle
2	**Raarane**	Hawiye	8	Muxamed	Muuse
2	**Jambeelle**	Hawiye	9	Sacad	Muxamed
3	Baalcad	Jambeelle	10	Cabdalle	Sacad
4	Olajir (Caalin)	Baalcad	10	Cawareere	Sacad
5	Ajuuraan	Olajir (Caalin)	11	Waqujire	Cawareere
6	Beeydan	Ajuuraan	12	Muxamed (Lugayare)	Wuqujire
6	Badbeydan	Ajuuraan	12	Qubeys	Wuqujire
6	Saanle	Ajuuraan	11	Odow	Cawareere
6	Salimeg	Ajuuraan	12	Muxamed	Odow
6	Toore	Ajuuraan	12	Daa'uud	Odow
6	Dhaqsoore	Ajuuraan	3	Silcis	Gorgaati
6	Walamage	Ajuuraan	4	Libol	Silcis
4	Hintire	Baalcad	4	Nugale	Silcis
5	Waaqle	Hintire	3	Daame	Gorgaati

4	Hiraab	Daame	11	Muxamed	Ibraahim
5	Mudulood	Hiraab	11	Abuukar	Ibraahim
6	Malabsay	Mudulood	10	Muxamed	Maalinle
6	Wacayten	Mudulood	11	Warsame	Muxamed
6	Udeejeen	Mudulood	11	Cabdalle	Muxamed
6	Daarandoole	Mudulood	11	Yeber	Muxamed
7	Hilibi	Daarandoole	8	**Moobleyn**	**Cusmaan**
7	Cusmaan	Daarandoole	9	Abidig	Moobleen
8	**Abgaal**	**Cusmaan**	10	Yaroow	Abidig
9	**Harti**	**Abgaal**	10	Kaalwaaq	Abidig
10	Warsangali	Harti	10	Wehre	Abidig
10	Suul	Harti	10	Maqalsame	Abidig
10	Ciise	Harti	10	Hundub	Abidig
9	**Wacbuudhan**	**Abgaal**	9	Magacle	Moobleen
10	Dhoole	Wacbuudhan	10	Hoole	Magacle
11	Daa'uud	Dhoole	10	Yeber	Magacle
10	Kabaale	Wacbuudhan	10	Yaalle	Magacle
11	Muuse	Kabaale	8	**Illaabaay**	**Cusmaan**
10	Daanweyne	Wacbuudhan	5	**Martiile**	**Hiraab**
11	Galmaax	Daanweyne	6	Maashiye	Martiile
9	**Warculus**	**Abgaal**	6	Dhuxul	Martiile
10	Waceysle	Warculus	6	Wahariile	Martiile
11	Cumar	Waceysle	6	Cimaateen	Martiile
11	Haaruun	Waceysle	7	Utureen	Cimaateen
11	Sulemaan	Waceysle	8	Waaceeye	Utureen
11	Jibriil	Waceysle	9	Axmad-diin	Waaceeye
8	**Wacadaan**	**Cusmaan**	10	Ciise	Axmad-diin
9	Maalinle	Wacadaan	11	Daa'uud	Ciise
10	Ibraahim	Maalinle	12	Sacad	Daa'uud
			13	Caagane	Sacad

14	Faqi shamsi (Qudbaale)	Caagane	17	Cabdalle (Weyne)	Cumar
15	Faqi Cumar	Faqi Shamsi	17	Cumarsiyaad	Cumar
16	Axmad (Looboge)	Faqi Cumar	17	Cumardiin	Cumar
17	Mahad'Alle	Axmad	17	Axmad	Cumar
18	Gacal	Mahad'Alle	17	Sadiiq (Cabdalle Yare)	Cumar
18	Eybakar	Mahad'Alle	17	Samarre	Cumar
18	Muxamed	Mahad'Alle	16	Cusmaan (Gandershe)	Faqi Cumar
18	Xasan	Mahad'Alle	17	Maadsheekh	Cusmaan
18	Cabdalle	Mahad'Alle	17	Ibraahim	Cusmaan
18	Cumar	Mahad'Alle	17	Usgow	Cusmaan
18	Caalin	Mahad'Alle	16	Muxamed	Faqi cumar
17	Caagane	Axmad	17	Baaxasan	Muxamed
18	Nuur	Caagane	18	Maad	Baaxasan
18	Muxamed	Caagane	18	Qaasim	Baaxasan
18	Buubaal	Caagane	18	Xaaji	Baaxasan
18	Samafale	Caagane	17	Muraad	Muxamed
18	Cumar	Caagane	17	Guudle	Muxamed
18	Mahadow	Caagane	16	Cali	Faqi Cumar
18	Samatar	Caagane	16	Abiib	Faqi Cumar
17	Cabdi	Axmad	16	Xasan	Faqi Cumar
17	Sacdi	Axmad	16	Cabdisheekh	Sheekhaal
18	Muxamed	Sacdi	16	Gaameedle	Sheekhaal
18	Cusmaan	Sacdi	16	Awsaciid	Sheekhaal
18	Magan	Sacdi	6	Cayr	Madarkicis
18	Cumar	Sacdi	7	Muucle	Cayr
18	Cali	Sacdi	8	Abti'edeg	Muucle
18	(Qaasim) Rooble	Sacdi	9	Qoorcas (Habar Aji)	Abti'edeg
18	(Xuseen)Yeberow	Sacdi	9	Warwaaq	Abti'edeg
16	Cumar (Qudub)	Faqi Cumar	10	Muxamed	Warwaaq

10	Cali	Warwaaq	7	Tashame	Saleebaan
10	Fiidsay	Warwaaq	7	Farax	Saleebaan
9	Dhowrkac	Abti'edeg	6	Saruur	Madarkicis
10	Madaxdiir	Dhowrkac	7	Nabadwaa	Saruur
10	Dhalow	Dhowrkac	8	Waaq	Nabadwaa
10	Cumar Dheer	Dhowrkac	9	Wacdaan	Waaq
10	Amaanle	Dhowrkac	5	Duduble	Hiraab
10	Cabdalle	Dhowrkac	6	Aarsade	Duduble
10	Bilaal	Dhowrkac	6	Waxadsame	Duduble
10	Samadoor	Dhowrkac	7	Samadoor	Waxadsame
11	Xasan	Samadoor	8	Hantile	Samadoor
11	Cabdalla	Samadoor	8	Maqalsame	Samadoor
12	Axmad	Cabdalla	7	Daa'uud	Waxadsame
13	Carroole	Axmad	7	Bisin	Waxadsame
14	Bambaanshe	Carroole			
14	Suubiye	Carroole			
14	Ayaanle	Carroole			
14	Caalin	Carroole			
14	Cabsiiye	Carroole			
7	Waace (Yabadhaale)	Cayr			
8	Sabbuux	Waace			
9	Muxamed	Sabbuux			
9	Nabiyaal	Sabbuux			
8	Sannad Nabi	Waace			
9	Caaldheere	Sannad Nabi			
9	Hiraabe	Sannad Nabi			
8	Walaaljecel	Waace			
8	Waregaal	Waace			
8	Wartaag	Waace			
6	Saleebaan	Madarkicis			

Gardheere Samaali

1	**Garjinte**	**Gardheere**	7	Gabboow	Dagoodiye
2	**Allamoog**	Garjinte	6	Masare	Saransoor
2	**Wacays**	Garjinte	6	Ciise	Saransoor
3	Cabdulle	Waceys	1	**Ibraahim**	**Gardheere**
4	Xeeroow	Cabdulle	2	**Cawramale**	Ibraahim
4	Muneey	Cabdulle	3	Garablow	Cawramale
4	Fakiis	Cabdulle	4	Tolweyne	Garablow
2	**Riyaale**	Garjinte	4	Yabadhaale	Garablow
3	Carte	Riyaale	3	Erenta	Cawramale
4	Mataan	Carte	4	Maskiinwaaq	Erenta
5	Saransoor	Mataan	4	Tolciise	Erenta
6	Gaaljecel	Saransoor	4	Tolmuuse	Erenta
7	Barsane	Gaaljecel	3	Gabaleen	Gawrmaale
7	Sooraanle	Gaaljecel	4	Waladey	Gabaleen
7	Cali	Gaaljecel	4	Cidwaaq	Gabaleen
7	Nuur	Gaaljecel	4	Yaabdaal	Gabaleen
7	Madoobe	Gaaljecel	4	Samarag	Gabaleen
7	Dhiblaawe	Gaaljecel	4	Abkey Lagow	Gabaleen
7	Xuseen	Gaaljecel	1	**Garre**	**Gardheere**
6	Dagoodiye	Saransoor	2	**Tuuf**	Garre
7	Fardaanow	Dagoodiye	3	Cadoolle	Tuuf
7	Ceelible	Dagoodiye	3	Cali	Tuuf
7	Cabaadwaaq	Dagoodiye	1	**Hoon**	**Gardheere**
7	Abrishe	Dagoodiye	2	**Galsoore**	Hoon
7	Kudaqaan	Dagoodiye	2	**Gaashe**	Hoon
7	Walaaljecel	Dagoodiye	2	**Irdhe**	Hoon
7	Midimaal	Dagoodiye			
7	Idiris	Dagoodiye			
7	Raqay	Dagoodiye			

Mayle Samaali

1	**Guud**	**Mayle**	11	Agoon	Ciise
2	Uurmidig	Guud	13	Yabar	Dige
3	Kanshile	Uurmidig	12	Uurkuxeeb	Yabar
4	**Xawaadle**	**Kanshile**	13	Aadan	Yabar
5	**Midigsame**	**Xawaadle**	13	Warsame	Aadan
5	**Maxamuud**	**Xawaadle**	13	Daarood	Cali
6	Allagumur	Maxamuud	**9**	**Cabdalle**	**Samatalis**
7	Saruur	Allagumur	10	Muxamed	Cabdalle
7	Lixsugur	Allagumur	11	Xuseen	**Muxamed**
6	Lo'doone	Maxamuud	11	Xasan	**Muxamed**
7	Ishaarab	Lo'doone			
7	Wacaale	Lo'doone			
8	Cabdiraxmaan	Wacaale			
8	**Samatalis**	**Wacaale**			
9	**Yuusuf**	**Samatalis**			
10	Cabdi	Yuusuf			
9	**Faramooge**	**Samatalis**			
10	Dhoore	Faramooge			
10	Dhegadikan	Faramooge			
9	**Dige**	**Samatalis**			
10	Ciise	Dige			
11	Ibraahim	Ciise			
11	Madacweyne	Ciise			
12	Cali	Madaxweyne			
13	Muxamed	Cali			
13	Haruun	Cali			
13	Darood	Cali			

Yaabuur iyo Maqarre Samaali

1	Yaabuur	Samaali	3	Waaqbari	Dabarre
2	Cali	Yaabuur	3	Ilkoole	Dabarre
3	Hubeer	Cali	3	Subeyr	Dabarre
4	Hayaame	Hubeer	2	Ciroole	Maqarre
5	Khayroow	Hayaame	1	**Xamarre Samaali**	Wuu dabar go'ay
5	Macallin	Hayaame	1	**Xariirre Samaali**	Wuu dabar go'ay
5	Ciidow	Hayaame	1	**Garriire Samaali**	Waxuu deggaa Ceel Karre
4	Harraa	Hubeer	1	**Karuurre Samaali**	Wuu dabar go'ay
5	Obo Bare	Harraa			
4	Galbiyeed	Hubeer			
5	Cabdille	Galbiyeed			
4	Huliye	Hubeer			
5	Fooqoonle	Huliye			
6	Fariin Jaale	Faqoonle			
3	Dawle	Cali			
4	Abaarre	Dawle			
5	Cumaroow	Abaarre			
5	Muuse	Abaarre			
5	Nuure	Abaarre			
5	Mahad	Abaarre			
4	Cirjecle	Dawle			
5	Gerre	Cirjecle			
5	Gerraade	Cirjecle			
1	Maqarre	Samaali			
2	Dabarre	Maqarre			

S A B

Sida laga warqabo Sab Hiil Abroone waxuu dhalay Amarre keli ah, Amarre waxuu dhalay Deysame isaguna waxuu dhalay Digil oo ay ka farcameen toddobo oo ah sida hoos ku tilmaaman:

1	Duubo	**Digil**	1	**Duubdheere**	Digil
2	Kab	Duubo	2	Warasiile (Xarin)	Duubdheere
2	Garmooge	Duubo	2	Takame (Dabarre)	Duubdheere
2	Otoote	Duubo	1	**Digane**	Digil
2	Watillal	Duubo	2	Hoohe	Digane
2	Daraweyne	Duubo	2	Barxeed	Digane
2	Taabsinow	Duubo	2	Mooriye	Digane
2	Gallaal	Duubo	2	Wadataale	Digane
2	Muxamed	Duubo	1	**Muxamed**	Digil
2	Aw Nuur	Duubo	2	**Mirifle**	Muxamed
2	Aw Juuraan	Duubo	3	Eemid	Mirifle
1	**Geedle**	Digil	3	Eelaay	Mirifle
2	Jiido	Geedle	3	Haraw	Mirifle
3	Googo	Jiido	3	Qoomaal	Mirifle
4	Wegis	Googo	3	Yalaale	Mirifle
5	Duukur	Wegis	3	Garwaale	Mirifle
3	Haafo	Jiido	3	Disow	Mirifle
4	Seefer	Haafo	3	Barbaarow	Mirifle
4	Naweeda	Seefer	2	**Caleemo**	**Muxamed**
5	Shareera	Seefer	3	Kasanle	Caleemo
5	Garoobo	Seefer	3	Jambaluul	Caleemo
5	Hafla	Seefer	3	Waaqdhore	Caleemo
5	Wais	Seefer	3	Gaalwegar	Caleemo
6	Busle	Wais	3	Jilible (Geledi)	Caleemo
6	Takame	Wais	3	Bagadi	Caleemo
			3	Baalguri	Caleemo
			3	Waaqbiyo	Caleemo
			3	Gasaar Gudde	Caleemo

F.G Cumar iyo Cusmaan Digil war lagama haayo meeshay ku dambeeyeen.

RAXAN-WEYN

Beelaha hoos ku xusan iyo kuwa kaleba kuma abtirsadaan SAB ama DIGIL, waa beelo, meelkastaba ha ka yimaadeene, ku soo biiray magaca RAXAN-WEYN dhaqan iyo degaanna la wadaagga beelaha DIGIL.

1	Reer Dumaal
2	Jiroon
3	Hadama
4	Luwaay
5	Geelidle
6	Shirmooge
7	Helleda
8	Wanjeel
9	Goolkulaba
10	Yintaar
11	Leysaan
12	Macallin Weyne
13	Uraabane
14	Garwaale
15	Jibile

Daarood

Sida la ogsoonyahay Daarood waxuu dhalay shan oo ah Kablalax, Sede, Tanade, Awrtable iyo Ciise

2	Kablalax	Daarood	15	Jibriil	Xummud
3	Koombe	Kablalax	16	Ibraahim	Jibriil
4	Geri	Koombe	17	Aadan	Ibraahim
4	Harti	Koombe	17	Yoonis	Ibraahiim
5	Seed (Dhulbahante)	Harti	17	Muxamed	Ibraahiim
6	Yoonis	Seed	18	Suleebaan	Muxamed
6	Hayaag	Seed	19	Cali	Suleebaan
7	Muuse	Seed	19	Ismaaciil	Suleebaan
7	Muxamed	Muuse	19	Baciidyahan	Suleebaan
7	Abokor	Muuse	19	Maxamuud	Suleebaan
7	Cabdulla	Muuse	5	Moorasante	Harti
5	Amalaale (Majeerteen)	Harti	6	Igle	Moorasante
6	Wabeeneeye	Amlaale	6	Warsengali	Moorasante
6	Nooles	Amlaale	7	Warlaabe	Warsengeli
6	Aawe	Amlaale	7	Warma'eke	Warsangeli
7	Saruura	Aawe	8	Xamargeelle	Warma'eke
8	Ammaanle	Saruura	9	Dubeys	Xamargeelle
9	Edegfacle	Ammaanle	10	Makaahiil	Dubeys
8	Nooles	Saruura	10	Muslim	Dubeys
9	Muxamed	Nooles	10	Maxamuud	Dubeys
10	Ijigle	Muxamed	10	Jidwakuro	Dubeys
11	Talareer	Ijigle	10	Cusmaan	Dubeys
12	Suwaaqroon	Talareer	10	Isaaq	Dubeys
12	Wadalmoge	Talareer	10	Iddireys	Dubeys
12	Nabidor	Talareer	5	Mooracase	Harti
13	Toljecle	Nabidor	6	Deshiishe	Mooracase
14	Xummud	Toljecle	6	Tinle	Mooracase

6	Mageblabe	Mooracase	11	Haaruun	Isaaq
6	Kabtanle	Mooracase	8	Cowlyahan	Baahale
3	Kumade	Kablalax	9	Tuurcadde	Cowlyahan
4	Gelimeys	Kumade	10	Xawis	Tuurcadde
4	Absame	Kumade	10	Soonqaad	Tuurcadde
5	Baalcad	Absame	10	Abokor Cadde	Tuurcadde
5	Weyteen	Absame	9	Jibraaiil	Cowlyahan
5	Jidwaaq	Absame	10	Waafato	Jibraa'iil
6	Bartire	Jidwaaq	10	Xasan	Jibaa'iil
6	Abasguul	Jidwaaq	11	Muumin	Xasan
6	Yabarre	Jidwaaq	11	Afgaab	Xasan
5	Ogaadeen	Absame	11	Aadankheyr	Xasan
6	Maqaabul	Ogaadeen	11	Afwaax	Xasan
7	Makahiil	Maqaabul	11	Cali	Xasan
6	Mirwalaal	Ogaadeen	8	Suleybaan	Baahale
7	Baahala	Mirwalaal	8	Xamar	Baahale
8	Subeeyr	Baahale	8	Ciise	Baahale
9	Muxamed	Subeeyr	7	Talamoge	Mirwalaal
10	Cismaan	Muxamed	8	Cabdalla	Talamoge
10	Cabdulle	Muxamed	8	Muxamed	Talamoge
11	Aadankheyr	Cabdulle	8	Caabudwaaq	Talamoge
11	Mahad Rooble	Cabdulle	2	Sede	Daarood
11	Khalaf	Cabdulle	3	Faahiye	Sede
11	Yuusuf	Cabdulle	3	Mareexaan	Sede
12	Cali	Yuusuf	4	Uurmidig	Mareexaan
12	Caamir	Yuusuf	5	Nibiroon	Uurmidig
12	Qalaf	Yuusuf	4	Oysame	Mareexaan
12	Shishoore	Yuusuf	5	Oganiyow	Oysame
12	Higis	Yuusuf	5	Hadanberi	Oysame
10	Isaaq	Muxamed	6	Gashidsoor	Hadanberi
11	Cali	Isaaq	6	Geshidle	Hadanberi

7	Xasan	Geshidle			
8	Macmahday	Xasan			
8	Nabihalaal	Xasan			
9	Ibraahim	Nabhihaal			
9	Muxamed	Nabihalaal			
8	Isaaq	Geshidle			
9	Redimire	Isaaq			
10	Sanfaruur	Redimire			
10	Muxamed	Redimire			
10	Talxe	Redimire			
11	Cumar	Talxe			
11	Muxamed	Talxe			
2	Tanade	Daarood			
3	Leelakase	Tanade			
3	Korshe	Tanade			
3	Malasmuge	Tanade			
3	Fatah	Tanade			
3	Legood	Tanade			
3	Jus	Tanade			
3	Alaye	Tanade			
2	Awrtable	Daarood			
2	Ciise	Daarood			

Sida la ogyahay Jareerta Soomaalida waxay u qaybsantaa shan qolo oo kala ah: Reer Shabeelle, raar Baarre, Reer Goleed, Reer Gabaaweyn iyo Reer Shiidle.

1	**Reer Shabeelle**		1	**Reer Gabaweyn**
2	Ciise		2	Gabaaweyn
3	Geedow	Ciisa	2	Garra Mara
3	Dhegayaa	Ciisa	1	**Reer Goleed**
3	Baad	Ciisa	2	Miyaw
3	Calimaad	Ciisa	2	Minyaasa
4	Kumaad	Calimaad	2	Makwa
4	Buurow	Calimaad	2	Majiindo
4	Muuse	Calimaad	2	Makalee
5	Gaabane	Muuse	2	Mushungula
3	Abokar	Ciisa	2	Wanyiika
4	Cismaaney	Abokar	2	Mulleema
5	Shirkow	Cismaaney	2	Maniyameesi
5	Casir	Cismaaney	2	Waabooni
4	Dhorow	Abokar	2	Wariibit
5	Haadle	Dhorow	2	Eyle
2	Gasar		1	**Reer Shiidle**
3	Gumarey	Gasar	2	Walaamoy
3	Kulmis	Gasar	2	Sagaale
4	Gaagaabow	Kulmis	2	Garmagale
4	Buullow	Kulmis	2	Waaqbiyo
3	Askar	Gasar	2	Adega (kaboole)
3	Hirey	Gasar	2	Ciise
1	**Reer Baarre**			
2	Makanne			
2	Kuusane	Makanne		
2	Cusmaan Adeer	Makanne		
2	Maxaad	Makanne		
2	Cali Sabdi	Makanne		

F.G. Lixda Shiidle waa dad isku bahaystay dhaqan iyo degaan. Jareerta Waaqbiyo waxay kasoo hayaantay beesha Waaqbiyo oo Afgooye degganeyd, sidoo kale Ciise Reer Shabeele Kaboolena Reer Baare.

	Shanta Tunni Baraawe				
1	**Reer Eegan**				
	Daafarad				
	Hajuubo				
	Wariile				
2	**Reer Xeebeed**				
	Goygaal				
	Daaqtire				

F.G. Shanta Tunni Baraawe oo ka kooban Saddexda Eegan iyo Labada Xeebeed (Daaqtire iyo Goygaal), sida taariikhda oraahda Soomaaliyeed sheegayso, waa dad aan isku abtirsan oo dan iyo deggaan wadaagga. Saddexda reer Eegan oo ah Daafaraad, Wariile iyo Hajuubo, waxay qarnigii 12aad Miiladiga ka soo gudbeen Luuq Ganaane waxayna soo gaareen webiga Sh/Hoose Helada Sablaale. Waxay la kulmeen ciidan uu soo dirsaday Boqorkii Ajuuraan ee waagaa u talinayay Baraawe. Qolodii reer Eegan waxaa loo diiday inay gudbaan taniyo ay ka oggolaadeen in la tumo, taasoo muujineysa hoos imaashada Saldanada Boqorka. Sidaa daraadeed magaca Tunni waxuu ka yimid kuwii la soo tumay.

	Shanta Tunni Toore				
1	Gaameedle				
2	Kuuma				
3	Megentole				
4	Galandheere				
5	Awgubow				

F.G Shanta Tunni Toore waa dad aan isku abtirsan waana dan iyo deggaan wadaag. Magaca Toore waa beel ka mid ah Ajuuraankii waagaa u talinayay Baraawe ay qolodaani megengashay.

Lifaaq K Dastuurkii ugu horreeyay Jamhuuriyadda Soomaaliya.

COSTITUZIONE DELLA REPUBBLICA SOMALA

IL PRESIDENTE DELL'ASSEMBLEA NAZIONALE

In veste di Presidente Provvisorio della Repubblica;
VISTA la deliberazione dell'Assemblea Costituente, che nella seduta del 21 Giungno 1960 ha approvato la Costituzione della Repubblica Somala;
VISTA la prima della disposizioni transitorie e finali della Costituzione;
VISTO il n.1 della terza delle disposizioni transitorie e finali della Costituzione;

PROMULGA

la Costituzione della Repubblica Somala nel seguente testo:

PREAMBOLO

NEL NOME DI DIO CLEMENTE E MISERICODIOSO
IL POPOLO SOMALO

CONSAPEVOLE del sacro diritto di autodeterminazione dei popoli, solennemente consacrato nella Carta delle Nazioni Unite;

FERMAMENTE deciso a consolidare e tutelare l'indipendenza della Nazione Somala, e il diritto di libertà delle sue genti, in una democrazia fondata sulla sovranità popolare e sulla eguaglianza dei diritti e dei doveri di tutti i citadini;

DETERMINATO a collaborare con tutti i popoli per il consolidamente della liberità, della giustizia e della pace nel mondo, ed una particolare con i popoli ai quali è legato da affinità storiche, religiose, culturali e politiche per la costituzione di un avvenire migliore;

NEL COSTITURSI in Repubblica Unitaria, Sovrana ed Indipendente, pone a fondamento dell'ordine giuridico e sociale Nazione Somala la presente:

COSTITUZIONE

PARTE PRIMA

PRINCIPIGENERALI

Art.1

La Repubblica

1. La Somalia è uno stato indipedente e pienamente sovarno. Essa è una Repubblica democratica rappresentiva unitaria. Il popolo è una unità indisvisble.

2. La sovranità appartience al popolo che la esercita nelle forme determinate dalla Costituzione e dalle Leggi. Nessuna parte del popolo e nessuna individuo può reclmare per sè la sovranita o arrogarsene l'esercizo.

3. L'Islam è la religione dello stato.

4. La bandiera nazionale è azzura, di forma rettangolare e reca al centro una stella bianca a cinque punte uguali.

5. L'Emblema della Somalia è composto da uno scudo d'argento e bordatura d'oro. Lo scudo, sormontato da una merlatura di cinque punte moresche d'oro, le due laterali smezzate, è sostenuto da due leopardi al naturale afforantati e controrampanti, poggiati su due lancie incrociantesi sotto la punta dello scudo stesso, con due foglie di palma al naturale ed intrecciate da un nastro bianco.

Art.2

Il Popolo

1. Il popolo è costituto da tutti i cittadini.
2. La legge stabilisci modi di acquisto e di perdita della cittadinanza.
3. La negazione e la privazione della cittadinanza non possono essere determinate da motivi politici.

Art.3

Uguaglianza dei cittadini

Tutti i cittadini, senza distinzione di razza, di origine nazionale, di nascita, di lingua, di religione, di sesso, di condizione sociale ed economica o di opinione sono uguali e nei doveri dinanzi alla leggi.

Art.4

Territorio dello Stato

1. Il Territorio nazionale è sacro e inviolabile.

2. La sovranità territoriale comprende il territorio continentale, le isole, il mare territoiale, il sottosuolo, lo spazio aereo soprastante e la piattaforma litorale.

3. Ogni varizione del territorio nazionale è autorizzata con legge approvato a maggioranza di quattro quinti dei memberi dell'Assemblea Nazionale.

4. La legge determina le parti del territorio e i beni che appartengo allo stato e agli Enti Pubblici, stabilendone il regime giuridico.

Art.5

Supremazia della legge

1. L'organizzazione dello Stato e i rapporti fra lo Stato e gli altri soggetti, pubblici e privati, sono regolati dal diritto.

2. Gli atti amministrativi contrari alle leggi e gli atti Costituzione possono essere invalidati per iniziativa dei soggetti interessati, secondo le norme della Costituzione.

Art.6

La Repubblica nell'ordinamento internazionale

1. Le norme del diritto internazionale generalmente ammesse e i trattati internazionali regolarmente conclusi dalla Repubblica e pubblicati nelle forme stabilite per gli atti legislativi hanno forza di legge.

2. La Repubblica ripudia la guerra come mezzo di risoluzione delle contoversie internazionali.

3. Accetta, in condizioni di parita con gli altri Stati, le limitazioni di sovranità necesarie ad un ordinamento che assicuri la pace tra le Nazioni.

4. La Repubblica Somala promuove, con mezzi legali e pacifici, l'unione dei territori Somali e favorisce la solidarietà fra i popoli del mondo e in particolare fra quelli Africani e Islamici.

Art.7

Dritti dell'Uomo

La Repubblica Somala adotterà, in quanto applicabile, il contenuto della Dichiarazione Universale dei Diritti dello Uomo deliberata dell'Assemblea Generale delle Nazioni Unite il 10 Dicembre 1948.

PARTE SECONDA

DIRITTI E DOVERI FONDAMENTALI DEL CITTADINO

Art.8

Diritto di voto

1. Tutti i cittadini in possesso dei requisiti stabiliti dalla legge hanno diritti al voto.

2. Il voto è personale, uguale, libero e segreto.

Art.9

Diritto di accesso alle pubbliche funzioni

Tutti i cittadini in possesso dei requisiti stabiliti della legge hanno diritto di accedere in condizioni di uguaglianza alle pubbliche funzioni.

Art.10

Diritto di petizione

1. Tutti i cittadini hanno diritto di rivolgere petizione scritte al Presidente della Republica all'Assemblea Nazionale e al Governo.

2. Ogni petizione, che non sia manifestamente infondata, comporta obbligo di esame.

Art.11

Diritto di residenza

1. Tutti i cittadini hanno diritto di risiedere e circolare liberamente ovunque nel territorio nazionale e non possono essere sotoposti a deportazione.

2. Ogni cittadino ha diritto di uscire dal territorio nazionale e di farvi ritorno.

Art.12

Diritto di associazione politica

1. Tutti i cittadini hanno diritto di associarsi in partiti politica, senza preventiva autorizzazione, allo scopo di concorrere in modo pacifico e democratico, a determinare la politica nazionale.

2. Sono proibiti partiti e associazione politiche segrete, o con organizzione a carattere militare, o con denominazione tribale.

Art.13

Diritto di associazione sindacale

1. Tutti i cittadini hanno diritto di costituire associazione sindacali o di aderivi per la protezione dei propri intressi economici.

2. I sindicati organizzati seconda principi democratica hanno personalità giuridica in base alla legge.

3. I sindicati dotati di personalità giuridica possono stipulare contratti collettivi di lavoro obbligatori per i propri aderenti.

Art.14

Diritto alla iniziativa economica

1. Tutti i cittadini hanno diritto alla iniziativa economica nell'ambito della legge.

2. La legg può regolare lo sfruttamento delle risorse economiche del territorio nazionale.

Art.15

Doveri di fedeltà alla Patria

1. Tuttii cittadini hanno il dovere di essere fedeli allo stato.

2. La difesa della Patria è dovere del cittadino.

3. Il servizio militare è regolato dalla legge.

PARTE TERZA

DIRITTI E DOVERI FONDAMENTALI DELL'UOMO

TITOLO I

Diritti di Libertà

Atr.16

Diritto alla vita e alla integrità personale

1. Tutti hanno diritto alla vita e alla integrità personale.

2. Non possono essere stabilite limitazione arbitrarie a tali diritti.

3. La legge può stabilire la pena di morte solo per i più gravi delitti contro la vita umana o la personalità dello stato.

Art.17

Libertà personale

1. Tutti hanno diritto alla Libetà personale.

2. L'assoggettamento a qualisiasi forma di schiavitù o servaggio è punito penamente.

3. Nessuno può essere sottoposto a detenzione o ad altra restrizione della libertà personale se non in caso di flagranza di reato o a seguito di provvedimento motivato degli organi giuridizionali competenti, nei casi e nei modi stabiliti dalla legge.

4. In casi di necessità urgente, indicati tassativamente dalla legge, gli organi amministrativi competente possono addotare provvedimenti provvisori, che devono essere comunicati senza indugio agli organi giurisdizionali competenti e da questi convalidati entro i termini e nei modi stabiliti dalla legge, senza di che i provvedimenti s'intendono revocati e restano privi di ogni effetto.

5. In ogni caso di detenzione o di altra restriziona della libertà personale, i motivi del provvedimento devono essere immediatamente contestati alla persona interessata.

6. Nessuno può essere sottoposto a misure di sicurezza se non nei casi e nei modi stabiliti della legge ed a seguito di provvedimento motivato degli organi competenti.

7. Nessuno può essere sottoposto ad ispezione o a perquisione personale se non nei casi e con le norme sancite nei precidenti commi 3, 4, 5 e negli altri casi e nei modi stabiliti dalla legge a fini giudiziari, sanitari o fiscali. In ogni caso devono essere salvaguardati il decoro e la dignità morale della persona.

Art.18

Garanzie nei casi di restrizione della libertà personale

Ogni violenza fisica o morale sulle persone sottoposte a restizioni di libertà è punita penalmente.

Art.19

Estradizione ed asilo politco

1. L'estradizione può essere disposta soltano nei casi e nei modi stabiliti dalla legge e comunque previa convenzione internazionale.

2. Nessuno può essere sottoposto e estradizione per reati politici.

3. Lo straniero preseguitato nel suo paese per reati politici ha diritto di asilo nel territorio dello Stato nei casi e alle condizione stabilite dalla legge.

Art.20

Limiti alle prestazione personali e patrimoniali

Nessuno prestazione personale o patrimoniale può essere imposta se non in base alla legge.

Art.21

Libertà di domicilo

1. Tutti hanno diritto alla inviolabilità di domicilio.

2. Non possono essere eseguite ispezione, nè perquisizione, nè sequestri nel domicilio o in qualsiasi altro luogo di disponibilità personale se non nei casi e con le norme sancite nei commi 3, 4, 5 dell'Art. 17 e negli altri casi e nei modi stabiliti dalla legge a fini giudiziari.

3. Non possono essere eseguite ispezione a fini sanitari o di incolumità pubblica o fiscali se non nei casi e nei modi stabiliti dalla legge.

Art. 22
Librtà di corrispondenza

1. Tutti hanno diritto alla libertà e segretezza della corrispondenza epistolare e di ogni altro mezzo di comunicazione.

2. Nessuno provvedimento limitativo può essere eseguito se non nei casi e con le norme sancite nei commi 3, 4, 5 dell'Art. 17 negli altri casi e nei modi stabiliti dalla legge a fini giudiziari.

Art. 23
Uguaglianza di dignità sociale

Tutti sono uguali per dignità sociale.

Art. 24
Proprietà

1. La properietà è garantita dalla legge, che ne determina i modi di acquisto e i limiti di esercizo allo scopo di assicurarne la funzione sociale.

2. La proprietà può essere esproptiata soltanto per motivi di pubblica utilità, nei modi stabiliti dalla legge, contro equo e tempestivo indennizzo.

Art. 25

Libertà di riunione

1. Tutti hanno diritto di riunirsi in modo e per scopi pacifici.

2. La legge può stabilire che delle riunioni pubbliche debba essere dato preavviso alle autorità, che possono vietarle sultanto per motivi pubblici di igiene, incolumità, buon costume, ordine e sicurezza.

Art. 26

Liberta di associazione

1. Tutti hanno diritto di associarsi liberamente senza autorizzazione.

2. Nessuno può essere costretto ad aderire ad associazione di qualsiasi specie o a permanervi.

3. Sono proibite associazioni segrete o con organizzazione a crattere militare.

Art. 27

Diritto di sciopero

Il diritto di sciopero è riconosciuto, e si esercita entro i limiti stabiliti dalla legge. E' vietato ogni atto discriminatorio limitativo del diritto di libertà sindicale.

Art. 28

Libertà di pensiero

1. Tutti hanno diritto di manifestare liberamente il proprio pensiero in qualsiasi forma, salvo le limitazioni che possono essere stabilite dalla legge al solo scopo di proteggere il buon costume e la sicurezza pubblica.

2. La manifestazioni del pensiero non possono essere soggette ad autorizzazioni o censure preventive.

Art. 29

Libertà di religione

Tutti hanno diritto alla libertà di coscienza ed a professare liberamente la propria religione ed esercitare il culto, salve le limitazioni che possono essere stabilite dalla legge allo scopo di proteggere il buon costume, l'igiene e l'ordine pubblico. Non è tuttavia permesso diffondere e propagandare religioni diverse da quella retta dell'Islam (*)

Art. 30

Statuto personale

1. Tutti hanno diritto al proprio statuto personale secondo le rispettive norme di legge o di costume.

2. Lo statuto personale dei musulmani è regolato secondo i principi generali della sciaria islamica.

---

* **Cosi modificato con lege 30 Gennaio 1963, n 16**

TITOLO II

Diritti Sociali

Art. 31

Tutela della famiglia

1. Lo Stato tutela la famiglia fondata sul matrimonio come elemento basilare della società.

2. Il mantenimento, l'educazione e l'istruzione dei figli spettano ai genitori a norma di legge.

3. All'adempimento dei compiti indicati nel comma precidente viene provveduto a norma di legge in caso di morte dei genitori ed in ogni caso in cui essi non vi provvedano per incapacità o per qualsiasi altro motivo.

4. I figli maggiorenni hanno l'obbligo del mantenimento dei genitori che non possano provvedere a se stessi.

5. Lo Stato tutela la maternità e l'infanzia, promovendo gli istituti necessari a tale scopo.

6. Lo Stato riconosce come proprio dovere la tutela dei figli di ignoti.

Art. 32

Istituti di beneficenza

Lo Stato promuove e incoraggia la creazione di istituti di beneficenza per i minorati fisici e per l'infanzia abbandonata.

Art. 33

Tutela della sanità pubblica

Lo Stato tutela la sanità pubblica e promuove l'essistenza sanitaria gratuita per gli indigenti.

Art. 34

Salvaguardia della moralità pubblica

Lo Stato cura la salvaguardia della moralità pubblica nei modi stabiliti dalla legge.

Art. 35

Istruzione Pubblica

1. Lo Stato promuove l'istruzione come fondamentale intresse della colletivittà e provvede all'istituzione di scuole properie, aperte a tutti.

2. I'istruzione primaria nelle scoule pubbliche è gratuita.

3. La libertà di insegnamento è granita dalla legge.

4. Enti e privati hanno diritto di istituire, senza oneri per lo Stato, scoule e istituti di educazione in base alla legge.

5. La scoule e gli istituti privati di educazione possono essere parificati alle scoule e istituti statali alle condizione stabilite dalla legge.

6. L'insegnamento della religione Islamica è obbligatorio nelle scoule primarie e secondarie statali e parificate per gli allievi di fede Islamica. L'insegnamento del sacro Corano nelle scoule primarie e secondarie governative per i Musulmani è elemento fondamentale.

7. Le istituzioni di cultura superiore hanno ordinamenti autonomi nei limiti della legge.

Art. 36

Tuleta del lavoro

1. Lo Stato tutela il lavoro e lo promuovo in tutte le sue forme ed applicazioni.

2. E' proibito il lavoro forzato od obbligatorio sotto ogni forma. La legge regola i casi incui il lavoro può essere imposto per necessità militari o civili ovvero a seguito di condanna penale.

3. Tutti i lavoratori hanno diritto, senza alcuna discriminazione, ad una remunerazione uguale valore, e tale da assicurare condizione di esistenza conformi alla dignità umana.

4. Tutti i lavoratori hanno diritto al riposo settimanale e a ferie annuali retribuite e non possono essere obbligati a rinunciarvi.

5. La legge stabilisce la durata massima della giornata lavorativa, l'età minima per i vari tipi di lavoro ed assicura al minore ed alla donna condizione di lavoro adeguate al loro stato.

6. Lo Stato tutela l'integrità fisica e morale dei lavoratori.

Art. 37

Assistenza e previdenza sociale

1. Lo Stato promuove con legge l'assistenza e la previdenza sociale.

2. Lo Stato grantisce ai suoi dipendenti civili e militari il diritto di pensione; grantisce loro, altrsì, l'assistenza in caso di infortunio, malatia e inabilità al lavoro, in conformità alla leggi.

TITOLO III

Granzie giurisdizionali

Art. 38

Diritto di azione

Tutti hanno diritto di agire in giudizo, in condizione di piena uguaglianza, avanti al giudice precostituito per legge.

Art. 39

Tutela contro gli atti dell'amministrazione pubblica

Contro gli atti dell'amministrazione pubblica è ammessa in ogni caso la tutela giuisdizionale nei modi e con gli effetti stabilita dalla legge.

Art. 40

Responsabilità civile dello Stato per fatti dei propri dipendenti

1. Chinque sia Stato danneggiato da azioni od omissioni compiute in violazione di diritti da funzionari o dipedenti dello Stato o di enti pubblici, nell'esercizo delle loro funzioni, ha diritto di ottenere il risarcimento dallo Stato o dagli enti pubblici interessati.

2. La resposabilità penale, civile e amministrativa dei funzione e dipendenti per gli atti e omissioni indicati nel comma precedente è regolata dalla legge.

Art. 41

Diritto di difesa

1. Il dirittto di difesa è ammesso in ogni stato e grado del procedimento.

2. Lo Stato grantisce, nelle condizioni e nei modi stabiliti dalla legge, la concessione del gratuito patrocinio ai non abbienti.

Art. 42

Irretroattività della legge penale

Nessuno può essere condannato per un fatto che, al momento in cui fu commesso, non era punibilie come reato in base alle leggi allora vigenti, nè con pene maggiori di quelle ivi previste.

Art. 43

Resposabilità penale

1. La responsabilità penale è personale. Non è ammessa alcuna specie di pena collettiva.

2. L'imputato è presunto innocente fino alla condanna definitiva.

Art. 44

Funzione sociale della pena

Le pene restrittive della libertà personale non possono consistere in trattamenti contrari al senso di umanità o tali da ostacolare la rieducazione del condannato.

Art. 45

Esercizo della funzione punitiva

La vigilanza sulla esecuzione delle misure di sicurezz spetta al giudice competente a norma di legge.

Art. 46

Riparazione degli errori giudiziari

La legge determina le condizioni e i modi per la riparazione degli errori giudiziari.

TITOLO IV

Doveri verso lo stato

Art. 47

Dovere di osservanza della costituzione e delle leggi

Tutti hanno il dovere di osservare lealmente la costituzione e le leggi dello Stato.

Art. 48

Dovere tributario

1. Tutti hanno il dovere di concorrere alle spese pubbliche secondo la propria capacità.

2. La legge stabilische il sistema tributario che deve essere informato a principi di giustizia sociale.

PARTE QUARTA

ORGANIZZAZIONE DELLO STATO

TITOLO I

Assemblea Nazionale

SEZIONE I

Ordinamento dell'Assemblea Nazionale

Art. 49

Funzione legislativa

La funzione legislativa è esercitata dall'Assemblea Nazionale.

Art. 50

La Dottrina dell'Islam nella legislazione

La dottrina dell'Islam è fonte principale delle leggi dello Stato.

Art. 51

Assemblea Nazionale

1. L'Assemblea Nazionale è composta di Deputati eletti dal popolo a suffragio universale, libero, diretto e segreto, e di deputati di diritto.

2. La legge stabilisce il numero dei Deputati, il sistema e la modalità per le elezioni.

3. Sono eleggibili a Deputati tutti i cittadini che hanno diritto al voto e che nell'anno delle elezioni compiono almeno 25 anni di età. La legge stabilisce i casi di ineleggibilità e di incompatibilità con le funzione di deputato.
4. E' deputato di diritto, a vita, al di fuori del numero dei Deputati elettivi, chi è stato Presidente della Repubblica, salvo nel caso di condanna per i reati di cui al primo comma dell'art.76.

Art. 52

Durata ed elezione

1. La durata di ogni legislatura è di 5 anni e decorre dalla proclamazione dei risultati elettorali. Ogni modifica a tale durata non ha effetto nel corso della legislatura in cui sia stata deliberata.

2. Le elezione della nuovo Assemblea sono indette dal Presidente della Repbblica ed hanno luogo negli ultimi 30 giorno prima della fine della legislatura in corso.

3. La nouva Assemblea si riunisce di diritto per la prima volta entro il trentismo giorno dalla proclamazione dei risultati elettorali.

Art. 53

Scioglimento

1. L'Assemblea può essere sciolta prima della scadenza della sua durata del Presidente della Repubblica sentito il parere del Presidente dell'Assemblea stessa, qualora essa non possa esercitare le sua funzioni ovvero le eserciti in modo tale da pregiudicare il normale svolgimento dell'attività legislativa.

2. Con il decreto con cui scioglie l'Assemblea, il Presidente indice le nouve elezione, che devono avere luogo entro 60 giorni dallo scioglimento.

3. Lo scioglimentonon non può essere disposto nel primo anno di durata dell'Assemblea e nell'ultimo anno di durata del mandato del Presidente del Republica.

4. L'Assemblea cessante conserva in ogni caso i suoi poteri fino alla proclamazione dei risultati delle elezione della nuova Assemblea.

Art. 54

Sessioni

1. L'Assembla si riunisce di diritto in due sessioni annuali, che hanno inizio rispettivamente nei mesi di Aprile e di Ottobre.

2. L'Assemblea può essere convocata in sessione straordinaria per iniziativa del suo Presidente o su richiesta del President della Repubblica o del Governo o di un quarto dei Deputati.

Art. 55

Funzionamento

1. Nella sua prima riunione l'Assemblea Nazionale elegge fra i Deputati il Presidente, uno o più Vice Presidente e gli altri memberi dell'Uffico di Presidenta.

2. La polizia dell'Assemblea spetta all'Assemblea stessa ed è esercitata dal Presidente o da chi ne fa le veci a norma di regolamento.

3. Le sedute dell'Assemblea sono pubbliche. Solo in casi eccezionali, l'Assemblea può deliberare di riunirsi in seduta segreta per iniziativa del suo Presidente o su richiesta del Presidente della Repubblica o del Governo o di almeno 30 Deputati.

4. Le deliberazioni dell'Assemblea non sono valide se non è presente la maggioranza assoluta dei Deputati, escludendo dal computo i Deputati corrispondenti ai seggi dichiarati vacanti.

5. Ogni deliberazione è adottata con voto favorevole della maggioranza dei presenti salvo che la Costituzione e le leggi prescrivano una maggioranza speciale.

Art. 56

Intervento dei Ministri e dei Sottosegretari di Stato

1. I Ministri e i Sottosegretari hanno diritto di assistere alle sedute dell'Assemblea e della Commissione e di prendervi la parola. Possono anche assistere alle sedute ed essere ascoltati funzionari ed esperti che i Ministri abbiano appositamento incaricato.

2. I Ministri e i Sottosegretari hanno il dovere di essere presenti alle sedute se l'Assemblea lo richiede.

Art. 57

Regolamento

Per quanto non previsto dalla Costituzione il funzionamento dell'Assemblea è discplinato da un regolamento da approvarsi dall'Assemblea stessa su proposta del suo Presidente o di almeno 5 Deputati.

Art. 58

Del Deputato

1. Ogni Deputato rappresenta il popolo ed esercita le sue funzione senza vincolo di mandato.

2. Nell'assumere le proprie funzione, i Deputati prestano singolarmente giuramento di fedeltà allo Stato, davanti all'Assemblea. La formula del giuramento è la seguente: (Giuro nel nome di Dio di adempiere con fedeltà alle mie funzione per il benessere del popolo, rispettando la Costituzione e le Leggi).

3. I Deputati non possono essere perseguiti per i fatti citati, le opinioni espresse o i voti dati nell'esercizio dello loro funzioni.

4. Senza l'autorizzazione dell'Assemblea i Deputati non possono essesre sottoposti a procedimenti penali; non possono essere arrestati o comuque privati della libertà personale o sottoposti a perquisizione perspnale o domiciliare, salvo che siano colti nell'atto di commettere un delitto per il quale è obbligatorio il mandato o l'ordine di cattura; non possono essere tratti in arresto o mantenuti in detenzione in esecuzione di una sentenza anche divenuta irrevocabile.

5. Quando non si tratti procedimenti penali le azione possono essere intentate nei confronti dei Deputati, senza l'autorizzazione dell'Assemblea, secondo la legge comune.

6. Al Deputato in carica spettano una indennità e una diaria per le sedute, fissate per legge.

Art. 59

Giudizio sulla validità dei titoli diammissione dei Deputati

1. Il giudizio sui ricorsi contro la validità dei titoli di ammissione dei deputati spetta alla Corte Suprema.

2. I ricorsi motivati possono essere presentati da qualsiasi cittadino purchè abbia le qualità di elettore, entro 39 giorni dalla proclamazione dei risultati delle elezioni o dalla sopravveenienza della causa di incompatibilità o di inelleggibilità.

3. La Corte Suprema decide entro 90 giorno dalla scadenza del termine per la presentazione dei ricorsi.

4. In caso di cessazione di un Deputato dalle funzione, il posto è dichiarato vacante dall'Assemblea ed è ricperto secodo le norme stabilite dalla legge.

SEZIONE II

Formazione delle Legge ed altre funzione dell'Assemblea Nazionale

Art. 60

Presentazione e discussione dei disegni di legge

1. L'inizativa della presentazione dei progetti di legge all'Assemblea Nazionale appartiene a ciascun Deputato, al Governo e a 10,000 elettori.

2. La legge regola l'iniziativa popolare che non può essere esercitatain materia tributaria.

3. Prima della discussione davanti all'Assemblea ogni progetto di legge è esaminato da una Commisione parlamtare che espone all'Assemblea i risultati del proprio esame in una o più relazione.

4. L'Assemblea discute a norma di regolamento e deliberta sui progetti di legge articolo e per articolo e per intero con votazione finale.

Art. 61

Promulgazione e pubblicazione

1. Ogni legge approvata dall'Assemblea è promulgata dal Presidente della Repubblica entro 60 giorni dall'approvazione.

2. Se l'Assemblea ne dichiara il carattra d'urgenza a maggioranza assoluta dei memberi, la legge deve essere promulgata entro il termine da essa stabilito, che non può in alcun caso essere inferiore a cinque giorni.

3. Entro il termine per la promulgazione il Presidente della Repubblica può chiedre all'Assemblea, con messagio motivato, che la legge venga sottoposta a nouva discussione e deliberazione.

4. Se l'Assemblea approva nouvamento la legge a maggioranza di due terzi il Presidente della Repubblica è tenuto a promulgaria entro 30 giorni dalla data di approvazione.

5. Le leggi approvate dall'Assemblea e promulgate dal Capo dello Stato sono pubblicate nel Bolletino Ufficale ed entrano in vigore nel quindicesimo giorno successivo alla pubblicazione, salvo che le leggi stesse dipongano diversamente.

Art. 62

Delega legislativa

1. L'Assemblea può delegare il Governo e emanare; su oggetti o matrie definite ed entro un termine stabilito, norme aventi forza di legge. Nel conferire la delega l'Assemblea può stabilire principi o criteri direttivi.

2. Le norme delegate sono emanate con decerto del Presidente della Repubblica su progetto approvato dal Consiglio dei Ministri.

Art. 63

Decreti - Leggi

1. In caso di neccessità urgente il Governo può emanare norme provvisorie con forza di legge. Tali norme sono emanate con decreti del Presidente della Repubblica, su progetto approvato dal Consigilo dei Ministri e devono essere presentate entro 5 giorni dalla data di pubblicazione all'Assemblea Nazionale per la conversione in legge.

2. L'Assemblea, se è riunita decide sulla conversione entro 30 giorni dalla presentazione; se non è riunita decide entro 30 giorni dalla prima riunione successiva.

3. Nel caso in cui non siano convertite in legge le predette norme perdono la loro efficacia sin dall'inizio; ma l'Assemblea può disporre che gli effetti cessino da una data diversa e può regolare i rapporti giuridici sorti sulla base delle norme non convertite.

Art. 64

Amnistia e indulto

1. Su legge di delegazione approvata dall'Assemblea a maggioranza di due terzi dei Deputati, possono essere concessi dal Presidente della Repubblica l'amnistia e l'indulto.

2. L'Amniistia e l'indulto non possono essere concessi per i reati commesi successivamente alla presentazione della proposta di legge per la delegazione.

Art. 65

Tributi e spese

1. L'istituzione, la modificazione e l'abolizione di tributi sono effettuate solo per legge.

2. Le leggi che importano nuove o maggiore spese a carico delle Stato devono dichiari mezzi per farvi fronte.

3. Nel caso di spese pluriennali l'indicazione della copertura della spesa può essere limitata al bilancio in corso.

Art. 66

Bilanci

1. L'Assemblea approva ogni anno il bilancio preventivo che il Governo deve presentare almeno due mesi prima della fine dell'anno finanziario.

2. La legge di approvazione del bilancio non può stabilire nuovi oneri fiscale e nuove spese.

3. L'esercizo provvisorio del bilancio può essere autorizzato con legge per periodi che non superino complessivamente tre mesi.

4. Nel primo semestre di ogni anno finanziaro il Governo deve presentare all'Assemblea per l'approvazione, il bilancio consuntivo dell'esercizio finanziario precedente.

Art. 67

Trattati Internazionali

L'Assemblea autorizza con legge la ratifica dei trattari Internazionali politici, militari, commerciali o che importino modificazioni di leggeod oneri finanziari non previsti dal bilancio.

Art. 68

L'Assemblea autorizza la dichiarazione dello Stato di guerra e conferisce al Governo i poteri neccessari.

Art. 69

Sindicato ispettivo dell'Assemblea

1. Ogni Deputato ha diritto di porre al Governo interrogazioni o interpellanze e di proporre mozioni all'Assemblea. Il Governo è tenuto a rispondere entro 20 giorni.

2. L'Assemblea può disporre inchieste, a mezzo di commissioni composte di deputati di tutti i gruppi parlamentari, allo scopo di accertare avvenimenti o situazioni di intresse pubblico. Con la deliberazione con cui dispone l'inchiesta l'Assemblea determina , entro i limiti della Costituzione,i poteri della Commissione, e può anche nominare esperti per collaborare con le commissione.

TITOLO II

Il Presidente della Repubblica

Art. 70

Elezione

1. Il Presidenti della Repubblica è il Capo dello Stato e lo rappresenta nella sua unità nazionale.

2. Il Presidente **della Repubblica è eletto dall'Assemblea Nazionalecon votazione segreta, a maggioranza di due terzi dei suoi memberi nel primo e nel secondo scrutino. Negli scrutini successivi è sufficiente la maggioranza assoluta.**

3. **Il Presidente della Repubblica nell'assumere le proprie funzioni giura fedeltà allo Stato, davati all'Assemblea Nazionale. La formula del guiramento è la seguente: < <Giuro nel nome di Dio di adempiere con fedeltà alle funzioni di di Presidente della Repubblicae di difendere con tutte le mie forze la Costituzione, per il bene della patria della Nazione> >.**

Art. 71

Requisiti per l'eleggibilita

1. E'eleggibile Presidente della Repubblica ogni cittadino musulmano, figlio di padre e madre cittadini originari, che abbia diritto al voto ed abbia compiuto 45 anni di età. La rielezione consecutiva è ammessa soltano per una volta.

2. Il Presidente della Repubblica non deve aver contratto nè contrarre, durante la carica, matrimoni con donne non cittadini originarie.

3. Il Presidente della Repubblicadurante il periodo di carica non può esercitare altre funzioni pubbliche, tranne il diritto di voto, nè esercitare attività professionali, commerciali, industriali o finanziarie.

Art. 72

Durata della carica

1. La durata in carica del Presidente della Repubblica è di sei anni con decorrenza dalla data di prestazione del giuramento. Ogni modifica di tale durata non si applica al Presidente in carica.

2. **L'elezione del nuovo Presidente della Repubblica è indetta dal Presidente dell'Assemblea Nazionale. Essa ha luogo entro 30 giorni prima della scadenza del mandato presideziale.**

3. **Se l'Assemblea Nazionale è sciolta, o manca meno di tre mesi alla sua cessazione, l'elezione del Presidente ha luogo entro 30 giorni dalla prima riunione della nuova Assemblea. Nel frattempo sono prorogati i poteri del Presidente in carica.**

Art. 73

Assegno e dotazione del Presidente della Repubblica

La legge stabilisce l'assegno e la dotazione del Presidente della Repubblica.

Art. 74

Impedimento, dimissioni o morte

1. In caso di morte, di dimissioni o di impedimento permanente del Presidente della Repubblica, l'Assemblea Nazionale si riunisce per eleggere il nouvo Presidente della Repubblica, entro 30 giorni.

2. Nell'attesa delle elezioni di cui al precedente comma, nonchè nei casi di sospensione di diritto del Presidente della carica a norma dell'articolo 76 e in ogni caso di impedimento temporaneo, le sue funzione sono esercitate temporaneamente a tutti gli effetti dal Presidente dell'Assemblea Nazionale o in mancanza dal Vice Presidente più anziono.

3. In caso di dimissione, il Presidente della Repubblica ne dà communicazione scritta all'Assenblea.

Art. 75

Attribuzioni

Il Presidente della Repubblica esercita le attribuzioni conferitegli dalla Costituzione e dalla legge nel campo legislativo, esecutivo e giudiziario. Ad esso spettano, inoltre, le attibuzioni seguenti:

a) autorizza la presentazione all'Assemblea dei disegni di legge di iniziativa del Governo;
b) indirizza messaggi all'Assemblea Nazionale;
c) concede grazia e commuta le pene;

d) accredita e ricevi gli agenti diplomatici;
e) ratifica i trattati internazionali previa, ove occorra, autorizzazione dell'Assemblea Nazionale;
f) ha il comando delle Forza Armate;
g) dichiara lo stato di guerra; previa autorizzazione dell'Assemblea Nazionale, a norma dell'articolo 68;
h) conferisce le onorificenze dello Stato.

Art. 76

Responsabilità

1. Il Presidente della Repubblica non è resposabile degli atti compiuti nell'esercizio delle sua funzioni, tranne per i delitti di alto tradimento o di attentato all'ordine costituzionali previsti della legge.

2. La responsabilità degli atti emanati dal Presidente è assunta dal Primo Ministro e dai Ministri competenti, che vi appongono la loro firma.

3. Nei casi di alto tradimento e di attentato all'ordine costituzionale il Presidente della Repubblica è messo in stato di accusa, con deliberazione approvata con votazione segreta a maggioranza di due terzi dei deputati, e giudicato della Corte Suprema costituita in Alta Corte di Giustizia.

4. Al di fuori della ipotesi del precedente comma, il Presidente della REpubblica non può essere sottoposto a giudizio penale per alcun reato se non nei casi in cui l'Assemblea ne dia l'autorizzazione, appovandola con votazione segreta a maggioranza di due terzi dei deputati.

5. L'approvazione del deferimento al giudizio per alto tradimento o attentato all'ordine costituzionale e l'autorizzazione a procedere per altri delitti importano la sospensione di diritto del Presidente dalla carica.

TITOLO III

il governo

SEZIONE I

Ordinamento del Governo

Art. 77

Funzione esecutiva

La funzione esecutiva è esercitata del Governo.

Art. 78

Il Govrno

1. Il Governo è composto del Primo Ministro e dei Ministri.

2. La riunione collegiale del Primo Ministro e dei Ministri Costituisce il Consiglio dei Ministri.

3. Il Primo Ministro è nominato e revocato dal Presidente della Repubblica.

4. I Ministri sono nominati e revocati dal Presidente della Repubblica su proposa del Primo Ministro.

5. Prima di assumere le loro funzione, il Primo Ministro e i Ministri prestano giuramento di fedeltà allo Stato, davanti al Presidente della Repubblica. La formula del giuramento è la seguente: < < Giuro nel nomo di dio di adempiere con fedeltà alle mie funzione per il benessere del popolo, rispettando la Costituzione e le leggi > > .

Art. 79

Sottosegretari di Stato

1. I Ministri possono essere assistiti da Sottosegretari di Stato nominati e revocati dal Presidente della Repubblica, su proposta del Primo Ministro, sentito il Consiglio dei Ministri.

2. I Sottosegretari coadiuvano i Ministri ed esecitano le funzione loro delegate.

3. Prima di assumere le funzione, i Sottosegretari prestano giuramento di fedeltà allo Stato, davanti al Primo Ministro. La formula del giuramento è la seguente: < < Giuro nel nomo di

Dio di adempiere con fedeltà alle mie funzione per il benessere del popolo, rispettando la Costituzione e la leggi > > .

Art. 80

Requisiti per la nomina a Ministri e Sottosegretari i cittadini che abbiano i reuisiti per essesre eleggibili Deputati.

2. I Ministri e i Sottosegretari durante il periodo di incarico non possono esercitare altre funzione di pubbliche, tranne il voto elettorale e le funzioni di Deputato all'Assembla Nazionale, nè esercitare attività professionali, commerciali, industriali e finanziarie. Non possono direttamente nè indirettemente prendre in locazione beni di pertinenza dello Stato e di Enti Pubblici, trane che si tratti di imobili ad uso di abitazione propria, nè acquistarli. Non possono altresì alienare o locarebeni propri allo Stato o ad Enti pubblici, nè partecipere a titolo personale a imprese statali, o controllate dallo Stato.

Art. 81

Presidente del Consiglio dei Ministri e Ministeri

1. La attribuzione della Presidente del Consiglio dei Ministri, nonchè il numero e le attribuzione dei Miniteri sono stabiliti con legge.

2. L'organizzazione della Presidente del Consiglio dei Minitri, dei Ministeri e degli uffici dipendenti è stabilita con regolamenti emanati in forma di decreto, dal Presidente della Repubblica.

Art. 82

Fiducia dell'Assemblea Nazionale

1. Il Governo deve avere la fiduca dell'Assemblea Nazionale entro 30 giorno dalla sua formazione. Il Governo si presenta alla Assemblea e ne chiede la fiducia. Successivamente esso può chiedere la fiducia in qualsiasi momento.

2. L'Assemblea Nazionale manifesta la fiducia o la sfiducia per mezzo di una mozione motivata e approvata a maggioranza semplice con votazione palese.

3. La mozione di sfiducia può inoltre essere proposta in qualsiasi momento con la motivazione relativa da almeno 10 Deputati ed è discussa non prima di 5 giorni dalla sua presenzione. E' approvata a maggioranza assoluta con votazione palese.

4. La sfiducia dell'Assemblea importa le dimissioni collettive del Governo.

5. Il Governo dimissionario resta in carica per l'attività neccessaria per la ordinaria amministrazione, sino alla nomina del nuovo Governo.

SEZIONE II

Attività del Governo e degli Organi dipendenti

Art. 83

Attribuzioni e responsibilità del Primo Ministro e dei Ministri

1. Il Primo Ministro determina l'azione politica del Governo e ne è responsabile. Egli mantiene l'unità di indirizzo del Governo coordinando gli atti del Consiglio dei Ministri.

2. I Ministri dirigono gli affari di competenza dei rispettivi Ministeri e ne sono responsabili individualmente.

3. Il Primo Ministro e i Ministri sono responsabili collegialmente degli atti del Consiglio dei Ministri.

Art. 84

Responsabiltà penale del Primo Ministro e dei Ministri

1. Il Primo Ministro e i Ministri sono responsabili dei reati commessi nell'esercizo delle loro funzione.

2. Per tali reati il Primo Ministro e i Minstri sono messi in stato di accusa, con deliberazione dell'Assemblea Nazionale, su iniziativa di almeno un quinto dei suoi memberi, approvata con votazione segreta a maggioranza di due terzi dei Deputati, e giudicati dalla Corte Suprema costituita in alta Corte di Giustizia.

3. Al di fuori della ipotesi del precedente comma, il Primo Ministro e i Ministri non possono essere sottoposti a giudizio penale per alcun reato, se non nei casi in cui l'Assemblea ne dia autorizzazione, approvandola con votazione segreta a maggioranza dei due terzi dei Deputati.

4. Il Primo Ministro e i Ministri deferiti all'Alta Corte di Giustizia son sospesi di diritto dall'esercizio delle loro funzioni.

Art. 85

Potere regolamentare

I regolamenti sono emanati con decreto del Presidente della Repubblica, su progetto approvato dal Consiglio dei Ministri. Il potere di amanare regolamenti in particolari materie può essere attribuito dalla legge ad altri organi dello Stato e ad Enti Pubblici.

Art. 86

Decentramento amministrativo

Le funzione amministrative sono decentrate per quanto possibile agli organi locali dello Stato e a Enti Pubblici.

Art. 87

Nomina di alti funzionari

Gli alti funzionari e i comandanti delle forze militari indicati dalla legge sono nominati dal Presidente della Repubblica su proposta del Ministro competente, approvata dal Consiglio dei Minitri.

Art. 88

Funzionari ed impiegati pubblici

1. I funzionari e gli impiegati pubblici debbono esercitare le loro funzioni in conformità alla legge, al solo scopo del bene pubblico.

2. I funzionari e gli impiegati pubblici non possono essere dirigenti di partiti politici.

3. La legge determina le categoria dei dipendenti pubblici che non possono appartenere a partiti politici e le altre attività incompatibili con le mansioni esercitate.

4. Il dipendente pubblico collocato in aspettativa per qualsiasi motivo, non può conseguire promozioni se non per anzianità.

5. Lo statuto degli impiegati pubbliche è stabilito con legge.

6. L'acceso ai ruoli organici del pubblico impiego avviene solo per concorenso pubblico, salvo nei casi indicati dalla legge.

Art. 89

Commisssione del Pubblico Impiego

1. La legge istituisce una Commissione del Pubblico Impiego stabilendone la composizione e le attribuzione.

2. La legge istitutiva della Commissione del Pubblico Impiego deve garantire l'indipedenza di funzioni a tale organo.

SEZIONE III

Organi Ausiliari

Art. 90

Magistrato ai Conti

1. Il controllo preventivo di legittimità sugli atti del Governo che importino oneri finanziari e il controllo successivo sulla gestione del bilancio dello Stato sono esercitati dal Magistrato ai Conti.

2. Il Magistrato ai Conti participa, nei modi stabiliti dalla legge, al controllo sulla gestione finanziaria degli enti cui lo Stato contribuisce in via ordinaria od anche in via straodinaria, ma in misura rilevante.

3. Riferisce sui risultati del riscontro all'Assemblea Nazionale.

4. La legge regola l'organizzazione di questo organo, assicurando ad esso l'indipedenza di funzioni ed agli organi ed enti controllati la granzia del contraddittorio.

Art. 91

Consiglio Nazionale dell'Ecconomia e del Lavoro

Il Consiglio Nazionale dell'Economia e del Lavoro è composta nei modi stabiliti dalla legge, di esperti e rappresentanti delle categorie produttive, in misura che tenga conto della loro importanza numerica e qualititiva.

E'organo di consulenza dell'Assemblea Nazionale e del Governo per le materie e secondo le funzioni che gli sono attribuite dalla legge.

TITOLO IV

La Magistratura

Art. 92

Funzione giudiziaria

La funzione giudiziaria è esercitate dalla Magitratura.

Art. 93

Indipendenza del potere giudiziario

Il potere giudiziario è indipedente dall'esecutivo e dal legislativo.

Art. 94

Corte Suprema

1. La Corte Suprema è il più alto organo giudiziario della Repubblica. Ha giurisdizione su tutto il territorio dello Stato in materia civile, penale, amministrativa, contabile e in ogni altra materia stabilita dalla Costituzione e dalle leggi.

2. Le norme relative all'ordinamento della Corte Suprema e degli altri organi giurisdiziionali sono stabilite con legge.

Art. 95

Unità della giurisdizione

1. Non possono essere istituiti organi giurisdizionali straordinari e speciali.

2. Possono soltanto essere istituite, presso gli organi giurisdizionali ordinari, sezioni specializzate in particolari materie, anche con partecipazione di cittadini esperti estranei alla Magistratura.

3. I Tribunali Militari in tempo di guerra hanno la giurisdizione stabilita dalla legge. In tempo di pace essi hanno giurisdizione soltano per i reati militari commessi da appartenenti alle Forze Armate(**).

4. Il popolo partecipa direttamente ai giudizi di assise, nei modi stabiliti dalla legge.

** Cosi modificato con Legge 30 Gennaio 1963, n.6

Art. 96

Guarentigie giudiziarie

1. Nell'esercizio della funzione giudizaria, i Magistrati sono soggetti solo alle legge.

2. Lae norme relative allo Stato giuridico ed alla nomina dei Magistrati sono stabilite con legge.

3. I Magistrati sono inamovibili salvo nei casi previsti dalla legge.

4. I Magistarti non possono esercitare uffici, servizi o attività incompatibli con le loro funzione.

5. I provvedimenti amministrativi e diciplinari relativi ai Magistrati sono emanati, a norma di legge, con decreto del Presidente della Repibblica, su proposta del Minitero di Grazia e Giustizia, sentito il Consiglio Superiore Giudizario.

Art. 97

Procedura giudiziaria

1. I dibattimenti giudiziaria sono pubblici, ma il giudice può disporre, per motivi di buon costume, di igiene o di ordine pubblico, che il dibattimento si svolga a porte chiuse.

2. Nessuna decisione giurisdizionale può essere presa senza che tutte le parti abbiano avoto la possibilità di di esporele proprie deduzioni e difesa.

3. Tutte le decisioni giurisdizionali e tutti i provvdimenti relativi alla libertà personale devono essere motivati e sono soggetti ad impugnazione a norma di legge.

4. Gli organi giurisdizionali dispongono direttamente dalla forza pubblica per il compimento degli atti inerenti alle loro funzione.